# المنتقى
# من
# موسوعة الأحاديث النبوية

اللغة الصومالية

## إعداد القسم العلمي

جمعية خدمة المحتوى
الإسلامي باللغات

جمعية الدعوة
وتوعية الجاليات بالربوة

شركاء التنفيذ:

دار الإسلام
جمعية الربوة
رواد الترجمة
المحتوى الإسلامي

يتاح طباعة هذا الإصدار ونشره بأي وسيلة مع
الالتزام بالإشارة إلى المصدر وعدم التغيير في النص.

Tel: +966 50 244 7000
info@islamiccontent.org
Riyadh 13245- 2836
www.islamhouse.com

**Waxaan ku bilaabayaa Magaca Allaah Naxariista guud iyo mida gaarka ahba naxariista.**

## Horudhac

Mahad oo dhan Allaha Rabul caalamiinka ah ayaa iska leh, Ilaahay naxariis iyo nabad gelyo ha siiyo Nabigeena Maxamed, ehelkiisii, asaxaabtiisii dhamaantood, iyo inta wanaaga ku raacday ilaa maalinta qiyaame, intaa ka dib: Waxa ugu wayn ee ay tahay inuu muslimku ku dadaalo, Akhris ahaan, u fiir-fiirsi iyo ka fakarid, barasho iyo ku camal fal-kitaabka Ilaahay ka dib- waa sunada Rasuulka -Salaa Allaahu calayhi wasalam, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri:(Waxaan idiinka tegay dadow, wax hadaad qabsataan, aydaan waligiin lumayn: waa kitaabka Ilaahay ,iyo sunada Nabigiisa).waxaa wariyey Imaam maalik ,Ilaahay sareeye wuxuu yiri:(Waxaa Rasuulku idiin la yimid qaata wuxuu idinka reebana ka taga)[Suurada Al xashri: 7]Sidaa darteed ayay ku dadaashay Jimciyadda adeega tarjamada nuxurka maadooyinka Islaamiga ah ee afafka kala duwan, iyo Jimciyadda dacwada iyo wacyi gelinta Jaaliyadaha ee Rabwa diyaarinta Mawsuuco wayn oo lagu uruuriyey Axaadiista Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, isla markaana lagu tarjumo tiro luuqado ah. Ilaahay sareeye wuu fududeeyey in laga xusho masuucadaas axaadiis qofka muslimku ugu baahan yahay diintiisa iyo aduunyadiisaba, , iyadoo ay jirto mowsuucada oo la soo gaabiyey oo la cadeeyay oo la sharxay macnaheeda, waxaay tusinayso, iyo faa'idooyinkeeda qaar ka mida, iyo in lagu soo saaray kitaabkaan lagu magacaaba:(Xulka Mawsuucada Axaadiista Nabiga Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee.)Waxaa socota shaqo ah in mawsuucadaas lagu tarjumo dhamaan luuqadaha nool ee aduunka, si nafaceedu caam u noqdo Basharkana lagu gaarsiiyo luuqadahooda sunada Rasuulka -sallallaahu calayhi wasalam-. Ilaahay ayaan waydiisanaynaa inuu camalkaan naga aqbalo, kana dhigo camal barakaysan, Allaha kariimka ahna u khaalis ah, hana ka ajar siiyo cid walba oo ka caawisay diyaarintiisa, tarjumidiisa iyo faafintiisa.Nabigeena Maxamed ahaa nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee.

(1) – عن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّمَا الْأَعْمَالُ بِالنِّيَّةِ، وَإِنَّمَا لِامْرِئٍ مَا نَوَى، فَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ إِلَى اللهِ وَرَسُولِهِ، فَهِجْرَتُهُ إِلَى اللهِ وَرَسُولِهِ، وَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ لِدُنْيَا يُصِيبُهَا أَوِ امْرَأَةٍ يَتَزَوَّجُهَا، فَهِجْرَتُهُ إِلَى مَا هَاجَرَ إِلَيْهِ».

وفي لفظ للبخاري: «إِنَّمَا الْأَعْمَالُ بِالنِّيَّاتِ، وَإِنَّمَا لِكُلِّ امْرِئٍ مَا نَوَى». **[صحيح] - [متفق عليه]**

(1) – Cumar Binu Khadaab Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: "Camalku wuxuu ku ansaxayaa niyada, qof walbana wuxuu niyoodo ayuu leeyahay, qofka hijradiisu tahay Ilaahay iyo Rasuulki dartood, hijradiisu xaga Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayey ahaatay, qofkase hijiradiisu ahayd inuu aduunyo helo ama haweeney uu guursado darteed, hijradiisu waa waxa uu u soo hijrooday uun ". Ruwaayada Bukhaarina waxay ahad: " acmaashu waa niyada uun, qof kastana wuxuu niyeystay uun buu leeyahay. " **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in camalka dhamaanti niyada loo eegayo, xugunkaasina waa dhamaan camal walba sida cibaadada iyo mucaamalaadka oo dhan, qofka camalkiisa u niyeysta inuu nafac helo ma helaayo wax aan nafacaas ahayn mana helaayo ajar, qofkiise niyeysta inuu Ilaahay ugu dhawaado camalkiisa wuxuu ka helyaa sawaab iyo ajar hadii xataa uu yahay camal caadi ah sida cunida iyo cabida.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee tusaaluu u soo qaatay si uu u cadeeyo saamaynta ay niyadu ku leedahay camalka, iyadoo acmaashu siman tahay muuqaalkooda guud, Nabigu wuxuu cadeeyey qofka u niyeysta hijradiisa ee dalkiisa uga safra Ilaahay raali galinti, hijradiisu waa mid sharci ah oo Ilaahay aqbalayo, kana ajar siinayo niyadiisoo runa awgeed, qofka hijradiisa u niyeysta inuu nafac aduun

helo sida xmjoolo, jago, ganacsi iyo dumar uu guursado hijradiisa kama helaayo nafacaa uu niyeystay mooyee mana helaayo ajar iyo sawaab.

## Faa'iidooyinka xaddiiska.:][

1. Waxaa la isku booriyey ikhlaaska, waayo Ilaahay ma aqbalo camal aan isaga darti loo samayn.
2. Acmaasha Ilaahay loogu dhawaado hadii qofku u sameeyo si caado ahaana ajar kama helaayo, ilaa uu u niyeysto inuu Ilaahay ugu dhawaado.

(4560)

(2) – عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صلى الله عليه وسلم: «مَنْ أَحْدَثَ فِي أَمْرِنَا هَذَا مَا لَيْسَ فِيهِ فَهُوَ رَدٌّ» متفق عليه. Tg

ولمسلم: «مَنْ عَمِلَ عَمَلًا لَيْسَ عَلَيْهِ أَمْرُنَا فَهُوَ رَدٌّ». [صحيح] - [متفق عليه]

(2) – Caa'isha -Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Rasuulka Ilaahay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee- wuxuu yiri: "Qofka la yimaada wax aan diinteena ka mid ahayn waa lagu celinayaa. waa mutafaq. muslimna wuxuu leeyahay: "Qofka sameeya camal aan diinteena ku jirin waa lagu celinayaa". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka ku soo dara diinta wax aan ku jirin, ama sameeya camal aan lahayn daliil kitaabka iyo sunada ah waa lagu celinayaa Ilaahayna ma aqbalaayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Cibaadadu waxay ku dhisantahay wixii ku soo arooray Qur'aanka iyo sunada Nabiga, Ilaahay ku caabudimayno wixii

uu jideeyey mooyee oo bidco iyo wax gadaal laga keenay ku caabudimayno.

2. Diintu maaha Ra'ayi iyo sida qofku jecel yahay, balse waa raacid rasuulka la raaco -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee.
3. Xadiiskani wuxuu daliil u yahay diinta kaamilnimadeeda.
4. Bidcadu waa wax kasta oo diinta lagu soo daro ee aan jirin waqtigii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyo asaxaabtiisa ee ah caqiido ama hadal ama camal.
5. Xadiiskani wa asal ka mida usuusha Islaamka camalkana wuxuu u yahay sida miisaanka, sida camal walba ee aan loola jeedin Ilaahay darti uusan qofku ajar uga helayn ayaa camal walba ee aan waafaqsanayn wixii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu la yimid ayaa lagu celinayaa qofkii sameeyey.
6. Waa la diiday wixii gadaal laga keenay ee ku saabsan arimaha diinta ee aan aduunyo ahayn.

(4792)

(3) – عن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال: بَيْنَمَا نَحْنُ عِنْدَ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ذَاتَ يَوْمٍ إِذْ طَلَعَ عَلَيْنَا رَجُلٌ شَدِيدُ بَيَاضِ الثِّيَابِ، شَدِيدُ سَوَادِ الشَّعَرِ، لَا يُرَى عَلَيْهِ أَثَرُ السَّفَرِ، وَلَا يَعْرِفُهُ مِنَّا أَحَدٌ، حَتَّى جَلَسَ إِلَى النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فَأَسْنَدَ رُكْبَتَيْهِ إِلَى رُكْبَتَيْهِ، وَوَضَعَ كَفَّيْهِ عَلَى فَخِذَيْهِ، وَقَالَ: يَا مُحَمَّدُ، أَخْبِرْنِي عَنِ الْإِسْلَامِ، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**الْإِسْلَامُ أَنْ تَشْهَدَ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللهِ، وَتُقِيمَ الصَّلَاةَ، وَتُؤْتِيَ الزَّكَاةَ، وَتَصُومَ رَمَضَانَ، وَتَحُجَّ الْبَيْتَ إِنِ اسْتَطَعْتَ إِلَيْهِ سَبِيلًا**» قَالَ: صَدَقْتَ، قَالَ: فَعَجِبْنَا لَهُ، يَسْأَلُهُ وَيُصَدِّقُهُ، قَالَ: فَأَخْبِرْنِي عَنِ الْإِيمَانِ، قَالَ: «**أَنْ تُؤْمِنَ بِاللهِ، وَمَلَائِكَتِهِ، وَكُتُبِهِ، وَرُسُلِهِ، وَالْيَوْمِ الْآخِرِ، وَتُؤْمِنَ بِالْقَدَرِ خَيْرِهِ وَشَرِّهِ**» قَالَ: صَدَقْتَ، قَالَ: فَأَخْبِرْنِي عَنِ الْإِحْسَانِ، قَالَ: «**أَنْ تَعْبُدَ اللهَ كَأَنَّكَ تَرَاهُ، فَإِنْ لَمْ تَكُنْ تَرَاهُ فَإِنَّهُ يَرَاكَ**» قَالَ: فَأَخْبِرْنِي عَنِ السَّاعَةِ، قَالَ: «**مَا الْمَسْؤُولُ عَنْهَا بِأَعْلَمَ مِنَ السَّائِلِ**» قَالَ: فَأَخْبِرْنِي عَنْ أَمَارَتِهَا، قَالَ: «**أَنْ تَلِدَ الْأَمَةُ رَبَّتَهَا، وَأَنْ تَرَى الْحُفَاةَ**

**الْعُرَاةَ الْعَالَةَ رِعَاءَ الشَّاءِ يَتَطَاوَلُونَ فِي الْبُنْيَانِ»** قَالَ: ثُمَّ انْطَلَقَ، فَلَبِثْتُ مَلِيًّا ثُمَّ قَالَ لِي: «**يَا عُمَرُ، أَتَدْرِي مَنِ السَّائِلُ؟**» قُلْتُ: اللهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ، قَالَ: «**فَإِنَّهُ جِبْرِيلُ، أَتَاكُمْ يُعَلِّمُكُمْ دِينَكُمْ**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(3) – Cumar Binu Khadaab Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Maalin anagoo Rasuulka Ilaahay scw la fadhina ayaa waxaa nagu soo baxay nin dharkiisu aad u cad yahay, timihiisuna aad u madow yihiin, raad safarna uusan ka muuqan, qof naga midana aanu garanayn, ilaa uu la fariistay Nabiga, oo jilbihiisa ku tiiriyey jilbaha Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee oo uu saaray labadiisa calaacalood labada bawdo ee Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, wuxuuna yiri: Maxamadow, iiga waran Islaamka, wuxuu ku yiri: " Islaamku waa inaad qirto in Ilaahay maahee inuusan jirin Ilaah kaloo xaq lagu caabudo, Maxamedna Rasuulka Ilaahay yahay, oo aad salaada oogtid, sakadana bixisid, ramadaankana soontid, oo aad xajkana gudatid hadaad awoodo " wuxuu yiri: run ayaad sheegtay, Cumar wuxuu yiri: waan la yaabnay wuu waydiinayaa, wuuna u rumanayaa, wuxuu ku yiri iiga waran iimaanka, wuxuu yiri: "waa inaad rumayso Ilaahay, malaa'iigtiisa, kutubtiisa, rusushiisa, maalinta qiyaamah, qadarka Ilaahay khayrkiisa iyo sharkiisaba " wuxuu yiri: run baad sheegtay, wuxuu yiri: iiga waran ixsaanka, wuxuu yiri: "waa inaad Ilaahay u caabudo sidii adoo arkaya, hadaadan arkayn isagaa ku arkaaya " wuxuu yiri: iiga waran saacada qiyaame, wuxuu yiri: "maaha midka la waydiiyey mid uga aqoon badan ka waydiiyey " wuxuu yiri: ii sheeg calaamadaheeda, wuxuu yiri "waa inay dhasho adoontu sayidadeeda, oo aad aragto kuwii cagaha cadaa, ee cayrta ahaa, oo ari raaca ahaa oo ku tartamaya guryo dhisid " wuxuu yiri Cumar: wuu tagay, cabaar ayaan sii joogay, wuxuu igu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiye "Cumarow, ma garanaysay kan wax i waydiinayey? " waxaan iri: Ilaahay iyo rasuulkiisaa iga og, wuxuu yiri: "malakul Jibriil buu ahaa, wuxuuna u yimid inuu diintiina idin baro ".
**[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Cumar Binu Khaddaab wuxuu sheeegay in malakul Jibriil nabadi korkiisa ha ahaate wuu ugu yimid asaxaabta isagoo u eg nin aanay

garanayn, sifooyinkiisana waxaa ka mida in dharkiisu aad u cadaa, timihiisuna aad u madoobayeen, wax raad safar ahina aanu ka muuqan, sida daal, boor, timo basaas iyo dhar wasakha, dadka meesha joogna aanay aqoon, oo Nabiga scw ay la fadhiyaan,  wuxuu soo fariistay Nabiga scw hortiisa,  sidii qof wax baranaya oo kale, wuxuu waydiiyey Islaamka, wuxuuna ugu jawaabay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee  Arkaantaas ka kooban qirida labada shahaado, ilaalinta salaadaha shanta ah,  sakada oo la siiyo kuwa xaq u leh, soonka bisha ramadaan, gudashada xajka qofkii awooda.

Wuxuu yiri ninkii su'aasha waydiiyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee:  "run baad sheegtay ", way la yaabeen asaxaabtu su'aashiisa la moodo inuusan aqoon  lahayn sida muuqata, ka dibna uu u rumaynaayo.

Ka dib wuxuu waydiiyey iimaanka, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ugu jawaabay: arkaanta lixda ah ee ka kooban rumaynta jiritaanka Ilaahay, sifooyinkiisa, ficilkiisa oo uu kali la yahay sida abuurada, cibaadadiisa oo uu kali la yahay, iyo malaa'igta uu Ilaahay nuur ka abuuray oo ay yihiin adoomo Ilaahay maamuusay oo aan Ilaahay ku caasin, oo amarkiisa ku shaqeeya, iyo rumaynta kutubta Ilaahay  ku soo dajiyey rusushiisa, sida Qur'aanka, Tawreed, Injiil, iyo qayrkood, iyo Rususha gaarsiinaysa Ilaahay diintiisa, waxaa ka mida Nuux, Ibraahiim, Muuse, Ciise, waxaa u danbeeyey  Maxamed nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, iyo Nabiyo iyo rusul kale, iyo rumaynta maalinta qiyaamaha, waxaana soo galaya waxa geerida ka dambeeya ee ah qabriga iyo nolosha barsakha, iyo in dadka la soo saari doono geerida ka dib, lana xisaabin doono, oo uu ku dambayn doono Janada ama Naarta, iyo rumaynta inuu Ilaahay qadaray wax kasta sida Ilaahay cilmigiisa ku horaysay oo ay keenayso xikmadiisu iyo qoridiisu oo isagu doonay, iyo in wax walba u dhici doonaan sida Ilaahay u qadaray oo uu u abuurayo Ka dib wuxuu waydiiyey ixsaanka, wuxuu u sheegay: inuu ixsaanku yahay qofka oo u caabuda Ilaahay sida inuu u jeedo, hadii qofka  iimaankiisu uusan darajadaas gaarin ha u caabudo

sidii in Ilaahay eegaayo, waayo waxaa horeeya darajada eegista ah oo saraysa, tan kalena waa darajada muraaqabada.

Ka dib wuxuu waydiiyey saacadu waa goorma? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u cadeeyey in saacada ogaanteedu ay ka mid tahay waxa Ilaahay kaligi og yahay oo cid khalqiga ka midihi aysan ogayn kan la waydiiyey iyo kan waydiinayaba ma oga.

Ka dib wuxuu waydiiyey calaamadaha saacada? wuxuuna cadeeyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inay calaamadaha saacada ka mid tahay badashada dumarka adoomada ah iyo caruurtooda, ama curuurta oo hooyadood caasi ku noqda, waxayna ula dhaqmaan sida adoomada, iyo kuwa ari raaca ah iyo kuwa saboolka ah waxaa loo waasicin aduunyada, aakhiru samaanka, markaas ayey iskugu faanayaan qurxinta guryaha iyo dhisidooda.

Ka dib wuxuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay intii la fadhiday oo Cumar ka mid ahaa inuu kan su'aalaha la yimid ahaa Malaku Jibriil oo u yimid inuu asaxaabta diintaan xaniifka ah baro.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waa akhlaaqda wanaagsan ee Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, wuxuu la fariisanayey asaxaabtiisa iyaguna way la fariisanaayeen.
2. Waxaa la jideeyey in loo naxariisto qofka wax waydiinaya oo la soo dhaweeyo, si uu wax u waydiiyo isagoo ciriiri iyo cabsi dareemayn.
3. Edebta lagula dhaqmo macalinka waa sida malakul Jibriil calayhi salaam sameeyey oo kale, isagoo fariistay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee hortiisa fadhi edabi ku jirto , si uu cilmi uga barto.
4. Arkaanta Islaamku waa shan, arkaanta iimaankana waa lix.

5. Marka ay kulmaan Islaamka iyo Iimaanku, Islaamka waxaa lagu fasiraa arimaha muuqda, Iimaankana arimaha qarsoon.
6. Waxaa la cadeeyey in diinta islaamku tahay darajooyin kala tagsan, darajada 1aad: waa Islaamka, tan 2aad: waa Iimaanka, tan 3aad: waa ixsaanka isagaana ugu sareeya.
7. Asal ahaan qofka wax waydiinaya waa inuusan aqoon lahayn, waxaana ku bixinaaya inuu wax waydiiyo waa jahliga, sidaa darteed bay asaxaabtu ula yaabeen su'aashiisa iyo u rumayntiisa.
8. Waxaa lagu bilaabaa shayba shayguu ka muhiimsan yahay: waayo wuxuu ku bilaabay labada shahaado markuu Islaamka sharxayey, wuxuu kaloo ku bilaabay in Ilaahay la rumeeyo markuu sharxaayey Iimaanka.
9. waxaa la waydiiyaa Ahlu cilmiga wax uusan qofku Jaahil ka yahay si qayrki u barto.
10. saacada oo la ogaado waa cilmiga Ilaahay kaligi og yahay.

(4563)

(4) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بنِ عُمَر رضي الله عنهما قال: قال رسولُ الله صلى الله عليه وسلم: «بُنِيَ الْإِسْلَامُ عَلَى خَمْسٍ: شَهَادَةِ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ، وَإِقَامِ الصَّلَاةِ، وَإِيتَاءِ الزَّكَاةِ، وَحَجِّ الْبَيْتِ، وَصَوْمِ رَمَضَانَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(4) – Cabdullaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaado isaga iyo abihiiye wuxuu yiri- wuxuu dhahay: Rasuulka Ilaahay -naxariee-: "Islaamka waxaa lagu dhisay shan tiir: in la qiro Ilaahay maahee ilaah kaloo xaq lagu caabudo in uusan jirin, Maxamedna adoon Ilaahay iyo Rasuulkiisa yahay, salaada oo la oogo, sakada oo la bixiyo, xajka oo la guto iyo bisha ramadaanka oo la soomo." [Xadiis la isku waafaqay]-[Xadiis Saxiix ah]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku shabahay diinta Islaamka dhismo aad loo adkeeyey, oo leh shan tiir oo dhismaha xambaarsan, qaybaha kale ee Islaamkuna waa sida dhismaha dhamaystirkiisa oo kale. Tiirarkana waxaa ugu horeeya: in la qiro Ilaahay mooyee in uusan jirin ilaah kale oo xaq lagu caabudo, Maxamedna Rasuulka Ilaahay yahay, labadaasi waa hal tiir oo kaliya, oo aan kale harikarin, waa in adoonku labadaas ku dhawaaqo isagoo aqoonsan in Ilaahay kaligi yahay, oo isagu keligii xaq u leeyahay cibaadada cid kalena aysan lahayn, oo ku camal fala waxay keenayso, isagoo rumaysan Risaaladii Nabi Maxamed nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee una hogaansan. Tiirka labaad: waa salaada oo la oogo, waana salaadaha shanta ah ee faralka ah maalinta iyo habeenka: waa fajarka, duhurka, casarka, maqribka iyo cishaha, iyadoo lala imaanayo shuruudeeda, arkaanteeda, iyo waajibaadkeeda. Tiirka sadexaad: waa bixinta sakada waajibka ah, waana cibaado maali ah, oo ku waajibtay maalkasta oo gaaray intii shareecadu xadaysay, iyadoo la siino dadka xaqa u leh. Tiirka Afraad: waa xajka, waana in la aado Makkah si loo guto howlaha xajka, iyadoo Ilaahay loogu dhawaanayo. Tiirka shanaad: waa soonka Ramadaanka, waana in laga af xirnaado cuntada iyo cabitaanka iyo wixii soo raaca ee ka duwan oo soonka jabin kara, isagoo niyoonaya inuu Ilaahay ku cibaado, laga bilaabo waqtiga fajarka ilaa qoraxdu dhacdo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Labada Ashahaado way isku xiran yihiin oo midkood ansixi maayo ilaa kan kale lala yimaado, sidaasaa hal tiir looga dhigay.
2. Labada Ashahaado waa aasaaska diinta, oo Ilaahay ma aqbalayo qawl iyo camal iyaga la`aantood.

(65000)

(5) – عَنْ مُعَاذٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ، قَالَ: كُنْتُ رِدْفَ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَلَى حِمَارٍ يُقَالُ لَهُ عُفَيْرٌ، فَقَالَ: «يَا مُعَاذُ، هَلْ تَدْرِي حَقَّ اللَّهِ عَلَى عِبَادِهِ، وَمَا حَقُّ العِبَادِ عَلَى اللَّهِ؟»، قُلْتُ: اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ، قَالَ: «فَإِنَّ حَقَّ اللَّهِ عَلَى العِبَادِ أَنْ يَعْبُدُوهُ وَلا يُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا، وَحَقَّ العِبَادِ عَلَى اللَّهِ أَنْ لا يُعَذِّبَ مَنْ لا يُشْرِكُ بِهِ شَيْئًا»، فَقُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ أَفَلاَ أُبَشِّرُ بِهِ النَّاسَ؟ قَالَ: «لا تُبَشِّرْهُمْ، فَيَتَّكِلُوا».

[صحيح] - [متفق عليه]

(5) – Mucaad Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariye inuu yiri: Nabiga ayaan la fuushanaa dameer la dhihi jiray: Cufeyr, markaasuu yiri: Mucaadoow, ma og tahay xaqa Ilaahay ku leeyahay adoomadiisa iyo xaqa adoomadu Ilaahay ku leeyihiin waxaan iri: Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayaa og, wuxuu yiri: xaqa Ilaahay Adoomada ku leeyahay waa inay caabudaan oo ayna cidna ugu shariig yeelin, xaqa Adoomadu Ilaahay ku leeyihiina waa inuuna cadaabin qofkii aan u shariig yeelin waxaan iri: Rasuulka Ilaahayow ma ugu bishaareeyaa dadka wuxuu yiri: maya ha ugu bishaareyn, yey is dhigane. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey xaqa Ilaahay ku leeyahay adoomada, iyo xaqa adoomadu Ilaahay ku leeyihiin, xaqa Ilaahay ku leeyahay adoomada waa inay caabudaan kaligi oo aanay cidna la wadaajin cibaadadiisa. Xaqa adoomadu Ilaahay ku leeyihiin waa inuusan cadaabin kuwa muwaxidiinta ah ee aan cibaadadiisa cidna la wadaajin Mucaad ka dib wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahayow, ma ugu bishaareeyaa dadka si ay ugu farxaan oo ay ugu bishaaraystaan fadligaas? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Mucaad wuu u diiday isago ka baqaya in dadku isku haleeyaan warkaas.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa cadaynta  xaqa Ilaahay kuwaajibiyey adoomadiisa, kaaso ah inay caabudaan oo aanay cidna ugu shariig yeelin.
2. Waa cadaynta xaqa adoomadu Ilaahay ku leeyihiin, kaaso Ilaahay  fadligiisa iyo nicmadiisa isugu  waajibiyey, kaaso ah inuu janada geliyo oo aanu cadaabin.
3. Xadiiskaan waxaa ku jira bishaaro wayn oo ay leeyihiin muwaxidiinta aan ilaahay cibaadadiisa cidna la wadaajin, bishaaradaas oo ah inay janada galayaan.
4. Mucaad wuxuu xadiiskaan sheegay intuusan dhiman, wuxuuna ka cabsi qabey inuu ku dhoco danbiga qarinta cilmiga.
5. Waa baraarujin inaan dadka qaarki lagu dhex faafin Axaadiista qaarkeed, iyadoo laga baqayo in qof macnahooda fahmi waayo, waana Axaadiista aanay ku sugnayn wax camal fal ah ama aysan ku sugnayn xad xuduuda shareecada ka mida.
6. Dadka muwaxidiinta ah kuwooda caasiyada ah waxay hoos joogaan ilaahay mashii`adiisa, haduu doono wuu cadaabin haduu doonana wuu u dambi dhaafin, ka dibna waxay ku danbaynayaan janada.

(65007)

(6) – عن أنس بن مالك رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَمُعَاذٌ رَدِيفُهُ عَلَى الرَّحْلِ قَالَ: «يَا مُعَاذُ بْنَ جَبَلٍ»، قَالَ: لَبَّيْكَ يَا رَسُولَ اللهِ وَسَعْدَيْكَ، قَالَ: «يَا مُعَاذُ»، قَالَ: لَبَّيْكَ يَا رَسُولَ اللهِ وَسَعْدَيْكَ، ثَلَاثًا، قَالَ: «مَا مِنْ أَحَدٍ يَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللهِ صِدْقًا مِنْ قَلْبِهِ إِلَّا حَرَّمَهُ اللهُ عَلَى النَّارِ»، قَالَ: يَا رَسُولَ اللهِ، أَفَلَا أُخْبِرُ بِهِ النَّاسَ فَيَسْتَبْشِرُوا؟ قَالَ: «إِذًا يَتَّكِلُوا». وَأَخْبَرَ بِهَا مُعَاذٌ عِنْدَ مَوْتِهِ تَأَثُّمًا. [صحيح] - [متفق عليه]

(6) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade-: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Mucaad oo la fangashan ayuu ku yiri: (Mucaad Binu Jabaloow) isna wuxuu ku yiri: ku ajiibay Rasuulkii Ilaahayow farxadi ha kuu ahaataye, wuxuu ku yiri: (Mucaadow), wuxuu yiri: ku ajiibay Rasuul Ilaahayow farxadi ha kuu ahaataye, saddeax jeer, wuxuu yiri: ( majiro qof qiraya inuu jirin ilaah kale, Allaha xaqa lagu caabudo mooyee, Muaamadna Rasuulka Ilaahay yahay, isagoo qalbigiisa karun sheegaya, hadduu jirase Ilaahaybaa ka xarimaya naarta inuu galo), wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahayow: ma ugu bishaareeyaa dadka ha bishaaraystaane?, wuxuu yiri: (haddaad u sheegto way is dhiganayaan), Mucaad wuxuu sheegay xadiiskan geeridii Nabiga ka dib, cabsi uu ka cabsaday inuu ku dambaabo qarinta cilmiga. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Mucaad Binu Jabal-Allaha ka raali ahaade wuxuu ahaa mid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee gadaashiisa la fangashan neefkiisii uu fuushanaa, wuu u yeeray: Mucaadoow? wuxuuna ku cel-celiyey dhawaqaa saddex jeer, isago ku adkaynaaya ahmiyada waxa uu ku oron doono.

Intaasoo dhana wuu u jawaabayey Mucaad oo kama aamuseyn Rasuulka, isagoo dhahayey: (ku ajiibay hadan ku ajiibay Rasuul Ilaahayow, farxadi ayey ii tahay ajiibidaaduye).

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay qof qira in Allaha xaqa ah maahee ilaah kale jirin Maxamadna Rasuulka Ilaahay yahay, isagoo qalbigiisa ka run sheegaya, beenna ka ahayn, hadduu sidaa ku dhinto Ilaahaybaa ka xarimaya naarta.

Mucaad baa waydiiyey Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu ugu bishaareeyo dadka warkaa, si ay ugu farxaan oo u bishaaraystaan khayrka.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka cabsaday inay is dhigtaan oo camalka wanaagsan yaraystaan.

Intuusan dhiman ka hor Mucaad warkaa qofna uma sheegin, ilaa uu Nabigu geeriyooday ka dib, isagoo ka baqay dambi inay ku noqoto qarinta cilmigu.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waa tawaaduca Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu fangaliyey Mucaad neefkii uu fuushanaa.
2. Qaabka uu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wax u barayey dadka waa qaab tusaale, oo laga helayo tilmaamo badan oo wanaagsan, waxuu ku cel-celiyey yeedhmada Mucaad oo agtiisa fadhiya, si uu ugu soo jeediyo dareenkiisa, waxa uu usheegi doono
3. Shuruuda shahaadada kalmada tawxiidka ee: laa ilaaha illa-llaah Maxamada Rasuulu allaah waa inay qofka run ka tahay qalbigiisana ka yaqiinsan yahay oo been iyo shakina ku jirin.
4. Dadka ahlu towxiidka ah ku waarimaayaan naarta hadii xataa ay dambigooda ku galaan waa laga soo saari markay dambiga laga nadiifiyo.
5. Fadliga shahaadataynku waa mid wayn qofka yiraahda oo ka run sheega.
6. Waa wax banaan in dadka loo sheegin xadiis haduu ka dhalanayo sheegitaanka wax aan la rabin oo fasahaad ah.

(10098)

(7) – عن طارق بن أشيم الأشجعي رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «مَنْ قَالَ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَكَفَرَ بِمَا يُعْبَدُ مِنْ دُونِ اللهِ حَرُمَ مَالُهُ وَدَمُهُ، وَحِسَابُهُ عَلَى اللهِ».

[صحيح] - [رواه مسلم]

(7) – Daariq Binu Ashiim Alashjaci Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahaya: (Qofka dhaha: laa ilaaha illa-llaah, ee ku gaalooba wax kastoo Ilaahay sokadii la caabudo Ilaahay wuu xarimay maalkiisa iyo dhiigiisaba, Ilaahay ayaana xisaabin doona). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka dhaha isagoo carabkiisana kaga dhawaaqaya:(laa ilaaha illa-llaah), macneheeduna yahay: majiro ilaah xaq lagu caabudo oo Ilaahay ahayn, oo iska diida waxa Ilaahay sokadii la caabudo, kana bari noqda diimaha aan islaamka ahayn oo dhan, qofkaa Ilaahay wuu ka xarimay muslimiinta, maalkiisa iyo naftiisaba, camalkiisa muuqda mooyaane wax kale daymon mayno, maalkiisa la xoogimaayo, dhiigiisa la daadin maayo, inuu danbi ama jariimo galo ay waajibto in dhiigiisa la daadiyo iyado axkaanta islaamka waafaqsan mooyee.

Ilaahay baana maamulaya xisaabtiisa maalinta qiyaamaha, hadduu runlow ahaa isagaa ka ajar siin, hadduu munaafaq noqdana isagaa cadaabin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ku dhawaaqa (laa ilaaha illa-llaah) iyo ku gaalawga wax kastoo Ilaahay sokadii la caabudo shardi bay u tahay soo galida Islaamka.
2. Macnaha (laa ilaaha illa-llaah) waa ku gaalowga wax kastoo Ilaahay sokodi la caabudo, sida sanamyada, qabuuraha, iyo qayrkood, iyo in Ilaahay loo kali yeelo cibaadada.
3. Qofka la yimaadda tawxiidka una hogaansama shareecada islaamka si muuqata waxaa waajib ah, in la ammaan siiyo, ilaa laga arkayo oo ku caddaanayo wax arinkaa khilaafsan.

4. Waa xaaraan maalka muslimka, dhiigiisa, cirdigiisa, xaq la'aan.
5. Adduunka inta la joogo dadka waxa lagu xukumayaa waxa laga arko ee ay ficilkooda ku muujinayaan, aakhiro marka la tagana Ilaahay wayne niyadooda iyo qasdigooda ayuu kula xisaabtamin.

(6765)

(8) – عَنْ جَابِرٍ رضي الله عنه قَالَ: أَتَى النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ رَجُلٌ فَقَالَ: يَا رَسُولَ اللهِ، مَا الْمُوجِبَتَانِ؟ فَقَالَ: «مَنْ مَاتَ لَا يُشْرِكُ بِاللهِ شَيْئًا دَخَلَ الْجَنَّةَ، وَمَنْ مَاتَ يُشْرِكُ بِاللهِ شَيْئًا دَخَلَ النَّارَ» [صحيح] - [رواه مسلم]

(8) – Jaabir Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nin ayaa u yimid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , wuxuuna ku yiri: Rasuulka Ilaahayow, waa maxay labada waajibay wuxuu ku yiri: qofka dhinta isagoon Ilaahay u shariig yeelayn janaduu galin, qofkase dhinta isagoo Ilaahay u shariig yeelaya naartuu galin. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee nin ayaa weydiiyey labada sifo ee midi waajibinayso galida janada, midna waajibinayso galida naarta ? Nabigu nabad iyo naxariis Allah siiyee wuxuu ugu jawaabay: in sifada waajibinaysa galida janada ay tahay in qofku dhinto isagoo Ilaahay kaligi caabudaya oo aan u shariig yeelin. Sifada waajibinaysa galida naartana ay tahay in qofku dhinto isagoo Ilaahay u shariig yeelaya, oo u yeela Ilaahay wax la mida ama u dhigma xaga Ilaahnimadiisa, rabinimadiisa, magacyadiisa iyo sifooyinkiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa fadliga tawxiidku leeyahay iyo in qofkii dhinta isagoo muumina oo aan Ilaahay cidna ugu shariig yeelin uu janada galayo.

2. Waa khatarta shirkigu leeyahay, iyo in qofkii dhinta isagoo Ilaahay u shariig yeelaya uu naarta galayo.
3. muwaxidiinta intooda caasiga ah waxay hoos joogaan mashii`ada Ilaahay , haduu doono wuu cadaabin haduu doonana wuu u dambi dhaafin, ka dibna waxay ku danbaynayaan janada.

(65008)

(9) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بنِ مَسْعُودٍ رضي الله عنه قال: قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم كَلِمَةً وَقُلْتُ أُخْرَى، قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم: «مَنْ مَاتَ وَهُوَ يَدْعُو مِنْ دُونِ اللهِ نِدًّا دَخَلَ النَّارَ» وَقُلْتُ أَنَا: مَنْ مَاتَ وَهُوَ لَا يَدْعُو لِلهِ نِدًّا دَخَلَ الْجَنَّةَ. [صحيح] - [متفق عليه]

(9) – Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: kalimad ana mid ayaan iri, Nabigaa yiri -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: " qofka dhinta isagoo wax aan Ilaahay ahayn baryaaya naartuu galayaa," ana waxaan iri: qofka dhinta isagoon wax aan Ilaahay ahayn baryeyn janaduu galayaa. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxa Ilaahay u waajibay ee ay tahay in kaligi lagu caabudo qofkii cid kale u leexiya, sida baryada Ilaahay qayrki la baryo, ama cid Ilaahay ahayn oo uu gar-gaar weydiisto, qofkaasi haduu sidaa ku dhinto naarta ayuu galayaa. Ibnu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ku siyaadiyey qofka dhinta isagoon Ilaahay cidna ugu shariig yeelin, kaasi wuxuu ku dambaynayaa janada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ducadu waa cibaado, mana loo leexiyo cid aan Ilaahay ahayn.
2. Towxiidka fadligiisa qofka ku dhinta janaduu galayaa, xataa hadii lagu ciqaabo danbiyadiisa qaarkood.

3. Shikiga khatartiisa iyo in qofka ku dhinta naarta galayo.

(3419)

(10) – عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لِمُعَاذِ بْنِ جَبَلٍ، حِينَ بَعَثَهُ إِلَى الْيَمَنِ: «إِنَّكَ سَتَأْتِي قَوْمًا أَهْلَ كِتَابٍ، فَإِذَا جِئْتَهُمْ فَادْعُهُمْ إِلَى أَنْ يَشْهَدُوا أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللهِ، فَإِنْ هُمْ أَطَاعُوا لَكَ بِذَلِكَ، فَأَخْبِرْهُمْ أَنَّ اللهَ قَدْ فَرَضَ عَلَيْهِمْ خَمْسَ صَلَوَاتٍ فِي كُلِّ يَوْمٍ وَلَيْلَةٍ، فَإِنْ هُمْ أَطَاعُوا لَكَ بِذَلِكَ، فَأَخْبِرْهُمْ أَنَّ اللهَ قَدْ فَرَضَ عَلَيْهِمْ صَدَقَةً تُؤْخَذُ مِنْ أَغْنِيَائِهِمْ فَتُرَدُّ عَلَى فُقَرَائِهِمْ، فَإِنْ هُمْ أَطَاعُوا لَكَ بِذَلِكَ، فَإِيَّاكَ وَكَرَائِمَ أَمْوَالِهِمْ، وَاتَّقِ دَعْوَةَ الْمَظْلُومِ، فَإِنَّهُ لَيْسَ بَيْنَهُ وَبَيْنَ اللهِ حِجَابٌ». [صحيح] - [متفق عليه]

(10) – Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu ku yiri Mucaad Binu Jabal markuu u diray Yaman: (( waxaad u tagidoontaa Qolo Ahlu kitaab ah, hadaad u tagto ugu yeer inay qiraan in Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudaa jirin, Maxamedna uu yahay Rasuulkii Ilaahay, haday intaa kaa yeelaan, u sheeg in Ilaahay ku faral yeelay shan salaadood habeen iyo maalin walba, haday intaa kaa yeelaan u sheeg in Ilaahay ku faral yeelay sadaqo laga qaadayo intooda maalka leh, oo lagu celinaayo intooda saboolka ah, haday intaa kaa yeelaan, waxaan kaaga digayaa xoolahooda kuwa ugu fiican inaad ka qaado, iskana ilaali ducada kan la dulmiyey, waayo isaga iyo Ilaahay xijaab uma dhexeeyo. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu u diray Mucaad Binu Jabal Allaha ka raali ahaade dhulka Yaman isagoo daaci iyo macalin ah wuxuu u cadeeyey inuu u tagi doono Qolo Nasaaro ah, si uu isugu diyaariyo, ka dibna uu dacwada ugu yeerayo ka bilaabo siday u kala muhiimsan tahay. Wuxuu ugu yeerayaa hagaajinta caqiidada marka koowaad, taaso ah inay qiraan in Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudo jirin, Nabi Maxamedna yahay Rasuulkii Ilaahay. Waayo iyaday Islaamka ku soo galayaan, hadii ay taas u

hogaansamaan wuxuu amrayaa inay salaada oogaan, waayo waa tan ugu wayn waajibka towxiidka ka dib. Hadii ay oogaan salaada wuxuu amrayaa kuwooda xoolaha leh inay bixiyaan sakada xoolahooda siiyaana ku wooda saboolka ah, wuxuuna uga digay inuu ka qaado xoolaha kuwa ugu fiican, waayo waajibku waa dhex dhexaadka. Ka dibna wuxuu u dardaarmay inuu ka fogaado dulmiga, si aanu kan la dulmiyey u habaarin, waayo baryadiisa Ilaahay waa aqbalayaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Macnaha:

   {شهادة أن لاإله إلا الله}

   waa in Ilaahay loo kali yeelo cibaadada, iyo katagida in la caabudo cidaan Ilaahay ahayn .

2. Macnaha:

   {شهادة أنّ محمداً رسول الله}

   waa in la aamino oo la rumeeyo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyo diinta uu la yimid, iyo inuu yahay Rasuulka u dambeeya ee Basharka Ilaahay u soo diray.

3. Qofka aqoonta leh iyo mid shubho aaminsan in lala hadlo la mid maha in lala hadlo mid jaahila, sidaa darteed ayuu Nabigu scw ugu baraarujiyey Mucaad hadalkiisii uu yiri: (waxaad u tagaysaa dad Ahlu kitaab ah).

4. Waa muhiim in Muslimku aqoon u leeyahay diintiisa, si uu isaga dhameeyo shubuhaadka, taaso ah inuu cilmiga barto.

5. Nabiga scw Markii Ilaahay soo diray ka dib waxaa buray Diintii Yuhuuda iyo Nasaarada, dadka maalinta qiyaame badbaadaya kuma jiraan ilaa ay Diinta Islaamka soo galaan, oo ay rumeeyaan Nabiga scw.

(3390)

(11) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّهُ قَالَ: قِيلَ: يَا رَسُولَ اللهِ، مَنْ أَسْعَدُ النَّاسِ بِشَفَاعَتِكَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ؟ قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «لَقَدْ ظَنَنْتُ يَا أَبَا هُرَيْرَةَ أَنْ لَا يَسْأَلَنِي عَنْ هَذَا الْحَدِيثِ أَحَدٌ أَوَّلُ مِنْكَ؛ لِمَا رَأَيْتُ مِنْ حِرْصِكَ عَلَى الْحَدِيثِ، أَسْعَدُ النَّاسِ بِشَفَاعَتِي يَوْمَ الْقِيَامَةِ، مَنْ قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ خَالِصًا مِنْ قَلْبِهِ أَوْ نَفْسِهِ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(11) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa lagu yiri: rasuulkii Ilaahayow dadka yaa ugu mudan shafaacadaada maalinta qiyaame? wuxuu yiri Rasuulku:(dhab ahaan waxaan filayey Abaa Hureyrow in aanu i waydiinayn xadiiskaan qof adiga kaa horeeya markaan arkay sidaad ugu dadaalaysid xadiiska, qofka dadka ugu mudan shafaacadayda maalinta qiyaame, waa qofka qalbigiisa ama naftiisa si ikhlaas ah uga yiraahda laa ilaaha ilaa Allaah.) **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofka ugu mudan shafaacadiisa maalinta qiyaame waa qofka qalbigiisa si ikhlaas ah uga yiraahda: (Laa Ilaaha Ilaa Allah) majiro mid xaqa lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn, waana inuu yahay mid ka nabad galay shirkiga iyo is tus tuska.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa sugan in Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu shafaaco leeyahay aakhiro, shafaacadiisana ma helayso cidaan muwaxidiinta ahayn.
2. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee shafaacadiisu waa isagoo Ilaahay u barya qofka naartu u waajibtay inuusan naarta galin, kii naarta galayna uu shafacaada kaga soo boxo naarta.

3. Fadliga ay leedahay kalimada tawxiidku iyadoo Ilaahay loo gaar yeelayo, iyo waynida raadkeeda.
4. Kalimada towxiidka waxaa lagu xaqiijin karaa in macnaheeda la barto laguna camal falo waxay keenayso.
5. Fadliga Abii Hurayre Allaha ha ka raali noqdee, iyo dadaalkiisa uu cilmiga ku bixiyey.

(3414)

(12) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «الْإِيمَانُ بِضْعٌ وَسَبْعُونَ -أَوْ بِضْعٌ وَسِتُّونَ- شُعْبَةً، فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الْأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ، وَالْحَيَاءُ شُعْبَةٌ مِنَ الْإِيمَانِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(12) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Iimaanku waa dhowr iyo todobaatan ama dhowr iyo lixdan qaybood, waxaana ugu fadli badan hadalka: (laa ilaaha Illa-llaah), waxaana ugu yar jidka oo wixii dhib ah laga qaado, xishoodkuna waa qayb ka mida iimaanka). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in iimaanku qaybo iyo laamo badan yahay, kuwaasoo ka kooban acmaal laqabto, caqiido, hadalo.

Waxaana ugu sareeya qaybaha iimaanka u guna fadli wayn hadalka: (laa ilaaha Illa-llaah), waa in macnaheeda aqoon loo leeyahay, laguna camal falayo waxay u taagan tahay, oo ah inuu Ilaahay yahay Ilaaha kaliya ee xaqa u leh in la caabudo keligii, wax kalana aan lala wadaajin.

Qaybta ugu yar laamaha iimaanku waa in laga leexiyo wixii dhib ku ah dariiqa dadku marayaan.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dib wuxuu sheegay in xishoodku qaybaha iimaanka ka mid yahay, waana dhaqan ku dhalinaaya qofka inuu wanaaga sameeyo xumaantana ka tago.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Iimaanku waa darajooyin qaar ka fadli badan yahay qaarka kale.
2. Iimaanku waa hadal iyo camal iyo caqiido.
3. Ilaahay oo laga xishoodaa wuxuu keenaa: inuuna kugu arag meel uu kaa reebay, iyo inuuna kaa waayin meel uu ku faray.
4. hadii tiro la sheego looma jeedo in arinku tiradaa ku kooban yahay, balse wuxuu ku tusayaa in acmaasha iimaanku badan tahay, carabtu waxaa dhici karta inay shay tiro ku sheegaan oo aysan doonayn inaysan wax qayrkiya diidin.

(6468)

(13) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بنِ مَسْعُودٍ رضي الله عنه قال: سَأَلْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: أَيُّ الذَّنْبِ أَعْظَمُ عِنْدَ اللهِ؟ قَالَ: «أَنْ تَجْعَلَ لِلهِ نِدًّا وَهُوَ خَلَقَكَ» قُلْتُ: إِنَّ ذَلِكَ لَعَظِيمٌ، قُلْتُ: ثُمَّ أَيٌّ؟ قَالَ: «وَأَنْ تَقْتُلَ وَلَدَكَ؛ تَخَافُ أَنْ يَطْعَمَ مَعَكَ» قُلْتُ: ثُمَّ أَيٌّ؟ قَالَ: «أَنْ تُزَانِيَ حَلِيلَةَ جَارِكَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(13) – Cabdillaahi Binu Mascuud -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabigaan waydiiyey nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: xaga Ilaahay dambigee ugu wayn?, wuxuu yiri: "waa adigoo Ilaahay u sameeya mid la mida isagoo ku abuuray", waxaan iri: arinkaasi waa mid wayn, maxaa ku xiga?, wuxuu yiri: "inaad ilmahaaga disho, adoo ka cabsanaaya inuu wax kula cuno", waxaan iri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: "inaad ka sinaysatid xaaska dariskaaga". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, waxaa la waydiiyey dambiyada ugu waa wayn wuxuuna yiri: Dambiyada shirkiga wayn ayaa ugu wayn, waana inaad Ilaahay u samayso mid u dhigma ama la mida Ilaahnimadiisa ama Rabinimadiisa ama Magacyadiisa iyo

Sifaadkiisa, danbigaasna Ilaahay kuma dhaafo towbad mooyee, qofkii sameeyaa haduu ku dhinto naarta ayuu ku waarayaa. Ka dib waa qofka oo ilmihiisa dila isagoo ka baqaya inuu wax la cuno, dilka naftuna waa la xarimay, laakiin wuxuu dambigu ku sii waynaanayaa markuu noqdo kan la dilay mid qaraabo dhaw la ah kan dilay, waxa kaloo dambiga sii waynaynaya marka ujeedka dilku noqdo cabsi uu ka qabo kan wax dilay in kan la dilay la wadaago irsaaqada Ilaahay. Ka dib waxaa xiga inuu ninku ka sinaysto xaaska ninka dariskiisa ah, isagoo xodxodonaaya si ay u ogolaato oo uu uga sinaysto. sinadu waa xaaraan laakiin wuxuu dambigeedu sii wayn yahay marka mida laga sinaystey ay tahay xaaska dariska ee shareecada islaamku kula dardaarantay in la wanaajiyo oo loo baarinimo falo oo dhaqan fiican lagula dhaqmo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dambiyadu way kala wayn yihiin, sida camalka wanaagsanba uu u kala ajar badan yahay.
2. Dambiyada waxaa ugu wayn: Ilaahay oo loo shariig yeelo, ka dibna inaad disho ubadkaaga adigo ka baqaya inuu wax kula cuno, ka dibna inaad ka sinaysato xaaska dariskaaga.
3. Irsaaqadu gacanta Ilaahay ayey ku jirtaa, Isagaana kafaala qaaday quudka makhluuqa oo dhan.
4. xaqa jaarku waa mid aad u wayn, dhibka loo gaystona dambigiisu waa ka wayn yahay dhibka loo gaysto dadka kale.
5. Allaha khaaliqa ah kaligi uun baa xaq u leh cibaadada cid lala wadaajiyona ma jirto.

(5359)

(14) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «كُلُّ أُمَّتِي يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ أَبَى»، قَالُوا: يَا رَسُولَ اللهِ، وَمَنْ يَأْبَى؟ قَالَ: «مَنْ أَطَاعَنِي دَخَلَ الْجَنَّةَ، وَمَنْ عَصَانِي فَقَدْ أَبَى». [صحيح] - [رواه البخاري]

(14) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay scw uu yiri: " Ummaddayda oo dhan janaday galaysaa qofka iska diida maahee ", waxay dheheen: Rasuulka Ilaahayow, yaa diidaya? wuxuu yiri: "qofka i adeeca janaduu galayaa, kan i caasiyana waa qof diiday-janada". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ummaddiisu dhamaan janada galayso qofkii iska diida maahee!

Asaxaabtu Allaha ka raali noqdee waxay yiraahdeen yaa diidaya rasuulkii Ilaahayow.?!

Wuxuu ugu jawaabey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee qofka u hogaansama ee raaca Rasuulka scw janaduu galayaa, qofkase aan u hogaansamin shareecada camalkiisa xun waxay ka dhigan tahay inuu diiday janada galideeda.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Rasuulku scw oo la adeeco waxay ka mid tahay Ilaahay adeecidiisa, Nabiga oo lagu caasiyona waxay ka mid tahay Ilaahay oo lagu caasiyey.
2. Nabiga scw oo la adeeco waxay qofka u waajibinaysaa janada, in la caasiyona waxay u waajibinaysaa naarta.
3. Waxaa loogu bishaaraynayaa kuwa Rasuulka adeecay ee ummaddaan ah, inay dhamaantood janada galayaan kuwa Ilaahay iyo Rasuulkiisa caasiyey mooyee.
4. Nabigu scw ummaddiisa wuu u naxariistay wuuna ku dadaalay hanuuntooda.

(4947)

(15) – عَن عُمَرَ بنِ الخَطَّابِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قال: سَمِعْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «لَا تُطْرُونِي كَمَا أَطْرَتِ النَّصَارَى ابْنَ مَرْيَمَ؛ فَإِنَّمَا أَنَا عَبْدُهُ، فَقُولُوا: عَبْدُ اللهِ وَرَسُولُهُ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(15) – Cumar Binu Khadaab Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: (Ha ku xad gudbina amaantayda siday ugu xad gudubtay Nasaaradu Ibnu Maryam, anigu waxaan ahay adoon Ilaahay ee i dhaha adoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in xadka sharciga ah la dhaafiyo amaantiisa oo lagu sifeeyo sifaatka Ilaahay iyo ficilka Ilaahay u gaarka ah, ama in lagu sheego inuu og yahay qaybka, ama Ilaahay lala baryo, sida ay nasaaradu ku samaysay Ciise Ibnu Maryam nabadi korkiisa ha ahaatee. Ka dib wuxuu cadeeyey inuu yahay adoon Ilaahay, wuxuuna faray inaan isaga ku niraahno: adoonkii Ilaahay iyo Rasuulkiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa laga digayaa in la dhaafo xadka sharciga ah ee waynaynta iyo amaanta, waayo taasi waxay keenaysaa shirki.
2. Arinkii Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka digay way ku dhacaday ummaddani, oo qolo waxay ku xad gudubtay Rasuulka Ilaahay scw, qolona waxay ku xad gudubtay Aalu Baytka, qolona waxay ku xad gudubtay owliyada Ilaahay, markaasay ku dheceen shirki.
3. Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu naftiisa ku sifeeyey inuu yahay adoon Ilaahay, si uu u cadeeyo

inuu yahay adoon Ilaahay Rabi u yahay, oo aysan banaanayn in la siiyo wax Ilaahay u gaara.

4. Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku sifeeyey naftiisa inuu Rasuul Ilaahay yahay, si uu u cadeeyo in xaga Ilaahay laga soo diray oo ay waajib tahay rumayntiisu iyo raacidiisu.

(3406)

(16) – عن أنس رضي الله عنه قال: قال النبي صلى الله عليه وسلم: «لَا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّى أَكُونَ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِنْ وَالِدِهِ وَوَلَدِهِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِينَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(16) – Anas Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: ( Axad idinka midihi ma rumayn ilaa uu iga jeclaado waaridki, caruurtiisa iyo dadka oo dhan. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulku wuxuu inoo sheegay in qofka muslimku iimaankiisu kaamil noqon karin ilaa uu ka hor mariyo jacaylka Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee jacaylka hooyadii, aabbihii, wiilkiisa, gabadhiisa, iyo dadkoo dhan, jacaylkaasina wuxuu keenayaa in la adeeco, loo gargaaro iyo inaan la caasiyin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib jacaylka Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waana in laga hor mariyo jacaylka cidkasta oo Ilaahay abuuray
2. Calaamada jacaylka Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee kaamilnimadeedu: waa in sunada Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee loo hiiliyo oo naf iyo maalba lagu bixiyo.

3. Jacaylka Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu keenayaa in lagu adeeco wuxuu faro, in la rumaysto wuxuu sheegay, lagana fogaado wuxuu reebay oo la joojiyey, iyo in la raaco lagana tago bidcada.

4. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee xaqiisu waa ka wayn yahay kana adag yahay dadka oo dhan, waayo isagaa sabab u ahaa inaan ka soo hanuuno baadi, inagana celiyey naarta, kuna liibaano janada.

(5953)

(17) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صلى الله عليه وسلم قَالَ: «دَعُونِي مَا تَرَكْتُكُمْ، إِنَّمَا هَلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ بِسُؤَالِهِمْ وَاخْتِلَافِهِمْ عَلَى أَنْبِيَائِهِمْ، فَإِذَا نَهَيْتُكُمْ عَنْ شَيْءٍ فَاجْتَنِبُوهُ، وَإِذَا أَمَرْتُكُمْ بِأَمْرٍ فَأْتُوا مِنْهُ مَا اسْتَطَعْتُمْ». [صحيح] - [متفق عليه]

(17) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Nabiga ka wariyey nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Ha i weydiinina waxaan ka aamuso, waxaa halaagay kuwii idinka horeeyey su'aalahoodii iyo ambiyadoodii oo ay khilaafayeene, hadaan wax idinka reebo ka fogaada, hadaan wax idin farana la imaada inta aad ka awoodaan. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay axkaamta shareecadu inay saddex tahay: qayb laga aamusay, qayb la iska reebay iyo qayb la is faray.

Mida 1aad: waa qaybta sharcigu ka aamusay: wax xugun ah malaha, shay walbana asalkiisu waajib maaha. Waqtigii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa waajib ahayd in la iska daayo waydiinta waxaan dhicin iyadoo laga baqaayey inay soo dagto waajibinteedu ama xaaraanimadeedu, Ilaahay wuxuu uga tagay isago u naxariisanaya adoomada. Nabigu markuu dhintay ka dibse haday su'aashu tahay qaab fatwo ah ama barasho ku saabsan dadku waxay u baahan yihiin oo

diinta ah way banaan tahay su'aashaasi, waliba waa la is faray, hadiise ay tahay qaab cinaad iyo iskalifid ah waa mida uu xadiisku reebey, waayo waxay keeni kartaa wixii ku dhacay reer benii Israa'iil (yuhuudda), markii la amray inay sac gawracaan, hadii ay sac uun gawracaan kuwo amarkii fuliyey ayey noqon lahaayeen, laakiin way isku adkeeyeen iyagana waa lagu adkeeyey.

midka 2aad: waa nawaahida: waana camalka laga ajarsiiyo qofkii iska daaya, laguna ciqaabo qofkii sameeya camalkaas, waxaana waajib ah in laga fogaado dhamaantood.

midka 3aad: waa awaamirta: waana camalka laga ajarsiinaayo qofkii sameeya, laguna ciqaabayo qofkii iska daaya, waxaana waajib ah in la sameeyo intii laga awoodo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa haboon in lagu mashquulo waxa muhiim ah ee loo baahan yahay, oo laga tago waxa aan loo baahnayn markaa la joogo, iyo inaan laga shaqayn su`aalida shayga aan dhicin.
2. Waa xaaraan su'aasha keeni karta inay masalada adkayso iyo furto albaabka shubuhaat keeni kara khilaaf badan.
3. Waxaa la isfaray in la iska daayo wixii la iska reebay oo dhan, waayo wax dhib ah kuma jirto ka tagidiisa, sidaa darteed baa loo guud yeelay reebidiisa.
4. Waxaa la is amray in shayga la is faray lagala yimaado kolba inta laga awoodo, waayo waxaa dhici kara in samayntiisa dhib noqoto ama la awoodi waayo, sidaa darteed amarku wuxuu noqonayaa in lagala yimaado inta laga awoodo.
5. Waxaa la reebay su'aalaha badan-ee wax faa'iido ahi ka dhalaneyn, waxay culumadu u qeybiyeen su'aasha labo qeybood: midda 1aad: waa su'aasha cilmiga iyo aqoonta lagu koror sanayo ee xagga diinta, waana la rabaa taasoo kale, waana su'aalihii asaxaabtu Suubbanaha ay weydiin jireen nabadgelyo

iyo naxariis Allaha siiyee, mida 2aad: waa su'aasha uu qofku uga jeedo madax adeyg iyo wax adkeyn ama xujeyn, waana midda la reebay.

6. Ummaddaan waxaa looga digayaa inay khilaafto Nabigeeda, sidii ku dhacday ummaddihii ka horeeyey.
7. Su'aalaha badan ee aan loo baahnayn iyo ambiyada oo la khilaafo waa asbaabta lagu halaagsamo, siiba umuuraha aan la gaari karin sida masalooyinka qaybka ee Ilaahay mooyee cid kale aysan aqoon iyo wixii ku saaban xaalka maalinta qiyaame.
8. Waa la reebay in la su'aalo masalooyinka adag, imaam Alawsaaci wuxuu yiri: hadii ilaahay rabo inuu adoonka ka xarimo barakada cilmiga carabiisa waxaa lagu tuuraa masalooyinka ad-adag, waxaan arkay kuwaaso dadka ugu cilmi yar, Ibnu Wahab wuxuu yiri: waxaan maqlay Imaam Maalik oo dhahaya: cilmiga oo lagu murmo nuurka cilmiga ayuu ka tiraa ninka qalbigiisa.

(4295)

(18) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «بَلِّغُوا عَنِّي وَلَوْ آيَةً، وَحَدِّثُوا عَنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ وَلَا حَرَجَ، وَمَنْ كَذَبَ عَلَيَّ مُتَعَمِّدًا فَلْيَتَبَوَّأْ مَقْعَدَهُ مِنَ النَّارِ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(18) – Cabdullaahi Binu Camar waxaa laga wariyey Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiiye inuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: (Iga gudbiya aniga kulay aayad ku tahay, reer Banii Israa'iilna ka sheekaya dhib kuma jiree, qofka si kas ah iigu been abuurta ha u diyaar noqodo booskuu naarta ka fariisan lahaa). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu amrayaa in cilmiga kitaabka iyo sunada laga gaar siiyo dadka, in yarba ha ahaadee

sida aayad quraana ama hal xadiisa, waxaana shardi ah inuu yaqaan waxa uu gaarsiinaayo oo uu dadka ugu yeerayo. Nabigu scw wuxuu cadeeyey inaan dhib ku jirin ka sheekaynta reer Banii Israa'iil wixii ku dhacay ee ay soo mareen waase wixii aan diinteena ka hor imaanayn. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dib wuxuu ka digay qofkii si kas ah ugu been abuurta inuu naarta ka diyaarsado guri.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la is jeclaysiinayaa gudbinta shareecada Ilaahay, qofkana waxaa laga rabaa inuu guto wuxuu xafiday ee uu fahmay haba yaraatee.
2. Waa waajib in cilmiga sharciga ah la raadiyo oo la barto, si qofka ay ugu suuro gasho inuu Ilaahay uu caabudo oo diinta Ilaahay si saxa u gaarsiiyo.
3. Waxaa waajib ah in la hubiyo sugnaanta xadiis kasta intaan la faafin ama dadka la gaarsiin, taasoo ah digtooni laga qabo inaan la soo galin goodigaas adag.
4. Waxaa la isku boorinayaa in hadalka run laga sheego lagana foojignaado tabinta warka, si aan loogu dhicin beenta, gaar ahaana markay tahay xaga diinta Ilaahay casa wajala.

(3686)

(19) – عن المقدام بن معدِيْكَرِب رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «أَلَا هَلْ عَسَى رَجُلٌ يَبْلُغُهُ الْحَدِيثُ عَنِّي وَهُوَ مُتَّكِئٌ عَلَى أَرِيكَتِهِ فَيَقُولُ: بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ كِتَابُ اللهِ، فَمَا وَجَدْنَا فِيهِ حَلَالًا اسْتَحْلَلْنَاهُ، وَمَا وَجَدْنَا فِيهِ حَرَامًا حَرَّمْنَاهُ، وَإِنَّ مَا حَرَّمَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَمَا حَرَّمَ اللهُ». [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وابن ماجه]

(19) – Almiqdaam inu macdi yakrib-Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri-: War hooy ma laga yaaba in xadiiskaygu gaaro nin fadhigiisa ku dangiiga oo yiraahda : waxaa anaga iyo adinka inoo dhexeeya kitaabka Ilaahay, waxaan ka helno ee xalaal ah waan xalaashanaynaa, waxaan ka helno ee xaaraan ahna waan iska xarimeynaa, hadaba wixii uu xarimay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waa sida waxa Ilaahay xarimay. [Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,ibn maajah]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu soo dhawaaday waqti ay orondoonaan dadka qaarki iyagoo fadhiya, oo midkood isagoo ku dangiiga gogoshiisa, oo uu soo gaaro xadiiska Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, oo markaas uu dhaho: waxaan ku kala baxaynaa Qur'aanka kariimka ah isagaana nagu filan, waxaan ku aragno ee xalaal ah waan ku camal falaynaa, waxaan ku aragno ee xaaraan ahna waan ka fogaanaynaa. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, ka dib wuxuu cadeeyey wax kastoo Nabigu xarimay ama ku reebay sunadiisa inuu la mid yahay xugunka Ilaahay ku xarimay kitaabkiisa, waayo Nabigu Ilaahay ayuu fariinta ka sidaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Sunada Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee waxaa loo weyneynayaa sida Qur'aanka loo weyneeyo waana la qaadanayaa.
2. Adeecida Rasuulka waa adeecida Ilaahay, ku caasinta Rasuulkana waa ku caasinta Ilaahay.
3. Waxaa sugan xujonimada sunada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyo in laga difaaco sunada kuwa la dirirsan ama diidan .

4. Qofka diidan sunada ee sheegta inuu Qur'aanka ku gaab sanayo, waa mid labadaba diidan oo ka been sheegaya wuxuu sheganayo oo ah inuu qur'aanka raacayo.
5. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, nabinimadiisa waxa cadaynaya waxaa ka mid ah: inuu sheego shay dhicidoon mustaqbalka, shaygiina sidii uu u sheegay u dhacayo.

(65005)

(20) – عن عائشة أم المؤمنين وعبد الله بن عباس رضي الله عنهما قالا: لَمَّا نَزَلَ بِرَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ طَفِقَ يَطْرَحُ خَمِيصَةً لَهُ عَلَى وَجْهِهِ، فَإِذَا اغْتَمَّ بِهَا كَشَفَهَا عَنْ وَجْهِهِ، فَقَالَ وَهُوَ كَذَلِكَ: «لَعْنَةُ اللَّهِ عَلَى اليَهُودِ وَالنَّصَارَى، اتَّخَذُوا قُبُورَ أَنْبِيَائِهِمْ مَسَاجِدَ» يُحَذِّرُ مَا صَنَعُوا. [صحيح] - [متفق عليه]

(20) – Caa'isha iyo Cabdullaahi Binu Cabaas Allaha ka wada raali ahaadee waxay yiraahdeen: Markuu ku soo dagay Rasuulka Ilahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee sakaraadka geeridu wuxuu bilaabay inuu wajiga iska saaro cimaamad uu lahaa, markuu sakaraadku ku sii kordhana wuu iska qaadaayey, wuxuu yiri isagoo xaaladaa ku sugan:" Allaha lacnado Yuhuud iyo Nasaaro, qubuuraha nabiyadooda ayey masaajid ka dhigteen" wuxuu ka digay waxay sameeyeen. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Caa'isha iyo Cabdullaahi Binu Cabaas Allaha ka raali ahaadee waxay inoo sheegeen in markii Rasuulka Ilahahay uu ku dhacey sakaraadku, uu bilaabay inuu wajiga iska saaro maro, marka neeftu ku dhagto sakaraadka awgii uu iska qaadayey, wuxuuna dhahayey isagoo xaaladaa adag ku jira: Allaha lacnado Yuhuud iyo Nasaaro oo ha ka fogeeyo naxariistiisa, sababtoo ah waxay ka dul dhiseen qubuuraha nabiyadooda masaajid, haduuna arinkaasi khatar wayn ahayn Nabiga oo xaalad sakaraad taagan muuna sooqaadeen, sidaa darteed wuxuu ka reebay Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiiye- ummaddiisa inay

sidasoo kale la yimaadaan oo ay u ekaadaan Yuhuuda iyo Nasaarada, waayo waa ficil yuhuud iyo nasaaro ay ku tilmaaman yihiin, waana wax u jiidi kara qofka inuu Ilaahay u shariig yeelo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la reebay in laga yeesho qubuuraha Nabiyada iyo saalixiinta masaajid lagu tukado, waayo ariinkaasi wuxuu horseedayaa shirki.
2. Rasuulku scw wuxuu ahmiyad wayn siiyey ilaalinta tawxiidka, iyo cabsida uu ka qabay waynaynta qubuuraha, waayo arinkaasi wuxuu keenayaa Ilaahay oo loo shariig yeelo.
3. Waa wax banaan in la lacnado yuhuuda iyo nasaarada iyo cid kastoo samaysa waxay sameeyaan ee ah qabuuraha oo laga dhiso, masaajid.
4. Dhisitaanka qubuuruhu waa dhaqan yuhuud iyo nasaaro, xadiiskaana waxaa ku jira inay reeban tahay isku ekaysiintoodu.
5. oo looga ekaado in qabuurta laga dhigo masaajid lagu tukado ama xageeda loo tukado hadii aan xataa masjid laga dhisin.

(3330)

(21) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم: «اللهُمَّ لَا تَجْعَلْ قَبْرِي وَثَنًا، لَعَنَ اللهُ قَوْمًا اتَّخَذُوا قُبُورَ أَنْبِيَائِهِمْ مَسَاجِدَ». [صحيح] - [رواه أحمد]

(21) – Abii Hurayra Allaha ka raali ahaade Nabiga wuxuu ka wariyey: Ilaahow ha ka dhigin qabrigayga Sanam, Ilaahay wuu lacnaday qoladii ka dhigata qubuurta ambiyadooda masaajid. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka baryey Rabigii inuusan ka dhigin qabrigiisa sida sanamka ay dadku caabudaan,

iyagoo waynaynaaya, oo sujuuda ay ula jeensadaan, ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay uu cariyey oo ka fogeeyey naxariistiisa qofka qabuurta Nabiyada ka dhigta masaajid, waayo qabriga in masjid laga dhigto waxay sabab u noqon in la caabudo oo la aamino.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadka sharciga ah in la dhaafiyo qubuurta Ambiyada iyo Saalixiintu waxay keenaysaa in Ilaahay sokodi la caabudo, waa waajib in laga digtoonaado asbaabta shirkiga keenta.
2. Ma banaana in la aado qabuurta iyado la waynaynayo oo agteeda lagu cibaadaysto, sikasta oo uu Ilaahay ugu dhawaa qofka qabriga ku jiraa.
3. Waa la xarimay in qabuurta laga dul dhiso masaajid.
4. Waa la xarimay in salaad lagu tukado qabuurta xataa hadaan masjidka loo dhisin salaada janaasada mooye taaso aan weli lagu tukan.

(3336)

(22 ) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «لَا تَجْعَلُوا بُيُوتَكُمْ قُبُورًا، وَلَا تَجْعَلُوا قَبْرِي عِيدًا، وَصَلُّوا عَلَيَّ؛ فَإِنَّ صَلَاتَكُمْ تَبْلُغُنِي حَيْثُ كُنْتُمْ». [حسن] - [رواه أبو داود]

(22) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri: (Ha ka dhigina guryihiina qubuur, hana ka dhigina qabrigayga ciid, iguna saliya, salintiinu way isoo gaaraysaa meel kastood joogtaan). [Xadiis Xasan ah] - [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

## Sharraxaad:

Nabigu wuxu reebay in guryaha lugu tukan waayo oo laga dhigo sida qabuurta aan lagu tukan oo kale. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis

Allaha siiyee wuxuu ka digay in lagu celceliyo siyaarada Qabrigiisa oo si joogto ah loogu kulmo qabriga oo caado laga dhigto, waayo taasi waxay noqonaysaa dariiq shirki gaarsiiya qofka. Nabigu wuxuu amray in lagu saliyo meel kastoo dhulka laga joogo, waayo saligu wuu isoo gaarayaa qofka dhaw iyo qofka fogba isku si ayuu ii soo gaarayaa, loomana baahana in lagu noqnoqdo qabrigiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la reebay inaan guryaha lagu samayn cibaadada Ilaahay sareeye.
2. Waa la reebay in loo safro qabriga Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, waayo wuxuu faray in lagu saliyo wuxuuna sheegay in saligu gaarayo, waxaase loo qasdayo oo loo safrayo waa masjidka Nabiga iyo in lagu soo tukado.
3. Waa la xarimay in qabriga Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee laga dhigo ciid, taaso ah in si gaara iyo waqti gaara lagu celceliyo siyaarada, waxaa la mida qabri walba in sidaa lagu sameeyo.
4. Maamuuska Ilaahay siiyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa tusaaya in sharci looga dhigay in lagu saliyo goor walba iyo meel walba.
5. Qabriga in lagu tukado reebideeda waxaa go'aamiyey asxaabta Nabiga; sidaa darteed wuxuu reebay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in guryaha laga dhigo sida qabuurta oo kale oo aan lagu tukan.

(3350)

(23) – عَنْ عَائِشَةَ أُمِّ المؤمنين رضي الله عنها: أَنَّ أُمَّ سَلَمَةَ ذَكَرَتْ لِرَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَنِيسَةً رَأَتْهَا بِأَرْضِ الْحَبَشَةِ، يُقَالُ لَهَا مَارِيَةُ، فَذَكَرَتْ لَهُ مَا رَأَتْ فِيهَا مِنَ الصُّوَرِ، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «أُولَئِكَ قَوْمٌ إِذَا مَاتَ فِيهِمُ الْعَبْدُ الصَّالِحُ، أَوِ الرَّجُلُ الصَّالِحُ، بَنَوْا

عَلَى قَبْرِهِ مَسْجِدًا، وَصَوَّرُوا فِيهِ تِلْكَ الصُّوَرَ، أُولَئِكَ شِرَارُ الْخَلْقِ عِنْدَ اللهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(23) – Caa'isha oo ahayd muuminiinta Hooyadood-Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey: Umu Salama waxay u sheegtay Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- kaniisad ay ku aragtay dhulka xabashida, taasoo la dhoho: Maariya, waxayna u sheegtay Nabiga sawiro ay ku soo aragtay, wuxuu yiri Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee : " kuwaasi waa duul markuu ka dhinto qof wanaagsani qabrigiisa ka dul dhista masaajid. wayna ku sawiraan sawiradaas, kuwaasi waa kuwa ugu sharka badan khalqiga Ilaahay [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Muuminiinta hooyadood ee umu Salama-Allaha ka raali ahaadee- waxay Nabiga u sheegtay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-inay ku aragtay dhulkii xabashida kaniisad-la dhoho : - maariya-, oo ay ku jiraan sawiro iyo waxyaabo lagu qurxiyey! oo ay la yaabtay!. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey sababaha ay sawiradaa u samaysteen: Wuxuu yiri: kuwaa aad sheegaysid waxay ahaayeen, kuwo marka uu qof wanaagsani ka dhinto, qabrigiisa ka dul dhista masaajid ay ku tukadaan, sawiradaana way ku sawirayeen. Wuxuuna cadeeyey, qofka waxaa sameeya inuu yahay kan ugu sharka badan khalqiga, waayo ficilkiisu wuxuu keenayaa, in Ilaahay loo shariig yeelo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la xarimay in qabuuraha masaajid laga dul dhiso ama lagu tukado ama in masaajida maydka lagu aaso, iyadoo looga hortagayo inay dadku shirki ku dhacaan.

2. In qubuuraha laga duldhiso masaajid oo sawiro la dhigo, waa camalka ay qabtaan yuhuuda iyo nasaaradu, qofka waxaa soo kale sameeyana iyaguu u ekaanayaa.
3. Waa la xarimay in la sawiro wixii ruuxi ku jirto.
4. Qofka ka duldhisa qabri masaajid ee sawiro ku dul sawira, waa kan ugu sharka badan khalqiga Ilaahay Isagaa sareeyee.
5. Shareecadu waxay ilaalisay towxiidka ilaalin buuxda, waxayna xirtay dhamaan meelaha ay ka imaan karaan wixii shirki keeni kara.
6. Waxaa la reebay in lagu xad gudbo jacaylka dadka saalixiinta ah, waayo arinkaasi wuxuu keenayaa in shirki lagu dhoco.

(10887)

(24) – عن أبي الهيَّاج الأسدي قال: قَالَ لِي عَلِيُّ بْنُ أَبِي طَالِبٍ: أَلَا أَبْعَثُكَ عَلَى مَا بَعَثَنِي عَلَيْهِ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ أَنْ لَا تَدَعَ تِمْثَالًا إِلَّا طَمَسْتَهُ، وَلَا قَبْرًا مُشْرِفًا إِلَّا سَوَّيْتَهُ.

[صحيح] - [رواه مسلم]

(24) – Abii Hayaaj Alsdi Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Cali Binu Abii Daalib ayaa igu dhahay: ma kuu diraa wuxuu Rasuulka Ilaahay scw ii diray? inaadan dhaafin sanam oo aad burburiso iyo qabri la dhisay oo aad dhulka la sinto. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu asxaabta u diri jiray inaysan ka tagin wax sanam ah, waana sawirka wax nool oo jurmi leh ama wax aan jurmi lahayn ee ay burburiyaan oo tirtiraan.

Iyo inaysan dhaafin qabri kor loo dheereeyey ilaa ay dhulka la simaan, wixii laga dul dhisayna ay dumiyaan, ama ay ka dhigaan mid siman oo aan dhulka ka sarayn wax badan balse ka sareeya wax taako dhan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa xaaraan in la sawiro wixii noole ah, waayo wwuxuu ka mid yahay wax yaabaha shirkiga keena.
2. Waa sharci in munkarka gacan uu ku bedelo qofka masuulka ahi ama awood u leh.
3. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku dadaalay baabi'inta shay walba oo ku tusaaya raadkii jaahiliyada, sida sawirada, asnaamta, dhismaha qubuurta laga dhisay.

(5934)

(25) عَنْ عَبْدِ اللهِ بْنِ مَسعودٍ رضي الله عنه عن رَسولِ اللهِ صلى الله عليه وسلم قال: «الطِّيَرَةُ شِرْكٌ، الطِّيَرَةُ شِرْكٌ، الطِّيَرَةُ شِرْكٌ، -ثلاثًا-»، وَمَا مِنَّا إِلَّا، وَلَكِنَّ اللهَ عَزَّ وَجَلَّ يُذْهِبُهُ بِالتَّوَكُّلِ.

[صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وابن ماجه وأحمد]

(25) – Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki,-saddex jeer", qofkasta oo naga mid ah qalbigiisa wax baasaysiga ah baa ka dhacaaya laakiin Ilaahay wuxuu kaga dhaafaa tawakulka.

[Xadiis Saxiix ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At□Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ka digay baasaysiga, waana qofku inuu sharaysto wax uun ama wax la maqlo ha ahaato ama wax la arko ee, sida shimbiraha, xayawaanka, dadka naafada ah, lambarada, maalmaha, iyo wixii la mida. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u soo qaatay shimbiraha aad ayaa loo yaqaanay waqtigii jaahiliga, waana shimbirta oo la duuliyo marka hawl la bilaabayo, sida safarka, ganacsiga iyo wixii la mida, haday u duusho xaga midig way bishaaraysan jireen, hawshoodana way ku dhaqaaqi jireen, hadayse u duusho xaga bidix way baasaysan jireen

oo waxay rabeena way joojin jireen. Wuxuuna sheegay inay shirki tahay, laakiin sharaysigu wuxuu ahaa shirki, waayo kheyrka Ilaahay uun baa keeni kara, sharkana Ilaahay uun baa difaaca kaligi cid la wadaagtana ma jirto.

Wuxuu sheegay Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- inuu qofka muslimka ah qalbigiisa ku dhicikaro wax sharaysi ka mid ahi, laakiin uu iskaga difaaco tawakulka Ilaahay la talo saaranayo, iyadoo la raacinayo in asbaabtii lala yimaado.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. In wax al sharaysto waa shirki, waayo waxaa ku jira inuu qalbigu cid aan Ilaahay ahayn ku xiran yahay.
2. Ahmiyada ayey leedahay ku celcelinta masalooyinka muhiimka ah, si loo qaybo oo ay qalbiga ugu degto.
3. Baasaysiga waxaa ku filan oo baabi'iya Ilaahay la talo saarto.
4. Waxaa la is faray in Ilaahay kaligii uun la talo saarto, oo qalbiga lagu xiro Ilaahay.

(3383)

(26) – عن عمران بن حصين رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «لَيْسَ مِنَّا مَنْ تَطَيَّرَ أَوْ تُطُيِّرَ لَهُ، أَوْ تَكَهَّنَ أَوْ تُكُهِّنَ لَهُ، أَوْ سَحَرَ أَوْ سُحِرَ لَهُ، وَمَنْ عَقَدَ عُقْدَةً، وَمَنْ أَتَى كَاهِنًا فَصَدَّقَهُ بِمَا يَقُولُ فَقَدْ كَفَرَ بِمَا أُنْزِلَ عَلَى مُحَمَّدٍ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ». [حسن] - [رواه البزار]

(26) – Cimraan Binu Xuseyn Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Naga mid maaha qofka shimbiraha ka faaliya ama shimbiraha looga faaliyo, ama faalalow ah ama loo faaliyo, ama saaxir ah, ama loo sixro, iyo kan guntimaha sixira gunta, iyo kan u taga faaliye ee rumaysta wuxuu sheego, waanu ku gaaloobay diinta Nabi Maxamed nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee lagu soo dajiyey). [Xadiis Xasan ah] - [Waxaa wariyay Albazaar]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u goodiyey qofkii ummaddiisa ah ee sameeya ficilada qaarkood oo uu ku cadeeyey hadalkiisii uu yiri: ( naga mid maaha) waxaana ka mida:

Tan 1aad: waa qofka shimbiraha ka faaliya ama shibiraha looga faaliyo asalkeeduna waa: shimbiraha oo la duuiyo marka camal la bilaabayo sida safar, ganacsi iyo wixii la mid ah, haduu u duulo xaga midig wuu bishaaraysan wuuna ku dhaqaaqi camalkii uu rabey, haduuse u duulo xaga bidix wuu baasaysan waanu ka joogin wixii uu rabey, uma banaana inuu isagu waxaa sameeyo ama uu cid kale u dirsado, waxaa soo galaya baasaysigaa wax kasta oo maqal ah ama muuqaal ah, sida shibmiraha, xayawaanka, dadka naafada ah, lambarada, maalmaha, iyo wixii lamid ah.

Tan labaad: (waa qofka faaliya ama loo faaliyo) waa kan sheegta inuu qaybka wax ka og yahay isagoo adeegsanaya xidigaha iyo wixii la mid ah, ama cidkale u taga sida wax sheega iyo wax la mida oo rumeysta wuxuu sheegay isago sheeganaya inuu yahay cilmi qaybka, kaasi wuu ku gaaloobay waxa Ilaahay ku soo dajiyey Nabi Maxamed scw.

Tan saddexaad:(waa qofka saaxirka ah ama isaga loo sixro) waa kan isagu sixirka sameeya, ama qof kale u dirsada inuu sixir u sameeyo, si uu cid wax u taro ama u dhibaateeyo, ama kan guntimo xarig ku xira

kuna sixira wax uu ku akhriyo oo ah wax la magan galo oo xaaraan ah ku tufa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib in Ilaahay la tawakalo oo la rumeeyo qadarka iyo Qadaha Ilahay, waana xaaraan in laga faashado shimbiraha iyo in wax la baasaysto, ama la sixro ama wax sheege la aado, ama dadka waxaa ka shaqeeya wax la waydiisto.
2. Cilmi qaybka in la sheegto shirkiga ayey ka mida tahay wuuna diidayaa towxiidka.
3. Waa xaaraan in la rumaysto qofka wax sheega ah iyo in lootago, taas waxaa la raaciyaa akhrinta waxa lagu magacaabo Calaacasha, Koobka, iyo fiirintiisa hadii xataa ay thay iska daawasho uun.

(5981)

(27) – عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**لَا عَدْوَى، وَلَا طِيَرَةَ، وَيُعْجِبُنِي الْفَأْلُ**» قَالَ قِيلَ: وَمَا الْفَأْلُ؟ قَالَ: «**الْكَلِمَةُ الطَّيِّبَةُ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(27) – Anas Binu Maalik -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka wariyey Nabiga inuu yiri: "Majirto is qaadsiini, majiro baaseysi, waxaanan jeclahay in wanaag la fisho", wuxuu yiri-Anas- waxaa lagu yiri -Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: waa maxay wanaag la fisho?, wuxuu yiri: "waa hadalka wanaagsan." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay faafitaanka cudurada ay aaminsanaayeen dadkii jaahiliyadu in cudurku iskiis ugu gudbo qof kale oo qadar Ilaahay aanu jirin inay taasi baadil tahay. Baasaysiguna uu baadil yahay, waana in qofku wax uun sharaysto yacni shay uu maqlay ha ahaado ama shay uu arkaye, sida

shinbirta ama xayawaan ama dad naafo ah ama lambaro ama maalmo iyo wixii la mida Wuxuu shimbiraha u xusay waxay ahaayeen shimbiruhu waxa ugu caansan ee la baasaysto waqtigii jaahiliyada, asal ahaana waa in shimbiraha la duuliyo marka hawl loo kacayo, sida safarka, ganacsiga iyo wixii la mida, hadii shimbirku u duulo xaga midigta wanaag ayuu filanayaa wuuna ku dhaqaaqayaa wuxuu rabay, haduuse u duulo xaga bidix wuu shareysan wuuna ka joogin wuxuu rabay. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu jecel yahay filashada wanaaga, oo ah warka qofka farxada iyo rayrayn geliya taaso ka timid kalimad fiican oo uu maqlay, oo ka dhigaysa in qofku rabigi male fiican ka fisho.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa in qofku Ilaahay talo saarto, oo uu aamino in Ilaahay mooyee inaysan cid kale khayr u keeni karin, sharkana Ilaahay maahee cid kale aysan ka celin karin.
2. Waa la reebay shimir baasaysiga, waana waxa qofku sharaysto una diida inuu shaqo qabto.
3. Malaha wanaagsani kuma jiro sharaysiga la reebay, balse waa filasho wanaagsan oo Ilaahay male fiican laga malaysto.
4. Wax walba waxay ku dhacaan qadarida Ilaahay casa wajala, waa kaligi cid wax la wadaagtana ma jirto.

(3422)

(28) – عَنْ زَيْدِ بْنِ خَالِدٍ الجُهَنِيِّ رضي الله عنه أَنَّهُ قَالَ: صَلَّى لَنَا رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ صَلَاةَ الصُّبْحِ بِالْحُدَيْبِيَةِ عَلَى إِثْرِ سَمَاءٍ كَانَتْ مِنَ اللَّيْلَةِ، فَلَمَّا انْصَرَفَ أَقْبَلَ عَلَى النَّاسِ، فَقَالَ: «هَلْ تَدْرُونَ مَاذَا قَالَ رَبُّكُمْ؟» قَالُوا: اللهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ، قَالَ: «أَصْبَحَ مِنْ عِبَادِي مُؤْمِنٌ بِي وَكَافِرٌ، فَأَمَّا مَنْ قَالَ: مُطِرْنَا بِفَضْلِ اللهِ وَرَحْمَتِهِ، فَذَلِكَ مُؤْمِنٌ بِي وَكَافِرٌ بِالْكَوْكَبِ، وَأَمَّا مَنْ قَالَ: بِنَوْءِ كَذَا وَكَذَا، فَذَلِكَ كَافِرٌ بِي وَمُؤْمِنٌ بِالْكَوْكَبِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(28) – Sayd Binu Khaalid Aljuhani Ilaahay ha ka raali noqde waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulkii Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate ayaa nagu tujiyey salaadii subaxa xudeybiya iyado habeenkaas roob da'ay markuu salaadii ka baxay ayuu dadka ku soo jeestey, wuxuuna yiri: ma og tihiin wuxuu Rabigiin yiri, waxay dheheen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yiri: adoomadayda waxaa waagu u baryey iyago midna i rumeeyey midna kufriyey, qofkii yiraahda: ilaahay fadligiisa iyo raxmadiisa ayaa roobku noogu da'ay, waa mid I rumeeyey kuna kufriyey xidiga, qofkase yiraahda xidig hebel iyo hebel, kaasi wuu igu kufriyey wuxuuna rumeeyey xidiga. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee salaada subax ayuu ku tukaday xudeybiya -waa tuulo u dhow Makkah- roob habeenimadii ra`ay ka dib. Markuu salaama naqsaday salaadiina ka baxay ayuu wajigiisa u soo jeediyey xaga dadka, wuxuuna yiri: ma og tihiin waxa rabigiin casa wajala yiri.? Waxay ku jawaabeen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og. Wuxuu yiri: Ilaahay wuxuu cadeeyey in dadku labo qaybood noqonayaan marka roobku da'aayo: qayb Ilaahey rumaysan, iyo qayb Ilaahay ku kufrida. Qofka dhaha: fadliga Ilaahay iyo naxariistiisa ayaa roobku noogu da'ay, oo roobka di'idiisa Ilaahay kor ahaaye u tiiriya, kaasi waa mu'umin rumeeyey Ilaaha khaaliqa ah ee kownka maamula, kuna kufriyey xidiga. Qofka yiraahda: xidig hebel iyo hebel buu roobku noogu da'ay, kaasi Ilaahay ayuu ku kurfiyey, wuxuuna rumeeyey xidiga, taasina waa gaalnimo yar, waayo wuxuu u tiiriyey di'ida roobka xidiga, taasna Ilaahay uma yeelin sabab sharci ah iyo mid qadar ah toona. Qofkiise roobka di`idiisa iyo dhacdooyinka kale ee dhulka ka dhaca u tiiriya dhaq-dhaqaaqa xiddigaha iyo soo bixitaankooda iyo dhicitaankooda, isagoo rumaysan in xidiguhu yihiin kuwa xaqiiqo ahaan ficilka wada, taasi waa kufrigii kufrinimada u waynaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa suno ah marka roobku da'o ka dib in la dhaho: fadliga Ilaahay iyo naxariisti ayaa roobku noogu da'ay.
2. Qofka u tiiriya nicmada soo dajinta roobka iyo nicmada kaleba xidiga abuur ahaan iyo jiritaan ahaanba waa qof gaal nimada wayn gaaloobay, haduuse u tiiriyo in xidigu sabab u yahay wuxuu gaaloobay gaalnimada yar, waayo uma aha sabab sharci ah ama xisi ah midna.
3. Nicmadu sabab ayey u noqotaa gaalnimada hadaad kufrido waxay kale oo ay sabab u noqotaa imaanka hadaad ku shukrido.
4. Waa la reebay in la dhoho: xidig hebel ayaa roobku noogu da'ay, haba looga jeedo xaga waqtigee, iyado laga hor tagaayo shirkiga.
5. Waa waajib in qalbiga lagu xiro ilaahay markaad nafac doonayso ama aad iska celinayso dhibaato.

(65010)

(29) – عَنْ عُقْبَةَ بْنِ عَامِرٍ الْجُهَنِيِّ رضي الله عنه: أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَقْبَلَ إِلَيْهِ رَهْطٌ، فَبَايَعَ تِسْعَةً وَأَمْسَكَ عَنْ وَاحِدٍ، فَقَالُوا: يَا رَسُولَ اللهِ، بَايَعْتَ تِسْعَةً وَتَرَكْتَ هَذَا؟ قَالَ: «**إِنَّ عَلَيْهِ تَمِيمَةً**»، فَأَدْخَلَ يَدَهُ فَقَطَعَهَا، فَبَايَعَهُ، وَقَالَ: «**مَنْ عَلَّقَ تَمِيمَةً فَقَدْ أَشْرَكَ**». [حسن] - [رواه أحمد]

(29) − Cuqba'a Binu Caamir Aljuhani-Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey: "In Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ay u yimaadeen koox rag ah, wuxuuna la mubaayacooday sagaal nin (islaamnimaduu kula balamay), nin ragaa ka mid ahaana wuu ka joogsaday oo lama mubaayacoon, waxayna ku dheheen: Rasuulka Ilaahayow sagaalna waad la mubaayacootay ninkana waad ka tagtaye maxaa jira? wuxuu yiri: "isagu xirsi ayuu xiran yahay", gacantuu geliyey ninkii oo wuu iska jaray, markaasuu suubanuhu la mubaayacooday, wuxuuna Nabigu yiri: "qofka xirta xirsi Ilaahay ayuu u shariig yeelay." **[Xadiis Xasan ah] - [Waxa wariyay Axmed]**

## Sharraxaad:

Rag koox ah ayaa Nabiga u yimid nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee tiradoodu waxay ahayd toban, sagaal iyaga ka mid ah ayuu Nabigu islaamnimada iyo inay isaga raacaan kula mubaayacooday, ninkii tobnaadna wuu ka istaagay, markii la waydiiyey sababta uu uga tegay wuxuu yiri: nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: Ninkani wuxuu xiran yahay xirsi, waana wax la xirto ama la gashado sida kuusha iyo wixii la mida si ay u celiso isha iyo wixii dhib ah. Ninkii wuxuu gacantiisa geliyey halkuu kaga xirnaa xirsigu, wuuna gooyey oo iska tuuray, Nabiguna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markaasuu la balamay, wuxuuna yiri isagoo ka digaya xirsiyada xugunkoodana cadaynaya wuxuu yiri: (Qofkaii xirsi xirta shirki ayuu sameeyey ).

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofkii cuskada cidaan Ilaahay ahayn Ilaahay wuxuu kula tacaamilaa wuxuu doonaayey lidkeeda.
2. hadii la rumeeyo in hadii xirsiga la xirto uu sabab u yahay inuu celiyo dhibka iyo isha waa shirki yar, hadiise uu rumeeyo in xirsigu isagu uu nafac leeyahay waa shirki wayn.

(6762)

(30) – عن عبد الله بن مسعود رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «إِنَّ الرُّقَى والتَمائِمَ والتِّوَلَةَ شِرْكٌ». [صحيح] - [رواه أبو داود وابن ماجه وأحمد]

(30) – Cabullaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan ka maqlay isagoo dhahaya: " Ku tufida, qardhaasta, iyo madiidadu waa shirki." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Abuu Daa'uud Ibnu Maajah iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey waxyaabo samayntoodu tahay shirki waxaana ka mida:

Tan koobaad: waa hadalkii ay isku dawayn jireen dadkii waqtigii jaahiliga, kaasoo ka koobnaa waxyaabo shirki ah.

Tan labaad: qardhaasta oo ah wax taxan oo kale, taasoo loo xiro caruurta, xoolaha iyo qayrkoodba iyado laga ilaalinayo isha.

Tan saddexaad: madiidaynta: waa wax loo sameeyo labada qof ee is qabta mid in la jeclaysiiyo kan kale.

Arimahaasi waxay ka mid yihiin shirkiga, dad ayaa sabab ka dhigaya, mana aha sabab sharciya oo daliil ku sugnaatay, mana aha sabab xisi ah oo khibrad ku sugnaatay. Asbaabta shirciga ah sida akhrinta Qur'aanka, ama asbaabta xisiga ah sida daawada khibrada lagu ogaaday, way banaan tahay iyado la rumaysan yahay inay tahay asbaab uun, nafaca iyo dhibkuna Ilaahay gacantiisa ku jiraan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa in towxiidka iyo caqiidada laga ilaaliyo wixii dhaawacaya.
2. waa la xarimay in la isticmaalo tufida shirkiga ah, qardhaasta iyo madiidada.
3. Dad ayaa citiqaadsan in saddexdaasi yihiin asbaab: waana shirki yar, waayo wax aan sabab ahayn ayuu sabaab ka dhigay,

haduuse aamino inay naf ahaanteedu leedahay nafac iyo dhib taasi waa shirki wayn.

4. Waxaa laga digayaa asbaabta shirkiga keenaya iyo kuwa xaaraanta ah.
5. Tufida shirkiga ahi waa xaaraan waxayna ka mid tahay shirkiga inta sharciga ah maahee.
6. Waxaa haboon in qalbigu ku xiran yahay Ilaahay kaligii, dhibka iyo dheeftuba isaga kaligi ayey ka yimaadaan, cibaadada cid la wadaagtaa majirto, khayrka cid aan isaga ahayni makeento, sharkana cid aan isaga ahayni ma ciliso.
7. Tufida banaan waxay ka kooban tahay saddex shardi: 1- in qofku citiqaado inay sabab uun tahay oo Ilaahay idankii uun wax ku tartayso 2- waa inay tahay Qur'aan, magacyada Ilaahay, sifaadkiisa, ducooyinkii Nabiga iyo ducooyinka sharciga ah, 3- inay tahay luqad la fahmaayo oo lahayn erayo aan la fahmayn iyo khuraafaad.

(5273)

(31) – عن بعض أزواج النبي صلى الله عليه وسلم عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ أَتَى عَرَّافًا فَسَأَلَهُ عَنْ شَيْءٍ لَمْ تُقْبَلْ لَهُ صَلَاةٌ أَرْبَعِينَ لَيْلَةً». [صحيح] - [رواه مسلم]

(31) – Waxaa laga wariyey qaar ka mid ah haweenkii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu Nabigu yiri: (Qofka u taga faaliye oo wax waydiiya salaad lagama aqbalo afartan habeen). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digayaa in loo tago faaliyaha -faaliyuhu waa magac guud oo ay wadaagaan wax sheega, xidigiyaha, faalka ciida, iyo wixii la mida, ee qaybka wax ka

sheegiisa u daliishada wax yaabo hor dhac ah oo ay adeeg sadaan, in wax la waydiiyo kaliya ayuu Ilaahay uga xarimayaa qofka ajarka salaada afartan maalmood, waxaana loogu ciqaabay dambigaa wayn ee uu sameeyey awgeed.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa xaaraan in faal la dhigo, iyo in la aado faalalow oo la waydiiyo wax qayb ah.
2. Qofku wuxuu ku waayi karaa ajarka cibaadada isagoo lagu ciqaabayo macsida uu sameeyey.
3. Waxaa soo galaya xadiiskaan waxa loo yaqaan burjiga iyo fiirintooda, iyo ku akhrinta calaacasha, bakeeriga iyo hadii ay xataa tahay daawsho uun, waayo kuligood waxay soo galayaan faalalowga iyo sheegashada cilmiga qaybka.
4. Haday tahay taasi ciqaabta qofka faaliyaha u taga, maxaa lagu abaal marin faalalowga?
5. Afartanka maalmood salaadoodu way ka ansaxaysaa qofka oo lama qalaynaayo laakiin ajar maleh.

(5986)

(32) – عن ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما أنه سَمِعَ رَجُلًا يَقُولُ: لَا وَالْكَعْبَةِ، فَقَالَ ابْنُ عُمَرَ: لَا يُحْلَفُ بِغَيْرِ اللَّهِ، فَإِنِّي سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «مَنْ حَلَفَ بِغَيْرِ اللهِ فَقَدْ كَفَرَ أَوْ أَشْرَكَ». [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وأحمد]

(32) – Cabdullaahi Binu Cumar Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiibe waxaa laga wariyey inuu maqlay nin dhahaya: maya kacbadaan ku dhaartee, wuxuu ku yiri Ibnu Cumar: lagumo dhaarto cidaan Ilaahay ahayn, anigu waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahay: (Qofkii ku dhaarta waxaan Ilaahay ahayn wuu gaaloobay ama shirki buu la yimid). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At Tirmidi, Iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofkii ku dhaarta cidaan Ilaahay ahayn iyo magacyadiisa iyo sifaadkiisa inuu Ilaahay ku kufriyey ama uu shirki la yimid, waayo dhaartu waxay keenaysaa waynaynta cida lagu dhaaranayo, waynayntana Ilaahay kaligi ayey u sugnaatay, laguma dhaarto Ilaahay, magacyadiisa iyo sifaadkiisa cidaan ahayn. Dhaartaasina waxay ka mid tahay shirkiga yar, laakiin hadii qofka dhaartay uu u wayneeyo waxa uu ku dhaartay sida waynaynta Ilaahay oo kale ama ka siidaran, markaa wuxuu noqonayaa shirkiga wayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dhaarta in lagu wayneeyaa waa xaq Ilaahay leeyahay, Isagaa nusqaan ka hufan oo sareeyee, laguma dhaarto cidaan Ilaahay, magacyadiisa iyo sifaadkiisa ahayn.
2. Asxaabtu waxay ku dadaaleen wanaag faridiisa iyo xumaanta reebideeda, gaar ahaan hadii xumaantu tahay mid shirki iyo gaalnimo la xiriirta.

(3359)

(33) – عَنْ حُذَيْفَةَ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**لَا تَقُولُوا: مَا شَاءَ اللهُ وَشَاءَ فُلَانٌ، وَلَكِنْ قُولُوا: مَا شَاءَ اللهُ ثُمَّ شَاءَ فُلَانٌ**». [صحيح بمجموع طرقه] - [رواه أبو داود والنسائي في الكبرى وأحمد]

(33) – Xudayfa -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate-inuu yiri: "Hadhihina: hadii Ilaahay ogolaado hebelna ogolaado, laakiin waxaad dhahdaan: hadii Ilaahay ogolaado ka dibna hebel ogolaado." **[Xadiis Saxiix ah, marka la isku daro dariiqyadiisa] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, An-Nasaa'i oo Sunan Kubraa ah, iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay inuu qofka muslimka ahi dhoho: hadii Ilaahay ogolaado hebelna ogolaado." Ama hadii Ilaahay doono iyo hebel, Waayo doonista Ilaahay iyo iraadadiisu waa mid guud oo Isaga u gaara oo aan cidna lama wadaagto. Adeegsiga xarafka waaw oo loo adeegsado (iyo) wuxuu tusayaa oo loo fahmayaa in lala wadaagayo Ilaahay waxa uu xukumayo, iyo in cid lala simayo Ilaahay-isagaa nusqaan oo dhan ka hufane-. laakiin wuxuu oran: hadii Ilaahay ogolaado, ka dibna hebel ogolaado, oo wuxuu ka yeelayaa rabitaanka iyo doonista adoonku inay ku xiran tahay doonitaanka Ilaahay isagoo oranaya: xarafka (suma), oo macnihiisu yahay (ka dib), wuxuuna ka leexanayaa oo iska ilaalinayaa xarafka (waaw), waayo xarafka (suma) wuxuu faa'iidaynayaa oo loo fahmayaa ka daba gayn, iyo ka danbayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa xaaraan hadalka: "wuxuu Ilaahay ogolaado ee adna aad ogolaato", iyo Ereyada la midka ah kuwaasoo laga fahmayo in Ilaahay wax lagu lamaaninaanyo, sida adeegsiga xarafka waaw, oo macnihiisu yahay (iyo), waayo hadalka noocaas ahi waa shirkiga ereyada  iyo hadalka.

2. Wuu banaan yahay hadalka: '' waxa Ilaahay ogolaado ka dibna aad ogolaato'', iyo ereyada u eg ee Ilaahay lagu larayo ereyga lagu dhawaaqi '' suma'', waayo ereygani macnihii laga cararayey ma laha.
3. Ilaahay waxaa loo sugay Mashii`ada, Adoonkana waxaa loo sugay Mashii`ada, laakiin Mashii`ada addoonku tan Ilaahay ayey raacsan tahay, oo ma yeelan karo Mashii`ad tan Ilaahay ka madax banaan.
4. Waxaa reeban in khalqiga lala wadaajiyo Mashii`ada Ilaahay ereyba ha ahaatee.
5. Hadii uu rumaysan yahay qofka erayga oronaya in Mashii`ada adoonku la mid tahay Mashii`ada Ilaahay oo ay la siman yahay si guud ahaaneed, ama uu rumeeyo in adoonku leeyahay Mashii`a gaara oo tan Ilaahay ka baxsan, hadiise uu rumeeyo in Mashii`ada adoonku inay tan Ilaahay ka hoosayso, waa shiri yar.

(3352)

(34) – عَنْ مَحْمُودِ بْنِ لَبِيدٍ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**إِنَّ أَخْوَفَ مَا أَخَافُ عَلَيْكُمُ الشِّرْكُ الْأَصْغَرُ**» قَالُوا: وَمَا الشِّرْكُ الْأَصْغَرُ يَا رَسُولَ اللهِ؟ قَالَ: «**الرِّيَاءُ، يَقُولُ اللهُ عز وجل لَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِذَا جُزِيَ النَّاسُ بِأَعْمَالِهِمْ: اذْهَبُوا إِلَى الَّذِينَ كُنْتُمْ تُرَاؤُونَ فِي الدُّنْيَا، فَانْظُرُوا هَلْ تَجِدُونَ عِنْدَهُمْ جَزَاءً؟**». [حسن] - [رواه أحمد]

(34) – Maxamud Binu Labiid -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Rasuulka Ilaahay ka wariyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu yiri: "Waxa ugu badan ee aan idiinka cabsi qabo waa shirkiga yar", waxay dheheen asaxaabtu: waa maxay shirkiga yari Rasuulka Ilaahayow? wuxuu dhahay: "waa istustuska , Ilaahay ayaa ku oran maalinta qiyaamaha kuwaa marka laga abaal mariyo dadka camalkooda: u taga kuwii aad is tusi jirteen noloshiinii aduunka, oo eega inaad abaal marin ka heshaan". [Xadiis Xasan ah] - [Waxa wariyay Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxa ugu badnaa ee uu uga cabsi qabay ummaddiisa wuxuu ahaa: shirkiga yar oo ah: is tustuska, kaasoo ah inuu qofku wax u sameeyo dadka dartood. Nabigu wuxuu kaloo sheegay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ciqaabta ku dhicidoonta dadka istustuska wax u sameeya, in lagu oran doono maalinta qiyaame: socda oo u taga kuwaad iyaga dartood camalka u samayn jirteen, bal soo eega inay idiin awoodaan inay ajar idinka siiyaan camalkii aad u samayseen?!

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib in camalka Ilaahay khaalis looga dhigo, lagana digtoonaado is tustuska.
2. Nabigu si aad ah ayuu ugu dhimriyey ummaddiisa, wuuna ku dadaalay inay soo hanuunaan una naseexeeyey.
3. Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee haduu sidaa ugu cabsan jiray asaxaabta isagoo la hadlaya, iyagoo ahaa madaxdii saalixiinta, dadka ka dambeeya in loo cabsado ayaa ka mudan.

(3381)

(35) – عن أبي مَرْثَدٍ الغَنَوِيِّ رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «لَا تَجْلِسُوا عَلَى الْقُبُورِ، وَلَا تُصَلُّوا إِلَيْهَا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(35) – Abii Mursad Alqanawi Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhahay: (Haku fadhiisanina qabuuraha, hana u tukanina xageeda). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in lagu fadhiisto qabuuraha.

Sidaasoo kale wuxuu reebay in xaga qabuuraha loo tukado, oo qabuuruhu noqdan kuwo ka xiga qofka tukanaya xaga qiblada, waayo arinkaasi wuxuu keenayaa shirki.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la reebay in salaad lagu dhex tukado qabuuraha, ama xagooda loola jeesto marka laga reebo salaada janaasada, sidaana sunaday ku cadahay.
2. Waxaa loo reebay salaada qabuuraha xagooda in loo tukado, in laga hortago wixii shirki keenikara.
3. Islaamku wuxuu reebay in lagu xad gudbo qubuurta iyo in la xumeeyo qubuurta xadka sharciga ka badbadin lama ogola ka gaabina lama ogola.
4. Xurmada muslimku waa mid joogto ah xataa isagoo dhintay, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (jebinta lafta maydku waxay la mid tahay isagoo nolol lagu jabiyey).

(10647)

(36) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**لَا تَصْحَبُ الْمَلَائِكَةُ رُفْقَةً فِيهَا كَلْبٌ وَلَا جَرَسٌ**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(36) – Abii Hureyra -Allaha karraalli ahaadee- wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: " Malaa'igtu ma raacdo safar wata Ey iyo gambaleel." **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inayna malaa'igtu raacayn safar wata Ey iyo ganbaleelka xoolaha lagu xiro ee codeeya marka neefku dhaqaaqo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waxaa la reebay in Ey la haysto ama la kaxaysto, waxaase laga soo reebay reebidaas Eyga lagu ugaarsado ama kan ilaaliya.
2. Malaa'igta diidaysa inay raacdo safarka waa Malaa'igta raxmada u qaybsan, laakiin Malaa'igta xafadada ah kama faaruqaan dadka haday joogaan iyo haday safar yihiinba.
3. Gambaleelka la iska reebay; waa muusig ka mida muusiga shaydaanka, wuxuuna shabahaa naaquuska nasaaradu garaacdo.
4. Muslimku waa inuu ku dadaalo inuu ka fogaado wax walba oo ka fogaynaaya Malaa'igta.

(8951)

(37) – عَن أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «يَأْتِي الشَّيْطَانُ أَحَدَكُمْ فَيَقُولُ: مَنْ خَلَقَ كَذَا؟ مَنْ خَلَقَ كَذَا؟ حَتَّى يَقُولَ: مَنْ خَلَقَ رَبَّكَ؟ فَإِذَا بَلَغَهُ فَلْيَسْتَعِذْ بِاللَّهِ وَلْيَنْتَهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(37) – Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: Sheydaankaa u imaan midkiin wuxuuna ku dhihin yaa abuuray kaas yaa abuuray kaas? Ilaa uu yiraahdo yaa abuuray Rabigaa, haduu halkaa soo gaaro ilaahay ha ka magan galo oo ha ka joogsado. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay daawada ugu fiican ee su`aalaha uu ku waswaasiyo sheydaanku mu'minka. sheydaanku wuxuu oran: yaa abuuray kaas? yaa abuuray kaas? yaa abuuray samada? yaa abuuray dhulka? Mu'minku wuxuu ugu jawaabayaa diin ahaan, fidro ahaan iyo caqli ahaan isagoo dhahaya: Allaah. laakiin sheydaanku ku joogsanmaayo xadkaas

waswaasinta ah balse wuxuu u gudbayaa inuu dhoho: yaa abuuray Rabigaa? Markaas mu'minku wuxuu waswaaskaas isaga joojin karaa saddex arimood.

Ilaahay oo uu rumeeyo.

Iyo inuu Ilaahay shaydaanka ka magan galo.

Iyo inuu ka joogsado inuu waswaaska sii wado.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa in la iska joojiyo waswaaska sheydaanka iyo waxa nafta ku soo dhacaya oo aan lagu fakarin wax yaabaha waswaaska ah, oo Ilaahay ka magan galo inuu ka joojiyo waswaaskaas.
2. Wax kasta oo qalbiga dadka ku soo dhaca oo waswaas ah sharcigana khilaafsan shaydaan ayuu ka yimid.
3. waa la iska reebay in daatada Ilaahay lagu fekero, waxaana la isku booriyey in Ilaahay khalqigiisa iyo Aayaadkiisa lagu fekero.

(65013)

(38) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «إِنَّ اللَّهَ قَالَ: مَنْ عَادَى لِي وَلِيًّا فَقَدْ آذَنْتُهُ بِالحَرْبِ، وَمَا تَقَرَّبَ إِلَيَّ عَبْدِي بِشَيْءٍ أَحَبَّ إِلَيَّ مِمَّا افْتَرَضْتُ عَلَيْهِ، وَمَا يَزَالُ عَبْدِي يَتَقَرَّبُ إِلَيَّ بِالنَّوَافِلِ حَتَّى أُحِبَّهُ، فَإِذَا أَحْبَبْتُهُ: كُنْتُ سَمْعَهُ الَّذِي يَسْمَعُ بِهِ، وَبَصَرَهُ الَّذِي يُبْصِرُ بِهِ، وَيَدَهُ الَّتِي يَبْطِشُ بِهَا، وَرِجْلَهُ الَّتِي يَمْشِي بِهَا، وَإِنْ سَأَلَنِي لَأُعْطِيَنَّهُ، وَلَئِنِ اسْتَعَاذَنِي لَأُعِيذَنَّهُ، وَمَا تَرَدَّدْتُ عَنْ شَيْءٍ أَنَا فَاعِلُهُ تَرَدُّدِي عَنْ نَفْسِ المُؤْمِنِ، يَكْرَهُ المَوْتَ وَأَنَا أَكْرَهُ مَسَاءَتَهُ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(38) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri: nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: "Ilaahay baa yiri: qofka la colooba waligayga, waxaan ogaysiiyey dagaal, adoonkaygu iiguma soo dhawaado waxaan ka jeclahay waxaan ku waajibyey, adoonkayguna ka suulimaayo inuu iigu soo dhawaado sunanta ilaa aan jeclaado, hadaan jeclaadona: waxaan noqdaa maqalkiisii uu wax ku maqlaayey, iyo aragiisii uu wax ku arkaayey, iyo gacantiisii uu wax ku qabanaayey, iyo lugtiisii uu ku soconaayey, haduu wax i waydiistona waan siin, haduu i magan galana waan magan gelin, ma jiro shay aan sameeyo oo aan ka laba labeeyo isadaan uga laba labeeyo muminka naftiisa, wuxuu neceb yahay geerida ana waxaan nibcahay xumayntiisa [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku sheegay xadiiskaan qudsiga ah in Ilaahay weyne yiri: Qofka dhiba wali ka mida awliyadeyda, oo ka caraysiiya waxaan ogaysiiyey colaad.

Waligu waa: Mu'uminka Taqiga ah, qofka kolba inta iimaankiisa iyo Ilaah ka cabsiqiisu dhan yahay ayuu noqonayaa nasiibkiisa uu ka helaayo walinimada Ilaahay. Muslimku uguma soo dhawaado Rabigi shay uu ka jecel yahay wixii uu ku faral yeelay oo uu ku waajibyey oo ah samaynta daacada iyo ka tagida muxaramaatka, Muslimkuna ka suulimaayo inuu Rabigi ugu soo dhawaado sunanta iyo faralka, ilaa uu gaaro jeclaanta Ilaahay. Markuu Ilaahay jeclaadana Ilaahay wuxuu u toosiyaa xubnahan afarta ah:

Ilaahay wuxuu u toosiyaa maqalka oo ma maqlo wax aan Ilaahay raali ka ahayn.

Ilaahay wuxuu u toosiyaa aragiisa, oo ma eego wax aan Ilaahay raali ka ahayn.

Ilaahay wuxuu u toosiyaa gacantiisa, oo kuma qabto wax aanu Ilaahay raali ka ahayn.

Ilaahay wuxuu u toosiyaa lugtiisa oo kuma aado meel aan Ilaahay raali ka ahayn, oo uguma socdo wax aan khayr ahayn.

Intaa waxaa u dheer haduu Ilaahay wax waydiisto Ilaahay wuu siinayaa, oo wuxuu noqonayaa mid ducadiisa la aqbalo, haduu Ilaahay wax ka magan galo oo soo hoos galo isagoo doonaaya inuu ilaaliyona, Ilaahay wuu magan galin wuuna ka ilaalin waxaa uu ka baqaayo.

Ka dib Ilaahay wuxuu yiri: kamaan laba-labeeyo waxaan sameynayo sidaan uga laba-labeeyo qaadida nafta mu'uminka anigoo u naxariisanaya darteed, waayo wuxuu neceb yahay geerida xanuunka ay leedahay darteed, Ilaahayna waa neceb yahay wixii mu'uminka xanuujiya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskani waa axaadiista uu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey Rabigi, waxaana looyaqaan xadiis Aludsi ama xadiis Ilaahi ah, waana xadiiska ereyadiisa iyo macnohooduba Ilaahay ka sugnaadeen, inkastoo aanu lahayn sifaadka Qur'aanku leeyahay ee uu kaga duwan yahay wixii ka soo haray, sida in lagu cibaadaysto akhrintiisa, oo loo dahaaro qaato qaadashadiisa, cajsi gelintiisa iyo icjaaskiisa aysan cidna keeni karin, iyo intaa qayrkeedba.
2. Waxaa la reebay in la dhibo awliyada Ilaahay, waxaana lagu booriyey dadku inay jeclaadaan awliyada Ilaahay oo ay gartaan fadliga ay leeyihiin.
3. waxaa la faray dadku inay la ciloobaan cadawga Ilaahay oo ay xarimaan xiriirintooda.
4. Qofka sheegta inuu wali Ilaahay yahay isagoo sharciga Ilaahay aan raacin been ayuu ka sheegay sheegashadiisa.
5. Waxaa lagu gaaraa walinimada Ilaahay gudashada waajibaadka iyo ka fogaanta xaaraanta.

6. Asbaabta Ilaahay ku jeclaado adoonka oo ducadiisa ku aqblo waxaa ka mida, inuu sameeyo sunooyinka markuu guto waajibaadka oo uu ka fogaado xaaraanta.

7. xadiisku wuxuu tusinayaa sharafta Awliyada Ilaahay iyo in makaanadoodu sarayso.

(6337)

(39) – عن العِرْباضِ بن ساريةَ رضي الله عنه قال: قام فينا رسول الله صلى الله عليه وسلم ذات يوم، فوَعَظَنا مَوعظةً بليغةً وَجِلتْ منها القلوبُ، وذَرَفتْ منها العيونُ، فقيل: يا رسول الله، وعظتَنَا موعظةَ مُودِّعٍ فاعهد إلينا بعهد. فقال: «عليكم بتقوى الله، والسمع والطاعة، وإن عبدًا حبشيًّا، وسترون من بعدي اختلافًا شديدًا، فعليكم بسنتي وسنة الخلفاء الراشدين المهديين، عَضُّوا عليها بالنواجِذ، وإياكم والأمور المحدثات، فإن كل بدعة ضلالة». [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وابن ماجه وأحمد]

(39) – Cirbaad Binu Saariyah Ilaahay ka raali ahaadee wuxuu yiri: Nabigaa nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee maalin ayuu na dhex istaagay oo na wacdiyey, wacdi xeel dheer oo quluubteenu cabsatay, indhahayaguna ilmeeyeen, waxaana lagu yiri: Rasuulka Ilaahayow waxaad na wacdiday wacdi sagootin ah ee noo samee balan qaad, wuxuu ku yiri: " waxaan idin farayaa Ilaahay cabsidi, iyo inaad maqashaan oo adeecdaan midka idiin madaxda ah hadii xataa uu yahay adoon xabashi ah, waxaad arki doontaan gadaashayda muran iyo is khilaaf daran, waxaan idiin dar-daarmayaa sunadayda iyo sunada khulafaa'u raashidiinta hanoonsan ee iga dambaysa-, gaws dambeedka ku qabsada, waxaanan idiinka digayaa wax kastoo diinta lagu soo daro, bidco kastaana waa baadi ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu wacdiyey asaxaabtiisa wacdi xeel dheer, taasoy quluubta cabsi gelisay, indhuhuna la ilmeeyeen. Waxay dheheen -asaxaabtu-Rasuulka Ilaahayow, waxay

u eg tahay waano sagootin ah, waa markay arkeen siduu ugu xeel dheeraaday Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waanada, waxay way diisteen dardaaran ay qabasdaan gadaashiisa. Wuxuu ku yiri: waxaan idiin dardaarmayaa Ilaahay cabsidi, idinkoo la imaanaya waajibaadka , kana tagaya wixii la xarimay. iyo inaad maqashaan oo adeecdaan madaxdiina, xataa haduu madax idiin noqdo adoon ama uu xoog idinku qabsado, yacni, haduu madax idiin noqdo dadka kan ugu liita ha nicina ee adeeca, iyadoo laga baqayo fitan, qofkii idinka mida ee noolaada wuxuu arki doonaa khilaaf badan. Ka dib wuxuu u sheegay sida looga bixi karo khilaafkaas, taaso ah in la qabsado sunada Nibiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, iyo sunada khulafad Raashidiinta ah ee mahdiyiinta ah ee isaga ka dambeeya, kuwaasoo ah: Abii Bakar Asidiiq, Cumar Binu Khaddaab, Cusmaan Binu Cafaan, Cali Binu Abii Daalib,-Allah ka raali ahaado dhamaantoode-, hadalka Rasuulka ee ah: "caduu calayhaa bina-waajidi" waa gawsaha danbe, oo uu uga jeedo in sunada la qabsado oo lagu taagnaado. Wuxuu uga digay wax kastoo diinta lagu soodaro oo bidca ah, waayo bidco walba waa baadi.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa muhiim in sunada laqabsado oo la raaco.
2. Waa in la ilaaliyo wacdiga iyo qalbiga jiclcintiisa.
3. Waa la amray in la raaco khulafada raashidiinta ah ee mahdiyiinta ah ee afarta ah ee Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka danbeeya, kuwaasoo ah: Abuu Bakar, Cumar, Cusmaan, Cali-Allaha ka raali ahaadee-.
4. Waa la diiday in diinta bidco lagu soo daro, bidco kastana waa lumid.
5. Waa in la maqlo oo la adeeco cida Muuminiinta madax u noqota, iyadoon macsi lagu raacayn.

6. Ahmiyad ayey leedahay in Ilaahay casa wajala laga baqao waqti walba iyo xaalad walba.
7. khilaafku wuu ka dhacayaa ummaddaan, hadii uu dhacana waa waajib in loo laabto Sunada Rasuulka scw iyo tii Khulafada Raashidiinta ah.

(65057)

(40) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم أنه قال: «مَنْ خَرَجَ مِنَ الطَّاعَةِ، وَفَارَقَ الْجَمَاعَةَ فَمَاتَ، مَاتَ مِيتَةً جَاهِلِيَّةً، وَمَنْ قَاتَلَ تَحْتَ رَايَةٍ عِمِّيَّةٍ، يَغْضَبُ لِعَصَبَةٍ، أَوْ يَدْعُو إِلَى عَصَبَةٍ، أَوْ يَنْصُرُ عَصَبَةً، فَقُتِلَ، فَقِتْلَةٌ جَاهِلِيَّةٌ، وَمَنْ خَرَجَ عَلَى أُمَّتِي، يَضْرِبُ بَرَّهَا وَفَاجِرَهَا، وَلَا يَتَحَاشَى مِنْ مُؤْمِنِهَا، وَلَا يَفِي لِذِي عَهْدٍ عَهْدَهُ، فَلَيْسَ مِنِّي وَلَسْتُ مِنْهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(40) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: Qofka ka hor yimaada madaxdiisa, bulshada muslimiintana ka dhex baxa ee sidaa ku dhinta, wuxuu ku dhintay dhimasho jaahili, qofka u dagaalama calan indho la`aan ah oo baadil ah, oo uu u caroonayo qabyaalad ama ugu yeeraya qabyaalad, ama u gargaaraya qabyaalad oo ku dhinta dhimashadiisu waa jaahili, qofka la dirira ummaddayda, ee garaaca kan baariga ah iyo kan faajirka ahba, ee aan ka leexan kan mu'uminka ah, ee aan kii balanta lahaa aan u oofin balantiisii, kaasi igama mid aha aniguna ka mid ma ihi". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka madaxda adeeci waaya oo ka baxa muslimiinta ku midaysan baycada Imaamka, ee sidaa ku dhinta isagoo jamaacada musliiinta ka baxay madaxdiina khilaafay, wuxuu ku dhintay dhimasho jaahili ah, kuwaasoo madaxna aan maqlayn, bulshodana aan ku xirnayn, balse ahaa kuwo kala firdha una kala qaybsanaa kooxo qabiilo ah oo qolaba qolo la dagaasho.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka u dagaalama calan aysan u cadayn inuu xaq yahay iyo inuu baadil yahay, oo uu u caroonayo hadii qoladiisu ama qabiilkiisu caroodo, oo uusan u caroon isagoo diinta u gargaaraya ama xaqa u gargaaraya, oo ku dagaalamo qabyaalad indho la`aan iyo cilmi la`aan ah, hadii xaaladaas lagu dilo waxay la mid tahay dhimasho jaahili ah.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofkii la dirira ummaddisa ee garaaca qofka fiican iyo kan xunba, ee wuxuu samaynaayo aan dan ka gelin, ee aan ka baqin ciqaabta dilka mu'uminiinta, ee aan ilaalinay balanta dadka lagula jiro sida gaalada balanta ku jooga iyo madaxda balanta lala galay, balse burinaaya balamada, arinkaasi wuxuu ka mid yahay dunuubta waawayn, qofkii sameeyana wuxuu xaq u yeelan goodigaas adag.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Madaxda in lagu adeeco wixii aan macsi Ilaahay casa wajala ahayn waxay ka mid tahay arimaha waajibka ah .
2. Xadiiskan waxaa ku jira digniin wayn oo ku socota cida adeeciwayda madaxda, ee ka baxa midnimada muslimiinta, haduu sidaa ku dhinto, wuxuu ku dhintay dariiqii dadka Jaahiliga.
3. Adiiskan waxaa ku jira reebid la reebayo in loo dagaalamo qabyaalad.
4. Waa waajib in la oofiyo balamada.
5. in madaxda la adeeco oo midnimda musliniita lagu jiro waxaa ku jira khayr badan, nabad iyo deganaansho, iyo in xaaladu hagaagto.
6. Waxaaa la reebay in la isku ekaysiiyo axwaasha dadka jaahiliga ah.

7. Waxaa la is farayaa ku dhex jirka midnimada ummadda muslimiinta.

(58218)

(41) – عن مَعقِلِ بن يَسار المُزَنِيّ رضي الله عنه قال: إني سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «مَا مِنْ عَبْدٍ يَسْتَرْعِيهِ اللهُ رَعِيَّةً، يَمُوتُ يَوْمَ يَمُوتُ وَهُوَ غَاشٌّ لِرَعِيَّتِهِ، إِلَّا حَرَّمَ اللهُ عَلَيْهِ الْجَنَّةَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(41) – Macqal Binu Yasaar AlMusani Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: " Qofkii Ilaahay madax uga dhigo shacab, oo maalinta geeridiisu joogto, dhinta isago soo khiyaamay shacabkiisii, Ilaahay wuxuu ka xarimaa janada. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qof kasta oo Ilaahay masuul uga dhigay dad, ha noqoto masuuliyad guud sida Madax wayne, ama masuuliyad gaara sida tan ninka ka saaran gurigiisa, ama gabadha ka saaran gurigeeda, hadii ay dayacaan wixii masuulka looga dhigay, ama ay khiyaanaan oo aanay u naseexayn, oo dayacaan xuquuqdooda diineed iyo tan aduunyo, waxay mutaysanayaan ciqaabtaas adag.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Goodigaasi gaar kuma aha madax waynaha iyo ku xigeenadiisa, balse waa mid guud oo loo jeedo qofkastoo Ilaahay madax uga dhigay dad.
2. Waxaa waajib ku ah qofkasta oo masuul ka noqda arin muslimiintu leeyihiin inuu u naseexeeyo, kuna dadaalo inuu amaanada guto, oo dadka uga digo khiyaanada.

3. Aad ayey u wayn tahay qofka mas'uuliyad guud u qabta dadka ama mid gaara, ha noqoto mid wayn ama mid yare.

(5335)

(42) – عَنْ أُمِّ سَلَمَةَ أُمِّ المُؤمنين رضي الله عنها: أَنَّ رَسُولَ اللهِ صلى الله عليه وسلم قَالَ: «سَتَكُونُ أُمَرَاءُ فَتَعْرِفُونَ وَتُنْكِرُونَ، فَمَنْ عَرَفَ بَرِئَ، وَمَنْ أَنْكَرَ سَلِمَ، وَلَكِنْ مَنْ رَضِيَ وَتَابَعَ» قَالُوا: أَفَلَا نُقَاتِلُهُمْ؟ قَالَ: «لَا، مَا صَلَّوْا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(42) – Umu salama, muuminiinta hooyadood-Allaha ka raali ahaadee- waxay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka warisay inuu yiri: "waxaa imaan doona kuwo madaxa oo samayndoona waxaad ku raacsan tihiin iyo waxaad ku diidan tihiinba, qofkii ku raaca wixii saxa wuu is beri yeelay, qofkii ku diida wixii khalad ahna wuu badbaadey, laakiin khaladku waa qofkii xumaha ku raaca oo ku raali noqda, waxay yiraahdeen: ma la diriraynaa? wuxuu yiri: maya, inta ay tukanayaan". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu inoo sheegay inay ina maamuli doonaan madax samayndoona shaqo aanu naqaan waafaqsana sharciga aanu naqaan, waxay kaloo samayn doonaan shaqo aan ku diidayno waayo waxay khilaafsan tahay sharciga. Qofka qalbigiisa ka diida munkarka ee aan awoodin inuu ka hadlo diidana, danbiga iyo nifaaqa bari ayuu ka noqday. Qofka awooda inuu madaxda ku diido gacan ahaan ama carab ahaan ee madaxda ku diida xumaha wuu ka badbaaday macsida iyo inuu ka qaybqaato xumaha. laakiin qofka ka raali noqda ee ku raaca xumaha wuu halaagsamin siday u halaagsameen.

Hadana waxay waydiiyeen Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inay la dagaalamaan madaxda xaalkuudu sidaa yahay?, wuuna u diiday Rasuulku arinkaa, wuxuuna ku yiri: maya, intay salaada idinla oogayaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa wax yaabaha tusinaaya Nabiga nabinimadiisa nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu sheegay waxa dhicidoona ee qaybka ah iyo inay u dheceen sidii uu u sheegay.
2. Ma banaana in laga raali ahaado munkarka iyo in laga qayb qaato, waana waajib in la diido.
3. Hadii madaxdu  sameeyaan wax shareecada khilaafsan ma banaana in lagu raaco arinkaas.
4. Madaxda muslimiinta in lala dagaalo ma banaana, waayo waxaa ka dhalanaya fasaad, dhiig la daadiyo iyo amniga oo la waayo, in loo adkaysto munkarka madaxda caasiga ah oo lagu sabro dhibkooda ayaa ka sahlan in lala dagaalo.
5. Salaada arinkeedu waa mid aad u wayn, iyadaa kala saarta kufriga iyo Islaamka.

(3481)

(43) – عَنِ ابْنِ مَسْعُودٍ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «سَتَكُونُ أَثَرَةٌ وَأُمُورٌ تُنْكِرُونَهَا» قَالُوا: يَا رَسُولَ اللَّهِ فَمَا تَأْمُرُنَا؟ قَالَ: «تُؤَدُّونَ الحَقَّ الَّذِي عَلَيْكُمْ، وَتَسْأَلُونَ اللَّهَ الَّذِي لَكُمْ». [صحيح] - [متفق عليه]

(43) – Cabdullaahi Binu Mascuud -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Waxaa imaan doona naf jeclaysi iyo arimo aad diidi doontaan" waxay dheheen: Rasuulka Ilaahayow, maxaad nafariysaa? wuxuu yiri: "iska bixiya xaqa la idinku leeyahay, xaqiinana Ilaahay waydiista." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inay muslimiinta talada u qaban doonaan madax qaadan doona maalka

muslimiinta iyo aduunyada kaleba, oo waxay doonaan ku samaynaaya Muslimiintana u diidaya xaqa ay ku leeyihiin. Madaxdaas waxaa laga arki doonaa arimo aad Diinta waafaqsanayn oo la diido. Asaxaabtu waxay waydiiyeen Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: waxa ay samaynayaan xaaladaas?. Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay in xoolaha ay qaateen aysan keenayn inaad diidaan xaqii ay waajibka idinku lahaayeen oo ah inaad maqashaan oo adeecdaan, balse ku sabra oo maqala oo adeeca oo ha ku qabsanina xukunka, oo Ilaahay waydiista xaqiina, oo ka barya inuu idiin hagaajiyo oo idinka celiyo sharkooda iyo dulmigooda.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskani wuxuu ka mid yahay wax yaabaha cadaynaya Nabinimada Suubbanaha nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waayo wuxuu sheegay waxa ummaddiisa ka dhici doona, siduu u sheegay ayuuna u dhacay.
2. Way banaan tahay in la sheego midka wax ku ibtilaysma waxa ku dhici doona ee balaayo ah, si uu naftiisa u diyaariyo, marka waxaasi yimaadana uu u noqdo mid samara ajarna ka raadsada.
3. Qabsashada kitaabka iyo sunada Rasuulka-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-waa labada lagaga boxo fitanta iyo is khilaafka.
4. Waxaa la isku boorinayaa in la maqalo oo wanaaga lagu adeeco madaxda oo aan lala dagaalamin xataa hadii ay la yimaadaan dulmi.
5. Waqtiga fitnada waa in la isticmaalo xikmad oo sunada la raaco.
6. Qofku waa inuu guto waajibka isaga saaran isaga haba la dulmiyee.

7. Xadiiskani wuxuu daliil u yahay Qaacidada ah: waxa la doortaa labo shar kii fudud ama labo dhib kii sahlan.

(3156)

(44) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بنِ عُمرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُما أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «كُلُّكُمْ رَاعٍ فَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ، فَالأَمِيرُ الَّذِي عَلَى النَّاسِ رَاعٍ وَهُوَ مَسْئُولٌ عَنْهُمْ، وَالرَّجُلُ رَاعٍ عَلَى أَهْلِ بَيْتِهِ وَهُوَ مَسْئُولٌ عَنْهُمْ، وَالمَرْأَةُ رَاعِيَةٌ عَلَى بَيْتِ بَعْلِهَا وَوَلَدِهِ وَهِيَ مَسْئُولَةٌ عَنْهُمْ، وَالعَبْدُ رَاعٍ عَلَى مَالِ سَيِّدِهِ وَهُوَ مَسْئُولٌ عَنْهُ، أَلاَ فَكُلُّكُمْ رَاعٍ وَكُلُّكُمْ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(44) – Cabdullaahi Binu Cumar-Allaha ka raalli ahaadee-wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "dhamaantiin waxaad tihiin Ilaaliye, waana la waydiin wixii la raaciyey, Amiirka dadka maamula waa ilaaliye isagaana la waydiin masuuliyadii uu hayey, ninka waxaa la raaciyey qoyskiisa waana la waydiin, gabadha xaaska ahna waxaa la raaciyey guriga ninkeeda iyo caruurtiisa waana la waydiindoonaa, Addoonka waxaa la raaciyey xoolaha sayidkiisa waana la waydiindoonaa, hooy dhamaantiin ilaaliyeyaal dhamaantiina waana la idin weydiindoonaa wixii la idin raaciyey." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qof walba oo  muslima ay ka saaran tahay bulshada masuuliyad ay tahay inuu ilaaliyo oo ka soo boxo. Imaamka iyo amiirku waxay ilaalinayaan wixii Ilaahay raaciyey, waxaa laga rabaa inay ilaaliyaan sharcga, oo ay ka difaacaan cidii dulmi wada, oo ay ku jihaadaan cadowgooda, oo aysan dayicin xaqooda. Ninkuna wuxuu masuul ka yahay inuu qoyskiisa biilo, oo uu si fiican ula dhaqmo, oo uu wax baro oo uu edbiyo. Gabadhana waxaa la raaciyey guriga ninkeeda waa inay si fiican u maamusho gurigiisa oo ay tarbiyeyso caruurtiisa, iyadaana masuul ka ah arinkaas. Qofka khidmeeya ee adoonka ah iyo kan

shaqaalaha ah waxay masuul ka yihiin xoolaha sayidkooda waa inay ilaaliyaan wixii uu u dhiibay iyo shaqadii uu u diray, iyagaana masuul ka ah arinkaas. Qofkasta wuxuu masuul ka yahay wixii la raaciyey, qof walbana waa la waydiinayaa wixii la raaciyey.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Masuuliyada bulshada muslimka ah waa mid guud, qof kastana waxaa laga rabaa inta awooddiisa iyo mas'uuliyadiisu tahay, ee uu gudan karo.
2. Masuuliyada dumarka saarani waa mid wayn, waxaana laga rabaa inay si wanaagsan u gudato waajibka ka saaran guriga ninkeeda iyo kan caruurteeda.

(5819)

(45) – عن عائشة رضي الله عنها قالت: سمعتُ من رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول في بيتي هذا: «اللَّهُمَّ مَنْ وَلِيَ مِنْ أَمْرِ أُمَّتِي شَيْئًا فَشَقَّ عَلَيْهِمْ فَاشْقُقْ عَلَيْهِ، وَمَنْ وَلِيَ مِنْ أَمْرِ أُمَّتِي شَيْئًا فَرَفَقَ بِهِمْ فَارْفُقْ بِهِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(45) – Caa'isha Allaha ka raali ahaade waxay dhahday: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isaga oo ku dhahaya gurigaygan dhexdiisa: "Allahayow qofkii madax u noqda ummaddayda oo wax ku adkeeya isna ku adkee, midka madax u noqda ummaddayda oo u naxariistana u naxariiso." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu habaaray qofkastoo madax ka noqda arimaha muslimiinta hayaraado arinkaasi ama ha waynaadee, madaxtinimadaasi ha noqoto mid guud ama mid kooban ee gaara, qofkaasoo madaxtinimadiisa dadka ku dhibaateeya, oo aan u naxariisan, Ilaahay wuxuu ku abaal marin camalkii uu sameeyey noociisa, wuuna ku adkayn.

Midkase u naxariista dadka oo u fududeeya arimahooda, Ilaahay ayaa u naxariista oo u fududeeya arinkiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa ku waajiba qofka muslimiinta arimahooda shay ka mida madax ka noqda inuu u naxariisto intuu kari karo.
2. Abaal marintu waxay ahaataa nooca camalku yahay.
3. Qiyaasta lagu eegayo waxa wax fudaydin la odhan iyo waxa culeys iyo kadeed la odhan waxuu ahaanayaa waxa aan kitaabka Alle iyo sunnada Nabiga weydaar saeyn ee waafaq san.

(5330)

(46) – عن تميم الداري رضي الله عنه أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «الدِّينُ النَّصِيحَةُ» قُلْنَا: لِمَنْ؟ قَالَ: «لِلهِ وَلِكِتَابِهِ وَلِرَسُولِهِ وَلِأَئِمَّةِ الْمُسْلِمِينَ وَعَامَّتِهِمْ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(46) – Tamiim adaari Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Diintu waa naseexo " waxaan ku niri: yey u tahay: wuxuu yiri: " Ilaahay, Kitaabkiisa, Rasuulkiisa, madaxda muslimiinta, iyo muslimiinta oo dhan " [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inay diinta ku dhisan tahay ikhlaas iyo run, si loogu guto sida Ilaahay u waajibiyey oo kaamila oo aan la yarayn oo la qishin.

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa lagu yiri: yey u tahay naseexo? wuxuuna yiri:

Tan kowaad: Ilaahay ayey u tahay isagaa koreeya oo nusqaan ka hufane: waa in loo khaalis yeelo camalka oo aan loo shariig yeelin ", oo aanu rumayno Rabinimadiisa, Ilaahnimadiisa, Magacyadiisa,

Sifaadkiisa, arinkiisa oo la wayneeyo iyo dadkoo la gaarsiiyo inay Ilaahay rumeeyaan.

Tan labaad: kitaabkiisa Qur'aanka ah: ayey u tahay: waana inaan aamino inuu hadlkii Ilaahay yahay oo kii kutubtiisa u danbeeyey yahay, iyo inuu nasakhay dhamaan shareecooyinkii isaga ka horeeyey, waa inaan waynayno oo si wanaagsan u akhrino oo ku camal falo quraanka muxkamkiisa, oo aanu u hogaansamo mutashaabihiisa, oo aanu ka tagno kuwa quraanka qalooociya oo bedela, waa inaan ku cibro qaadano waanadiisa, oo cilmigiisa faafino, dadkana ugu yeerno.

Tan saddexaad: waxay u tahay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee : oo ah in la rumeeyo inuu yahay Rasuulkii u dambeeyey, oo aan rumayno wuxuu la yimid, oo aanu amarkiisa qaadano, wuxuu naga reebayna ka harno, oo aynaan Ilaahay ku caabudin wixii Nabigu la yimid maahee, oo nabiga xaqiisa waynayno, oo nabiga maamuusno, oo dacwadiisa fidino, oo shareecadiisa faafino, oo tuhunka ka difaacno.

Tan afraad: madaxda muslimiinta ayey u tahay: taasoo ah in xaqa loogu kaalmeeyo, oo aan lagu qabsan madaxtinimada, waana in la maqlo oo lagu adeeco sharciga Ilaahay.

Tan shanaad: muslimiintoo dhan ayey u tahay naseexo: waana in loo ixsaan falo oo khayrka loogu yeero, oo dhibka laga daayo, oo khayrka lala jeclaado, oo baarinimo iyo taqwo lagula dhaqmo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Naseexada in la is faro dadka oo dhan ayey u taalaa.
2. Nseexadu maqaamka ay diinta ku leedahay wuu wayn yahay.
3. Diintu waxay ka kooban tahay caqiido, oraah iyo camal fal.
4. Naseexada waxaa ka mida in nafta kan loo naseexaynayo laga sifeeyo qishka iyo khayrka oo lala doono.
5. Rasuulka scw si fiican ayuu dadka wax u bari jiray isagoo shayga si guud u sheega ayuu hadana sii faahfaahinayeya.

6. Waxaa lagu bilaabaa shayba shayga uu ka muhiimsan yahay, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku bilaabay naseexada Ilaahay, ka dibna kitaabkiisa, ka dibna Nabigiisa nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dibna madaxda muslimiinta ka dibna muslimiinta oo dhan.

(4309)

(47) – عن أبي سعيد الخُدْريِّ رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «مَنْ رَأَى مِنْكُمْ مُنْكَرًا فَلْيُغَيِّرْهُ بِيَدِهِ، فَإِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَبِلِسَانِهِ، فَإِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَبِقَلْبِهِ، وَذَلِكَ أَضْعَفُ الْإِيمَانِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(47) – Abii Saciid Al-khudri Allaha ka raalli ka noqdee wuxuu yiri: waxaan ka maqlay rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo leh: qofkii idinka mid ah ee arka xumaan gacantiisa ha ku dooriyo, haduusan awoodin carabkiisa ha ku dooriyo, haduusan awoodin qalbigiisa hakanoco, kaasina waa meesha iimaanka ugu liidata. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu farayaa naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee tir tirida xumaha waana wax kasta oo Ilaahay iyo rasuulkiisu reebeen kolba awooda qofka muslimka ahi intay qaban kareyso. Haduu arko -muslimku-xumaan waxaa ku waajib ah inuu gacantiisa ku baabi'iyo, haduu awoodaa leeyahay oo sameyn karo. Haduuna awoodi karin sidaas, carabkiisa ha ku tir tiro xumaantaa oo ha ka reebo kan xumaanta faraha kula jira, hana ku waaniyo kheyrka sharta badalkeeda. Haduu awoodi waayo kaalintaa qalbigiisa ha ku badalo xumaanta isagoo nacaya xumaantaa oo go'aansanaya haduu awoodi lahaa inuu ficil ku baabi'in lahaa. Qalbiga oo laga naco xumaanta waa derejada ugu hoosaysa derajooyinka iimaanka ee xumaanta lagu tir-tiro.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskaani wuxuu sal u yahay cadaynta martabadaha xumaanta lagu badalo ee lagu tir-tiro.
2. Arintu waa jaranjaro marka xumaanta la reebayo, qofwalbana waa inta awoodiisa iyo karaankiisu dhan yahay.
3. Xumaha oo la reebo diinta wuxuu ka yahay baab aad u wayn qof uu ka dhacayona ma jiro, qof walboo muslim ah waxaa lagu waajibin inta awoodiisu tahay.
4. Wanaaga oo la is faro iyo xumaha oo la iska reebo waa sifooyinka iimaanka, iimaankuna wuu kordhaa wuuna naaqusaa.
5. Xumaha la reebo waxaa u shardi ah: in la og yahay in waxa la reebayo ay xun yihiin.
6. Waxaa shardi u ah badalida munkarka: in aanay ka dhalanayn munkar kaloo ka wayn.
7. munkarka in la reebo waxay leedahay aadaab ay haboon tahay in qofka muslim ka ahi barto.
8. munkarka in la reebo wuxuu u baahan yahay siyaasad sharciya iyo cilmi iyo aragti dheer.
9. munkarka inaan qalbiga laga nicin waxay tusaysaa daciifnimada iimaanka.

(65001)

(48) – عَنِ النُّعْمَانِ بْنِ بَشِيرٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «مَثَلُ القَائِمِ عَلَى حُدُودِ اللَّهِ وَالوَاقِعِ فِيهَا، كَمَثَلِ قَوْمٍ اسْتَهَمُوا عَلَى سَفِينَةٍ، فَأَصَابَ بَعْضُهُمْ أَعْلاَهَا وَبَعْضُهُمْ أَسْفَلَهَا، فَكَانَ الَّذِينَ فِي أَسْفَلِهَا إِذَا اسْتَقَوْا مِنَ المَاءِ مَرُّوا عَلَى مَنْ فَوْقَهُمْ، فَقَالُوا: لَوْ أَنَّا خَرَقْنَا فِي نَصِيبِنَا خَرْقًا وَلَمْ نُؤْذِ مَنْ فَوْقَنَا، فَإِنْ يَتْرُكُوهُمْ وَمَا أَرَادُوا هَلَكُوا جَمِيعًا، وَإِنْ أَخَذُوا عَلَى أَيْدِيهِمْ نَجَوْا، وَنَجَوْا جَمِيعًا». [صحيح] - [رواه البخاري]

(48) – Nucmaan Binu Bashiir-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Tusaalaha Qofka xuduuda Ilaahay ku taagan ee ilaalinaya sharciga iyo midka ku dhacaya ee aan ka waabanayn,waa sida dad doon u qori ritay, oo qaar heleen xaga sare qaar xaga hoose, oo kuwa xaga hoose markay biyo u baahdaan siimarayaan kuwa korka saaran, oo ay dhahaan: hadaan halkeenanba dalooshano, oo aynaan dhibin kuwa naga sareeya, hadaba kuwa xaga sare saarani haday u ogolaadaan sidaa dhamaantood way halaagsamayaan, hadayse ka qabtaan gacmaha oo u diidaan way bad baadi, dhamaantoodna way wada bad-baadayaan." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu tusaale u soo qaatay kuwa xuduuda shareecada dhowra ee amarka Ilaahay ku toosan, wanaagana fara xumahana reeba . iyo kuwa ku dhaca xuduuda Ilaahay, ee kataga wanaaga xumaantana u bareera, iyo saamaynta taasi ku leedahay badqabka bulshada, waa sida dad saaran doon, una qori ritay cida xaga sare fariisan iyo kuwa xaga hoose fariisan, sidaana qaar ku heleen xaga sare, qaarna xaga hoose, kuwa hoosta fadhiya markay biyo rabaan waxay siimarayaan kuwa sare, oo ay dheheen kuwa hoose: halkan aan joogno aan dalooshano, si aynaan u dhibin kuwa sare, haday ku eegaan kuwa korka saarani daloolintaa, way la dagin doontu dhamaantood, hadayse ka joojiyaan oo daloolintaa u diidaan way wada bad-baadayaan dhamaantood.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Muhimada ayey u leeyahay wanaag faridiisa iyo xumaanta reebideedu badqabka Bulshda iyo nabadgalyadeeda.
2. Qaababka wax lagu baro dadka waxaa ka mid ah tusaale bixinta, si uu macnuhu ugu dhawaado caqliga si muuqaal ah.

3. xumaanta muuqata oo lagu dhoco oo la inkiri waayo, waxaa ka dhasha fasahaad bulshada u keena dhibaato.
4. halaaga bulshadu wuxuu ka dhashaa dadka xumaanta samaynaaya oo loo daayo inay dhulka fasaadiyaan.
5. Xumaanta oo la sameeyo iyo niyada oo la wanaajiyo kuma filna in camalka la hagaajiyo.
6. masuuliyada bulshada muslimka ah waa la wadaagaa ee qof kaliya ma saarna.
7. Bulshada waa lagu cadaabayaa dambiga uu sameeyey qof gaar ah hadaan la iska qaban xumaanta.
8. Dadka xumaanta sameeya waxay u tusaan in xumaantoodu khayr u tahay Bulshada Muslimka ah, sida munaafiqiintu sameeyaan oo kale.

(3341)

(49) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «مَنْ دَعَا إِلَى هُدًى كَانَ لَهُ مِنَ الْأَجْرِ مِثْلُ أُجُورِ مَنْ تَبِعَهُ، لَا يَنْقُصُ ذَلِكَ مِنْ أُجُورِهِمْ شَيْئًا، وَمَنْ دَعَا إِلَى ضَلَالَةٍ كَانَ عَلَيْهِ مِنَ الْإِثْمِ مِثْلُ آثَامِ مَنْ تَبِعَهُ، لَا يَنْقُصُ ذَلِكَ مِنْ آثَامِهِمْ شَيْئًا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(49) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Qofka dadka hanuun ugu yeera wuxuu helayaa ajarka ay helayaan dadka hanuunka ku raacay mid la mida, iyagoon ajarkooda laga nusqaamin, qofkase ugu yeera dadka baadil wuxuu helayaa dambiga ay yeeshaan dadka ku raacay baadilka, iyadoo aan danbigoodii waxba laga nusqaamin." **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey- in qofka dadka ku haga, tusa, oo ku booriya wanaaga iyo kheyrka hadal

iyo ficil kuu doonaba ha ahaadee, inuu helayo ajar la mida ajarka dadka kheyrka ku raaca uu helayo, iyadoon waxba laga dhimayn ajarkooda Qofkase dadka ku haga ee tusa dariiqa baadilka iyo shar danbigi iyo gaf ku jiraan ama arin aan banaanayn, hadal iyo ficil kuu doonaba ha ahaadee, wuxuu helayaa dambiga ay yeelanayaan dadka xumaanta ku raacay, iyagoo aan laga nusqaamin dambiyadooda waxba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadli wayn baa ku jira dadka oo hanuunka iyo kheyrka loogu yeero, ha badnaato ama ha yaraatee, qofka daaciga ah ee dadka kheyrka u hor seedana wuxuu leeyahay ajarka qofka waanagiisa ku camal falay oo kale, arinkaasina waa fadliga Ilaahay iyo kaamilnimada deeqsinimadiisa.
2. khatar ayaa ku jirta dadka oo xumaan loogu yeero, wax wayn iyo wax yar kay doontaba ha ahaatee, midka xumaanta ugu yeeraya wuxuu leeyahay dambiga uu helayo kan xumaanta ka qaatay ee sameeyey.
3. Abaal marintu waa nooca hadba camalku yahay, qofka kheyr dadka ugu yeera kheyrkaa cida sameysa ajarkeedoo kale ayuu helayaa, midka sharka ugu yeerana sharkaa cida sameysa dambiga ay ka helayaan oo kale ayuu leeyahay.
4. Qofka muslimka ah waa inuu ka digtoonaadaa in lagaga daydo xumaan uu muujiyey dadka hortiisa, waayo waxaa dusha loo saari dambiga dadka kaga dayda xumaanta waloow yaanu ku boorine.

(3373)

(50) – عن أبي مسعود الأنصاري رضي الله عنه قال: جَاءَ رَجُلٌ إِلَى النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالَ: إِنِّي أُبْدِعَ بِي فَاحْمِلْنِي، فَقَالَ: «مَا عِنْدِي»، فَقَالَ رَجُلٌ: يَا رَسُولَ اللهِ، أَنَا أَدُلُّهُ عَلَى مَنْ يَحْمِلُهُ، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «مَنْ دَلَّ عَلَى خَيْرٍ فَلَهُ مِثْلُ أَجْرِ فَاعِلِهِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(50) – Abii Mascuud Alansaarii Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee  nin ayaa u yimid wuxuuna yiri: waan gaadiid beelaye  gaadiid i saar, wuxuu ku yiri Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: "kuuma heli karo", nin kalaa yiri: Rasuulkii Ilaahayow, anaa tusaaya qof saara, Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri-: "qofka khayrka dadka tusa wuxuu leeyahay ajar la mida kan khayrka sameeyey ajarkiisa". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nin ayaa u yimid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuuna ku yiri: gaadiidkaygii ayaa iga dhintaye, i fuuli gaadiid, oo i sii waxaan fuulo oo i gaarsiiya, wuuna ka cudur daartay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee  inaanu hayn shay uu fuuliyo, nin kale oo joogay ayaa yiri: Rasuulka Ilaahayow, anaa tusaya qof fuuliya, markaasaa Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee  u sheegay inuu ajarka la wadaagayo kan wax sadaqaystay waayo wuxuu tusay qof u baahan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa in kheyrka la is ku tilmaamo.
2. In la isku booriyo khayrku waa asbaabta keenaysa bulshada Muslimka ahi inay is kaashato oo ay is caawiso.
3. Waasicnimada fadliga Ilaahay sareeye.
4. Xadiiskani waa qaacido guud oo ay soo galayso acmaasha khayrka ah oo dhan.
5. Qofku haduuna dabooli karin baahida kan baryaya, waa inuu u tilmaamaa qof kale oo qayrki ah.

(5354)

(51) – عَنْ سَهْلُ بْنُ سَعْدٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ يَوْمَ خَيْبَرَ: «لَأُعْطِيَنَّ هَذِهِ الرَّايَةَ غَدًا رَجُلًا يَفْتَحُ اللَّهُ عَلَى يَدَيْهِ، يُحِبُّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيُحِبُّهُ اللَّهُ وَرَسُولُهُ»، قَالَ: فَبَاتَ النَّاسُ يَدُوكُونَ لَيْلَتَهُمْ أَيُّهُمْ يُعْطَاهَا، فَلَمَّا أَصْبَحَ النَّاسُ غَدَوْا عَلَى رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كُلُّهُمْ يَرْجُو أَنْ يُعْطَاهَا، فَقَالَ: «أَيْنَ عَلِيُّ بْنُ أَبِي طَالِبٍ؟» فَقِيلَ: هُوَ يَا رَسُولَ اللَّهِ يَشْتَكِي عَيْنَيْهِ، قَالَ: «فَأَرْسِلُوا إِلَيْهِ»، فَأُتِيَ بِهِ فَبَصَقَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي عَيْنَيْهِ وَدَعَا لَهُ، فَبَرَأَ حَتَّى كَأَنْ لَمْ يَكُنْ بِهِ وَجَعٌ، فَأَعْطَاهُ الرَّايَةَ، فَقَالَ عَلِيٌّ: يَا رَسُولَ اللَّهِ، أُقَاتِلُهُمْ حَتَّى يَكُونُوا مِثْلَنَا؟ فَقَالَ: «انْفُذْ عَلَى رِسْلِكَ حَتَّى تَنْزِلَ بِسَاحَتِهِمْ، ثُمَّ ادْعُهُمْ إِلَى الإِسْلاَمِ، وَأَخْبِرْهُمْ بِمَا يَجِبُ عَلَيْهِمْ مِنْ حَقِّ اللَّهِ فِيهِ، فَوَاللَّهِ لَأَنْ يَهْدِيَ اللَّهُ بِكَ رَجُلًا وَاحِدًا، خَيْرٌ لَكَ مِنْ أَنْ يَكُونَ لَكَ حُمْرُ النَّعَمِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(51) – Sahal Binu Sacad-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Rasuulka Ilaahay ka wariyey nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri maalintii kheybar: "Waxaan calankaan siindoonaa bari nin Ilaahay gacmihiisa ku furidoono, kaasoo Ilaahay iyo Rasuulkiisa jecel, Ilaahay iyo Rasuulkiisuna jecel yihiin", wuxuu yiri -Sacad-: dadku waxay baryeen habeekii iyagoo ku murmaya kee loo dhiibidoonaa, markii waagu baryey ayey ku soo kalaheen Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyagoo qof walba uu rabo in loo dhiibo, wuxuu yiri: "aaway Cali Binu Abii Daalib?" waxay ku dhaheen: Rasuulkii Ilaahayow, indhahaa xanuunaya, wuxuu yiri: "u yeera", waana loo keenay, Rasuulka ayaa kaga tufay indhaha wuuna u duceeyey, wuuna bogsaday isagoo la moodo inuusan xanuusan, calankii ayuu u dhiibay, Cali ayaa yiri: Rasuulkii Ilaahayow, ma waxaan la dagaalamaa ilaa ay anagoo kale noqdaan? wuxuu yiri: "tartiib u soco ilaa aad degtid goobtooda, ka dibna ugu yeer Islaamka, una sheeg waxa ku waajibaya ee xaqa Ilaahay ah, Ilaahay baan ku dhaartaye in Ilaahay kugu soo hanuuniyo hal nin, ayaa kaaga kheyr badan inaad yeelato geel cas-cas".
[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay asaxaabta in muslimiintu ka guulaysan doonaan yuhuuda reer kheybar beri,  taasina waxay ku imaan doontaa nin Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee calanka ugu dhiibi doono gacantiisa, calankuna waa midka ciidanku astaanta ka dhigtay. Ninkaana sifooyinkiisa waxaa ka mida inuu Ilaahay iyo Rasuulkiisa jecel yahay Ilaahay iyo Rasuulkiisuna ay jecel yihiin. Asaxaabtu waxay habeenkii ku baryeen iyagoo ku murmaya yaa la siin doonaa calanka?, iyagoo doonaya inay sharaftaas wayn helaan. Markii waagii baryey ayey u tageen Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyadoo mid walba rabo inuu ku guulaysto sharaftaas wayn,

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu waydiiyey Cali Binu Abii Daalib-Allaha ka raali ahaadee-?

waxaa lagu yiri: wuu bukaa oo indhahaa xanuunaya.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu u cidiray waana loo keenay-Cali-, Nabigu candhuuftiisa sharafta leh ayuu indhaha kaga tufay, wuuna u duceeyey, wuu ka bogsaday xanuunkii sidii isagoo aan xanuunsan, markaasuu calankii u dhiibay, wuxuuna faray inuu tartiib u socdo inta uu u dhawaanayo dhufayska cadawga, oo uu Islaamka ugu yeero, haday aqbalaan, u sheeg Faralka ku waajibaya.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dib wuxuu u cadeeyey Cali fadliga dacwada Ilaahay leedahay,  oo hadii qofka daaciga ah Ilaahay sababtiisa ku soo hanuuniyo hal qof waxay uga kheyr badan tahay geel cas-cas, kaasoo ah waxa ugu qiimo badan xoolaha Carabta isagoo dhaqanaya ama sadaqaysanaya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiska waxaa ku cad fadliga Cali Binu Abii Daalib-Allaha ka raali ahaadee-, iyo inuu Rasuulku uga markhaati noqday jacaylka uu Ilaahay iyo Rasuulkiisa jecel yahay, iyaguna jecel yihiin.

2. Waxaa ku jira xadiiska siday asxaabtu ugu dadaali jireen kheyrka, oo ugu baratamayeen.
3. waxaa sharci ah in waqtiga dagaalka lagu socdo aadaabta Islaamka oo laga tago seef la boodnimada iyo qaylada iyo buuqa aan loo baahnayn.
4. Xadiisku wuxuu ka mid yahay adulada tusaysa Nabiga nabinimadiisa -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- waayo wuxuu sheegay in laga guuleysan doono yuhuuda, iyo sida uu u daweeyey indhaha cali Binu Abii Daalib idanka Ilaahay.
5. Ujeedada ugu wayn ee jihaadka laga leeyahay waa inuu dadku soo galo Islaamka.
6. Dacwada Islaamku waa talaabooyin is xig-xiga, waxa ugu horeeya ee gaalka laga dalbo waa inuu Islaamka soo galo oo shahaadateynka ku dhawaaqo, ka dibna waxaa la farayaa waajibaadka Islaamka.
7. Dacwada Islaamku way fadli badan tahay khayr ayaana ugu jira kan u yeeraya dadka iyo kan loo yeerayoba, waxaa laga yaabaa kan loo yeerayo inuu soo hanuuno oo kan u yeeraya uu ajar badan ka helo.

(3409)

(52) – عن ابنِ عُمَرَ رضي الله عنهما قال: قال رسولُ الله صلَّى الله عليه وسلم: «مَن تَشَبَّهَ بِقَوْمٍ فَهُوَ مِنْهُمْ». [حسن] - [رواه أبو داود وأحمد]

(52) – Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabbihiiye wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri "Qofkii qolo isu ekaysiiya iyaguu ka mid yahay. [Xadiis Xasan ah] - [Waxaa Wariyay Abuu Daa'uud iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofkii isku ekaysiiya qolo gaalo ah ama faasiqiina ama saalixiina isagoo

samaynaya wax ka mida wixii lagu yaqaanay, sida caqiidada, cibaadada iyo caadooyinka iyaguu ka mid yahay, waayo oogada oo ay isaga ekaadaan waxay keenaysaa inay gudaha isaga ekaadaan, shakina malaha in hadii qolo la isu ekaysiiyo ay ka imaanayso inay cajabiyeen, taaso keeni karta inuu jeclaado oo wayneeyo oo uu ku dhex jiro, taaso qofka u keeni karta inuu uga ekaado xaga gudaha iyo cibaadada, Ilaahay ayaan ka magan galnaye.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa laga digayaa isku ekeysiinta gaalada iyo faasiqiinta.
2. Waxaa la isku boorinayaa isku ekaysiinta saalixiinta iyo ku dayashadooda.
3. Dusha oo la isaga ekaado waxay dhaxal siinaysaa uurka la iska jeclaado.
4. qofku goodiga iyo danbiga wuxuu ka qaadanayaa hadba sida uu yahay isu ekaysiintiisu iyo nooca ay tahay.
5. waxaa la iska reebay in la isu ekaysiiyo gaalada diintooda iyo caadooyinkooda u gaarka ah, wixiise aan intaas ahayn sida in laga barto farsamada iyo wixii la mida ma soo galayaan reebitaankaas.

(5353)

(53) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن النبيَّ صَلّى اللهُ عَلَيْهِ وسَلَّم قَالَ: «الرَّجُلُ عَلَى دِينِ خَلِيلِهِ، فَلْيَنْظُر أَحَدُكُم مَنْ يُخَالِل». [حسن] - [رواه أبو داود والترمذي وأحمد]

(53) – Abuu hurayra-Allaha karraalli ahaadee-waxuu nabiga kawariyey-naxariis iyo nabadi korkiiye-inuu dhahay: ((qofku waa kolba diinta(dhaqanka) saaxiibkii uu kusugan yahay uun,ee ha eego midkiin qofka uu lasaaxiibayo)). [Xadiis Xasan ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At Tirmidi, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

wuxuu cadeeyey nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu qofku ka.shabbaho saaxiibkii xagga hab dhaqankiisa iyo caadooyinkiisa, oo waliba ay saamayso saaxiib nimadu akhlaaqda,hab dhaqanka, sidaa tarteed ayuu ku boorriyey ummaddiisa xulashada saaxiibka fiican,waayo waxuu tusaa saaxiibkii iimaanka iyo hanoonka, hiil xagga khayrka ahna wuu u.ahaadaa saaxiibkii.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa lafarayaa dadka inay kala saaxiibaan dadka intooda wanaagsan,waxaana laga nahiyayaa ina shar wadayaasha kuxidh maan ama la saaxiibaan.
2. waxaa loo gaar yeelay saaxiibka oo loo sheegi waayey qaraabadiisa waayo saaxiibka adaa dooranaya lkn walaalka iyo qaraabada doorashadooda adigu kaalin kumalihide waa cidduu Alle kula dhaliyo.
3. Yeelashada saaxiibka waa in aad looga fikiro.
4. Qofku waxuu kuxoojiyaa diintiisa lasocodka mu.uminiinta wanaagsan, waxaana daciifiya ku xidhnaashaha faasidiinta.

(3122)

(54) – عن تَميم الداري رضي الله عنه، قال: سمعتُ رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «لَيَبْلُغَنَّ هَذَا الأَمْرُ مَا بَلَغَ اللَّيْلُ وَالنَّهَارُ، وَلَا يَتْرُكُ اللَّهُ بَيْتَ مَدَرٍ وَلَا وَبَرٍ إِلَّا أَدْخَلَهُ اللَّهُ هَذَا الدِّينَ، بِعِزِّ عَزِيزٍ أَوْ بِذُلِّ ذَلِيلٍ، عِزًّا يُعِزُّ اللَّهُ بِهِ الإِسْلَامَ، وَذُلًّا يُذِلُّ اللَّهُ بِهِ الكُفْرَ» وَكَانَ تَمِيمٌ الدَّارِيُّ يَقُولُ: قَدْ عَرَفْتُ ذَلِكَ فِي أَهْلِ بَيْتِي، لَقَدْ أَصَابَ مَنْ أَسْلَمَ مِنْهُمُ الْخَيْرُ وَالشَّرَفُ وَالْعِزُّ، وَلَقَدْ أَصَابَ مَنْ كَانَ مِنْهُمْ كَافِرًا الذُّلُّ وَالصَّغَارُ وَالْجِزْيَةُ. [صحيح] - [رواه أحمد]

(54) – Tamiim Addaari-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan ka maqlay isagoo dhahaya: "Arinkaani (islaamka) wuxuu gaaridoonaa habeenka iyo maalintu halkay gaaraan, Ilaahay dayn maayo guri magaalo iyo guri baadiye midna ee wuu galin diintiisa, wuxuu ku galin sharafta mid sharaf leh ama dulinimada mid duli ah, sharaf uu Ilaahay ku sharfayo islaamka, iyo dulayn uu Ilaahay ku dulaynayo kufriga" wuxuu dhihi jiray Tamiim addaari: aarinkaa waxaan ku ogaaday oo aan ku arkay qaraabadayda, dhab ahaan khayr iyo sharaf bay heleen kuwa Islaamay, kuwa gaalnimo ku harayna waxaa haleelay duli, quursi iyo jisyo. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Axmed]

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu islaamku ku faafidoono meel walba oo dhuka ka mida, diinta Islaamku waxay gaaridoontaa meelkasta oo habeenka iyo maalitu gaaraana, Ilaahayna ka tagi maayo guri magaalo, tuulo, baadiye iyo saxaraha midna ee wuu galinayaa diintaan. Qofka qaata diinta Islaamka ee iimaanka laga helo wuxuu noqon mid lagu sharfo sharafta Islaamka, Midka iska diida ee ku gaalooba diinta wuxuu noqon mid duliya oo ihaanaysan.

Intaa ka dib saxaabiga Tamiim addaari-Allaha ka raali ahaadee-ayaa sheegay inuu arinkaa ku arkay dadka isaga eheladiisa ah, oo inta ka islaamtay khayr iyo sharaf iyo cisi heleen, inta gaalnimada qaadatayna duli iyo ihaano ku dhacday, iyagoo waliba jisyo bixinaya oo muslimiinta siinaya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Muslimiinta bisharaa ugu sugan xadiiskaan in diintoodu dhulka oo dhan wadagaari doonto.

2. Cisiga iyo sharaftu Islaamka iyo muslimiintay u sugnaatay, duligana gaalnimada iyo gaaladay u sugnaatay.
3. Xadiiskaan waxaa ku sugan daliil cad oo ah cadeymaha muujinaya nabinimada Suubbanaha-naxariis iyo nabadi korkiisa ah ahaatee- isagoo warkaa uu sheegay uu u dhacay sidii uu sheegay.

(11220)

(55) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنْ رَسُولِ اللهِ صلى الله عليه وسلم أنه قال: «وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ لَا يَسْمَعُ بِي أَحَدٌ مِنْ هَذِهِ الْأُمَّةِ يَهُودِيٌّ وَلَا نَصْرَانِيٌّ، ثُمَّ يَمُوتُ وَلَمْ يُؤْمِنْ بِالَّذِي أُرْسِلْتُ بِهِ إِلَّا كَانَ مِنْ أَصْحَابِ النَّارِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(55) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Allaha nafta Maxamed gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee qofka i maqla ee ummaddaan ka mid ah yahuudi ama nasraani-kuu doonaba ha ahaadee-, ee dhinta isagoon rumayn xaqa la ila soo diray wuxuu ahaanayaa kuwa naarta gala". **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku dhaartay qofka maqla Nabiga scw oo dacwada Islaamku gaadho, yahuudi iyo kiristaan ama qayrkoodba ha ahaadee, ee dhinta isagoon Islaamin, inuu ahaanayo mid naarta gala oo ku waaraya waligiiba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Risaalada Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waa diin ay u siman yihiin dhamaan aduunka waxa ku nool dhamaan, waajibna ay ku tahay in dadkoo dhami raacaan, oo ay waliba nasakhday dhamaan sharciyadii iyada ka horeeyey dhamaan.

2. Qofka ku gaalooba Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ma anfacayso sheega shadiisa ah inuu rumaysan yahay Nabiyada kale nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee dhamaan-.
3. Qofka aan maqlin Nabiga scw oo aanay diinta Islaamku gaarin waa loo cudur-daarayaa, arinkiisuna aakhiro Ilaahay ayuu u yaallaa.
4. Qofku Islaamka wuu ku intifaacayaa inta geerida ka horaysa, haduu xataa aad u jiran yahay ilaa ay ruuxdu soo gaarto dhuunta.
5. Diinta gaalada in sax lagu sheego iyadoo ay ku jiraan tan yahuuda iyo tan kiristaanku waa gaalnimo.
6. Yahuuda iyo nasaarada lagu xusay xadiiskaan waxay baraarujin u tahay gaalada kale, waayo yuhuuda iyo nasaaradu waxay leeyihiin kitaabka, haduu xaalkoodu sidaa yahay, kuwa iyagu aan wax kitaaba lahayni wayba kasii daran yihiin, oo dhamaantood waxaa ku waajib ah, inay Ilaahay diintiisa soo wada galaan, Nabigana-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wada adeecaan.

(3272)

(56) – عَنْ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنهما قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ غَدَاةَ الْعَقَبَةِ وَهُوَ عَلَى نَاقَتِهِ: «**الْقُطْ لِي حَصًى**» فَلَقَطْتُ لَهُ سَبْعَ حَصَيَاتٍ، هُنَّ حَصَى الْخَذْفِ، فَجَعَلَ يَنْفُضُهُنَّ فِي كَفِّهِ وَيَقُولُ: «**أَمْثَالَ هَؤُلَاءِ فَارْمُوا**» ثُمَّ قَالَ: «**أَيُّهَا النَّاسُ، إِيَّاكُمْ وَالْغُلُوَّ فِي الدِّينِ، فَإِنَّما أَهْلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ الْغُلُوُّ فِي الدِّينِ**». [صحيح] - [رواه ابن ماجه والنسائي وأحمد]

(56) – Cabdullaahi Ibnu Cabaas -Allaha ka raali noqdee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay : wuxuu yiri: subaxdii jamratul-caqaba latuurayey, isagoo hashiisii saaran: "dhagax ii soo gur" waxaan u soo guray todoba dhagax oo yar-yar, oo kuwa far garanka ah, wuxuu bilaabay inuu gacantiisa ku ruxo oo dhaho: "kuwan oo kale uun tuura" ka dib wuxuu dhahay: "dadoow, waxaan idiinka digayaa inaad diinta ku xad gudubtaan, dadkii idinka horeeyeyba waxay ku halaagsameen diinta oo ay ku xad gudbeen." **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Ibnu Maajah, An nasaa'i iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Cabdullahi Binu Cabbaas-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu sheegay inuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee la joogay maalintii xoolaha la qalayey ee ciida, ee lana tuurayey dhagaxa jamratul-caqaba, xajkii Al-wadaac ee ugu dambeeyey Suubanaha-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-. Nabigu wuxuu amray isaga inuu u soo qaado toddoba dhagax oo yar-yar, oo mirkiisu uu le.eg yahay Digirta wayn, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inta gacantiisa ku shubay ayuu yiri: Dhagxaan kuwaan oo kale le`eg uun tuura, Intaa ka dib wuxuu ka digay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in lagu xad gudbo diinta oo la isku adkeeyo oo xadkeeda la dhaafo, waayo ummadihii hore waxaa halaagay ku xad gudubka diinta iyo iyadoo la isku adkeeyo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la reebay in diinta lagu xad gudbo, oo la cadeeyo cirib xumada ka dhalan karta, ayna sabab u noqon karto Halaaq.
2. Waa in lagu cibro qaato ummadihii naga horeeyey oo aan ka fogaano qaladkii ay ku dhaceen.
3. waxaa la isku boorinayaa in sunaha lagu daydo.

(3395)

(57) – عن عبد الله بن مسعود قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «**هَلَكَ الْمُتَنَطِّعُون**» قالها ثلاثًا. [صحيح] - [رواه مسلم]

(57) – Cabulaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri : (Way halaagsameen kuwa diinta isku adkeeya) saddex jeer ayuu yiri. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay guul darada iyo khasaaraha ku dhacaya kuwa diinta isku adkeeya iyagoo toosnaan iyo cilmi ku socon diintooda iyo aduunyadoodaba, iyo hadalkooda iyo ficilkoodaba, kuwaasoo dhaafay xadka sharciga ah ee Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee la yimid.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la xarimay in la isku adadkeeyo oo la isku kalifo arin walba, waxaana la isku booriyey in isku adkayta laga fogeeyo arin walba, gaar ahaana arimaha cibaadada iyo waynaynta saalixiinta.
2. Qofku inuu raadiyo cibaadada ugu saraysa iyo qayrkeedba waa arin fiican, waxayna noqonaysaa sharciga oo la raaco.
3. Waa suno in la adkeeyo arinkii muhiim ah, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ku soo celceliyey hadalkaa saddex jeer.
4. Waa wanaaga Islaamka iyo fudaydkiisa.

(3420)

(58) – عَنْ عَدِيِّ بْنِ حَاتِمٍ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «الْيَهُودُ مَغْضُوبٌ عَلَيْهِمْ، وَالنَّصَارَى ضُلَّالٌ». [صحيح] - [رواه الترمذي]

(58) – Cadiyi Binu Xaatim -Allaha ka raali ahaadee-Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Yuhuuda waa loo carooday, Nasaaraduna waa baadiyoobeen ." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At□tirmidi]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in yuhuudu yihiin duul Ilaahay u carooday, waayo intay xaqa garteen ayey ku camal fali waayeen. Kiristaankuna waa duul baadiyoobay, waayo waxay ku camal faleen aqoon la`aan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Cilmiga iyo camalka oo la isku geeyo ayaa lagaga bad-baadayaa wadada ay mareen kuwa loo carooday iyo kuwa baadiyoobay.
2. Waxaa laga digayaa wadada yuhuuda iyo kirishtaanku mareen, waxaana la ina farayaa inaan ku ekaano jidka toosan ee Islaamka.

(65061)

(59) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بْنِ عَمْرِو بْنِ الْعَاصِ رضي الله عنهما قَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «كَتَبَ اللهُ مَقَادِيرَ الْخَلَائِقِ قَبْلَ أَنْ يَخْلُقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ بِخَمْسِينَ أَلْفَ سَنَةٍ، قَالَ: وَعَرْشُهُ عَلَى الْمَاءِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(59) – Cabullaahi Binu Camar Binu caas Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiiye wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo leh: «Ilaahay wuxuu qoray maqaadiirta khalqiga inta aanu abuurin samooyinka iyo dhulka Kontan kun oo sano ka hor wuxuu yiri: carshigiisuna biyaha ayuu ka sareeyey». [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim].

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahey ku qoray looxul maxfuudka wixii dhici doona ee khalqiga qadarkooda ah iyadoo faah-faah taaso inta aanu abuurin samooyinka iyo dhulka konton kun oo sano ka hor, waxayna u dhicidoontaa sida uu Ilaahay casa wajala ugu talo galay. Wax kasta oo dhaca waxay ku dhacaan Ilaahay qadarkiisa iyo qadihiisa. Wixii adoonka ku dhaca ma ay gafeen, wixii aan ku dhicina kuma ay dheceen.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib ah in la rumeeyo qadarka iyo qadaha
2. Qadarku waa Ilaahay inuu og yahay shey walba uuna qoray oo uu doonay oo abuuray.
3. In la rumeeyo in qadarka la qoray inta aan la abuurin samooyinka iyo dhulka wuxuu keenayaa raali ahaansho iyo in Ilaahay la isku dhiibo.
4. Carshiga Ilaahay biyuu dul ahaa intaan la abuurin samooyinka iyo dhulka.

(65038)

(60) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ مَسْعُودٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ: حَدَّثَنَا رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَهُوَ الصَّادِقُ المَصْدُوقُ: «أَنَّ خَلْقَ أَحَدِكُمْ يُجْمَعُ فِي بَطْنِ أُمِّهِ أَرْبَعِينَ يَوْمًا وَأَرْبَعِينَ لَيْلَةً، ثُمَّ يَكُونُ عَلَقَةً مِثْلَهُ، ثُمَّ يَكُونُ مُضْغَةً مِثْلَهُ، ثُمَّ يُبْعَثُ إِلَيْهِ المَلَكُ، فَيُؤْذَنُ بِأَرْبَعِ كَلِمَاتٍ، فَيَكْتُبُ: رِزْقَهُ وَأَجَلَهُ وَعَمَلَهُ وَشَقِيٌّ أَمْ سَعِيدٌ، ثُمَّ يَنْفُخُ فِيهِ الرُّوحَ، فَإِنَّ أَحَدَكُمْ لَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ الجَنَّةِ حَتَّى لاَ يَكُونُ بَيْنَهَا وَبَيْنَهُ إِلَّا ذِرَاعٌ، فَيَسْبِقُ عَلَيْهِ الكِتَابُ، فَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ النَّارِ فَيَدْخُلُ النَّارَ، وَإِنَّ أَحَدَكُمْ لَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ النَّارِ حَتَّى مَا يَكُونُ بَيْنَهَا وَبَيْنَهُ إِلَّا ذِرَاعٌ، فَيَسْبِقُ عَلَيْهِ الكِتَابُ، فَيَعْمَلُ عَمَلَ أَهْلِ الجَنَّةِ فَيَدْخُلُهَا». [صحيح] - [متفق عليه]

(60) – Cabdullaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu noo sheegay isagoo Runlow la rumaysto ah: Abuurida midkiin waxaa lagu jamciyaa uurka hooyadi afartan maalmood iyo afartan habeen, ka dib wuxuu noqon xinjir intaas in le'eg, ka dib wuxuu noqon cad hiliba intaas in le`eg, markaas ayaa loo soo diraa malag, waxaana la faraa afar kalmadood, wuxuu qoraa: risiqiisa, cimrigiisa, camalkiisa iyo inuu yahay mid liibaanay ama hoogay, ka dib naftuu ku afuufin, midkiin wuxuu camal fali camalka Ahlu janaha ilaa marka uu u jiro janada dhudhun wax le'eg ayaa qadarkii u qornaa soo hormarin wuxuuna camal fali camalka Ahlu naarta markaasuu naarta galin, midkiin ayaa camal fali camalka Ahlu naarka ilaa uu u jirsado naarta dhudhun wax le'eg waxaa soo hormarin qadarkii u qornaa wuxuuna camal fali camalka Ahlu janaha markaasuu janada galayaa. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Wuxuu yiri Ibnu Mascuud: wuxuu noo sheegay Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate isago runlow ah oo la rumaysto, isagoo Ilaahay rumaystay. wuxuu yiri: midkiin waa la jamciyaa abuuritaankiisa, taasina waa hadii ninku xaaskiisa u galmoodo manidiisu waa baahsan tahay waxaa lagu aruurin uurka gabadha mudo

afartan beri ah isagoo candhuuf u eg. Ka dib wuxuu noqon xinjir taaso ah dhiig adag, waana afartanka labaad. Ka dib wuxuu noqon cad hiliba waana cad yar oo la calalin karo, waana afartanka saddexaad, Ka dib Ilaahay wuxuu u soo diraa malag, naftuuna ku afuufaa afartanka saddexaad markay dhamaato, Waxaa la faraa malaga inuu qoro afar kalmadood oo ah: Risiqiisa, oo ah inta ay dhan tahay nicmada uu helaayo inta uu nool yahay, Ajashiisa, waana intuu aduunka joogi doono, Camalkiiisa, oo ah mid hoogay ama liibaanay midkuu ahaan doono. ka dib wuxuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku dhaartay qofku inuu camalka Ahlu janaha camal falin, kaasoo camal saalixa, sida dadka u muuqata, ilaa markay janada u jiro dhudhun, waxaa loo jeeda markay janada uga dhiman tahay inta qofka dhulka maraya ay uga dhiman tahay wax dhudhun le`eg waxaa ka qaalib noqda qadarkii u qornaa wuxuuna camal fali camalka Ahlu naarka oo loogu khatimin naartuuna galin, waayo shardiga lagu aqbalayo camalkiisa waa inuu qofku ku sugnaado camalkiisa saalixa ah oo uusan xumaana ku badalin, mid kale oo dadka ka mida ayaa camal fali camalka Ahlu naarka ilaa uu ku dhawaado inuu galo, waa sida isago naarta u jirsaday wax le'eg dhudhun dhulka ah, waxaa ka kormarin qadarkii Ilaahay u qoray wuxuuna camal fali camalka Ahlu janaha wuuna galin janada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Meesha ay ku dambayn arinta ciribteedu waa sida kolba qadarka Ilaahay horay u qoray.
2. Waa laga digay in lagu sirmo muuqaalka camalka, waayo camalka khaatumada uunbaa laga eegaa.

(65037)

(61) – عن ابن مسعود رضي الله عنه قال: قال النبي صلى الله عليه وسلم: «الْجَنَّةُ أَقْرَبُ إِلَى أَحَدِكُمْ مِنْ شِرَاكِ نَعْلِهِ، وَالنَّارُ مِثْلُ ذَلِكَ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(61) – Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey Allaha ka raali ahaadee inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Qofkastoo idinka mida Janadu waxay uga dhowdahay suunka kabtiisa, naartuna waa la mid). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in janada iyo naartuba u dhaw yihiin dadka sida kabaha lugta ku jira ee lagu socdo oo kale, waayo waxaa laga yaabaa in camal cibaado ah oo Ilahay jecel yahay ah la sameeyo oo janada lagu galo, ama la sameeyo macsi lagu galo naarta.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la is jeclaysiinayaa khayrka haba yaraadee, waxa kaloo la iska cabsi galiayaa sharka haba yaraadee.
2. Qofka muslimka ah waxaa lama huraan u ah noloshiisa inuu kulmiyo rajo iyo cabsi, Ilaahayna waydiisto mar waliba inuu xaqa ku sugo si uu u nabad galo oo uusana ugu kadsoomin xaalkiisa .

(3581)

(62) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «حُجِبَتِ النَّارُ بِالشَّهَوَاتِ، وَحُجِبَتِ الْجَنَّةُ بِالْمَكَارِهِ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(62) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: (Naarta waxaa lagu wareejiyey shahawaat, Janadana waxaa lagu wareejiyey wax naftu kahanayso). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in naarta lagu hareereeyey waxyaabaha naftu jeceshahay ee xaaraanta ah

iyo waajibaadka oo laga gaabiyo. Qofka naftiisa raacsiiya hawadeeda wuxuu ku mudanayaa naar. Janada waxaa lagu wareejiyey waxyaabaha naftu dhibsato, sida joogtaynta wixii Ilaahay amray, iyo ka tagida xaaraanta iyo arinkaas oo lagu sabro, haduu qofku naftiisa ku jihaado wuxuu ku mudanayaa janada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Sababaha loogu dhoco shahawaadka waxaa ka mida in shaydaanku u qurxiyo munkarka iyo waxa xun, ilaa ay naft u aragto wax wanaagsan oo ay u leexato.
2. Waxaa la farayaa dadku inay ka fogaadaan shahawaadka xaaraanta ah, waayo waa dariiqa naarta ku aroora, waxa kaloo la is farayaa in lagu sabro khayrka ay naftu dhibsato, waayo waa dariiqa janada ku aroora.
3. Fadli ayey leedahay nafta oo lala jihaado iyo cibaadada oo lagu dadaalo oo lagu sabro waxa naftu nacayso iyo mashaqada cibaadada ku xeeran.

(3702)

(63) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «لَمَّا خَلَقَ اللَّهُ الْجَنَّةَ وَالنَّارَ أَرْسَلَ جِبْرِيلَ عَلَيْهِ السَّلَامُ إِلَى الْجَنَّةِ، فَقَالَ: انْظُرْ إِلَيْهَا وَإِلَى مَا أَعْدَدْتُ لِأَهْلِهَا فِيهَا. فَنَظَرَ إِلَيْهَا فَرَجَعَ، فَقَالَ: وَعِزَّتِكَ لَا يَسْمَعُ بِهَا أَحَدٌ إِلَّا دَخَلَهَا. فَأَمَرَ بِهَا فَحُفَّتْ بِالْمَكَارِهِ، فَقَالَ: اذْهَبْ إِلَيْهَا فَانْظُرْ إِلَيْهَا وَإِلَى مَا أَعْدَدْتُ لِأَهْلِهَا فِيهَا. فَنَظَرَ إِلَيْهَا، فَإِذَا هِيَ قَدْ حُفَّتْ بِالْمَكَارِهِ، فَقَالَ: وَعِزَّتِكَ لَقَدْ خَشِيتُ أَنْ لَا يَدْخُلَهَا أَحَدٌ. قَالَ: اذْهَبْ فَانْظُرْ إِلَى النَّارِ وَإِلَى مَا أَعْدَدْتُ لِأَهْلِهَا فِيهَا. فَنَظَرَ إِلَيْهَا فَإِذَا هِيَ يَرْكَبُ بَعْضُهَا بَعْضًا، فَرَجَعَ فَقَالَ: وَعِزَّتِكَ لَا يَدْخُلُهَا أَحَدٌ. فَأَمَرَ بِهَا فَحُفَّتْ بِالشَّهَوَاتِ، فَقَالَ: ارْجِعْ فَانْظُرْ إِلَيْهَا. فَنَظَرَ إِلَيْهَا فَإِذَا هِيَ قَدْ حُفَّتْ بِالشَّهَوَاتِ، فَرَجَعَ وَقَالَ: وَعِزَّتِكَ لَقَدْ خَشِيتُ أَنْ لَا يَنْجُوَ مِنْهَا أَحَدٌ إِلَّا دَخَلَهَا». [حسن] - [رواه أبو داود والترمذي والنسائي]

(63) – Abuu Hureyra Allaha ha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: Markuu Ilaahay Abuuray janada iyo naarta wuxuu u direy janada malakul jibriil nabadi korkiisa ha ahaatee, wuxuuna ku yiri: soo eeg janada iyo waxaan ugu diyaariyey ehelkeeda, wuu soo eegay oo soo noqday wuxuuna yiri cisadaada ayaan ku dhaartee qofkii maqlaa wuu galin, ilaahay wuxuu amray in lagu wareejiyo waxa naftu neceb tahay, wuxuuna ku yiri aad oo soo eeg janada iyo waxaan ugu diyaariyey ehelkeeda wuu soo eegay, wuxuuna arkay iyadoo lagu wareejiyey waxa naftu neceb tahay, wuu soo noqday wuxuuna yiri: cisadaadaan ku dhaartee waxaan ka baqayaa inaan qofna galin, ilaahay wuxuu ku yiri aad naarta oo soo eeg iyada iyo waxaan ugu diyaariyey ehelkeeda wuu aaday wuxuuna arkay iyadoo is kor saaran, wuu soo laabtay wuxuuna yiri: cisadaadaan ku dhaartee cidina galimayso, ilaahay wuxuu faray in lagu wareejiyo waxa naftu jeceshahay, wuxuuna yiri ku noqo oo soo eeg, wuuna ku laabtay oo soo eegay mise waaba iyadoo lagu wareejiyey waxa naftu jeceshahay, wuuna soo laabtay oo yiri: cisadaadaan ku dhaartee waxaan ka baqayaa in qofna ka bad baadi waayo. **[Xadiis Xasan ah] - [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi, iyo nasaa.i]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay markuu abuuray janada iyo naarta, uu ku yiri: malakul Jibriil nabad gelyo Allah siiye: janada aad oo soo eeg, wuuna aaday oo soo arkay kanasoo laabtay. Jibriil wuxuu yiri: Rabiyow, cisadaadaan ku dhaartaye qofkii maqla janada iyo waxa dhexyaal oo nicmo iyo karam iyo khayr ah wuxuu jeclaanayaa inuu galo oo iyada u shaqaysto. Ka dib Ilaahay wuxuu ku wareejiyey janada wax yaabaha naftu neceb tahay iyo waxyaabo ay adag tahay in la sameeyo oo ah wax la is faray iyo wax la iska reebay, qofkii raba inuu janada galao waa inuu ka gudbo wax yaabahaas naftu neceb tahay. ka dib Ilaahay casa wajala wuxuu yiri: Jibriilow Janada aad oo soo eeg, waa markii uu ku wareejiyey

Janada waxa naftu neceb tahay ka dib. Jibriil wuu aaday Janada oo soo eegay, ka dib wuu yimid wuxuuna yiri: Rabiyow cisadaadaan ku dhaartaye waxaan ka cabsan in qofna gali waayo waxa ka sokeeya ee adayg iyo dhib ah darteed. Ilaahay markuu abuuray naarta wuxuu yiri: Jibriilow: soco oo soo eeg naarta, markaasuu aaday oo soo eegay naarta. Jibriil wuxuu yiri: Rabiyow, cisadaadaan ku dhaartaye qofkii maqla waxa dhex yaala naarta ee cadaab, kurbo iyo dhibaato ah, wuu nacaya inuu galo wuuna isaga fogaanayaa asbaabta lagu galo naarta. ka dib Ilaahay wuxuu ku wareejiyey naarta oo jidkeeda dhigay waxa naftu jeceshahay iyo macmacaan, ka dibna Ilaahay Jibriila wuxuu ku yiri: Jibriiloow, soco oo soo eeg-naarta. Jibriil wuu aaday naarta oo soo eegay, ka dib wuu ka yimid wuxuuna yiri: Rabiyow cisadaadaan ku dhaartaye waxaan ka baqay inuu qofba ka bad-baadi waayo waxa lagu gadaamay ee macmacaana awgeed.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa in la rumeeyo in janada iyo naartu haatan joogaan .
2. Waa waajib in la rumeeyo qeybka iyo wax kasta oo ka yimid xaga Ilaahay iyo Rasuulkiisa naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate.
3. Muhimad yuu leeyahay in lagu sabro waxa naftu neceb tahay, waayo waa jidka lagu gaaro janada.
4. Muhimad ayey leedahay in xaaraanta oo laga fogaado, waayo waa jidka naarta ku gaynaya.
5. Ilaahay wuxuu ku wareejiyey janada waxa naftu neceb tahay, naartana waxa naftu jeceshahay, taasina waxaa keenaya itaxaanka nolosha aduunyada.
6. Jidka janadu wuu adag yahay wuuna dhib badan yahay, wuxuuna u baahan yahay sabir iyo in iimaanka loo dhabar

adaygo, jidka naartuna waxaa ka buuxa macaanka aduunka iyo waxay naftu rabto.

(65034)

(64) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «نَارُكُمْ جُزْءٌ مِنْ سَبْعِينَ جُزْءًا مِنْ نَارِ جَهَنَّمَ»، قِيلَ: يَا رَسُولَ اللَّهِ، إِنْ كَانَتْ لَكَافِيَةً. قَالَ: «فُضِّلَتْ عَلَيْهِنَّ بِتِسْعَةٍ وَسِتِّينَ جُزْءًا كُلُّهُنَّ مِثْلُ حَرِّهَا». [صحيح] - [متفق عليه]

(64) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: Dabkiinu waa hal qayb oo ka mida todobaatan qaybood oo naarta jahanama ah, waxaa lagu yiri Rasuulka Ilaahayow, dabkaan ayaa ku filan. wuxuu yiri: waxay ka sii badan tahay sagaal iyo lixdan qaybood oo dhamaantood kulaylkeeda oo kale wada leh. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay dabka aan shidano inuu yahay qayb ka mida todobaatan qaybood oo naarta jahanama ka mid ah. Naarta aakhiro kulaylkeedu wuxuu ka badan yahay dabka aduunka sagaal iyo lixdan jeer, oo qayb kastana u dhiganto kulaylka dabka aduunka. Waxaa lagu yiri: Rasuulka Ilaahayow, naarta aduunka ayaa ugu filan cadaab cidii galaysa. Wuxuu yiri: naarta jahanama waa laga siyaadiyey kulaylka dabka aduunka sagaal iyo lixdan jeer oo dhamaantood kulaykoodu iyadoo kale yahay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waxaa la isaga digay naarta si dadku uga fogaadan samaynta ficilada naarta lagu mutaysto.
2. Waa wayn tahay naarta jahanama iyo cadaabteedu, iyo kuleylkeeda oo daran.

(65036)

(65) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «يَقْبِضُ اللَّهُ الأَرْضَ، وَيَطْوِي السَّمَوَاتِ بِيَمِينِهِ، ثُمَّ يَقُولُ: أَنَا المَلِكُ، أَيْنَ مُلُوكُ الأَرْضِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(65) – Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: Ilaahay baa dhulka qabanaaya, samooyinkana midigtiisuu ku laa-laabayaa, ka dibna wuxuu dhahayaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu Ilaahay maalinta qiyaamah dhulka qaban doono iskuna ururin doono, samadana midigtiisa ku laa-laabi doono, samo walbana mid kale ku laabi doono, oo uu baabi'in doono, wuxuuna dhihidoonaa: Anaa boqora ee aawey boqoradii dhulku?!

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la xasuusinayaa dadka in boqornimada Ilaahay baaqi ahaansayso, boqornimada makhluuquna ay dhamaanayso.
2. Waynida Ilaahay iyo waynida awoodiisa iyo saldanadisa iyo kaamilnimada Boqortooyadiisa.

(65028)

(66) – عَنْ عَائِشَةَ أُمِّ المُؤمنينَ رضي الله عنها قَالَتْ: دَخَلَ عَلَيَّ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، وَقَدْ سَتَرْتُ سَهْوَةً لِي بِقِرَامٍ فِيهِ تَمَاثِيلُ، فَلَمَّا رَآهُ هَتَكَهُ وَتَلَوَّنَ وَجْهُهُ وَقَالَ: «يَا عَائِشَةُ، أَشَدُّ النَّاسِ عَذَابًا عِنْدَ اللهِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ الَّذِينَ يُضَاهُونَ بِخَلْقِ اللهِ» قَالَتْ عَائِشَةُ: «فَقَطَعْنَاهُ فَجَعَلْنَا مِنْهُ وِسَادَةً أَوْ وِسَادَتَيْنِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(66) – Caa'isha, Muminiinta Hooyadood- Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Nabiga ayaa ii soo galay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee anigo sanduuqayga ku daboolay maro sawiro leh, Nabigu scw markuu arkay maradii wajigiisu waa isbedelay wuxuuna yiri: caa`ishoy Ilaahay xagiisa waxaa dadka ugu cadaab kulul maalinta qiyaame kuwa Ilaahay khalqigiisa wax u ekaysiiya, caa`isha waxay tiri: maradii waan kala jeexnay oo waxaan ka dhignay barkin ama laba barkimood. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa u soo galay Caa'isha, wuxuu arkay iyadoo sanduuq alaabta lagu rido ku dabooshay maro sawiro wax naflay ahi ku sawiran yihiin, markaasaa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wejigiisu isbedelay isagoo Ilaahay darti u carooday, wuuna ka tuuray maradii, wuxuuna yiri: Dadka ugu cadaabta daran maalinta qiyaamaha waa kuwa u ekeysiinaaya sawiradooda makhluuqaadka Ilaahay. Caa'isha waxay tiri: waxaan ka dhignay barkimo ama labo barkimood.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa haboon in waxa xun la reebo marka la arko ee u horaysa, dibna aan loo dhigin, hadaanu fasahaad ka xuni ka dhalanayn.
2. Cadaabtu maalinta qiyaamaha way u kala daran tahay sida dambiyadu u kala waa-wayn yihiin.
3. Sawirida naflaydu waxay ka mid tahay dambiyada waa-wayn.
4. Xikmadaha loo xarimay sawirida waxaa ka mida inay shabahdo Ilaahay khalqigiisa, waana isku mid haduu uga jeedo kan wax sawirayaa u ekeysiin ama yaanu uga jeedine.

5. Shareecada Islaamku waxay ku dadaashay ilaalinta maalka iyadoo laga faa'iidaysanayo, ka dib marka laga fogeeyo wixii xaaraan ah.
6. Waxaa la reebay in la sameeyo sawirada wixii naflay ah qaabkay doontaba ha ahaatee, xataa hadii ay tahay wax la liido.

(5931)

(67) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ، لَيُوشِكَنَّ أَنْ يَنْزِلَ فِيكُمْ ابْنُ مَرْيَمَ حَكَمًا مُقْسِطًا، فَيَكْسِرَ الصَّلِيبَ، وَيَقْتُلَ الخِنْزِيرَ، وَيَضَعَ الجِزْيَةَ، وَيَفِيضَ المَالُ حَتَّى لاَ يَقْبَلَهُ أَحَدٌ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(67) – Abii hurayra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: "Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye, waxay u dhawdahay inuu idiin la soo dago ina Maryama isago xaakim caadil ah, oo uu jejebiyo macatabka, oo dilo khansiirka, oo uu soo rogo jisyada, oo maalku buux dhaafo, heer cid qaadata oo baahan la waayo." **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku dhaartay inay soo dhowaatay waqtigii uu Nibi Ciise soo degi lahaa, ee uu dadka cadaalad ku xukumi lahaa, isagoo raacaya shareecadii Nabi Maxamed scw. Oo Nabi Ciise uu jabindoono macatabka kiristaanku wayneeyaan. Nabi Ciise wuxuu dilidoonaa khinsiirka, Nabi Ciise wuxuu soo rogidoonaa Jisyada dadka oo dhana wuxuu ku amridoonaa inay Islaama soo galaan. Xooluhu waa badandoonaan qof qaadanayana ma jiro, waayo xoolihii ayaa iska badanaya, qof walbana wuxuu ku kaaftoomay wixii gacantiisa ku jira, waxaa soo dagaya Barkada waxaana is raacraacaya khayrka.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa sugan tahay in Nabi Ciise-nabadi korkiisa ha ahaatee- uu aakhira samaanka soo degidoono, taasina ay tahay mid ka mida calaamadaha saacada qiyaamaha.
2. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Shareecadiisa wax nasakhi karaa ma jiraan.
3. Maalka ayaa barakoobaya aakhira samaanka, dadkuna way nicidoonaan.
4. Waa bishaaro in diinta islaamku baaqi ahaanayso, iyadoo Nabi Ciise ku xukumi doonaa dhulka aakhiru samaanka.

(65025)

(68) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لِعَمِّهِ: «**قُلْ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، أَشْهَدُ لَكَ بِهَا يَوْمَ الْقِيَامَةِ**»، قَالَ: لَوْلَا أَنْ تُعَيِّرَنِي قُرَيْشٌ، يَقُولُونَ: إِنَّمَا حَمَلَهُ عَلَى ذَلِكَ الْجَزَعُ لَأَقْرَرْتُ بِهَا عَيْنَكَ. فَأَنْزَلَ اللهُ: {إِنَّكَ لا تَهْدِي مَنْ أَحْبَبْتَ وَلَكِنَّ اللهَ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ} [القصص: 56]. [صحيح] - [رواه مسلم]

(68) – Abii Hurayra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu ku yiri Adeerki (( dheh: laa Ilaaha Ilaa Allaah, aan kuu marag furo maalinta Qiyaamee)), wuxuu yiri Adeerki hadayna qurayshi igu ceebayn lahayn oo aysan oronayn: waxaa ka keenay cabsi waan oron laha oo kaaga farxin lahaa, Ilaahay ayaa soo dajiyey: {Adigu ma hanuunin kartid qofkaad jeceshahay, laakiin Ilaahay ayaa hanuuniya qofkuu doono}: [Alqasas: 56]. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka codsaday adeerki Abii Daalib isagoo sakaraadkii geerida ku jira, inuu ku dhawaaqo shahaadada, si uu ugu shafeeco maalinta qiyaamaha, oo uga

markhaati koco inuu Islaamay, wuu diiday inuu ku dhawaaqo shahaadada, isago ka baqaya in qurayshi ku caydo, oo ku tiraahdo wuxuu u Islaamay ka baqid dhimasho iyo taagdaro! wuxuu ku yiri Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: hadayna taasi jirin qalbigaaga waa uga farxin lahaa shahaadada, waxaanan ku tusi lahaa waxaad jeceshahay ilaa aad raali noqoto!, Ilaahaybaa soo dajiyey aayada sheegaysa in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uusan lahayn hidaayada towfiiqda Islaamka, balse Ilaahay casa wajala kaligi ayaa waafajiya cidii uu doono. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ummdda wuxuu ku hanuuniyaa hidaayada dalaalada, Cadynta, hanuuninta iyo inuu jidka toosan dadka ugu yeero.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xaqa loogama tago cabsi laga qabo dadka hadlkooda.
2. Nabigu scw wuxuu leeyahay hidaayada dalaalada iyo tan hanuuntinta ee malaha hidaayada towfiiqda.
3. Way banaan tahay booqashada gaalka buka si loogu yeero diinta Islaamka.
4. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku dadaalay inuu dadka diinta ugu yeero xaalad walba.

(65069)

(69) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رضي الله عنهما قَالَ: قالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «حَوْضِي مَسِيرَةُ شَهْرٍ، مَاؤُهُ أَبْيَضُ مِنَ اللَّبَنِ، وَرِيحُهُ أَطْيَبُ مِنَ المِسْكِ، وَكِيزَانُهُ كَنُجُومِ السَّمَاءِ، مَنْ شَرِبَ مِنْهَا فَلاَ يَظْمَأُ أَبَدًا». [صحيح] - [متفق عليه]

(69) – Cabdullahi Binu Camar Allaha ka rali ahaado isagiyo aabbihiiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: xawdkaygu wuxuu le`eg yahay intii bil socodkeeda, biyihiisu way ka cad yihiin caanaha, caraftiisuna way ka udug badan tahay miskiga, weelashiisuna waa sida xidigaha samada, qofka ku caba waligii ma haraadayo. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu maalinta qiyaame leeyahay xawd, dhererkiisu dhan yahay in loo socdo bil, balaciisuna intaasoo kale. Biyihiisuna ka cadaan badan yihiin caanaha. Caraftiisuna udgoon tahay kana carfoon tahay carafta miskiga. Kirliyadiisuna sida xidigaha samada oo kale u badan yihiin. Qofka kaga caba kirliyadaa xowdka waligii ma haraadayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xowdka Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waa biyo qabad aad u wayn oo ay u soo arooraan muuminiinta ummaddiisa ahi maalinta qiyaamaha.
2. Nicmo ayuu helayaa qofka ka caba xowdka Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee oo waligii ma haraadayo.

(65030)

(70) – عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الخُدْرِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «يُؤْتَى بِالْمَوْتِ كَهَيْئَةِ كَبْشٍ أَمْلَحَ، فَيُنَادِي مُنَادٍ: يَا أَهْلَ الجَنَّةِ، فَيَشْرَئِبُّونَ وَيَنْظُرُونَ، فَيَقُولُ: هَلْ تَعْرِفُونَ هَذَا؟ فَيَقُولُونَ: نَعَمْ، هَذَا المَوْتُ، وَكُلُّهُمْ قَدْ رَآهُ، ثُمَّ يُنَادِي: يَا أَهْلَ النَّارِ، فَيَشْرَئِبُّونَ وَيَنْظُرُونَ، فَيَقُولُ: وهَلْ تَعْرِفُونَ هَذَا؟ فَيَقُولُونَ: نَعَمْ، هَذَا المَوْتُ، وَكُلُّهُمْ قَدْ رَآهُ، فَيُذْبَحُ ثُمَّ يَقُولُ: يَا أَهْلَ الجَنَّةِ خُلُودٌ فَلاَ مَوْتَ، وَيَا أَهْلَ النَّارِ خُلُودٌ فَلاَ مَوْتَ، ثُمَّ قَرَأَ: {وَأَنْذِرْهُمْ يَوْمَ الحَسْرَةِ إِذْ قُضِيَ الأَمْرُ وَهُمْ فِي غَفْلَةٍ} [مريم: 39]، وَهَؤُلاَءِ فِي غَفْلَةٍ أَهْلُ الدُّنْيَا {وَهُمْ لاَ يُؤْمِنُونَ} [مريم: 39]». [صحيح] - [متفق عليه]

(70) – Abii Saciid Alkhudri Allaha ka rali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: Waxaa la keenidoonaa dhimashadii oo u eg wan galaalan, mid dhawaaqa ayaa ku dhawaaqin: dadka janadow, qoortaasay kor u soo istaagin oo soo fiirin wuxuu oran: ma garanaysaan kan? waxay oran: haa, waa dhimashadii, wayna soo wada arkeen, hadana wuu dhawaaqin, kuwa naarta ku suganow, wayna soo qoor taagayaan waana soo eegayaan, wuxuu ku oran: ma garanaysaan kan? waxay oran: haa, waa dhimashadii, wayna wada arkeen, markaasaa la gawricin, ka dib wuxuu oran: kuwiina janada ku suganow waa waarid oo dhimasho ma jirto, kuwiina naarta ku suganow waa waarid oo dhimasho ma jirto, mar kaasuu akhriyin Ayada: {Nabiyow uga dig maalinta shalaytada iyadoo la go'aamiyey arinkooda iyagoo qaflad ku sugan} [surada maryam:39], kuwaas qaflada ku sugani waa kuwa aduunka jooga { iyagu Ilaahay ma ay rumayn} [maryam:39]. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in mawtka la keenidoono maalinta qiyaamaha isagoo u eg idaha labkooda oo leh midab cadaan iyo madaw ah . Waa loo dhawaaqin: kuwiina janada ku suganow! waxay taagayaan luqunta iyo madaxa wayna soo fiirin. wuxuu iyaga ku oran: ma garanaysaan kan? Waxay oran: haa, kani waa dhimashadii, wayna wada arkeen oo garteen. Ka dib waxaa dhawaaqin kii dhawaaqayey: kuwiina naarta ku suganow, xagiisa ayey luquntooda u soo taagin iyagoo madaxyadooda kor u qaadaya soona fiirinaya, Wuxuu ku oran: ma taqaanaan kan? Waxay oran: haa, kani dhimashadii wayna wada arkeen. Waa la gowracin, ka dib kii dhawaqaayey wuxuu oran: kuwiina janada ku suganow waligiin waad ku baaqi ahaanaysaan oo dhimasho ma jirto, kuwiina naarta ku suganow waligiin waad ku baaqi ahaanaysaan oo dhimasho ma jirto. Taasi waa si ay u noqoto mid u siyaadiysa muuminiinta nicmada gaaladana ugu siyaadisa ciqaabka. Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa

ha ahaate ka dib wuu akhriyey: {Nabiyow uga dig maalinta shalaytada, xili la go'aamiyey arinkooda iyagoo qaflad ku jira oo aan rumasnayn}. Maalinta qiyaamaha waa la kala saarin dadka janada galaya iyo kuwa naarta galaya, mid kastana wuxuu galayaa mida uu helay isagoo ku waaraayo. wuxuu ka shalaynayaa oo ka qoomamaynayaa kii xumaanta falay inuusan wanaag samayn, kii ka gaabiyey khayrkana wuxuu ka shalaayin inuusan khayrka badsan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Aakhiro dadku waxay ku danbaynayaan waa inay ku waaraan janada ama naarta.
2. Si daran ayaa looga digay dhibaatada maalinka qiyaamaha, iyo inuu yahay maalin qoomamo iyo shalayto.
3. Waa la cadeeyey farxada joogtada ah ee Ahlu Janaha iyo murugada joogtada ah ee Ahlu Naarka.

(65035)

(71) – عن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال: إنه سمع نبي الله صلى الله عليه وسلم يقول: «لَو أَنَّكُمْ تَتَوَكَّلُونَ عَلَى اللهِ حَقَّ تَوَكُّلِهِ، لَرَزَقَكُمْ كَمَا يَرْزُقُ الطَّيْرَ، تَغْدُو خِمَاصًا وَتَرُوحُ بِطَانًا». [صحيح] - [رواه الترمذي وابن ماجه وأحمد]

(71) – Cumar Binu Khadaab Allaha ka raali ahaadee wuxuu sheegay: inuu ka maqlay Nabiga Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Hadii aad Ilaahay u talo saaran lahaydeen tawakulka dhabta ah, wuxuu idiin arsaaqi lahaa siduu shimbiraha u arsaaqo, waxay kalahdaa iyadoo gaajaysan, waxayna soo hoyataa iyadoo dharagsan ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At􀀀tirmidi, Ibnu Maajah iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu inagu boorinayaa inaan Ilaahay casa wajala, ku kalsoonaano markaan nafaca doonayno ama dhib iska reebayno aduun iyo aakhiroba ku saabsan,

waayo cid aan Ilaahay ahayn wax ma bixiso wax ma diido, wax ma dhibto waxna ma tarto. Nabigu wuxu inagu boorinayaa inaan la imaano asbaabta keenaysa inaan nafac doono iskan joojino dhibka inagoo Ilaahay si dhab ah ugu kalsoon, goortaan sidaa samayno Ilaahay wuxuu inoo irsaaqayaa sida uu shimbirta u irsaaqo, waxay baxdaa subixii iyadoo baahan ka dib waxay soo laabataa galabtii iyadoo calooshu u buuxdo, ficilkaa ay shimbirtu samaysay waa nooc asbaabtii raadinta iyo doonista irsaaqada ah, iyadoo aan la samaynayn isku halayn iyo caajis midna.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadli ayuu leeyahay talo saarashada llaahay, iyo inuu ka mid yahay asbaabta ugu wayn ee arsaaqada lagu doono.
2. Talo saarashada Ilaahay ma diidayso in ficil iyo asbaab lala yimaado, waayo wuxuu sheegay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee tawakulka dhabta ahi kama hor imaanayo in aroortii iyo galabtii irsaaqad la doonto.
3. Shareecadu waxay ahmiyada siisaa acmaasha qalbiga, waayo tawakalku waa camal qalbiga ah.
4. in asbaabta kaligeed la isku haleeyo waa nusqaanta diinta, asbaabta oo laga tagana waa nusqaanta caqliga.

(4721)

(72) – عَن أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**يُسَلِّمُ الرَّاكِبُ عَلَى المَاشِي، وَالمَاشِي عَلَى القَاعِدِ، وَالقَلِيلُ عَلَى الكَثِيرِ**». وَلِلبُخَارِي: «**يُسَلِّمُ الصَّغِيرُ عَلَى الكَبِيرِ، وَالمَارُّ عَلَى القَاعِدِ، وَالقَلِيلُ عَلَى الكَثِيرِ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(72) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka gaadiidka saaran ayaa salaamaya kan lugaynaya, kan lugaynayana wuxuu salaamayaa kan fadhiya, dadka tirada yarina kuwa tirada badan bay salaamayaan." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee dadka wuxuu baray aadaabta dadku isu salaamaan, taasoo ah "Asalaamu calaykum wa raxmatu Alaah wa barakaatuh", Qofka yari wuxuu salaamayaa kan wayn, kan wax fuushana kan lugaynayana, kan lugaynayana kan fadhiya, kuwa tirada yarna kuwa tirada badan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa suno ah in la isku salaamo qaabka xadiisku sheegay, haduuse kan socdaa salaamo kan wax fuushan iyo intii xaga hore lagu sheegayba, way banaan tahay laakiin way khilaafsan tahay sida saxda ah ee fadliga badan.
2. Salaanta oo loo faafiyo sida xadiiska ku sugan waa sababta keenta is jacaylka iyo isku duubnida.
3. Haday isu dhigmaan oo siman yihiin, sida la soo dheegay, waxaa khayr badan hadba kii bilaaba salaanta.
4. shareecada Islaamku waa mid kaamil ah oo cadaynaysa wax walba oo dadku u baahan yahay.
5. Waa in dadka la baro aadabta salaanta oo qof walba oo xaq lehna xaqiisa la siiyo.

(4243)

(73) – عَنْ جَابِرِ بْنِ عَبْدِ اللهِ رضي الله عنهما أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «اتَّقُوا الظُّلْمَ، فَإِنَّ الظُّلْمَ ظُلُمَاتٌ يَوْمَ الْقِيَامَةِ، وَاتَّقُوا الشُّحَّ، فَإِنَّ الشُّحَّ أَهْلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ، حَمَلَهُمْ عَلَى أَنْ سَفَكُوا دِمَاءَهُمْ وَاسْتَحَلُّوا مَحَارِمَهُمْ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(73) – Jaabir Binu Cabullaahi-Allaha ka raalli ahaadee-wuxuu ka wariyey Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Ka cabsada dulmiga, waayo dulmigu wuxuu qofka galinayaa mugdiyada maalinta qiyaame, ka cabsada bukhliga, waayo bukhligu wuxuu halaagay kuwii idinka horeeyey, wuxuuna gaarsiisay inay dhiigooda daadiyaan oo wixii Ilaahay ka xarimay xalaashadaan." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digay dulmiga, dulmiga waxaa ka mida: dadka oo la dulmiyo, nafta oo la dulmiyo, Ilaahay xaqiisa oo la dulmiyo, Dulmigu waa in laga tago in la siiyo mid walba oo xaq leh xaqiisa, dulmigu waa mugdiyo ay galayaan dadka sameeya dulmiga maalinta qiyaame, iyagoo la kulmidoona dhibaato adag iyo halaag. Waxa kale oo uu reebey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee bukhliga oo ah bakhaylnimada teeda ugu xun iyo ku dadaalideeda, waxaana ka mida ka gaabinta xuquuqda maalka saaran oo qofku ku bakhaylo iyo inuu aad ugu dadaalo aduunyo raadin. Dulmiga nuucaas ahi wuxuu halaagay ummaddihii inaga horeeyey, wuxuuna gaarsiiyey inay is laayaan oo ay xalaashadaan wixii Ilaahay ka xarimayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Maalka oo la huro iyo walaalaha oo la wanaajiyo waa sababaha dadka is jacaylsiiya xiriirkana wanaajiya.
2. Xoolo jacaylka iyo bukhligu waxay qofka u soo jiidaan macsida, fuxshiga, iyo dambiga.

3. Waa in lagu cibro qaato xaalka ummaddihii hore.

(5787)

(74) – عن أبي موسى رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ اللَّهَ لَيُمْلِي لِلظَّالِمِ، حَتَّى إِذَا أَخَذَهُ لَمْ يُفْلِتْهُ» قَالَ: ثُمَّ قَرَأَ: «{وَكَذَلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَا أَخَذَ الْقُرَى وَهِيَ ظَالِمَةٌ إِنَّ أَخْذَهُ أَلِيمٌ شَدِيدٌ}[هود: 102]» [صحيح] - [متفق عليه]

(74) – Abii Muusa Allaha ka raali ahaadee wuxuu dhahay: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: (Ilaahay waa u kaadiyaa daalimka markuu qabtase ma siidaayo), wuxuu yiri: ka dibna wuxuu akhriyey: {waa sidaa uun markuu rabigaa qabto magaalooyin dulmi falay, Rabigaa qabashadiisu waa mid aad u daran} [huud:102]). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in lagu dhegenaado oo lagu socdo dulmiga sida macsida iyo shirkiga, oo laga dulmiyo dadka xaqooda, Ilaahay koreeyee, wuu u kaadiyaa qofka daalimka ah cimrigana wuu u dheereeyaa, maalkiisana wuu u daayaa oo ciqaabta kuma dedejiyo, haduu towbo keeni waayose wuu qabtaa oo masiidaayo umana dhaafo dulmigiisii badan awgi.

Ka dibna wuxuu akhriyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee -: {Waa sidaa qabashada Rabigaa markuu qabto magaalooyin dulmi falay, Ilaahay qabashadiisu waa mid oo aad u daran} [huud:102].

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofka caqliga lehi waa inuu u degdego towbada, oo Ilaahay makrigiisa uusan aamin ka ahaan haduu yahay mid dulmi ku socda.

2. Ilaahay casa wajala waa u kaadiyaa daalimiinta kumana soo dadajiyo cuquubada iyago loo seeto dheeraynaayo cadaabkana loo laalaabo hadaysan towbad keenin.

3. Dulmigu waa asbaabta ummadduhu umutaan ciqaabta Ilaahay.
4. Hadii Ilaahay halaago magaalo waxaa dhici kara  in dad saalixiina ku jiraan, kuwaa waxaa lagu soo saarayaa qiyaamaha waxay ku dhinteen ee wanaag ahaa, dhibna kuma haynayso inay ciqaabta kula jireen kuwa daalimiinta ah.

(5811

(75) – عن ابن عباس رضي الله عنهما عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِيمَا يَرْوِي عَنْ رَبِّهِ عَزَّ وَجَلَّ قَالَ: «إِنَّ اللهَ كَتَبَ الْحَسَنَاتِ وَالسَّيِّئَاتِ، ثُمَّ بَيَّنَ ذَلِكَ، فَمَنْ هَمَّ بِحَسَنَةٍ فَلَمْ يَعْمَلْهَا كَتَبَهَا اللهُ لَهُ عِنْدَهُ حَسَنَةً كَامِلَةً، فَإِنْ هُوَ هَمَّ بِهَا فَعَمِلَهَا كَتَبَهَا اللهُ لَهُ عِنْدَهُ عَشْرَ حَسَنَاتٍ إِلَى سَبْعِمِائَةِ ضِعْفٍ، إِلَى أَضْعَافٍ كَثِيرَةٍ، وَمَنْ هَمَّ بِسَيِّئَةٍ فَلَمْ يَعْمَلْهَا كَتَبَهَا اللهُ لَهُ عِنْدَهُ حَسَنَةً كَامِلَةً، فَإِنْ هُوَ هَمَّ بِهَا فَعَمِلَهَا كَتَبَهَا اللهُ لَهُ سَيِّئَةً وَاحِدَةً». [صحيح] - [متفق عليه]

(75) – Ibnu Cabaas Allaha ka raali ahaadee isaga iyo aabihiiye. Wuxuu ka wariyey Nabiga Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , Nabiguna Ilaahay ka wariyey inuu yiri: wuxuu Nabigu yiri: "Ilaahay wuu qoray xasanaadka iyo dambiyada, ka dibna wuu  cadeeyey, qofka ku hamiya inuu sameeyo xasano ee aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa xasano kaamil ah, hadiise uu ku hamiyo xasano oo uu sameeyo Ilaahay wuxuu u qoraa toban xasano ilaa todobol oo laalaab, ilaa laalaabyo badan, qofkii ku hamiya danbi oo aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa xasano kaamil ah, haduu ku hamiyo dambi oo uu sameeyo waxaa loo qoraa hal danbi. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay qadaray xasanaadka iyo dambiyada ka dibna uu u cadeeyey laba malag siday u qori lahaayeen.

Qofka damca oo goosta oo u qasda inuu xasano  sameeyo waxaa loo qoraa hal xasano isago aan samaynba, haduu sameeyo  waxaa loo laalaabaa toban laabkeed, ilaa todoba boqol oo laalaab ilaa laalaabyo

badan, siyaadaduna waa kolba inta ikhlaas qalbiga ku jirta, iyo wax tarkii uu gudbiyey iyo wixii la mida.

Qofka damca oo u qasda oo goosta inuu dambi sameeyo ka dibna Ilaahay darti u daaya waxaa loo qoraa xasano, haduuse ka mashquulo oo uusan asbaabteeda la imaan waxba looma qoro, hadiise uu kari waayo waxaa loo qoraa niyadiisa wixii ku jiray. haduu sameeyana waxaa loo qoraa hal dambi.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa cadayn Ilaahay fadligiisa wayn ee uu ummaddaan siiyey isago xasanaatka u laalaabay oo agtiisa ugu qoray, oo uusan u laalaabin dambiyada.
2. Niyadu ahmiyad iyo saamayn ayey ku leedahay camalka.
3. Ilaahay fadligiisa casa wajala, dhimrintiisa iyo ixsaankiisa waxaa ka mida in qofkii ku hamiya xasano oo aan samayn in Ilaahay u qoraayo xasano.

(4322)

(76) – عَنِ ابْنِ مَسْعُودٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ، قَالَ: قَالَ رَجُلٌ: يَا رَسُولَ اللهِ، أَنُؤَاخَذُ بِمَا عَمِلْنَا فِي الْجَاهِلِيَّةِ؟ قَالَ: «مَنْ أَحْسَنَ فِي الْإِسْلَامِ لَمْ يُؤَاخَذْ بِمَا عَمِلَ فِي الْجَاهِلِيَّةِ، وَمَنْ أَسَاءَ فِي الْإِسْلَامِ أُخِذَ بِالْأَوَّلِ وَالْآخِرِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(76) – Ibnu Mascuud Allaha raali ka noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nin ayaa ku yiri: Rasuulkii Ilaahayow, miyaa naloo qaban wixii aanu waqtigii jaahiliga samaynay, wuxuu yiri: qofkii islaama ee wanaag fala loo qaban maayo wuxuu jaahiligii sameeyey, qofkase Islaama oo shirki la yimaada danbigii hore iyo kii dambeba waa lagu ciqaabin. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Wuxuu cadayey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee fadliga uu leeyahay soo galida Islaamku. Qofka islaama ee ay fiicnaato

islaamnimadiisu oo ahaada qof daacada oo runlow ah, loo raacanmaayo wixii macsi ah ee uu sameeyey jaahiligii. qofkase islaamnimadiisu xumaato sida inu munaafiq noqda ama diintiisa ka ridoobo waa lagu xisaabin macsidii uu qaalnimadiisii sameeyey iyo tii uu sameeyey intuu muslimay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Asaxaabtii Allaha ka raali ahaadee waxay ihtimaam siin jireen oo ka baqi jireen wixii jaahiligii ka dhacay ee ficilo xun ahaa.
2. waxaa la isku dhiiri gelinayaa ku sugnaashaha diinta Islaamka.
3. fadliga uu leeyahay diinta Islaamka oo la soo galo iyado qofka loogu dhaafayo wixii ficil ahaa ee horay uga dhacay.
4. qofkii murtad ah iyo munaafiqa waa lagu xisaabin ficiladii ay sameeyeen jaahiligii iyo danbiyadii ay sameeyeen intay islaameen.

(65002)

(77) – عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رَضِيَ اللهُ عَنْهُمَا: أَنَّ نَاسًا مِنْ أَهْلِ الشِّرْكِ، كَانُوا قَدْ قَتَلُوا وَأَكْثَرُوا، وَزَنَوْا وَأَكْثَرُوا، فَأَتَوْا مُحَمَّدًا صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالُوا: إِنَّ الَّذِي تَقُولُ وَتَدْعُو إِلَيْهِ لَحَسَنٌ، لَوْ تُخْبِرُنَا أَنَّ لِمَا عَمِلْنَا كَفَّارَةً، فَنَزَلَ {وَالَّذِينَ لا يَدْعُونَ مَعَ اللهِ إِلَهًا آخَرَ وَلا يَقْتُلُونَ النَّفْسَ الَّتِي حَرَّمَ اللهُ إِلا بِالْحَقِّ وَلا يَزْنُونَ}[الفرقان: 68]، وَنَزَلَت: {قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَى أَنْفُسِهِمْ لا تَقْنَطُوا مِنْ رَحْمَةِ اللهِ} [الزمر: 53]. [صحيح] - [متفق عليه]

(77) – Ibnu Cabaas Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Dad ka mida mushrikiinta, ayaa dil badan gaystay, sinadana badsaday, waxayna u yimaadeen Rasuulka scw waxayna ku dheheen: waxaad sheegaysid oo aad dadka ugu yeeraysid waa wax fiican, ee noo sheeg dambiyadii aanu galay wax naga guda, markaasaa waxaa soo dagay: {kuwa aan Ilaahay cid kale la baryin ee aan dilin naf Ilaahay dilkeeda xarimay in xaq lagu dilo mooyee,ee aan sinaysan} [suuratu-furqaan:68], waxaa kaloo soo dagay:{ ku dheh Adoomadaya naftooda ku xad gudbayow, ha ka quusanina naxariista Ilaahay} [suuratu sumar:53]. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rag mushrikiinta ka mid ah ayaa u yimid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxayna gaysteen dilal badan iyo sino, waxay ku dheheen Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee : diinta aad dadka ugu yeeraysaa iyo waxa laga baranaayo waa wax fiican, laakiin ka waran muxuu yahay xaalkayagu iyo wixii aanu soo falnay ee ah, shirki iyo dambiyo waawayn, ma leeyihiin wax kafaaro gud ah?.

Waxaa soo dagay labada aayadood, taasoo Ilaahay kaga aqbalay dadka towbadii iyagoo sameeyey dambiyo badan oo waawayn, hadayna sidaas dhici lahayna waxay ku sii jiri lahaayeen gaalnimadooda iyo kibirkooda mana soo galeen diintaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Wanaaga Islaamka iyo waynidiisa iyo inuu tirtiraayo danbiyadii ka horeeyey.
2. Raxmada Ilaahay waasac nimadeeda taaso uu siiyey adoomadiisa iyo u dambi dhaafka iyo cafiga uu siiyey adoomadiisa.

3. Ilaahay wuxuu xarimay shirkiga, wuxuu kaloo xarimay in naf xaqdaro lagu dilo, wuxuu kaloo xarimay sinada, iyo goodi adag oo ku soo arooray qofkii danbiyaas gala.
4. Towbada runta ah oo ay la jirto Ilaahay oo loo khaalis yeelo, iyo camalka saalixa ah waxaa lagu dhaafaa dhamaan dambiyada waaweyn ee gaalnimadu ku jirto.
5. Waa la xarimay quusashada iyo in laga rajo beelo naxariista Ilaahay Isagaa nusqaan oo dhan ka hufane.

(65071)

(78) – عَنْ حَكِيمِ بْنِ حِزَامٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ، قَالَ: قُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ، أَرَأَيْتَ أَشْيَاءَ كُنْتُ أَتَحَنَّثُ بِهَا فِي الجَاهِلِيَّةِ مِنْ صَدَقَةٍ أَوْ عَتَاقَةٍ، وَصِلَةِ رَحِمٍ، فَهَلْ فِيهَا مِنْ أَجْرٍ؟ فَقَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «أَسْلَمْتَ عَلَى مَا سَلَفَ مِنْ خَيْرٍ». [صحيح] - [متفق عليه]

(78) – Xakiim Binu Xisaam Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Waxaan iri: Rasuulka Ilaahayow, iiga waran waxyaabo aan ku cibaadeysan jirey waagii jaahiliga, sida: Sadaqada, xoraynta adoomada, iyo xiriirinta qaraabada ee ajar ma ka helayaa? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: wixii khayr ahaa ee aad horay u samaysay ayaad ku islaamtay. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey hadii gaalku islaamo in laga ajar siinaayo camalkiisii wanaagsanaa ee waqtigii jaahiliga ee islaamka ka hor uu sameeyey, sida sadaqada, xoraynta adoomada iyo xiriirinta qaraabada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Gaalku xasanaadka uu aduunka ku sameeyey aakhiro laga ajar siin maayo haduu gaalnimodiisa ku dhinto.

(65016)

(79) – عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «إِنَّ اللهَ لَا يَظْلِمُ مُؤْمِنًا حَسَنَةً، يُعْطَى بِهَا فِي الدُّنْيَا وَيُجْزَى بِهَا فِي الْآخِرَةِ، وَأَمَّا الْكَافِرُ فَيُطْعَمُ بِحَسَنَاتِ مَا عَمِلَ بِهَا لِلَّهِ فِي الدُّنْيَا، حَتَّى إِذَا أَفْضَى إِلَى الْآخِرَةِ، لَمْ تَكُنْ لَهُ حَسَنَةٌ يُجْزَى بِهَا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(79) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee : Ilaahay kama dulmiyo muuminka xasano aduunka wuu ku siiyaa aakhirona wuu ku abaal mariyaa, gaalkase xasanaadkii uu aduunka Ilaahay darti ugu sameeyey ayaa lagu quudin intuu joogo aduunka, markuu aakhiro yimaadna mahelaayo xasano lagu abaal mariyo. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey waynida fadliga Ilaahay siiyey muuminka, iyo cadaalada uu u sameeyey gaalada. Muuminka laga nusqaamiyo ajar xasano uu sameeyey, balse aduunkaa lagu siin ajarka daacadiisa, iyado Ilaahay u kaydinaayo ajarka lagu abaal marindoon aakhiro, waxaana dhici karta in aakhiro loogu keydiyo ajarka oo dhan . Gaalkase Ilaahay wuxuu aduunka ku siinayaa ajarka xasanaadkii uu aduunka ku sameeyey, markuu aakhiro yimaadana ma helaayo ajar lagu abaal mariyo, waayo camalka wanaagsan ee qofka anfacaya labada daarood waa inuu qofku muumin yahay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofkii ku dhinta gaalnimo camal anfacayaa ma jiro.

(65015)

(80) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فِيمَا يَحْكِي عَنْ رَبِّهِ عَزَّ وَجَلَّ، قَالَ: «**أَذْنَبَ عَبْدٌ ذَنْبًا، فَقَالَ: اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي، فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى: أَذْنَبَ عَبْدِي ذَنْبًا، فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ، وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ، ثُمَّ عَادَ فَأَذْنَبَ، فَقَالَ: أَيْ رَبِّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي، فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى: عَبْدِي أَذْنَبَ ذَنْبًا، فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ، وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ، ثُمَّ عَادَ فَأَذْنَبَ، فَقَالَ: أَيْ رَبِّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي، فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى: أَذْنَبَ عَبْدِي ذَنْبًا، فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ، وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ، اعْمَلْ مَا شِئْتَ فَقَدْ غَفَرْتُ لَكَ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(80) – Abii Hurayra Allaha ka raali noqde waxaa laga wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu ka wariyey Nabiguna Rabigii ka soo wariyey, inuu yiri: " "Adoon baa dambaabay dambi, wuxuu yiri: Allahayow ii dambi dhaaf, Ilaahay sareeye wuxuu yiri : Adoonkaygaa dambaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kuna ciqaaba, hadana wuu ku noqdoo wuu dambaabay, wuxuuna yiri : Rabiyow, ii dambi dhaaf, Ilaahay ayaa yiri: adoonkaygaa dambaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kuna ciqaaba dabmiga, hadana wuu ku noqdoo wuu dambaabay, wuxuuna yiri: Rabiyow ii dambi dhaaf, Ilaahay ayaa yiri: wuu dambaabay adoonkaygu wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kuna ciqaaba dambiga, fal waxaad doonto, waan kuu dambi dhaafaye". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu scw wuxuu rabigii ka wariyey inuu adoonku markuu dambi falo ee uu dhoho: Allahayow ii dambi dhaaf, inuu Ilaahay dhahayo: adoonkaygaa dambi falay, oo ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kaasoo astura oo u dhaafa dambiga, ama ku ciqaaba, waan kuu dambi dhaafay. Hadana wuu ku noqday adoonku oo wuu dambaabay, wuxuuna dhahay: Rabiyow ii dami dhaaf, Ilaahay ayaa dhahay: adoonkaygaa dambi ku dhacay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, oo astura una dhaafa adoonkiisa, ama ku ciqaaba,

waan u dambi dhaafay adoonkayga. Hadana wuu ku noqday adoonkaygu oo dambaabay, wuxuuna dhahay: Rabiyow ii dami dhaaf, Ilaahay ayaa wuxu dhahay: adoonkaygaa dambi ku dhacay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, oo astura una dhaafa adoonkiisa, ama ku ciqaaba, waan u dambi dhaafay adoonkayga, ha sameeyo wuxuu doono kol haduu markuu dambi falaba ka istaagayo, kana murugoonayo, go`aansanayo in aanu ku laaban doonin, laakiin naftiisu ka adkaanayso, dambigiina ku dhacayo, intuu sidaa yahay oo dambaabayo kana tawbo keenayo waan u dambi dhaafi, tawbadaa baabi'isa wixii ka horeeyey.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Naxariista Ilaahay siiyey adoomadiisa waa waasac, dadkuna si kasta oo ay u dambaabaan hadii ay ka towba keenaan ee ay Ilaahay u soo noqdaan wuu ka towbo aqbalaa.
2. Muuminka Ilaahay rumeeyey wuxuu rajo ka qabaa cafinta rabigiis, ciqaabtiisana wuu ka cabsadaa, towbada ayuu u degdegaa oo macsida kuma sii jiro.
3. Shuruuda towbada saxda ahi waa: dambiga oo la joojiyo, lagana qoomameeyo, oo la go`aansado inaan lagu laaban dambiga, hadayse tahay towbadu dulmi laga galay adoomada, sida maalka, cirdiga-sharafka qofka, iyo naftaba, shardi kale oo afraad baa ku biiraya, kaasoo ah ka xalaashiga qofkii xaqa iska lahaa, ama in la siiyo xaqiisa.
4. Muhimad ayey leedahay aqoonta Ilaahay taasoo ka dhigaysa adoonka mid aqoon u leh diintiisa oo marwalba oo uu dambaabo u towba keena Ilaahay, oo aanu quusan kuna sii jirin dambiga.

(4817)

(81) – عن عَلِيٍّ قَالَ: إِنِّي كُنْتُ رَجُلًا إِذَا سَمِعْتُ مِنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ حَدِيثًا نَفَعَنِي اللهُ مِنْهُ بِمَا شَاءَ أَنْ يَنْفَعَنِي بِهِ، وَإِذَا حَدَّثَنِي رَجُلٌ مِنْ أَصْحَابِهِ اسْتَحْلَفْتُهُ، فَإِذَا حَلَفَ لِي صَدَّقْتُهُ، وَإِنَّهُ حَدَّثَنِي أَبُو بَكْرٍ، وَصَدَقَ أَبُو بَكْرٍ، قَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «مَا مِنْ رَجُلٍ يُذْنِبُ ذَنْبًا، ثُمَّ يَقُومُ فَيَتَطَهَّرُ، ثُمَّ يُصَلِّي، ثُمَّ يَسْتَغْفِرُ اللهَ، إِلَّا غَفَرَ اللهُ لَهُ»، ثُمَّ قَرَأَ هَذِهِ الْآيَةَ: {وَالَّذِينَ إِذَا فَعَلُوا فَاحِشَةً أَوْ ظَلَمُوا أَنْفُسَهُمْ ذَكَرُوا اللهَ فَاسْتَغْفَرُوا لِذُنُوبِهِمْ} [آل عمران: 135]. [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي والنسائي في الكبرى وابن ماجه وأحمد]

(81) – Cali Bi nu Abii Daalib-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: waxaan ahaa nin haduu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee xadiis ka maqlo Ilaahay ku anfici jiray intuu doono, haduu nin asaxaabta Rasuulka ahi ii sheegana waan dhaarin jiray, markuu iidhaarto ayaan rumaysan jiray, Abuubakar baa iisheegay, Abuubakarna waa run sheege, wuxuu yiri: waxaan Rasuulka Ilaahay ka maqlay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate- isagoo dhahaya: "Majiro qof dambaabaya dambi, oo intuu kaco dahaara qaadanaya salaadna tukanaaya, ka dibna istiqfaarsanaya, haduu jirose Ilaahay wuu u dambi dhaafayaa isaga", intaa ka dib aayaddanuu akhriyey: "kuwa marka ay dambi xun sameeyaan ama naftooda dulmiyaan Ilaahay xusaya ee dambi dhaaf way diisanaya" [Aala cimraan:135]. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,nasaa.i,ibn maajah,Axmad]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in uusan jiro adoon inta uu dambaabo dambi, sifiican u wayso qaata, oo labo rakcadood oo tawbo keen ah tukada, intaa ka dibna Ilaahay waydiista dambi dhaaf, Ilaahay uu u dambi dhaafaya. Intaa ka dib wuxuu akhriyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, Aayadaan qur'aanka ah: {kuwa marka ay xumaan sameeyaan ama naftooda dulmiyaan Ilaahay xusaya, ee dambiyadooda Ilaahay inuu u dhaafo waydiisanaya, Ilaahay mooyee ma cid kalaa dhaafta dambiyada,

kuwaasoo aan ku adkaysan dambiyada ay sameeyeen} [Aala cimraan:135].

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waxaa lagu boorinayaa dadka salaada ka dibna istiqfaar marka dadka dambi ka dhoco.
2. Waa dambi dhaafka Ilaahay waasac nimadiisa iyo in Ilaahay aqbalaayo towbada iyo istiqfaarta.

(65063)

(82) – عَنْ أَبِي مُوسَى رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «إِنَّ اللهَ عَزَّ وَجَلَّ يَبْسُطُ يَدَهُ بِاللَّيْلِ لِيَتُوبَ مُسِيءُ النَّهَارِ، وَيَبْسُطُ يَدَهُ بِالنَّهَارِ لِيَتُوبَ مُسِيءُ اللَّيْلِ، حَتَّى تَطْلُعَ الشَّمْسُ مِنْ مَغْرِبِهَا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(82) – Abii Muusa Alashcari -Allaha ka raali ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Ilaahay wuxuu fidiyaa gacantiisa habeenka si uu u tawbo keeno midka maalinta dambaabay, maalintana wuu fidiyaa gacantiisa si uu u towbo keeno midka habeenka dambaabay, ilaa qoraxu ka soo baxdo meesha ay u dhacdo." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay ka tawbo aqbalaayo adoomadiisa, Hadii adoonku maalintii dambaabo oo habeenkii u towbo keeno Ilaahay waa ka aqbalayaa, hadii habeenkii uu dambaabo oo maalintii towbo keeno Ilaahay wuu ka aqbalayaa towbadiisa, Ilaahay wuu fidiyaa gacantiisa Isago ku faraxaaya towbada, oo aqblaaya towbada, albaabka towbaduna wuxuu ahaanayaa mid furan ilaa qoraxdu ka soo baxdo meeshay u dhacdo taaso tusaysa in aduunkii dhamadaay, hadii qorax ka soo baxdo galbeedka albaabkii towbadu waa xirmay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Towbada waa la qabalayaa inta albaabkeedu furan yahay, albaabkeedana waa la xirayaa hadii qoraxdu ka soo baxdo meesha ay u dhacdo, iyo in qofku towbo keeno inta aanay naftu soo gaarin dhuunta.
2. Waa inaan la quusan danbi la qalay awgeed, Ilaahay cafintiisa iyo naxariistiisu waa wayn tahay, albaabka towbaduna waa furan yahay.
3. Shuruuda towbada:
4. mida 1aad: dambiga oo la joojiyo.
5. mida 2aad: waa in laga qoomameeyo dambigii.
6. mida 3aad: waa inuu go'aansado inuusan ku noqon dambigaas waligi, waa haduu yahay xuq Ilaahay, haduuse yahay xaq aadane shuruuda towbada waxaa ku jira inuu xaqa aadanaha gudo oo qofkii uu ka galay u celiyo, ama uu ka cafiyo kii ku lahaa.

(4318)

(83) – عن أبي هريرة رضي الله عنه: أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «يَنْزِلُ رَبُّنَا تَبَارَكَ وَتَعَالَى كُلَّ لَيْلَةٍ إِلَى السَّمَاءِ الدُّنْيَا حِينَ يَبْقَى ثُلُثُ اللَّيْلِ الْآخِرُ، يَقُولُ: «مَنْ يَدْعُونِي فَأَسْتَجِيبَ لَهُ؟ مَنْ يَسْأَلُنِي فَأُعْطِيَهُ؟ مَنْ يَسْتَغْفِرُنِي فَأَغْفِرَ لَهُ؟»». [صحيح] - [متفق عليه]

(83) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu Rasuulka ka wariyey scw inu dhahay: (Rabigeen-tabaaraka watacaalaa-habeen walba wuxuu u soo dagaa samada dhow, marka habeenku yahay saddex qaybood qaybta u dambaysa, Isagoo dhahaya: (yaa i baryaaya oo aan u ka ajiibaa? yaa wax i waydiisanaya oo siiyaa? yaa dambi dhaaf i waydiisanaya oon u dambi dhaafaa?). **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inuu Ilaahay wayne u soo dego samada dhow habeen walba, marka ay ka hadho habeenka saddex meelood meesha u dambaysa, wuxuuna jeclaysiiyaa adoomadiisa inay baryaan, wuuna ka ajiiba cidii barida, wuxuu ku booriyey inay waydiistaan waxay rabaan, isaguna wuu siiyaa cidii waydiisata, wuxuuna ugu yeedhaa inay Ilaahay dambi dhaaf way diistaan, Isagaa u dambi dhaafa adoomadiisa mu'uminiinta ahe.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Habeenka suluska dambe fadli aad u waynbaa ku jira, salaada, ducada iyo istiqfaarta waqtigaa.
2. Waxaa la gudboon qofka markuu xadiiskan maqlo inuu ahaado mid aad ugu dadaala ka faa'iidaysiga saacadaha ducada la aqbalo.

(10412)

(84) – عن النُّعمان بن بَشير رضي الله عنه قال: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ -وَأَهْوَى النُّعْمَانُ بِإِصْبَعَيْهِ إِلَى أُذُنَيْهِ-: «إِنَّ الْحَلَالَ بَيِّنٌ وَإِنَّ الْحَرَامَ بَيِّنٌ، وَبَيْنَهُمَا مُشْتَبِهَاتٌ لَا يَعْلَمُهُنَّ كَثِيرٌ مِنَ النَّاسِ، فَمَنِ اتَّقَى الشُّبُهَاتِ اسْتَبْرَأَ لِدِينِهِ وَعِرْضِهِ، وَمَنْ وَقَعَ فِي الشُّبُهَاتِ وَقَعَ فِي الْحَرَامِ، كَالرَّاعِي يَرْعَى حَوْلَ الْحِمَى يُوشِكُ أَنْ يَرْتَعَ فِيهِ، أَلَا وَإِنَّ لِكُلِّ مَلِكٍ حِمًى، أَلَا وَإِنَّ حِمَى اللهِ مَحَارِمُهُ،

أَلَا وَإِنَّ فِي الْجَسَدِ مُضْغَةً، إِذَا صَلَحَتْ صَلَحَ الْجَسَدُ كُلُّهُ، وَإِذَا فَسَدَتْ فَسَدَ الْجَسَدُ كُلُّهُ، أَلَا وَهِيَ الْقَلْبُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(84) – Nucmaan Binu Bashiir Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: wuxuuna Nucmaan la aaday labadiisa farood dhagahiisa: "Xalaashu way cadahay, xaaraantuna way cadahay, waxaana u dhexeeya shubuhaat, oo dad badani aysan aqoon, qofka ka dhowrsada shubuhaatka wuu ilaaliyey diintiisa iyo cirdigiisa, qofkase ku dhaca shubuhaatka xaaraan buu ku dhacay, sida xoola raaca seeraha ku ag raaco waxay u dhawdahay in xooluhu u dhacaan oo daaqaan", war hooy boqor walba wuxuu leeyahay seero, war hooy seeraha Ilaahay waa wuxuu xarimay, war hooy jirka waxaa ku jira xubin, haday hagaagto jirkoo dhan uu hagaagayo, haday xumaatana jirkoo dhan uu xumaanayo,war hooy taasi waa qalbiga. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey qaacido guud oo shay walba soo galayo, taasoo u qaybsamaysa saddex qaybood: qayb xalaal ah oo cad, qayb xaaraan ah oo cad, iyo arimo mushtabihaat ah oo aan xugunkoodu xalaal iyo xaaraan kii uu yahay aysan cadayn, kuwaasoo dad badani aanay ogaan karin.

Qofka ka taga mushtabihaatka wuu ilaaliyey diintiisa wuxuuna ka fogaaday xaaraanta, waxaana cirdigiisu ka badbaaday hadalka dadka oo ah waxay ku ceebayn lahaayeen haduu ku dhici laha mushtabihaatka. Qofkase aan ka fogaan shubuhaatka dhab ahaan naftiisu waxay halis u tahay inay xaaraan ku dhacdo ama in dadku cirdigiisa wax ka sheegaan. Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu tusaale u soo qaatay, si uu u cadeeyo arinka qofka shubuhaatka ku dhaca, inuu yahay sida qof xoolaha ku ag raaca dhul ninkii lahaa dayr ku wareejiyey, waxaa laga yaabaa in xoolahaasi

daaqaan dhulkaa xiran waayo way u dhaw yihiin, taas waxaa la mida qofka ku dhaca shubuhaadka, waayo wuxuu u dhawaanayaa xaaraantii waxaa dhici karta inuu ku dhaco. Ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in jirka ay ku jirto xubin " waa qalbiga ", uu wanaageeda jirkoo dhan ku hagaago, xumaanteedana jirkoo dhan ku xumaanayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa in laga fogaado shubuhaatka aan xugunkoodu
2. qofka u cadayn.

(4314)

(85) – عن ابن عباس رضي الله عنهما قال: كُنْتُ خَلْفَ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَوْمًا، فَقَالَ: «يَا غُلَامُ، إِنِّي أُعَلِّمُكَ كَلِمَاتٍ، احْفَظِ اللهَ يَحْفَظْكَ، احْفَظِ اللهَ تَجِدْهُ تُجَاهَكَ، إِذَا سَأَلْتَ فَاسْأَلِ اللهَ، وَإِذَا اسْتَعَنْتَ فَاسْتَعِنْ بِاللهِ، وَاعْلَمْ أَنَّ الْأُمَّةَ لَوِ اجْتَمَعَتْ عَلَى أَنْ يَنْفَعُوكَ بِشَيْءٍ، لَمْ يَنْفَعُوكَ إِلَّا بِشَيْءٍ قَدْ كَتَبَهُ اللهُ لَكَ، وَلَوِ اجْتَمَعُوا عَلَى أَنْ يَضُرُّوكَ بِشَيْءٍ، لَمْ يَضُرُّوكَ إِلَّا بِشَيْءٍ قَدْ كَتَبَهُ اللهُ عَلَيْكَ، رُفِعَتِ الْأَقْلَامُ وَجَفَّتِ الصُّحُفُ». [صحيح] - [رواه الترمذي]

(85) – Waxaa laga wariyey Ibnu Cabaas Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiibe wuxuu yiri: "Maalin ayaan Rasuulka scw gadaashiisa fuushanaa,wuxuu igu yiri: " " yaroow, waxaan ku barayaa erayo, llaahay xifdi wuu ku xifdine, llaahey xifdi hortaadaad ka heliye, markaad wax waydiisanayso Ilaahay waydiiso, hadii aad cid kaalmaysan Ilaahay kaalmayso, ogowna haday ummadda oo dhan isu tagaan si ay wax kuugu taran, kuma tari karaan wax Ilaahay kuu qoray mooyee, hadii dadka oo dhan isu tagaan si ay kuu dhibaan kuguma dhibi karaan, wax uu Ilaahay kuu qoray mooyee, kor ayaa loo qaaday qalimadii warqadihiina way qalaleen ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At□tirmidi]

## Sharraxaad:

Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaade wuxuu sheegay in isagoo yar uu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee la fuushanaa, markaasa Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku yiri: waxaan ku barayaa arimo iyo waxyaabo Ilaahay kugu anficidoon:

Ilaahay xifdi, oo ku xifdi inaad ilaaliso wuxuu ku faray iyo inaad ka dheeraato wuxuu kaa reebay, waa inuusan kaa helin meelaha macsida iyo danbiga, hadaad sidaa samayso abaal marintaadu waxay noqonaysaa in Ilaahay kaa xifdiyo dhibka aduunka iyo kan aakhiroba, kuguna guuleeyo dhamaan waxaad rabto oo dhan halkaad u dhaqaaqdaba.

Hadii aad rabto inaad shay waydiisato, ha waydiisan cid aan Ilaahay ahayn, waayo isaga kaligi ayaa ajiiba kuwa wax waydiista.

Hadii aad damacdo in lagu kaalmeeyo cidaan Ilaahay ahayn ha kaashan.

Waa inaad yaqiinsataa inaadan helayn nafac hadii ay dadka dhulka jooga isu tagaan si ay wax kuu taraan kuguma tari karan wax Ilaahay kuu qoray mooyee. wax dhiba kuguma dhacayo hadii ay isu tagaan dadka dhulka jooga oo dhan si kuu dhibaan kuguma dhibi karaan wax Ilaahay kuu qaray mooyee.

Arinkaan Ilaahay casa wajala ayaa qoray, wuxuuna ku qadaray sida xikmadiisa iyo cilmigiisu keenayaan, wax badalid ahna laguma samaynayo wax Ilaahay qoray.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Muhimada ay leedahay in la baro kuwa yar yar iyo caruurta arimaha Diinta sida caqiidada iyo aadaabta Islaamka iyo wax yaabo kale.
2. Abaal marintu waxay noqotaa nooca camalka.

3. Waxaa la is farayaa in Ilaahay lagu kalsoonaado, oo kaligi la talo saarto oo aan cid kale la talo saaran, isagaa ugu khayr badan mid la talo saarto.
4. Waa la rumeeyo qadaha iyo qadarka oo lagu raali noqdo qadarka, Ilaahayna isagaa qadaray shay walba.
5. Qofka dayaca Ilaahay amarkiisa, Ilaahay ayaa isagana dayacaya mana xifdiyo.

(4811)

(86) – عَنْ سُفْيان بنِ عَبْدِ اللهِ الثَّقَفِيِّ رضي الله عنه قال: قُلْتُ: يَا رَسُولَ اللهِ، قُلْ لِي فِي الْإِسْلَامِ قَوْلًا لَا أَسْأَلُ عَنْهُ أَحَدًا غَيْرَكَ، قَالَ: «قُلْ: آمَنْتُ بِاللهِ، ثُمَّ اسْتَقِمْ». [صحيح] - [رواه مسلم وأحمد]

(86) – Sufyaan Binu Cabdullaahi Athaqafi-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Waxaan iri: Rasuulka Ilaahayow, iiga sheeg diinta Islaamka hadal aana waydiin cid aan adiga ahayn, wuxuu yiri: "dheh: Ilaahay ayaan rumeeyey ka dibna toosnow." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Muslim iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Saxaabigii Sufyaan Binu Cabdullaahi -Allaha ka raali ahaadee- ayaa waydiiyey Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate- inuu baro hadal soo koobaya macnaha Islaamka oo uu qabsado, cid kalana aanu waydiin? Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: wuxuu ku yiri: dheh: Ilaahay ayaa kaligi ah waana rumeeyey inuu Rabigay yahay Ilaahayna yahay oo isagu i abuuray uuna yahay kan aan caabudo ee xaqa ah ee aan lahayn cid shirko la ah. ka dibna uu u hogaansamo adeecida Ilaahay isagoo gudanaaya wixii Ilaahay ku waajibiyey, kana tagaya wixii Ilaahay ka xarimay sidaasna joogteeya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Diinta asalkeedu waa in la rumeeyo Ilaahay Rabinimadiisa, Ilaahnimadiisa, magacyadiisa iyo sifooyinkiisa sare.

2. Muhumad ayey leedahay toosnaantu Imaanka ka dib, iyadoo la joogtaynaayo cibaadada lagu sugnaanayona.
3. Iimaanku waa shardiga lagu aqblo Camalka.
4. Rumaynta Ilaahay waxaa soo galaya wax kasta oo ay waajib tahay in la rumeeyo ee ay ka mid yihiin Caqiidada Imaanka iyo Usuushiisa, iyo wixii soo raaca ee ah camalka Qalbiga iyo hogaansanka iyo in Ilaahay la isu dhiibo uurka oo oogadaba.
5. Toosnaantu waa in lagu taagnaado dariiqa iyadoo lala imaanayo waajibakii lagana tagayo wixii la iska reebay.

(65018)

(87) – عَنِ النُّعْمَانِ بْنِ بَشِيرٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ، إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى». [صحيح] - [متفق عليه]

(87) – Nucmaan Binu Bashiir-Allaha ka raalli ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Mu'uminiinta ee isjacaylkooda, isku naxariisashadoodu iyo isu dhimrintoodu, waxay la mid tahay sida jirka oo kale, oo hadii xubin xanuunsato jirka kale oo dhan uu la qabayaa soo jeedka iyo xanuunka." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay waajib tahay in muslimiinta xaalka dhexdooda ahi yahay kuwo jecel khayrka, naxariista, is caawinta iyo isu gargaarida, oo wixii dhib soo gaara uu u wada saameeyo sida jir qura, oo hadii xubin ka xanuunsato xubnaha kale ee jirku la qabayaan xanuunka iyo soo jeedkaba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa habboon in la weyneeyo xuquuqda muslimiinta, laguna dhiirigaliyo inay iskaashadaan, oo isu naxariistaan.
2. Waxaa habboon in dadka Ahlu iimaanka ahi is jeclaadaan oo isu gargaaran dhexdooda.

(4969)

(88) – عن عثمان بن عفان رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ تَوَضَّأَ فَأَحْسَنَ الْوُضُوءَ خَرَجَتْ خَطَايَاهُ مِنْ جَسَدِهِ حَتَّى تَخْرُجَ مِنْ تَحْتِ أَظْفَارِهِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(88) – Cusmaan Binu Cafaan-Allah ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Qofka waysaqaata ee hagaajiya waysada, dambiyadiisu jirkiisa oo dhan bay ka baxayaan ilaa ay ciddiyaha hoostoodana ka baxaan). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka wayso qaata isagoo ilaalinaaya sunadii iyo aadaabtii waysada arinkaasi wuxuu sabab u noqonayaa in loo dambi dhaafo, ilaa uu dambigu ka baxayo ciddiyaha gacmihiisa iyo kuwa lugahiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa lagu borinayaa in lagu dadaalo barashada waysaysiga, sunayaashiisa, aadaabtiisa iyo ku camal falkiisa.
2. Waysaysigu aad buu u fadli badan yahay, dambiyada yar-yarna waa loogu dhaafaa qofka, dambiyada waawaynse waa in laga toobad keeno.
3. Shuruuda dambigu ku baxayo waa in waysada la kaamil yeelo oo lala yimaado waysada iyadoo aan la khaldin sida Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee u sheegay.

4. Dambi dhaafka xadiiskan lagu sheegay wuxuu ku xiran yahay in laga fogaado dambiyada waawayn oo laga towbakeeno, Ilaahay wuxuu yiri: (haddaad ka fogaataan dambiyada waawayn ee laydinka reebay waxaan idiin dhaafi dambiyadiina-yar-yar-) [Annisaa:31].

(6263)

(89) – عَنْ أَبِي أَيُّوبَ الأَنْصَارِيِّ رضي الله عنه أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**إِذَا أَتَيْتُمُ الغَائِطَ فَلاَ تَسْتَقْبِلُوا القِبْلَةَ، وَلاَ تَسْتَدْبِرُوهَا وَلَكِنْ شَرِّقُوا أَوْ غَرِّبُوا**» قَالَ أَبُو أَيُّوبَ: فَقَدِمْنَا الشَّأْمَ فَوَجَدْنَا مَرَاحِيضَ بُنِيَتْ قِبَلَ القِبْلَةِ فَنَنْحَرِفُ، وَنَسْتَغْفِرُ اللَّهَ تَعَالَى. [صحيح] - [متفق عليه]

(89) – Abii Ayuub Alansaari -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: " Markaad xaaraysaan ha u jeensanina qiblada, hana u daba jeedinina qiblada, laakiin bari iyo galbeed u jeesta" wuxuu yiri Abuu Ayuub: waxaan tagnay shaam waxaan ka helnay musqulo loo jeediyey xaga qiblada waanan ka leexanaynay, Il aahayna waan danbi dhaaf waydiisanayney [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka reebay qofkii xaaraya ama kaadinaaya inuu qiblada ama xaga kacbada u jeesto ama uu u daba jeediyo qiblada oo uu dhabarkiisa ka dhigo qiblada, laakiin qofku uu u jeesto xaga bari ama xaga galbeed hadii qibladiisu tahay sida qiblada reer madiina oo kale. Ka dib Abuu Ayuub-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu sheegay markii ay tageen Shaam inay ugu tageen musqulo loo diyaariyey in lagu xaajaysto oo loo jeediyey xaga Kacbada, waxayna jirkooda ka jeedin jireen qiblada, sidaas oo ay tahay ayey Ilaahay dambi dhaaf waydiisan jireen.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xikmada ku jirta arinkaa waa wayneynta Kacbada sharafta leh iyo ixtiraamkeeda.
2. Istiqfaartu waa marka laga boxo meesha lagu xaajo gudanaayo.
3. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee si fiican ayuu wax u barayey dadka, waayo markuu sheegay wixii la diiday ayuu dadka u sheegay waxa u banaan.

(3078)

(90) – عَنْ أَبِي قَتَادَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «لَا يُمْسِكَنَّ أَحَدُكُمْ ذَكَرَهُ بِيَمِينِهِ وَهُوَ يَبُولُ، وَلَا يَتَمَسَّحْ مِنَ الْخَلَاءِ بِيَمِينِهِ، وَلَا يَتَنَفَّسْ فِي الْإِنَاءِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(90) – Abii Qataada-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Yaanu midkiin ku qaban midigtiisa guskiisa isagoo kaadinaaya, oo yaanu midigtiisa isaga tirin najaasada, oo yaanu ku neefsan weelka uu ku cabayo. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey qaar ka mida aadaabta, isagoo reebay in ninku midigtiisa ku qabto guskiisa markuu kaadinaayo wuxuu kaloo reebay inuu gacantiisa midig uu kaga tiro najaasada guska ama dabada, waayo midigtu waxay u diyaarsan tahay waxyaabaha fiican. Sidaasoo kale wuxuu reebay inuu qofku ku neefsado weelka uu wax ku cabaayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa cad in Islaamku ugu horeeyey aadaabta iyo nadaafada.
2. Waa in laga fogaado waxyaabaha qurunka ah, hadayse daruuri noqoto waa in gacanta bidix loo adeegsado.

3. Waxaa la cadeeyey sharafta ay leedahay midigtu iyo inay wax dheer tahay bidixda.
4. Shareecada Islaamku waa mid kaamil ah, cilmiga shareecaduna waa mid wax walba ku dhan yihiin.

(3079)

(91) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صلى الله عليه وسلم قَالَ: «لَا يَقْبَلُ اللهُ صَلَاةَ أَحَدِكُمْ إِذَا أَحْدَثَ حَتَّى يَتَوَضَّأَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(91) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: " Ilaahay ma aqbalo salaada midkiin markii waysadu ka jabto ilaa uu weyso qaato. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu wuxuu cadeeyey shuruuda salaadu ku ansaxayso inay ka mid tahay dahaaradu, sidaa darteedna ay waajib ku tahay qofka doonaya inuu salaad tukado inuu wayso qaato, hadii shay waysada buriya ka dhacay, sida saxarada, kaadida, hurdada, iyo qayrkeed.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofka Xadaska wayn qaba la aqbalimaayo salaadiisa ilaa uu qubays ku dahaaro qaato, xadaska yarna uu ka wayso qaato.
2. Waysadu waa biyaha oo afka lagu shubto laguna wareejiyo lana tufo, biyahana sanka gudihiisa loogu shubo ka dibna laga soo firdhiyo oo wajiga la dhaqo sadex jeer, ka dibna gacmaha la dhaqo ilaa suxulada saddex jeer, ka dibna madaxa oo dhan hal mar la masaxo, ka dibna lugaha la dhaqo ilaa anqawyada saddex jeer.

(353)

(92) – عَنْ جَابِرٍ رضي الله عنه قال: أَخْبَرَنِي عُمَرُ بْنُ الْخَطَّابِ: أَنَّ رَجُلًا تَوَضَّأَ فَتَرَكَ مَوْضِعَ ظُفُرٍ عَلَى قَدَمِهِ فَأَبْصَرَهُ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالَ: «ارْجِعْ فَأَحْسِنْ وُضُوءَكَ» فَرَجَعَ، ثُمَّ صَلَّى. [صحيح بشواهده] - [رواه مسلم]

(92) – Jaabir Binu Cabdullaahi-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Cumar Binu Khadaab ayaa ii sheegay: Nin ayaa weyso qaatay oo ka tagay meel cidi le`eg oo ciribtiisa ah, Nabiguna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu arkay, wuxuuna ku yiri: "noqo oo weysadaada hagaaji", wuu laabtay-ninkii- wuuna wanaajiyey weysadii ka dib wuu tukaday. **[Xadiis Saxiix ah, marka la eego u Marag kaca kale ee soo arooray] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Wuu laabtay ninkii, oo wuu soo dhamaystiray weysadiisa, wuuna tukaday.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib in loo dhakhsado farida wanaaga, oo wax loo sheego kan jaahilka ah iyo kan hilmaansan, gaar ahaan hadii munkarkaas uu keenayo in cibaadadiisu burto.
2. Waa waajib in xubnaha laga weyso qaato la wada gaarsiiyo biyaha, oo qofkii ka taga qayb xubinta ka mida haba yaraadee weysadu ka ansiximayso waxaan ku waajiba inuu soo celiyo waysada hadii waqti dheer ka soo wareegay.
3. Waa sharci in la wanaajiyo weyso qaadka, waana in la dhameystiro looguna xeel dheeraado sida sharcigu faray.
4. Labada cagaood waxay ku jiraan xubnaha laga weyso qaato, kumana filna in la masoxo, balse waajib in la dhoqo.
5. Waxaa haboon in la xiriiriyo xubnaha laga weyso qaato, oo waa in la dhaqo xubinta inta xubintii hore aysan qalalin.

6. Aqoon la'aanta iyo ilawshuhu qofka ka ma ridayaan wax waajib ah, waxayse ka ridaan dambiga, sidaa darteed ninkan aan wanaajin weysadiisa aqoon la'aantiisa awgeed Nabigu scw kama ridin waajibkii, oo waysadii ah, blase wuxuu faray inuu ku soo celiyo waysada.

(8386)

(93) – عن عَمْرِو بْنُ عَامِرٍ عَنْ أَنَس بن مالك قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَتَوَضَّأُ عِنْدَ كُلِّ صَلَاةٍ، قُلْتُ: كَيْفَ كُنْتُمْ تَصْنَعُونَ؟ قَالَ: يُجْزِئُ أَحَدَنَا الْوُضُوءُ مَا لَمْ يُحْدِثْ. [صحيح] - [رواه البخاري]

(93) – Camar Binu Caamir wuxuu ka wariyey Anas Binu Maalik inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu u wayso qaadan jiray salaad walba, waxaan ku iri: maxaad sameyn jirteen?, wuxuuna yiri: waxaa ku filnaa midkayo waysadiisa mar hadaanay ka jabin. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee salaad walba oo faral ah wuu u wayso qaadan jiray, xataa hadaan waysadu ka burin, waana si uu uga helo ajar iyo fadli.

Waxaa banaan in lagu tukado hal wayso salaadaha faral ka ah hal ka badan intuu waysadiisa qabo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ficilka uu ugu badanaa ee uu samayn jiray wuxuu ahaa inuu salaad walba u wayso qaato, isagoo doonaya sida ugu kaamilsan.
2. Waa suno in salaad walba loo wayso qaato.
3. Way banaan tahay in lagu tukado hal wayso hal salaad wax ka badan.

(65080)

(94) – عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنهما قَالَ: تَوَضَّأَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَرَّةً مَرَّةً. [صحيح] - [رواه البخاري]

(94) – Ibnu Cabaas Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu wayso qaadanayo wuxuu dhaqi jiray mar mar kaliya. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa waqtiyada qaar markuu waysaysanayo, xubinaha waysada wuxuu dhaqi jiray hal mar, wuxuu dhaqi jiray wajiga, luqluqushada, san daarsiga, gacmaha iyo lugaha hal mar, waana intaas qadarka waajibka ahi.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xubnaha waysada inta waajibka ah in la dhaqo waa hal mar, wixii intaa ka badani waa sune.
2. Waa sharci waysada hal mar la dhaqayo waqtiyada qaarkood.
3. Waa sharci in madaxa hal mar la masaxo.

(65081)

(95) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بْنِ زَيْدٍ رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ تَوَضَّأَ مَرَّتَيْنِ مَرَّتَيْنِ. [صحيح] - [رواه البخاري]

(95) – Cabdullaahi Binu Sayd Allaha ka raali ahaadee: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu waysadiisa dhaqay xubnaha labo labo mar. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa xiliyadiisa qaar haduu wayso qaadanayo xubnaha waysada wuxuu

dhaqi jiray labo mar, wuxuu dhaqi jiray wajiga-oo uu ku jiro luqluqushada iyo san daarsigu, gacmaha iyo lugaha labo mar.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waajibka dhaqida xubnaha waysada waa hal mar, wixii ka badani waa suno.
2. Waa Sharci in waysada la dhaqo xubnaha labo labo mar waqtiyada qaarkood.
3. Waa sharci in madaxa la masaxo hal mar.

(65082)

(96) – عَنْ حُمْرَانَ مَوْلَى عُثْمَانَ بْنِ عَفَّانَ رضي الله عنه: أَنَّهُ رَأَى عُثْمَانَ بْنَ عَفَّانَ دَعَا بِوَضُوءٍ، فَأَفْرَغَ عَلَى يَدَيْهِ مِنْ إِنَائِهِ، فَغَسَلَهُمَا ثَلَاثَ مَرَّاتٍ، ثُمَّ أَدْخَلَ يَمِينَهُ فِي الْوَضُوءِ، ثُمَّ تَمَضْمَضَ وَاسْتَنْشَقَ وَاسْتَنْثَرَ، ثُمَّ غَسَلَ وَجْهَهُ ثَلَاثًا، وَيَدَيْهِ إِلَى الْمِرْفَقَيْنِ ثَلَاثًا، ثُمَّ مَسَحَ بِرَأْسِهِ، ثُمَّ غَسَلَ كُلَّ رِجْلٍ ثَلَاثًا، ثُمَّ قَالَ: رَأَيْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَتَوَضَّأُ نَحْوَ وُضُوئِي هَذَا، وَقَالَ: «مَنْ تَوَضَّأَ نَحْوَ وُضُوئِي هَذَا ثُمَّ صَلَّى رَكْعَتَيْنِ لَا يُحَدِّثُ فِيهِمَا نَفْسَهُ غَفَرَ اللهُ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(96) – Xumraan oo ahaa adoonkii Cusmaan Binu Cafaan Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Cusmaan ayaa weel lagu waysaysto dalbaday, gacmihiisa ayuu dhaqay saddex jeer, ka dibna gacantiisa midig ayuu galiyey waysadii, waanu luqluqday, oo san daarsaday, oo ka soo firdhiyey sanka biyihii, ka dibna wajigiisuu saddex jeer dhaqay, iyo gacmihiisa ilaa suxullada saddex jeer, ka dibna madaxuu masaxay, hadana luguhuu dhaqay mid walba saddex jeer, intaa ka dib wuxuu yiri Cusmaan-: Nabigaan scw arkay isagoo qaabkaa aan u wayso qaatey oo kale u wayso qaadanaya, oo dhahay:"qofka u weyso qaata sidaa aan u wayso qaatay ee tukada labo rakcadood oo aan naftiisa la sheekaysan salaada dhexdeeda, Ilaahay wuxuu ka dhaafaa dambiyadiisii hore". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Cusmaan Binu Cafaan Allaha ka raali ahaadee wuxuu baray qaabkii waysaysiga Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waliba qaab tusaalaysan, oo uu tusayo hortooda dadka siday tahay waysadu, wuxuuna dalbaday biyo weel ku jira, saddex jeer ayuu ku shubay gacmihiisa wuuna mayray, intaa ka dibna gacantiisa midig buu weelka galiyey biyuhuuna sooqaatay, afkiisuna galiyey wuuna soo tufay, hadana biyihii buu sanka ku qaaday ilaa gudaha sanka, wuuna soo firdhiyey, hadana wajigiisuu saddex jeer dhaqay, gacmuhuu ku xijiyey ilaa labada xusul saddex jeer, hadana hal marbuu madaxa mariyey gacantiisoo qoyan, intaa ka dibna luguhuu dhaqay ilaa anqawyada saddex jeer.

Markuu dhameeyey Allaha ka raali ahaadee ayuu ka sheegay inuu arkay Nabiga scw oo sidiisaa oo kale u wayso qaatay, oo waliba ugu bishaareeyey qofka sidiisa oo kale u waysa qaata labo rakcadoodna tukada, isagoo khushuucsan qalbigiisana soo xaadiriyey llaahay hortiisa, Ilaahay inuu kaga abaal marin doono waysadiisaa uu wanaajiyey iyo salaada gaarka ah inuu ka dhaafo dambiyadiisii hore.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa suna ah in gacmaha la dhoqo intaan weelka la galin waysada ka hor, yaanu hurdaba ka soo toosine, haduu ka soo tooso hurdada habeenka waxaa waajib ah inuu faraha dhaqdo.

2. Waxaa haboon in macallinku raaco qaabka ugu dhow ee uu wax ku fahmi karo aqoontuna ugu xasilayso kan wax baranaya, waxaana ka mida in  qofka lagu baro ficil,.

3. Waxaa la gudboon qofka tukanaaya inuu niyadiisa ka saaro fikirka aduun ee ka mashquulinaya khushuucda salaada, waayo salaada kaamilka ahi waxay ku xiran tahay  qalbiga oo jooga oo ku xiran salaada, waayo fikirka maskaxda ku soo

dhacaya lagama aamin helo, sidaa darteed waa inuu qofku iskala jihaado waxaas oo aanu isku sii dayn.

4. Waa sune in la midigaysto waysaysiga.
5. Waa sharci tartiibta kala horaysiinta luq-luqashada iyo san daarsiga iyo firdhinta.
6. Waxaa suna ah in la saddexeeyo mayrida wajiga, gacmaha, lugaha, waajibkuse xubintiiba waa hal mar.
7. Dambi dhaafka Ilaahay ee dambiyadaa la soo samayey waxay ku xiran tahay labo qodob oo lala yimaado: waysaysiga iyo labo rakcadood oo lala yimaado sida xadiiska lagu soo xusay.
8. Xubin kastoo xubnaha waysaysiga ka mid ah waxay leedahay xad: wajiga xadkiisu waa: halka ay timaha madaxa ka baxaan ilaa lafta garka dherer ahaan, hadana dhagta ilaa dhagta kale balac ahaan, gacanta xadkeedu waa: faraha laga bilaabo ilaa suxulka, waana halka gacantu ka laabato ee cududa iyo dhudhunka u dhaxaysa, madaxa xadkiisu waa: timaha fooda laga bilaabo ilaa halka qoorta iyo madaxu iska galaan, masixitaanka dhaguhuna madaxay raacsan yihiin, luguha xadkoodu waa: anqawga oo kaamila iyo kala goyska dhudhunka.

(3313)

(97) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «إِذَا تَوَضَّأَ أَحَدُكُمْ فَلْيَجْعَلْ فِي أَنْفِهِ ثُمَّ لِيَنْثُرْ، وَمَنِ اسْتَجْمَرَ فَلْيُوتِرْ، وَإِذَا اسْتَيْقَظَ أَحَدُكُمْ مِنْ نَوْمِهِ فَلْيَغْسِلْ يَدَهُ قَبْلَ أَنْ يُدْخِلَهَا فِي وَضُوئِهِ، فَإِنَّ أَحَدَكُمْ لاَ يَدْرِي أَيْنَ بَاتَتْ يَدُهُ». ولفظ مسلم: «إِذَا اسْتَيْقَظَ أَحَدُكُمْ مِنْ نَوْمِهِ فَلَا يَغْمِسْ يَدَهُ فِي الْإِنَاءِ حَتَّى يَغْسِلَهَا ثَلَاثًا، فَإِنَّهُ لَا يَدْرِي أَيْنَ بَاتَتْ يَدُهُ».

[صحيح] - [متفق عليه]

(97) – Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Markuu wayso qaadanayo midkiin biyaha sankiisa haku qaado oo hadana ha soo firdhiyo, qofka dhagax ku istinjoodana witir ha ka dhigo, markuu midkiin hurdada ka tooso ha dhaqo gacmihiisa intaanu biyaha waysada gelin, waayo ma oga midkiin halka ay gacantiisu bariday", imaam Muslim ayaa isna sidan u wariyey: "markuu midkiin tooso yaanu gelin gacantiisa weelka ilaa uu saddex jeer uu dhaqo, waayo ma oga halkay gacantiisu bariday." **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey qaar ka mida axkaanta dahaarada, waxaana ka mida: Midka 1aad: qofki waysaysanaya waa inuu inuu biyaha sanka ku jiido, hadana neefta soo raaciyo oo soo firdhiyo. Midka 2aad: qofkii doonaya inuu isaga nadiifiyo najaasada ka soo baxaysa isaga waxaan biyo ahayn sida dhagxaanta iyo wixii la mida, wuxuu isku nadiifinayaa tirsi kinsi ah oo ugu yaraan ah sadex ugu badnaan wixii tirtiraya najaasada meeshana nadiifinaya. Midka 3aad: qofka ka toosa hurdada habeenka gacantiisa galinmaayo weelka markuu wayso qaadanayo ilaa uu gacantiisa ku dhaqdo weelka dibadiisa, waayo ma oga halkay gacantiisu bariday, kama aamin aha in gacantiisu najaaso taabatay, waxaana dhici kara inuu shaydaan ku ciyaaray, oo uu saaray waxyaabo dadka dhibaya ama biyaha xumaynaya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib san daarsigu marka la wayso qaadanayo, waana biyaha oo inta neefta sanka lagu jiido hadana neefta la soo raaciyo oo la soo firdhiyo.
2. Waa sune in Dhagaxa lagu istijoodo tira kinsi ah oo is dheer.

3. in la dhaqo gacmaha sadex jeer marka hurdada habeennimo laga soo tooso waa amar sharci ah.

(3033)

(98) – عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنهما قَالَ: مَرَّ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِقَبْرَيْنِ، فَقَالَ: «إِنَّهُمَا لَيُعَذَّبَانِ، وَمَا يُعَذَّبَانِ فِي كَبِيرٍ، أَمَّا أَحَدُهُمَا فَكَانَ لاَ يَسْتَتِرُ مِنَ البَوْلِ، وَأَمَّا الآخَرُ فَكَانَ يَمْشِي بِالنَّمِيمَةِ» ثُمَّ أَخَذَ جَرِيدَةً رَطْبَةً، فَشَقَّهَا نِصْفَيْنِ، فَغَرَزَ فِي كُلِّ قَبْرٍ وَاحِدَةً، قَالُوا: يَا رَسُولَ اللَّهِ، لِمَ فَعَلْتَ هَذَا؟ قَالَ: «لَعَلَّهُ يُخَفِّفُ عَنْهُمَا مَا لَمْ يَيْبَسَا». [صحيح] - [متفق عليه]

(98) − Ibnu Cabaas-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa soo maray laba qabri, wuxuuna yiri: "labadaba waa lacadaabayaa, wax wayna lagu cadaabimaayo, mid kaadida iskama duwi jirin, kan kalena dadka ayuu warka u kala qaadi jiray" wuxuuna soo qaatay laan timireed qoyan wuuna u kala dilaaciyey labo qaybood, qabri walbana qaybuu ku talaalay, waxay dheheen-asaxaabtii-: Rasuulka Ilaahayow maxaad sidaa u samaysaa? wuxuu yiri: "waxaa laga yaaba inay ka khafiifiyaan intaysan qalalin. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa soo maray laba qabri wuxuuna yiri: Labada qof ee qabriyadan ku jira waa la cadaabayaa, wax wayna lagu cadaabimaayo aragtidiina, wax wayn bayna ka tahay xaga Ilaahay. Midkood wuxuu ahaa midaan danaynayn inuu ka ilaaliyo jirkiisa iyo dharkiisa kaadida markuu xaajo gudanaayo. kan kalena dadka ayuu warka u kala qaadi jiray, isagoo ay ka tahay iska horkeenid, dhibaatayn iyo inay isku dhacaan dadku.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Namiimada iyo kaadida oo aan la ka dhawrin waxay ka mid yihiin dambiyada waawayn iyo asbaabta cadaabta qabriga.

2. Waxyaabaha qaybka ah qaarkood oo Ilaahay muujiyey -sida cadaabta qabriga- waxay cadayn u tahay calaamada nabinimada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee.
3. Ficilka uu Nabigu sameeyey ee ah kala jeexida laanta timirta ah ee uu ka taagay qabriga waxay khaas u tahay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, waayo Ilaahay ayaa tusay xaalka labadaa qof ee qabriga jira, loogana qiyaas qaadan maayo cid kale, waayo qofna ma oga xaalka dadka qabriga ku jira.

(3010)

(99) – عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا دَخَلَ الخَلاَءَ قَالَ: «اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الخُبُثِ وَالخَبَائِثِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(99) – Anas -Allaha ka raali ahaadee waxa uu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxa uu ahaa marka uu galayo suuligo inuu dhaho: "Allahayow waxaan kaa magan galayaa shaydaanka kiisa lab iyo kiisa dhadigba." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa marka uu doono inuu xaajo guto, kaadi ama saxaro, Ilaahay ayuu magan gali jiray, Isaguuna cuskan jiray inuu ka nabad galiyo sharka shaydaanka lab iyo midka dhadigba. Waxaa kaloo lagu fasiray khubuska iyo khabaa`iska sharka iyo najaasada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ducadan ayaa la suneeyey in la akhristo marka lagalaayo suuliga.
2. Dhamaan khalqiga oo dhan waxay baahi u qabaan Rabigooda, inuu ka difaaco wax kastoo dhib ah oo dhibaatayn, xaalad walba oo ay ku sugan yihiin.

(3150)

(100) – عن عائشة رضي الله عنها قالت: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «**السِّوَاكُ مَطْهَرَةٌ لِلْفَمِ، مَرْضَاةٌ لِلرَّبِّ**». [صحيح] - [رواه النسائي وأحمد]

(100) – Caa'isha- Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inay tiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee. (Cadaygu afka wuu nadiifiyaa Ilaahayna wuu raali galiyaa). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay An nisaa'i iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in laanta geedka cadayga ah iyo wixii la mida uu ka nadiifiyo afka iyo ilkaha wixii wasakha ama ur ah. Wuxuuna ka mid yahay asbaabta u keenaysa adoonka Ilaahay raali ahaantiisa, waayo waxaa ku jira- cadayga adeecida Ilaahay iyo amarkiisa oo la qaato, iyo nadaafada Ilaahay jecel yahay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa fadliga cadayga, iyo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee oo jeclaysiyey ummaddiisa inay cadayga badsadaan.
2. Rumay waxaa u fadli badan laanta geedka cadayga iyo isticmaalka burshka iyo macjuunka way gali karaan booska cadayga.

(3588)(101) – عن أبي هريرة قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «**حَقٌّ عَلَى كُلِّ مُسْلِمٍ أَنْ يَغْتَسِلَ فِي كُلِّ سَبْعَةِ أَيَّامٍ يَوْمًا، يَغْسِلُ فِيهِ رَأْسَهُ وَجَسَدَهُ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(101) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay ayaa yiri: " Waxaa muslim kasta xaq ku ah, inuu qubaysto todobadii maalmoodba maalin, oo dhaqo madaxiisa iyo jirkiisoo dhan".

**[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inay xaq sugan ku tahay qofkastoo muslima qaan gaara, caaqila, inuu qubaysto todobada bari ee usbuuca maalin, oo uu maalintaa uu dhaqo madaxiisa iyo dhamaan jirkiisa, isagoo ka doonaya nadaafad iyo dahaaro, waxaana maalmaha ugu haboon maalinta Jumcaha, sida laga fahmayo riwaayadaha qaarkood, qubayska maalinta jumcaha salaada ka hor waa suno aad loo adkeeyey, xataa haduuba qubaystay khamiistii tusaale ahaan, waxaana waajibnimada ka leexiyey, hadalkii Caa'isha-Allaha ka raali ahaadee-: "Waxay ahaayeen dadku kuwo shaqooyinkooda ku jira, markay salaada jumcada tagayaana sidoodaa ayey ku tagayeen, waxaana lagu yiri: hadaad soo qubaysan la haydeen", bukhaari ayaa wariyey, riwaayad kale oo bukhaari leeyahay waxay ahayd: "waxay dadku lahaayeen shiir " waana shiirka dhididka iyo wixii la mida, sidaasoo ay tahay waxaa lagu yiri: " hadaad soo qubaysan lahaydeen", dadka kalena waa kaga sii haboon yihiin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Islaamku ahmiyad iyo dhawrid ayuu siiyey nadaafada iyo dahaarada.
2. Maalinta jumcada in loo qubaysto salaada waa suno la hubo.
3. Hadii jirka la xuso waxaa soo galaya madaxa hadana si gaara ayaa loo xusay ahmiyadiisa awgeed.
4. Waxaa waajib ku ah inuu qubaysto qofkastoo leh shiir dadku dhibsanayaan.

5. Maalinta ugu mudan qubayska waa maalinta Jumcaha wuxuu sii muhiim yahay maalinta jumcaha, fadliga uu leeyahay maalinkaasi dartii.

(65084)

(102) – عن أبِي هريرة رضي اللَّه عنه: سمعتُ النبِيّ صلى الله عليه وسلم يقول: «**الفِطْرَةُ خمسٌ: الخِتَانُ والاستحدادُ وقصُّ الشَّارِبِ وتقليمُ الأظفارِ وَنَتْفُ الآبَاطِ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(102) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu dhahay: waxaan Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka maqlay isagoo dhahaya: (Fidrada fiicani waa shan: gudniinka, xiiritaanka bisqanta, gaabinta shaarubaha, jaritaanka cidiyaha, rifitaanka timaha kilkilada. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey shan wax yaabood oo diinta islaamka iyo sunihii ambiyada ka mid ah:

Tan koowaad: gudniinka, waana jaritaan la jaro haraga sare ee qariya madaxa buuryada raga, iyo in la jaro madax kintirka gabdhaha halka buuryadu marayso korkeeda.

Tan labaad: waa xiiritaanka timaha bisqanta.

Tan saddexaad: gaabinta timaha shaarubaha, lamana ogola inay qariyaan bishinta.

Tan afraad: waa jaritaanka cidiyaha.

Tan shanaad: waa timaha kilkillada oo la rifo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Sunaha ambiyada ee Ilaahay jecelyahay raaligana ka yahay uuna faray adoomadiisa waxay dadka u tahay kamaal, wanaag iyo qurux.

2. waa sharci in arimahan la joogteeyo oo aan la moogaan.

3. Tilmaamahan waxay leeyihiin faa'iidooyin xaga diinta iyo xaga aduunka ah, waxaa ka mid ah: muuqaal wanaag, nadaafada jirka, iyo in dahaarada loo degdego, in gaalada la khilaafo iyo in amarka Ilaahay la qaato.
4. Xadiisyo kale waxaa lagu sheegay tilmaamo kale oo fidrada ka mida, oo aan shantaan ahayn, sida: garka in la daayo, rumayga, iyo kuwa kale.

(3144)

(103) – عَنْ عَلِيٍّ رضي الله عنه قَالَ: كُنْتُ رَجُلًا مَذَّاءً وَكُنْتُ أَسْتَحْيِي أَنْ أَسْأَلَ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لِمَكَانِ ابْنَتِهِ فَأَمَرْتُ الْمِقْدَادَ بْنَ الْأَسْوَدِ فَسَأَلَهُ فَقَالَ: «**يَغْسِلُ ذَكَرَهُ وَيَتَوَضَّأُ**».

وَلِلْبُخَارِيِّ: فَقَالَ: «**تَوَضَّأْ وَاغْسِلْ ذَكَرَكَ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(103) – Cali Binu Abii Daalib -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: waxaan ahaa nin Madi badan Nabigana nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waan ka xishoon jiray, waayo gabadhiisaan qabay, waxaan faray Miqdaad Binu Aswad, wuuna su`aalay wuxuuna yiri: xubintiisa taranka ha dhaqo hana wayso qaato.Bukhaarina waxaa ka sugnaaday: wuxuu yiri:
"waysayso oo dhaq xubintaada taranka." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Cali Binu abii Daalib -Allaha ka raali ahaadee- ayaa sheegay in Madi badani ka imaan jirtay - Madidu waa biyo cad oo khafiif ah is jiidanaya, oo xubinta taranka kasoo baxa marka dareenka qofku jiro ama galmada ka hor-, mana garan waxa uu samaynayo marka ay kasoo baxdo madidu, wuxuuna ka xishooday inuu waydiiyo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , waayo waa sayga Faadumo oo inanta Nabiga ah. wuxuu waydiistay Miqdaad Binu Aswad inuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waydiiyo arinkaa. Wuxuuna ugu

jawaabay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu dhaqo xubintiisa taranka ka dibna waysaysto.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xaddiiska waxaa ku cad fadliga Cali Binu Abii Daalib-Allaha ka raali ahaadee-, xishoodku umadiidin su'aasha uu Suubanaha waydiin lahaa, oo qof kaluu u adeegsaday si uu u helo jawaabta Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee .
2. way banaan tahay in qof kale loo wakiisho su'aal cilmiyeedka fatwada ah.
3. Way banaan tahay inuu qofku iska waramo oo u sheegto qof kale wax uu ka xishoonayo oo ay danta iyo maslaxadu keentay.
4. waa nijaas madidu, waxaana waajib ah in laga dhaqo jirka iyo dharkaba.
5. madida oo qofka ka timaada waa wax yaabaha waysada buriya.
6. waxaa waajib ah in ladhaqo xubinta taranka iyo xiniinyaha sida xaddiis kale kusoo aroortay.

(3348)

(104) – عَنْ عَائِشَةَ أُمِّ المؤمنين رضي الله عنها قَالَتْ: كَانَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا اغْتَسَلَ مِنَ الجَنَابَةِ، غَسَلَ يَدَيْهِ، وَتَوَضَّأَ وُضُوءَهُ لِلصَّلاَةِ، ثُمَّ اغْتَسَلَ، ثُمَّ يُخَلِّلُ بِيَدِهِ شَعَرَهُ، حَتَّى إِذَا ظَنَّ أَنَّهُ قَدْ أَرْوَى بَشَرَتَهُ، أَفَاضَ عَلَيْهِ المَاءَ ثَلاَثَ مَرَّاتٍ، ثُمَّ غَسَلَ سَائِرَ جَسَدِهِ، وَقَالَتْ: كُنْتُ أَغْتَسِلُ أَنَا وَرَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ إِنَاءٍ وَاحِدٍ، نَغْرِفُ مِنْهُ جَمِيعًا. [صحيح] - [رواه البخاري]

(104) – Caa'isha, Mu'uminiinta Hooyadood -Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu janaabo ka qabaysanayo wuxuu dhiqi jiray gacmihiisa, wuxuuna u wayso qaadan jiray sida salaada uu ugu wayso qaato, ka dibna wuu qubaysan jiray, isagoo faraha dhex galinaya timihiisa ilaa uu jirkiisa biyaha wada gaarsiiyo, saddex jeer ayuu biyaha isku shubi jiray, ka dibna jirkiisa kale dhan ayuu dhaqi jiray, waxay tiri- Caa'isha-: aniga iyo Rasuulka weel kaliya ayaan ku wada qubaysan jirnay, oo aan labadayadu kawada darsan jirnay biyaha. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu rabo inuu janaabo ka qabaysto, wuuu ku bilaabi jiray inuu gacmaha dhaqo. Ka dibna wuu wayso qaadanayey sida waysada salaada, ka dibna biyaha ayuu jirkiisa gaarsiin jiray, ka dibna gacmaha ayuu timaha madaxa dhex galin jiray, ilaa uu i dhoho biyuhu waa gaareen timaha salkooga, jirkuna waa ka dhergay biyaha, saddex jeerbuu madaxiisa biyaha ku shubaayey, ka dibna jirkiisa kale ayuu dhaqi jiray. Waxay tiri Caa'isha-Allaha ka raali ahaadee-Aniga iyo Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa weel kali ah ku wada qubaysanaynay, oo biyaha ka wada darsanaynay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qubaysigu waa labo nuuc: mid uu ku ansaxayo qubaysku iyo mid kaamil ah, kan uu ku ansaxaayo waa in qofku niyeysto dahaaro ka dibna uu jirkiisa wada gaarsiiyo biyaha isagoo luqluqanaaya oo san daarsanaya, Qubayska kaamilka ahna waa inuu u qubaysto sida Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee u qubaystay ee ku soo aroortay xadiiskaan.

2. Waxaa la dhahaa janaabo qof kastoo biyaha shahwadu ka yimaadaan, ama galmo sameeya walow yaanu biyaba ka imane.
3. Way banaan tahay inay ninka iyo xaaskiisu cawradooda is eegaan, kuna wada qubaystaan weel kaliya.

(3316)

(105) – عَنْ عَمَّارِ بنِ ياسِرٍ رضي الله عنه قال: بَعَثَنِي رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي حَاجَةٍ، فَأَجْنَبْتُ فَلَمْ أَجِدِ الْمَاءَ، فَتَمَرَّغْتُ فِي الصَّعِيدِ كَمَا تَمَرَّغُ الدَّابَّةُ ثُمَّ أَتَيْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فَذَكَرْتُ ذَلِكَ لَهُ فَقَالَ: «إِنَّمَا كَانَ يَكْفِيكَ أَنْ تَقُولَ بِيَدَيْكَ هَكَذَا» ثُمَّ ضَرَبَ بِيَدَيْهِ الْأَرْضَ ضَرْبَةً وَاحِدَةً، ثُمَّ مَسَحَ الشِّمَالَ عَلَى الْيَمِينِ، وَظَاهِرَ كَفَّيْهِ وَوَجْهَهُ. [صحيح] - [متفق عليه]

(105) – Camaar Binu Yaasir -Allaha karaali ahaadee-wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, ayaa hawl ii diray markaasaan isku junubay biyana waan waayey, waxaan ku gal-gashay ciida sida neefku ugu galgasho, ka dibna waxaan u imid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, xaalkaygaana u sheegay, wuxuuna yiri: " waxaa kugu filnaa inaad gacmahaaga sidan dhahdid ", wuxuuna hal mar ku dhiftay gacmihiisa dhulka, gacantiisa bidix ayuu ku masaxay tiisa midig, iyo labadiisa calaacalood oo dusha ah iyo wajigiisa. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Camaar Binu Yaasir ayuu u diray inuu u safro hawlo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee u gaara, waxaa ku yimid Janaabo oo jimaac ku timid ama biyaha shahwada oo ka yimid, biyo uu ku qubaystana ma helin, Ma uusan aqoon xugunka in Janaabada laga booraysto, wuxuuse yaqaanay xugunka in laga booraysto Xadaska yar, wuu ijtihaaday waxayna la noqotay sida xubnaha waysada loogu masaxo ciida marka xadaxka yar uu jiro, in jinaabadana ciida la wada gaarsiinayo jirka, isagoo uga qiyaas qaadanaya biyaha, sidaa darteed wuxuu ku gal-gashay carada oo

wada gaarsiiyey jirka, wuuna tukaday, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , markuu yimid ayuu u sheegay arinkaa, si uu u ogaado inuu saxan yahay iyo in kale? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu u cadeeyey qaabka looga dahaara qaato labada xadas kan yar sida kaadida, iyo midka wayn sida janaabada: waana inuu hal mar ku dhifto gacmihiisa dhulka, oo ku masaxaa gacantiisa bidix tiisa midig, iyo labadiisa calaa-calood korkooda iyo wajiga.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waa waajib in biyo la raadiyo intaan la booraysan.
2. waa mashuur inuu booraysto qofka janaabada qaba ee biyaha waayey.
3. Booraysiga xadaska wayn wuxuu la mid yahay booraysiga xadaska yar.

(3461)

(106) – عَنْ المُغِيرَةِ رضي الله عنه قَالَ: كُنْتُ مَعَ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي سَفَرٍ، فَأَهْوَيْتُ لِأَنْزِعَ خُفَّيْهِ، فَقَالَ: «دَعْهُمَا، فَإِنِّي أَدْخَلْتُهُمَا طَاهِرَتَيْنِ» فَمَسَحَ عَلَيْهِمَا. [صحيح] - [متفق عليه]

(106) – Muqiirah-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan safar la galay, waxaan u foorarsaday si aan uga siibo labada khuf, wuxuu igu yiri: " iska daa, anoo wayso qaba -ayaan galiyaye", uuna masaxay. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo safaradiisii mid ka mida ku jira ayuu waysaystay, markuu soo gaaray labada lugood, ayuu Muqiira Binu Shucba laacay si uu Nabiga scw uga saaro khufkii cagaha ugu jiray, si uu Nabigu u dhaqo lugaha! wuxuu yiri Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: iska daa ha bixine , waxaaan gashaday labada khuf anoo dahaara qabee, Nabigu

nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu masaxay labadii khuf mana dhaqin lugihiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Marka laga weyso qaadanayo xadaska yar waa sharci in la masaxo khufaynka, laakiin marka laga qubaysanayo xadaska wayn waxaa lagama maarmaan ah in la dhaqo cagaha.
2. masaxidu waa hal mar oo gacanta oo qoyan la mariyo khufka korkiisa oo aan xaga hoose laga masaxin.
3. Waxaa loo shardiyaa masixitaanka labada khuf in marka hore waysoqab cagaha biyo lagu dhaqay ka dib la gashaday, khufkuna waa inuu yahay daahir, asturaayana lugta inta ay waajibka tahay in la dhaqo, masixitaankuna wuxuu ahaanayaa xadaska yar ka dib, qofkii janaaba qaba ama qubays ku waajibay ma masaxayo khufka, masixitaankuna waqti go'an buu leeyahay xaga shareecada, waana habeen iyo maalin qofka aan safarka ahayn, iyo saddex maaal mood iyo habeenadooda oo qofka musaafirka ah.
4. Waxaa looga qiyaas qaadanayaa labada khuf wax kastoo astura lugaha sida sharabaadada iyo qayrkeed, wayna banaan tahay in la masaxo.
5. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu lahaa akhlaaq wanaagsan iyo wax baritaan wanaagsan, isagoo u diiday muqiira inuu ka baxsho labada khuf, sababtana u cadeeyey, taasoo ah inuu gashaday khufka isagoo wayso qaba, si uu muqiira u fahmo, xukunkana u ogaado.

(3014)

(107) – عَنْ عَائِشَةَ أُمِّ المؤمنين رضي الله عنها أَنَّ فَاطِمَةَ بِنْتَ أَبِي حُبَيْشٍ سَأَلَتِ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَتْ: إِنِّي أُسْتَحَاضُ فَلاَ أَطْهُرُ، أَفَأَدَعُ الصَّلاَةَ؟ فَقَالَ: «لَا، إِنَّ ذَلِكِ عِرْقٌ، وَلَكِنْ دَعِي الصَّلاَةَ قَدْرَ الأَيَّامِ الَّتِي كُنْتِ تَحِيضِينَ فِيهَا، ثُمَّ اغْتَسِلِي وَصَلِّي». [صحيح] - [متفق عليه]

(107) − Caa'isha, mu'uminiinta Hooyadood- Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Faadumo bintu Abii Xubaysh ayaa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee su'aal waydiisay waxayna tiri: Anigu dhiig furan baan leehay oo daahir ma noqdee salaada ma ka tagaa? wuxuu yiri: "maya, taasi waa xidid dartiiye salaada jooji qadarkii ayaamaha xaydku kugu dhici jiray, ka dibna ka qubayso oo salaada tuko." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Faadumo Bintu Xubeysh Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxay waydiisay oo tiri: aniga dhiigu igama joogsado oo wuxuu iga socdaa waqti dhaafsan mudadii dhiiga caadadu iga socon jiray, ee xugunkiisu ma yahay xugunka dhiiga xaydka oo salaada ma joojiyaa.? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee . wuxuu ku yiri: kaasi waa dhiig istaxaado ah waana dhiig jiro ah wuxuuna ka soo baxaa xidid Raximka ku jira ee ma aha dhiigii caadada. marka aad gaadho waqtigii aad heli jirtay dhiiga caadada ee bilaha ah intaanu kugu dhicin dhiiga istixaadadu, jooji salaada, soonka iyo wixii loo diidi jiray mida xaydka qabta. Hadii mudadaas qadarkeedu dhamaado, waxaad noqonaysaa mid xaydka daahir ka noqotay, meesha dhiiga iska dhaq, ka dibna si kaamila uga qubayso xadaska, oo tuko.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib Dumarku inay ka qubaystaan marka uu ka dhamaado ayaamaha xaydku.
2. Salaaddu waa ku waajib mida dhiiga istixaadada qabta.

3. Xaydku: waa: dhiiga dabiici ah oo raximku soo saaro, isagoo soo mariya xubinta taranka ee dumarka qaan gaaray, kaasoo ku dhaca dumarka ayaamo la yaqaan.
4. Istixaadadu waa: dhiig soconaaya waqti aan ahayn waqtigii dhiiga caadada, kaasoo ka imanaaya qaybta soke ee raximka ee aan ahayn guntiisa hoose.
5. Farqiga u dhexeeya dhiiga caadada iyo midka itixaadada: dhiiga caadadu waa madow adag oo ur qarmuun, kan istixaadaduna waa casaan khafiif ah oo aan lahayn ur qarmuun.

(3029)

(108) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**إِذَا وَجَدَ أَحَدُكُمْ فِي بَطْنِهِ شَيْئًا، فَأَشْكَلَ عَلَيْهِ أَخَرَجَ مِنْهُ شَيْءٌ أَمْ لَا، فَلَا يَخْرُجَنَّ مِنَ الْمَسْجِدِ حَتَّى يَسْمَعَ صَوْتًا، أَوْ يَجِدَ رِيحًا**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(108) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee -: "Hadii qofkiin calooshiisa shay ka dareemo, oo uu ka shakiyo in wax ka yimaadeen iyo in kale, yaanu ka bixin masjidka ilaa uu maqlo cod ama uu ur dareemo. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey hadii qofka tukanaaya calooshiisa ka dareemo dhaqdhaqaaq oo uu kala garan waayo in wax ka yimaadeen iyo in kale, yaanu salaada ka bixin oo jarin si uu u soo wayso qaato, ilaa uu hubsado inuu jiro shay waysadiisii ka buriyey, taaso ah inuu maqlo neef codkeed ama uu uriyo neef, maxaa yeelay qofka huba waysada shaki kama buriyo, qofkuna wuu hubaa waysadiisii, shayga dhaqaajiyey ayaa shaki ah.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskani waa asal ka mida asalada Islaamka iyo qaacido ka mida qaacidooyinka fiqiga, waana: yaqiin shaki laguma suuliyo, asalkuna wuxuu baaqi ku ahaanayaa sidiisa ilaa la hubsado wax sidiisa ka duwan.
2. Shakigu ma saameeyo dahaarada, qofka tukanayaana dahaaradiisii ayuu qabaa ilaa uu hubsado inay burtay.

(65083)

(109) – عن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِذَا قَالَ الْمُؤَذِّنُ: اللهُ أَكْبَرُ اللهُ أَكْبَرُ، فَقَالَ أَحَدُكُمُ: اللهُ أَكْبَرُ اللهُ أَكْبَرُ، ثُمَّ قَالَ: أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، قَالَ: أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، ثُمَّ قَالَ: أَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللهِ، قَالَ: أَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللهِ، ثُمَّ قَالَ: حَيَّ عَلَى الصَّلَاةِ، قَالَ: لَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللهِ، ثُمَّ قَالَ: حَيَّ عَلَى الْفَلَاحِ، قَالَ: لَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللهِ، ثُمَّ قَالَ: اللهُ أَكْبَرُ اللهُ أَكْبَرُ، قَالَ: اللهُ أَكْبَرُ اللهُ أَكْبَرُ، ثُمَّ قَالَ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، قَالَ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ مِنْ قَلْبِهِ دَخَلَ الْجَنَّةَ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(109) – Cumar Binu Khadaab Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri Rasuuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Markuu dhoho mu'addinku: Allaahu akbar Allaahu akbar, ee midkiin dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar, haddana dhoho: Ashhadu allaa ilaaha illa llaah, uu ka daba dhoho: Ashhadu Allaa ilaaha illa llaah, haddana dhaho: Ashhadu Ana Maxamada rasuul Allaah, ee ka daba dhoho: Ashhadu ana Maxamada rasuul Allaah, haddana dhoho: xaya cala salaah, isna dhoho: laa xawla walaa quwata illaa billaah, hadana dhoho: xaya calal falaax, isna dhoho: laa xawla walaa quwata illaa billaah, haddana dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar, isna ka daba dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar, haddana dhoho: laa ilaaha illallaah, isna ka daba dhoho: laa ilaaha Illaa Allaah isagoy qalbiga ka tahay janaduu galayaa". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Aadaanku waa ogaysiin dadka la ogeysiinayo soo galida waqtiga salaada, erayada aadaanku waa erayo caqiidada rumaynta Ilaahay ku dhan yahay.

Xadiiskan Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku cadeyey inay sharci tahay qofku markuu aadaanka maqlo, in qofka maqlaya inuu yiraahdo sida mu`adinku leeyahay oo kale, oo hadii mu`adinku yiraahdo: "Allaahu akbar" qofka maqlaya wuxuu oran: " Allaahu akbar ", sidaasuu u wadayaa, markuu soo gaaro mu'addinku " xaya cala salaat ", xaya calal-falaax ", wuxuu oran qofka maqlayaa aadaanka: " laa xawla walaa quwata ilaa bilaah ".

Wuxuu kaloo cadeeyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in qofka ka daba dhaha mu'addinka erayada aadaanka isagoy qalbi iyo daacad ka tahay inuujanada galayo.

Macnaha Erayada aadaanku waa: " Allaahu akbar ": Ilaahay baa waxwalba ka wayn oo ka mudan.

" Ashhadu ilaa ilaaha ilaa Allaah ": ilaah xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn ma jiro.

"Ashhadu ana Maxamada Rasuulu Allaah ": waxaan markhaati ka ahay oo ka qirayaa carabkayga iyo qalbigayga inuu Maxamad yahay Rasuul Ilaahay casa wajala soo diray, in la adeecona ay waajib tahay.

"xaya cala salaat", u kaalaya salaada, hadalka qofka maqlaya aadaanka ee: "laa xawla walaa quwata ilaa billaah" waa: ma jirto xeelad gaara oo aanu kaga bixi karno wixii daacada naga hor joogsada, xoog iyo awoodna uma lihin aan shay ku samayno Ilaahay inuu nawaafahiyo mooyee.

"xaya calal-falaax", u kaalaya asbaabta liibaanta, taasoo ah in lagu guulaysto janada lagana bad-baadada naarta.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. fadli ayuu leeyahay in laga daba dhoho mu'addinka erayada uu oranayo marka laga reebo ''xaya cala salaat iyo xaya calal-

falaax'', taasoo uu oranayo ''laa xawla walaa quwata ilaa billaah''.

(65086)

(110) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بْنِ عَمْرِو بْنِ الْعَاصِ رضي الله عنهما أَنَّهُ سَمِعَ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «إِذَا سَمِعْتُمُ الْمُؤَذِّنَ فَقُولُوا مِثْلَ مَا يَقُولُ، ثُمَّ صَلُّوا عَلَيَّ، فَإِنَّهُ مَنْ صَلَّى عَلَيَّ صَلَاةً صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ بِهَا عَشْرًا، ثُمَّ سَلُوا اللهَ لِيَ الْوَسِيلَةَ، فَإِنَّهَا مَنْزِلَةٌ فِي الْجَنَّةِ، لَا تَنْبَغِي إِلَّا لِعَبْدٍ مِنْ عِبَادِ اللهِ، وَأَرْجُو أَنْ أَكُونَ أَنَا هُوَ، فَمَنْ سَأَلَ لِيَ الْوَسِيلَةَ حَلَّتْ لَهُ الشَّفَاعَةُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(110) – Cabdullaahi Binu Camar Binu Caas Allaha ka raali ahaade wuxuu ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Hadii aad maqashaan mu'adinka dhaha wuxuu dhahayo, anigana igu saliya, waayo qofka igu saliya hal mar Ilaahay ayaa toban jeer ku saliya, ka dibna ii waydiiya Ilaahay wasiila, wasiiladu waa darajo janada ku taal, oo aan ku haboonayn adoon ka mida adoomada Ilaahay mooyaane, waxaanan rajaynayaa inaan noqdo adoonkaas, qofka ii waydiiya wasiila waxaa gaaraya shafaacadayda". **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ummaddiisa ku booriyey qofka maqla mu'adinka salaada u adimaya inuu ka daba dhoho wuxuu leeyahay mu'adinku, marka laga reebo xay calataynka, labadaa wuxuu ka daba dhahayaa: laa xawla walaa quwata ilaa billaah, ka dib Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayuu ku saliyayaa marka aadaanku dhamaado, qofka hal mar ku saliya sababteeda Ilaahay wuxuu ugu saliyaa toban salaadood, salaada Ilaahay ku saliyaayo adoonkiisa macnaheedu waa in Ilaahay adoonka ku amaanayo malaa`igta agteeda.

Ka dib wuxuu faray Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in Ilaahay loo waydiiyo "wasiila", waana darajo janada ka mida, waana tan ugu saraysa, waana darajo aan ku haboonayn una qalmin hal adoon

oo adoomada Ilaahay ka mida mooyee, waxaanan Ilaahay ka rajaynayaa inaan noqdo adoonkaa, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sidaa u yiri waa tawaaduc, waayo hadii darajadaas sare hal qof mudan yahay, qofkaasi isaga maahee cid kale ma noqonaayo, waayo isagaa ugu fadli badan khalqiga.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka Ilaahay Nabiga uga barya "wasiilo" inuu halayo shafaacada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee .

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa in la ajiibo mu'adinka.
2. Nabiga in lagu saliyo fadli ayey leedahay mu`adinka marka la ajiibo ka dib.
3. Waxaa la isku boorinayaa in Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Ilaahay loo waydiiyo "wasiila" marka lagu saliyo isaga ka dib.
4. Wasiiladu waa darajo sare, oo adoon qura maahee cid kale u qalmin.
5. Waxaa la cadeeyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee fadligiisa waxaana lagu gaar yeelay darajadaas sare.
6. Qofka Ilaahay u waydiiya Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee "wasiila" shafaacadiisa ayuu helayaa.
7. Waxaa la cadeeyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee tawaaduciisa waayo wuxuu waydiistay ummaddiisu inay Ilaahay uga barido darajadaas sare, iyadoo darajaas isaga la siin doono.
8. Waa Ilaahay fadligiisa iyo naxariistiisa waasaca ah, oo halka xasano waxay u dhigantaa toban iyada la mida.

(65087)

(111) – عَنْ سَعْدِ بْنِ أَبِي وَقَّاصٍ رضي الله عنه عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُ قَالَ: «مَنْ قَالَ حِينَ يَسْمَعُ الْمُؤَذِّنَ أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ، رَضِيتُ بِاللهِ رَبًّا وَبِمُحَمَّدٍ رَسُولًا، وَبِالْإِسْلَامِ دِينًا، غُفِرَ لَهُ ذَنْبُهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(111) – Sacad Binu Abii Waqaas -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu yiri: {Qofka dhaha markuu maqlo mu'adinka: Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee oo uu kali yahay oo cid wax la wadaagta aysan jirin, Maxamedna uu yahay adoonkiisii iyo Rasuulkiisii, waxaan raali ka ahayn inaan Ilaahay Rabi ka dhigto oo Maxamed aan ka dhigto Rasuul oo aan Islaamkana ka dhigto diin, danbigiisa waa la dhaafaa} **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka dhaha marka uu maqlo mu'adinka: ( waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee oo uu kaligi yahay oo aan cidna wax la wadaagin) yacni: waxaan qirayaa oo ictiraafayaa oo sheegayaa in uusan jirin macbuud xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn, Ilaah walba oo aan Ilaahayna waa baadil. (Maxamedna uu yahay Adoonkii iyo Rasuulkii Ilaahay) yacni: inuu yahay Adoon aan la caabudin iyo Rasuul aan been sheegin. " Raali ayaan ka ahay inaan Ilaahay Rabi ka dhigto" yacni: Raali ayaan ka ahay Ilaahay Rabi nimadiisa, Ilaahnimadiisa, magacdiisa iyo sifooyinkiisa, ( Maxamedna aan ka dhigto Rasuul) yacni: waxaan rumaynayaa dhamaan wixii lala soo diray iyo inuu na soo gaarsiiyey, ( iyo Islaamka) yacni: waxaan rumaynayaa dhamaan axkaamta Islaamka oo ay ka mid tahay wixii la is faray iyo wixii la iska reebay. (Diinan) yacni: waan rumaynayaa waana u hogaansamayaa. ( Waa loo dhaafaa danbiigsa) yacni: waxaa laga dhaafayaa dambiyadiisa yar-yar.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ku cel-celinta ducadan marka aadaanka la maqlayo waxay ka mid tahay waxyaabaha dambiyada lagu dhaafo.

(6272)

(112) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: أَتَى النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ رَجُلٌ أَعْمَى، فَقَالَ: يَا رَسُولَ اللهِ، إِنَّهُ لَيْسَ لِي قَائِدٌ يَقُودُنِي إِلَى الْمَسْجِدِ، فَسَأَلَ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنْ يُرَخِّصَ لَهُ فَيُصَلِّيَ فِي بَيْتِهِ، فَرَخَّصَ لَهُ، فَلَمَّا وَلَّى دَعَاهُ، فَقَالَ: «هَلْ تَسْمَعُ النِّدَاءَ بِالصَّلَاةِ؟» فَقَالَ: نَعَمْ، قَالَ: «فَأَجِبْ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(112) – Abii Hurayra _Allaha ka raali noqde waxa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa u yimid nin indhoole ah, wuxuuna ku yidhi Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Rasuulka Ilaahayow, mahaysto qof masaajidka ii kaxeeya oo gacanta iqabta, wuxuuna waydiistay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu u ogolaado inuu gurigiisa salaadda ku tukado, waanu u ogolaaday Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, laakiin makuu ka dhaqaaqay ayuu u yeeray, wuxuuna ku yiri:( aadaanka salaadda ma maqashaa? wuxuu yiri: haa, wuxuu Rasuulku ku yiri: (ajiib ). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nin indhoole ah ayaa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee u yimi wuxuuna yiri: Rasuul Ilaahayow, ma halayo qof i caawiya oo gacanta i qabta oo ii kaxeeya masaajidka, salaadaha shanta ah, wuxuu rabay in Rasuulka u fasaxo inuusan jamacada imaan, wuuna u fasaxay, markuu ka dhaqaaqey ayuu u yeeray wuxuuna ku yiri: aadaanka salaadda ma maqashaa? wuxuu yiri: haa, wuxuu ku yiri: aadaanka salaadda ajiib.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Salaadda jamaacadu waa waajib, waayo rukhsada waxaa laga qaataa uun shay waajib ah.
2. Hadalka Nabiga scw ee ah (Ajiib dhawaqa) qofka maqalaya aadaanka wuxuu ku tusayaa inay waajib tahay salaadda jamaacada ahi, waayo amarka asalkiisu waa waajib.

(11287)

(113) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّهُ سَمِعَ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «أَرَأَيْتُمْ لَوْ أَنَّ نَهَرًا بِبَابِ أَحَدِكُمْ يَغْتَسِلُ فِيهِ كُلَّ يَوْمٍ خَمْسًا، مَا تَقُولُ ذَلِكَ يُبْقِي مِنْ دَرَنِهِ؟» قَالُوا: لَا يُبْقِي مِنْ دَرَنِهِ شَيْئًا، قَالَ: «فَذَلِكَ مِثْلُ الصَّلَوَاتِ الخَمْسِ، يَمْحُو اللَّهُ بِهِ الخَطَايَا». [صحيح] - [متفق عليه]

(113) – Abii Hureyra-Allaha ka raalli ahaadee- wuxuu ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Ka warama haddii wabi marayo albaabka midkiin, oo ku qubaysanayo maalin walba shan jeer, uskag maku harayaa qofkaa?" waxay dheheen: wax uskag ah kuma harayo qofkaa, wuxuu yiri: "sidaa waxaa la mid ah salaadaha shanta ah, oo Ilaahay dambiyaduu ku baabi'iyaa." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku matalay shanta salaadood ee habeenka iyo maalinta la tukado sida ay u baabi'iyaan dambiyada yar-yar sida wabi qul-qulaya al-baabka qof guri, oo uu ku qubaysanayo maalin walba shan jeer, qofkaas wax uskag ah ama wasakh ah kuma harayaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadligaasi wuxuu gaar ku yahay in lagu dhaafo danbiyada yar yar, Danbiyada waawaynse waa in laga towbad keeno.

2. Fadliga gudashada salaadaha shanta ah ee faralka iyo in la ilaaliyo shuruudeeda, arkaanteeda, waajibaadkeeda, sunanteeda waa mid wayn.

(4968)

(114) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بِن مَسْعُودٍ رضي الله عنه قَالَ: سَأَلْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: أَيُّ العَمَلِ أَحَبُّ إِلَى اللَّهِ؟ قَالَ: «**الصَّلاَةُ عَلَى وَقْتِهَا**»، قَالَ: ثُمَّ أَيٌّ؟ قَالَ: «**ثُمَّ بِرُّ الوَالِدَيْنِ**» قَالَ: ثُمَّ أَيٌّ؟ قَالَ: «**الجِهَادُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ**» قَالَ: حَدَّثَنِي بِهِنَّ، وَلَوِ اسْتَزَدْتُهُ لَزَادَنِي. [صحيح] - [متفق عليه]

(114) – Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee, wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: camalkee Ilaahay ugu jecel yahay? wuxuu yiri: "waa salaadoo waqtigeeda la tukado" wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: " labada waalid oo baari loo noqodo" wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: "jidka Ilaahay oo lagu jihaado" wuxuu yiri: intaasuu ii sheegee, hadaan kordhisan lahaa wuu ii kordhin lahaa. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa la waydiiyey camalkee Ilaahay ugu jecel yahay? waxuuna ku jawaabay: salaadda falarka ah oo waqtigeeda shareecadu xadeysey la tukado. Waxaa ku xiga, labada waalid oo loo baari noqdo loona samafalo, xaqoodan la guto, lagana daayo caasinimada. waxaa ku xiga, Jidka Ilaahay oo lagu jihaado, si kalmada Ilaahay ay u sarayso, iyadoo la difaacaayo Islaamka iyo dadkiisa, loona muujiyo shacaa`irta Islaamka, iyadoo loo hurayo nafta iyo maalkaba.

Cabdullaahi Binu Mascuud- Ilaahay ha ka raali ahaadee: wuxuu yiri: intaasuu ii sheegay-Rasuulku scw-, hadaan ku dhihilahaa: maxaa ku xiga? wuu ii siyaadin lahaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Camalku wuxuu ku kala fadli badan yahay sida uu Ilaahay u kala jecel yahay.
2. Muslimka waxaa lagu dhiiri gelinayaa inuu ku dadaalo camalba camalka uu kasii fadli badan yahay.
3. Jawaabaha Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu ka bixiyey camalka ugu fadli badan waxay u kala duwan yihiin waa sida uu dadku axwaashoodu u kala duwan tahay, iyo qof walba sida u roon oo dantu ugu jirto.

(3365)

(115) – عَنْ عُثْمَانَ رضي الله عنه قَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «مَا مِنَ امْرِئٍ مُسْلِمٍ تَحْضُرُهُ صَلَاةٌ مَكْتُوبَةٌ فَيُحْسِنُ وُضُوءَهَا وَخُشُوعَهَا وَرُكُوعَهَا، إِلَّا كَانَتْ كَفَّارَةً لِمَا قَبْلَهَا مِنَ الذُّنُوبِ، مَا لَمْ يُؤْتِ كَبِيرَةً، وَذَلِكَ الدَّهْرَ كُلَّهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(115) – Cusmaan Binu Cafaan -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Majiro qof muslim ah oo salaad faral ahi u soo gashay, oo wanaajiya waysadeeda, khushuuceeda, rukuuceeda, haduuse jiro waxaa loogu dhaafaa wixii dambi ahaa ee salaadaas ka horeeyey, hadaanu dambi wayn la imaan, arinkaasi waa sanadka oo dhan." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qof walba oo Muslim ah oo uu u soo galo waqtiga salaada wajibka ah oo hagaajiya waysadeeda oo dhamaystira, ka dib ku khushuuca salaadiisa isagoo qalbigiisa iyo xubnihiisa hor gaynaya Ilaahay iyo waynankiisa, isagoo dhamaystiraya camalka salaada sida rukuuca, sujuuda iyo qayrki, salaadaasi waxay noqonaysaa mid loogu danbi dhaafo wixii danbi yar ar ahaa ee salaadaas ka horeeyey, haduusan la

imaan danbi wayn oo ka mida danbiyada kabaa`irta, fadligaasi wuxuu jiraa waqti walba iyo salaad walba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Salaada lagu dhaafo dambiyada waa mida uu adoonku wanaajiyo waysadeeda, khushuucna ku tukado isagoo Ilaahay darti ula jeeda.
2. Fadli wayn baa ku jira joogtaynta cibaadada, waxayna sabab u tahay in lagu dhaafo danbiyada yaryar.
3. Fadli wayn baa ku jira wanaajinta waysada iyo wanaajinta salaada oo khushuuc lagu tukado.
4. Waxaa muhiim ah ka fogaanta dambiyada waawayn, si looga dhaafo adoonka dambiyada yar-yar.
5. Dambiyada waawayn laguma dhaafo towba keen waxaan ahayn.

(6254)

(116) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم كان يقول: «الصَّلَوَاتُ الْخَمْسُ، وَالْجُمُعَةُ إِلَى الْجُمُعَةِ، وَرَمَضَانُ إِلَى رَمَضَانَ، مُكَفِّرَاتٌ مَا بَيْنَهُنَّ إِذَا اجْتَنَبَ الْكَبَائِرَ».

[صحيح] - [رواه مسلم]

(116) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay inuu oran jiray: (Salaadaha shanta ah, iyo jimce ilaa jimcada kale, iyo ramadaan ilaa ramadaanka kale, waa lagu danbi dhaafaa inta u dhaxaysa hadii laga fogaado kabaa`irta). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in salaadaha shanta ah ee la isku farad yeelay maalinta iyo habeenka, iyo salaada jumcaha ee usbuucii mar ah, iyo soonka oo bisha ramadaan oo

sanadkii mar ah lagu dhaafo dambiyada yaryar waana shardi in laga fogaado dambiyada waa wayn. Dambiyada waawayn sida sinada iyo khamri cabida laguma dhaafo towbo maahee.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dambiyada waxaa ka mida kuwo yaryar iyo kuwo waawayn.
2. Dambiyada yaryar dhaafidooda waxaa u shardi ah in laga fogaado dambiyada waawayn.
3. Danbiyada waawayni waa dambiyada ay ku soo aroortay xad aduunka ah ama loogu goodiyey in aakhiro la cadaabayo, ama Ilaahay u caroonaya, ama ku soo aroortay hanjabaad ama la lacnadayo kan ficilka sameeyey sida sinada iyo khamri cabida.

(3591)

(117) – عن عمرو بن شُعيب عن أبيه عن جدِّه قال: قال رسولُ الله صلى الله عليه وسلم: «مُرُوا أولادكم بالصلاةِ وهم أبناءُ سبعِ سِنينَ، واضرِبوهم عليها وهم أبناءُ عَشرٍ، وفرِّقوا بينهم في المَضاجِعِ». [حسن] - [رواه أبو داود]

(117) – Camar Binu Shuceyb wuxuu Aabihii ka wariyey Aabihiina awowgi ka wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Fara caruurtiina salaadda markay gaaraan toddoba sano, kuna garaaca haday ka tagaan salaadda iyagoo toban jir ah, una kala duwa meesha ay seexanayaan." [Xadiis Xasan ah] - [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay waajib ku tahay Aabaha inuu amro caruurtiisa wiilal iyo gabdho salaadda, markay da'ada gaaraan toddoba sano, oo uu baro caruurta siday u takan lahaayeen. markay gaaraan toban sano wuxuu ugu darayaa, inuu ku garaaco hadday ka gaabiyaan salaada, waana in loo kala duwo firaashka ay ku seexanayaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waa in carruurta yar-yar la baro diinta intayna qaan gaarin, waxaana ugu muhiimsan salaada.
2. Garaaciddu waa edbinta, ee maaha ciqaab, waa in garaacidu noqotaa mid ku haboon xaalada caruurta.
3. shareecada islaamku way ilaalisay sharafka qofka, wayna xidhay waddo kastoo fasaad uga iman karo.

(5272)

(118) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللهُ عنه سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صلى الله عليه وسلم يَقُولُ: «قَالَ اللهُ تَعَالَى: قَسَمْتُ الصَّلَاةَ بَيْنِي وَبَيْنَ عَبْدِي نِصْفَيْنِ، وَلِعَبْدِي مَا سَأَلَ، فَإِذَا قَالَ الْعَبْدُ: {الْحَمْدُ لِلهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ}، قَالَ اللهُ تَعَالَى: حَمِدَنِي عَبْدِي، وَإِذَا قَالَ: {الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ}، قَالَ اللهُ تَعَالَى: أَثْنَى عَلَيَّ عَبْدِي، وَإِذَا قَالَ: {مَالِكِ يَوْمِ الدِّينِ}، قَالَ: مَجَّدَنِي عَبْدِي، -وَقَالَ مَرَّةً: فَوَّضَ إِلَيَّ عَبْدِي-، فَإِذَا قَالَ: {إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ}، قَالَ: هَذَا بَيْنِي وَبَيْنَ عَبْدِي وَلِعَبْدِي مَا سَأَلَ، فَإِذَا قَالَ: {اهْدِنَا الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ، صِرَاطَ الَّذِينَ أَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلَا الضَّالِّينَ}، قَالَ: هَذَا لِعَبْدِي وَلِعَبْدِي مَا سَأَلَ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(118) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu ka maqlay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: " Ilaahay sareeye wuxuu yiri: salaada waxaan u kala qaybiyey aniga iyo adoonkayga laba nus, adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay, hadii adoonku dhoho: {mahadi Rabiga caalamiinta ayey u sugnaatay}, Ilaahay sareeye wuxuu oran: adoonkaygaa iimahad naqay, haduu dhoho: {Allaha naxariista guud iyo tan gaarka leh}, Ilaahay sareeye wuxuu oran: adoonkaygaa i amaanay, haduu dhoho: {Allaha iska leh amarka maalinta qiyaamaha}, Ilaahay sareeye wuxuu oran: adoonkaygaa i sharfay,- marna wuxuu oran: adoonkaygaa taladiisa ii dhiibtay-, haduu dhoho: {kaligaa ayaan caabudaynaa, oo kaligaa ayaan kaalmaysanaynaa }, Ilaahay sareeye wuxuu oran: taasi Aniga iyo adoonkaygay noo dhaxaysaa, adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay, haduu dhoho: {nagu hanuuni jidka toosan, jidka kuwii aad u nicmaysay, hanana marin jidka kuwa aad u carootay iyo kuwa xaqa ka

lumay}, wuxuu Ilaahay sareeye oran: taasi Aniga iyo adoonkayga ayey naga dhaxaysaa, adoon kayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay: in Ilaahay sareeye ku yiri xadiis Alqudsiga: suurada faatixada ee salaada lagu akhriyo waxaan u kala qaybiyey aniga iyo adoonkayga labo nus, nus anigaa leh, nusna isagaa leh

Nuskeeda koobaad: waa mahadnaq, amaan iyo Ilaahay oo la sharfo, adoonkayga waxan ku abaal marin abaal marinta ugu khayr badan.

Nuskeeda labaad: waa is bihin bihin iyo baryo, waan ka ajiibin wuxuu i waydiistona waan siin.

Haduu dhoho qofka tukanaaya:{mahad oo shan waxay u sugnaatay Rabiga Caalamka }, Ilaahay wuxuu oran: wuu ii mahadnaqay adoonkaygu, haduu dhoho: {Allaha naxariista guud iyo tan gaarka ah leh}, Ilaahay wuxuu oran: wuu i amaanay adoonkaygu, waana i waynayey uuna ii qiray nicmooyinka aan ku galadaystay khalqigayga, haduu dhoho: {Allaha iska leh amarka maalinta qiyaamaha}, Ilaahay wuxuu oran: wuu i sharfay adoonkaygu, waana sharaf balaaran.

Haduu dhoho: {Alahayow, Adaan ku caabudaynaa oo ku kaalmaysanaynaa}, Ilaahay wuxuu oran: taasi waxay u dhaxaysa aniga iyo adoonkayga.

Nuska koowaad ee aayadu Ilaahay ayaa leh waana:(Adaan ku caabudaynaa), waana qirid Ilaahay loo qirayo Ilaahnimadiisa, iyo inuu ka ajiibay adoonka cibaadada, halkaasayna ku egtahay nuska Ilaahay leeyahay.

Nuska labaad ee aayada, ee adoonku leeyhay: (Adiga oo kaliya ayaan ku kaalmaysanaynaa), waana Ilaahay oo gargaar la waydiisto, iyo Ilaahay oo u balan qaaday inuu kaalmaynayo.

Haduu dhoho: {nagu hanuuni jidka toosan *, jidka ay mareen kuwaad u nicmaysay, ee aan ahayn kuwaad u carootay iyo kuwa xaqa ka lumay, Ilaahay wuxuu oran: taasi waa is bihin bihin iyo baryo

adoonkayga ka timid, adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay, waana ka ajiibay baryadiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Faatixada xaalkeedu waa wayn yahay Ilaahay wuxuu ku magacaabay (salaad).
2. Waxaa ku cad xadiiska in Ilaahay daryeelay adoonkiisa, amaanta Ilaahay uu amaanay adoonka wuxuu sabab uga dhigay in adoonku Ilaahay ku xamdiyey, amaanay, sharfay iyo inuu u balan qaadey inuu siinayo wuxuu waydiisto.
3. Suuradaan wayn waxay koobtay, Ilaahay mahadiisa, xuska qiyaamaha, baryada Ilaahay, in loo khaalis yeelo Ilaahay cibaadada, Ilaahay oo la waydiisto inuu ku hanuuniyo jidka toosan, iyo in laga digtoonaado jidka baadilka.
4. Qofka tukanaaya waa inuu dareemo xadiiskan -markuu faatixada akhrinaayo-waxaa kordhaya inuu salaada ku khushuuco.

(65099)

(119) – عن بريدة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ الْعَهْدَ الَّذِي بَيْنَنَا وَبَيْنَهُمُ الصَّلَاةُ، فَمَنْ تَرَكَهَا فَقَدْ كَفَرَ». [صحيح] - [رواه الترمذي والنسائي وابن ماجه وأحمد]

(119) – Burayda Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Balanta u dhaxaysa inaga iyo iyaga waa salaada, qofka ka tagaana wuu gaaloobay". **[Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey tirmidi,nasaa.i,ibn maajah,Axmad]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in balanta iyo heshiiska u dhaxaysa muslimiinta, gaalada iyo

munaafiqiinta uu yahay salaadda, qofka salaadda ka tagaana uu gaaloobay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waynida xaalka salaada, waayo iyadaa kala saarta muuminka iyo gaalka.
2. Axkaanta Islaamka waxaa qofka loogu sugaa wixii ka muuqda qofka xaalkiisa kore ee uurkiisa lama eegayo.

(65094)

(120) – عن جابرٍ رضي الله عنه قال: سمعت النبي صلى الله عليه وسلم يقول: «إِنَّ بَيْنَ الرَّجُلِ وَبَيْنَ الشِّرْكِ وَالْكُفْرِ تَرْكَ الصَّلَاةِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(120) – Jaabir Binu Cabdullaahi Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Ninka iyo shirkiga iyo gaalnimada waxaa u dhexeeya salaada oo uu ka tago". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digay in laga tago salaada faralka ah, wuxuuna sheegay in ninku ku dhoco shari iyo kufri ay ka xigto inuu salaada ka tago, salaadu waa tiirka labaad ee tiirarka islaamka, maqaamkeeduna wuu ku wayn yahay islaamka, qofka iskaga taga isagoo inkirsan waajib ahaanteeda muslimiintu way isku raacsan yihiin inuu gaaloobay, qofka uga taga salaada wahsi iyo fudaydsi wuu gaaloobay, inay asaxaabtu sidaa isku raacday baana la soo wariyey, haduu waqtiyada qaarna tukanaayo qaarna iska daynayana wuxuu khatar ugu jiraa goodigaas adag.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Salaadu ahmiyad ayey leedahay in la ilaaliyaana waa muhiim, waxayna kala saaraysaa kufriga iyo iimaanka.

2. Digniin adag ayaa ku soo aroortay ka tagida salaada iyo dayiceeda.

(65093)

(121) – عن سالم بن أبي الجَعْدِ قال: قال رجل: ليتني صَلَّيتُ فاسترحْتُ، فكأنّهم عابُوا ذلك عليه، فقال: سمعتُ رسولَ الله صلى الله عليه وسلم يقول: «يا بلالُ، أقِمِ الصَّلاةَ، أرِحْنا بها».
[صحيح] - [رواه أبو داود]

(121) – Saalim Binu Abii Jacdi Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: nin ayaa yiri: shalaytadaydee maan tukado oo aan nasto, waaba iyadoo aad moodid inay arinkaa ku ceebeeyeen, wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw waxaan maqlay isagoo dhahaya: "Bilaalow, salaada aqiim oo noogu raaxee". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

## Sharraxaad:

Nin asaxaabta ka mid ahaa ayaa yiri: shalaytadaydee maan tukado oo aan raaxaysto, dadkii la fadhiyey ayaa arinkaa ku ceebeeyey, wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan ka maqlay isagoo dhahaya: Bilaalow! kor u qaad aadaanka oo salaada aqim, si aan ugu raaxaysano, taasina waa waxa ku jira salaada ee ah Ilaahay la sheekaysigiisa iyo raaxada ruuxda iyo qalbiga.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Raaxada qalbigu salaaday ku jirtaa, waayo waxaa ku jira salaada Ilaahay la sheekaysigiisa.
2. Waa in lagu inkiro qofka cibaadada ka caga jiida.
3. Qofka guta waajibka saaran, ee masuuliyada saaran ka soo baxa, wuxuu helayaa oo uu dareemayaa raaxo iyo xasilooni.

(65095)

(122) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، إِذَا كَبَّرَ فِي الصَّلَاةِ، سَكَتَ هُنَيَّةً قَبْلَ أَنْ يَقْرَأَ، فَقُلْتُ: يَا رَسُولَ اللهِ بِأَبِي أَنْتَ وَأُمِّي أَرَأَيْتَ سُكُوتَكَ بَيْنَ التَّكْبِيرِ وَالْقِرَاءَةِ، مَا تَقُولُ؟ قَالَ «**أَقُولُ: اللهُمَّ بَاعِدْ بَيْنِي وَبَيْنَ خَطَايَايَ كَمَا بَاعَدْتَ بَيْنَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ، اللهُمَّ نَقِّنِي مِنْ خَطَايَايَ كَمَا يُنَقَّى الثَّوْبُ الْأَبْيَضُ مِنَ الدَّنَسِ، اللهُمَّ اغْسِلْنِي مِنْ خَطَايَايَ بِالثَّلْجِ وَالْمَاءِ وَالْبَرَدِ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(122) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu salaada xirto in yar ayuu aamusi jiray, intaanu akhrinta bilaabin, waxaan ku iri Rasuulkii Ilaahayow, aabahay iyo hooyadayba lagugu furaye iiga waran aamuskaaga u dhexeeya xirashada salaada iyo akhrinta, maxaad tiraahdaa? wuxuu yiri: "waxaan dhahaa: Allahayow kala fogee aniga iyo dambiyadayda sidaad u kala fogaysay bari iyo galbeed, Allahayow dambiyadayda iga daahiri sida marada cad looga nadiifiyo wasakhda, Allahayow igaga dhaq dambiyadayda baraf, biyo iyo biyo qabow". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu salaada xirto wuu yara aamusi jiray intaanu faatixada akhrin, wuxuuna salaadiisa ku bilaabi jiray qaar ka mida ducooyinka, waxaa ka mida ducooyinka ku soo arooray oraahdiisii: "Allahayow, nakala fogee aniga iyo dambiyadayda, sidaad u kala fogaysay bari iyo galbeed, Allahayow iiga nadiifi dambiyadayda sida marada cad looga nadiifiyo wasakhda, Allahayow igaga dhaq dambiyadayda biyo, baraf iyo biyo qabow", Wuxuu Ilaahay ka baryayaa inuu kala dheereeyo isaga iyo dambiyadiisa, si aanu ugu dhicin, oo uu ka fogeeyo fogaan aanay wada kulmin, sida bari iyo galbeed aanay waligood u kumayn, haduu dambi ku dhocona Ilaahay uga nadiifiyo sida marada cad looga nadiifiyo wasakhda, oo uu dambiga ka dhaqo oo ka qaboojiyo ololkiisa iyo

kulaylkiisa, oo uu uga dahiro kuwaan wax lagu dahiro ee qabow, oo ah biyo, baraf iyo biyo qabow.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waana la siraystaa ducada salaada lagu bilaabo xataa haday tahay salaada jahriyada ah, sida Maqribka iyo Cishaha.
2. Asxaabta Nabigu scw waxay ku dadaali jireen inay arimahiisa oo dhan ogaadaan, dhaqdhaqaaqiisa iyo daganaantiisaba.
3. Qaabab kale oo ducada salaada lagu bilaabo ah ayaa soo arooray, sida ugu fadliga badana waa inuu qofku ducooyinka soo arooray ee Nabiga scw ka sugan midba mar la yimaado.

(3104)

(123) – عَن ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما: أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يَرْفَعُ يَدَيْهِ حَذْوَ مَنْكِبَيْهِ إِذَا افْتَتَحَ الصَّلاَةَ، وَإِذَا كَبَّرَ لِلرُّكُوعِ، وَإِذَا رَفَعَ رَأْسَهُ مِنَ الرُّكُوعِ، رَفَعَهُمَا كَذَلِكَ أَيْضًا، وَقَالَ: «سَمِعَ اللَّهُ لِمَنْ حَمِدَهُ، رَبَّنَا وَلَكَ الحَمْدُ»، وَكَانَ لاَ يَفْعَلُ ذَلِكَ فِي السُّجُودِ. [صحيح] - [متفق عليه]

(123) – Cabdulaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye- Waxaa laga wariyey: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu kor u qaadi jiray gacmihiisa ilaa meel ku aadan garbihiisa markuu salaada xiranaayo, iyo haduu rukuuca u takbiirsado, iyo haduu madaxiisa kor uga soo qaadayo rukuuca, sidaas oo kale ayuu gacmihiisa kor ugu qaadi jirey, wuxuuna dhahaayey: "Ilaahay wuu maqlaa qofkii ku xamdiya, Rabiyow aday mahadi kuu sugnaatay", sidaana kuma samayn jirin sujuuda. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa inuu saddex meelood oo salaada ka mida gacmihiisa kor

u qaado ilaa meel la siman garabka garabkuna waa meesha ay isugu yimaadaan lafta garabka iyo cududu.

meesha 1aad: waa markuu salaada xiranaayo.

meesha 2aad: markuu rukuucda u takbiirsanaayo.

meesha 3aad: waa markuu rukuucda ka tooso, ee uu dhahayo: Ilaahay wuu maqlaa qofka ku xamdiya, Rabigayow aday mahadi kuu sugnaatay.

Mana ahayn mid gacmihiisa kor u qaada markuu sujuuda bilaabayo, iyo markuu ka soo kacayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xikmada ku jira in gacmaha kor loo qaadayo salaada dhexdeeda waa inay qurux u tahay salaada Ilaahayna ay u tahay waynayn isagaa nusqaan ka hufane.
2. Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- waxaa ka sugnaaday inuu gacmihiisa kor u qaadi jiray meel afaraad, sida ku soo aroortay riwaayada Abii Xamiid Asaacidi oo uu ka soo wariyey Abii Daa'uud iyo qayrkiba, waana marka laga kacayo ataxyaadka koobaad ee salaadaha saddexda rakco iyo afarta rakco ah.
3. Waxaa kaloo ka sugnaaday Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee  inuu gacmaha gaarsiin jiray meel ku toosan dhagihiisa isagoon taabsiinayn, sida ku soo aroortay riwaayada Maalik Binu Xuweyris ee ku sugan saxiixeynka: "Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaan jiray haduu takbiirsanayo gacmihiisa ayuu kor u qaadi jiray ilaa uu la simo dhagahiisa".
4. Jamcinta samica Allahuda iyo Taxmiidu waxay u gaar tahay imaamka iyo qofka keligi tukanaaya, laakiin ma'muumku wuxuu dhahayaa Rabanaa walakal xamdu.

5. Oraahda: "Rabanaa walakal-xamdu" oo la dhoho rukuucda ka dib Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu uga sugnaaday afar qaab, tani waa mid ka mida, sida ugu fadliga badana waa inuu qofku raac raaco qaababkaas oo midba mar la yimaado.

(3095)

(124) – عَنْ عُبَادَةَ بْنِ الصَّامِتِ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «لَا صَلَاةَ لِمَنْ لَمْ يَقْرَأْ بِفَاتِحَةِ الكِتَابِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(124) – Cubaada Binu Saamit-Allaha ka raalli ahaadee-wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: ((Salaadi kama ansixin qofka aan Akhrin suuradda faatixada)) waa qofka aan imaam ku xirnayn, qofka imaamka ku xirtay oo waqti uu faatixada ku akhriyo ka gaari waayey ma khuseeyo xaddiisku. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay salaadi ansaxayn faatixada la'aanteed, waayo waa rukni ka mida arkaanta salaadda rakcad walba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Faatixada akhrinteeda wax kale kama gudi karaan qofka isagoo awooda inuu akhriyo iyada.
2. Waa ka buraysaa rakcadda uusan faatixada ku Akhrin qofkii kas u sameeya ama kii aan ogayn ama illawsan, waayo waa rukni Arkaantana sina looma dhaafikaro.
3. Faatixada akhrinteedu way ka dhacaysaa qofku hadduu imaamka ku soo gaaro rukuuca.

(5378)

(125) – عن أَبي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه: أنه كَانَ يُكَبِّرُ فِي كُلِّ صَلَاةٍ مِنَ الْمَكْتُوبَةِ وَغَيْرِهَا، فِي رَمَضَانَ وَغَيْرِهِ، فَيُكَبِّرُ حِينَ يَقُومُ، ثُمَّ يُكَبِّرُ حِينَ يَرْكَعُ، ثُمَّ يَقُولُ: سَمِعَ اللهُ لِمَنْ حَمِدَهُ، ثُمَّ يَقُولُ: رَبَّنَا وَلَكَ الْحَمْدُ، قَبْلَ أَنْ يَسْجُدَ، ثُمَّ يَقُولُ: اللهُ أَكْبَرُ حِينَ يَهْوِي سَاجِدًا، ثُمَّ يُكَبِّرُ حِينَ يَرْفَعُ رَأْسَهُ مِنَ السُّجُودِ، ثُمَّ يُكَبِّرُ حِينَ يَسْجُدُ، ثُمَّ يُكَبِّرُ حِينَ يَرْفَعُ رَأْسَهُ مِنَ السُّجُودِ، ثُمَّ يُكَبِّرُ حِينَ يَقُومُ مِنَ الْجُلُوسِ فِي الِاثْنَتَيْنِ، وَيَفْعَلُ ذَلِكَ فِي كُلِّ رَكْعَةٍ، حَتَّى يَفْرُغَ مِنَ الصَّلَاةِ، ثُمَّ يَقُولُ حِينَ يَنْصَرِفُ: وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ، إِنِّي لَأَقْرَبُكُمْ شَبَهًا بِصَلَاةِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، إِنْ كَانَتْ هَذِهِ لَصَلَاتَهُ حَتَّى فَارَقَ الدُّنْيَا. [صحيح] - [متفق عليه]

(125) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade, wuxuu yiri: Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee salaad walba wuu takbiirsan jiray tan faralka ah iyo tan sunahaba, ramadaanka iyo qayrkiba, wuuna takbiirsan jiray markuu kacayo, markuu rukuucayo, wuxuuna dhihi jiray: samica Allahu liman xamidah, ka dib wuxuu dhihi jiray: rabanaa walakal xamdu, intuuna sujuudin, ka dibna wuxuu dhihi jiray: Allahu akbar, markuu u sii hoobanayo sujuuda, ka dib wuu takbiirsan jiray markuu madaxiisa sujuuda ka oo qaadayo, ka dib wuu takbiirsan jiray markuu fadhiga rakcada labaad ka kacayo, sidaasuu ku samaynayey rakcad walba, ilaa uu salaada dhameeyo, wuxuu yiri-abuu Muusa-markuu tagayey: Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee salaadaydaa u ekaansho badan salaadii Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee salaaddiisuna sidaas ayey ahayd ilaa uu aduunka ka tagay. **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Abuu Hurayra waxuu wariyey-Allaha ka raalli ahaadee-qeyb ka mida sifooyinkii/qaabkii salaadda Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxuuna ka warramay inuu Nabigu markuu salaadda isku taago takbiiratul-ixraamka ku bilaabi, haddana uu takbiiran jiray markuu rukuucayo, markuu sujuudayo, markuu sujuudda ka toosayo,

markuu sujuudda labaad sujuudayo, markuu kasoo toosayo sujuudda labaad, markuu ka kacayo fadhiga labada rakcadood ee hore, salaadaha maqribka iyo kuwa afarlayda ah, sidaabuuna samayn jiray salaadda oo dhan, ilaa uu gudanaayo salaadda, marka uu rukuucda ka toosayana waxuu dhihi jiray: samicallahu liman xamidah (Alle wuu maqlaa midka ku xamdiya, haddana waxuu dhahayey isagoo taagan: Rabbanaa lakal-xamdu (Rabbigayoow aday mahadi kuu sugnaatay).

Ka dib wuxuu oronayey Abuu Hureyra markuu salaada ka baxay: Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, salaadaydaa ugu ekaansho badan salaadii Rasuulka scw sidaa ayey ahayd sifada salaaddiisu ilaa uu dunida ka tagay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la takbiirsan markastoo hoos loo dhaadhacayo ama kor loo soo kacayo marka laga reebo ka soo kicida rukuuca oo uu oronaayo: samica Allaahu liman xamidah.
2. Asaxaabtu waxay ku dadaalayeen ku dayashada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyo ilaalinta sunadiisa.

(65098)

(126) – عن ابنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنهما عن النبيِّ صلى الله عليه وسلم قال: «أُمِرْتُ أَنْ أَسْجُدَ عَلَى سَبْعَةِ أَعْظُمٍ: عَلَى الْجَبْهَةِ وَأَشَارَ بِيَدِهِ عَلَى أَنْفِهِ، وَالْيَدَيْنِ، وَالرُّكْبَتَيْنِ، وَأَطْرَافِ الْقَدَمَيْنِ، وَلَا نَكْفِتَ الثِّيَابَ وَالشَّعَرَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(126) – Ibnu Cabaas-Allaha ka raali ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Waxaa la i faray inaan ka sujuudo todoba lafood: wajiga, wuxuuna gacantiisa ku ishaaray sankiisa, gacmihiisa, labada law, faraha lugaha, oo aanaan aruurin celcelinna dharka iyo timaha ". **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu Ilaahay amray markuu tukanaayo inuu ka sujuudo todoba xubnood oo jirka ka mida, waxayna yihiin:

Tan 1aad: wajiga: waana balaca wajiga ee sanka iyo indhaha ka sareeya. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku ishaaray gacantiisa sankiisa, isagoo cadaynaaya wajiga iyo sanku inay hal xubin oo todobada ka mida yihiin, wuxuuna xoojinayaa in qofka sujuudsani sankiisa dhulka taabsiiyo.

xubinka 2aad iyo 3aad: waa labada gacmood.

xubinka 4aad iyo 5aad: waa labada law.

xubinka 6aad iyo 7aad: waa faraha labada lugood.

Rasuulku wuxuuna amray in aynaan xirin timaheena, ama aanaan aruurin dharkeena markaan dhulka ku sujuudayno anagoo ilaalinayna dharka, balse aan sii dayno ilaa ay dhulka ku dhacdo oo xubnaha la sujuudno.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib in todobadaa xubnood in laga sujuudo marka la tukanaayo.
2. Waa karaahiyo in la aruuriyo ama la celceliyo marada iyo timaha marka la tukanaayo.
3. waxaa ku waajib ah qofka tukanaaya inuu ku xasilo salaadiisa, taasoo ah inuu xubnaha sujuuda ee todobada ah dhulka dhigo, kuna xasilo ilaa uu digriga sujuuda la imaanayo.
4. Nahyiga ku soo arooray in timaha la celceliyo wuxuu gaar ku yahay Raga, waayo Dumarka waxaa la faray salaada inay is asturaan.

(10925)

(127) – عن جَرِيْرِ بنِ عبدِ الله رضي الله عنه قال: كُنَّا عِنْدَ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فَنَظَرَ إِلَى الْقَمَرِ لَيْلَةً -يَعْنِي الْبَدْرَ- فَقَالَ: «**إِنَّكُمْ سَتَرَوْنَ رَبَّكُمْ كَمَا تَرَوْنَ هَذَا الْقَمَرَ، لَا تُضَامُونَ فِي رُؤْيَتِهِ، فَإِنِ اسْتَطَعْتُمْ أَنْ لَا تُغْلَبُوا عَلَى صَلَاةٍ قَبْلَ طُلُوعِ الشَّمْسِ وَقَبْلَ غُرُوبِهَا فَافْعَلُوا**» ثُمَّ قَرَأَ: «**{وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ قَبْلَ طُلُوعِ الشَّمْسِ وَقَبْلَ الْغُرُوبِ}**» [صحيح] - [متفق عليه]

(127) – Jariir Binu Cabdullaahi-Allaha ka raali ahaadee -wuxuu yiri: Anagoo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee la joogna ayuu fiiriyey dayaxa-habeen uu ahaa 14-, wuxuuna yiri: " waxaad u arki doontaan Rabigiin sidaad dayaxan u arkaysaan, idinkoon isku ciriirinayn aragtida Ilaahay, hadaad awoodaan inaad ilaalisaan salaada inta qoraxda aanay soo bixin iyo inta aanay dhicin sameeya" ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu akhriyey aayadan Qur'aanka ah: {ku tasbiixso xamdiga Rabigaa intaan qoraxdu soo bixin iyo inta aanay dhicin}. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Asaxaabtu habeen ayey la joogeen Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuuna eegay dayaxa oo ahaa habeenka 14aad- wuxuuna yiri: Muuminiintu Rabigood waxay ku arkidoonaan indhahooda si dhab ah, isagoon cidna shabihin, dadkuna iskuma ciriiryayaan aragtidiisa, kuna dhicimaayo daal iyo mashaqo midna marka ay Ilaahay arkayaan. Ka dibna Rasuulku -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: hadaad kartaan inaad iska joojisaan asbaabta idin dhaafinaysa salaada fajarka iyo salaada casarka sameeya, oo la imaada labadaas salaadood waqtigooda iyagoo kaamila oo jamaaco aad la tukateen, arintaasi waxay ka mid tahay asbaabta keenta in Ilaahay casa wajala wajigiisa la arko. Ka dib wuxuu akhriyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee aayadaan: {Ku tasbiixso xamdiga rabigaa qooraxdu inta aanay soobixin iyo inta aanay dhicin}.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dadka iimaanka leh waxaa loogu bishaaraynayaa inay Ilaahay ku arkidoonaan janada.
2. Qaababka loo gudbiyo dacwada Ilaahay waxaa ka mida: adkaynta, jeclaysiinta iyo in tusaale la soo gaato.

(5657)

(128) – عن أَبِي مُوسَى الأَشْعَرِيِّ رضي الله عنه: أَنَّ رَسُولَ اللهِ صلى الله عليه وسلم قَالَ: «مَنْ صَلَّى الْبَرْدَيْنِ دَخَلَ الْجَنَّةَ» [صحيح] - [متفق عليه]

(128) – Abuu Muusa Alashcari-Allaha ka raali ahaadee- Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Qofka tukada labada salaadood ee qabaw janaduu galayaaa." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Wuxuu Nabigu ku booriyey dadku inay ku dadaalaan salaada labada qabaw ee ah salaada fajarka iyo casarka, wuxuuna ugu bishaareeyey qofka labadaa salaadood xaqooda ula yimaada ee ilaaliya waqtigooda, jamaacana ku tukada, waxay sabab ugu noqdaan janada galideeda.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiska waxaa ku cad fadliga salaada fajarka iyo casarka, waayo fajarku waa waqtiga hurdadu ugu macaan tahay, casarkuna wuxuu ku beegan yahay waqti dadku ku mashquul yahay shaqadiisa, qofka labadaa salaadood ilaaliya waa hubaal inuu kuwa kalana ilaalinaayo.
2. Salaada fajarka iyo casarka waxaa lagu magacaabay labada qabaw, waayo salaada subax waxaa jooga qabawga habeenka, salaada casarna waxaa jooga qabowga maalintii inkasta oo ay

tahay waqti kulul waxayse ka qabowdahay waqtigii ka horeeyey ama waxaa loogu magacaabay in magacu qaalib ka noqday sida loo yiraahdo qoraxda iyo dayaxa: Alqamaraan.

(4198)

(129) – عن جُندب بن عبد الله القَسْري رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ صَلَّى صَلَاةَ الصُّبْحِ فَهُوَ فِي ذِمَّةِ اللهِ، فَلَا يَطْلُبَنَّكُمُ اللهُ مِنْ ذِمَّتِهِ بِشَيْءٍ، فَإِنَّهُ مَنْ يَطْلُبْهُ مِنْ ذِمَّتِهِ بِشَيْءٍ يُدْرِكْهُ، ثُمَّ يَكُبَّهُ عَلَى وَجْهِهِ فِي نَارِ جَهَنَّمَ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(129) – Jundub Binu Cabdulaahi Alqusari Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: "Qofka tukada salaada subaxa Ilaahay magantiisuu ku jiraa, ee yaanu Ilaahay idinka dalbin shay ka mida magantiisa, maayo qofkii Ilaahay magantiisa shay ka mida uu ka dalbo wuu qabanayaa, ka dibna wuxuu wajiguu ugu tuurayaa naarta jahanama. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka tukada salaada subxa inuu ku jiro Ilaahay xifdigiisa, ilaalintiisa, waardiyihiisa, difaacidiisa iyo u gargaaridiisa.

Ka dib Nabigu wuxuu ka digay in la jabiyo oo laga boxo balankaa, taasoo ah in qofku ka tago salaada subaxa, ama qof tukaday salaadii subax uu dhib u gaysto, qofkii sidaa sameeya wuxuu buriyey balantii, wuxuuna mutaystay goodiga adag, iyado Ilaahay ku ciqaabidoono danbiga uu ku dhacay, qofkii Ilaahay ka dalbo magantiisa wuu qabanayaa ka dibna wuxuu wajiga ugu tuurayaa naarta.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la cadeeyey muhimada salaada fajarka iyo fadligeedaba.

2. Digniin adag ayaa loo diray qofka dhibaato u gaysta dadka salaada subaxa tukaday.
3. Ilaahay ayaa ka aara kuwa dhibaateeya adoomadiisa saalixiinta ah.

(5435)

(130) – عن بريدة بن الحصيب رضي الله عنه أنه قال: بَكِّرُوا بِصَلَاةِ الْعَصْرِ، فَإِنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «مَنْ تَرَكَ صَلَاةَ الْعَصْرِ فَقَدْ حَبِطَ عَمَلُهُ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(130) – Buraydata Binu-xuseyn-Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: U dhakhsada salaadda casar, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: ( qofka ka taga salaada casar camalkiisu wuu buray). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digay in salaada casar waqtigeeda dib looga dhigo, si bareer ah qofka sidaa sameeyana camalkiisu wuu buraayo oo wax kasoo qaad ma leh.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa laysku boorinayaa in salaada casar lagu ilaaliyo waqtigeeda hore, loona degdego arintkaa.
2. Goodi adag ayaa loo jeediyey qofka oo ka taga salaada casar, waqtigeeda oo ka tagana wuxuu ka dambi wayn yahay salaadaha kale oo waqtigoodu tago, waana salaadda Alwusdaa ee si gaara loogu amarka hadalka Ilaahay yiri: (ilaaliya salaadaha iyo salaada Alwudaa) [ Al baqara238].

(6261)

(131) – عن أنس بن مالك رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ نَسِيَ صَلَاةً فَلْيُصَلِّ إِذَا ذَكَرَهَا، لَا كَفَّارَةَ لَهَا إِلَّا ذَلِكَ: {وَأَقِمِ الصَّلاةَ لِذِكْرِي} [طه: 14]». [صحيح] - [متفق عليه]

(131) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Qofka salaad ilaawa ha tukado markuu xasuusto, kafaaro gud kale malaha oo intaa ahayn: {salaada u oog xuskayga} [suuratu Daaha:14]" [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey qofka ilaawa salaad faral ah ee waqtigeedii baxay, waxaa ku waajib ah inuu u deg-dego qalaynteeda marka uu xasuusto, dambiga ka tagida salaada laga dhaafimaayo oo Ilaahay ma asturayo in muslimku uu tukado markuu xasuusto maahee, Ilaahay ayaa kitaabkiisa ku yiri: {salaada u oog xuskayga dartii} [suuratu: daaha:14], oog oo tuko salaada aad ilawdo markaad xasuusato.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la cadeeyey ahmiyada salaada iyo inaan la fududaysan gudashadeeda iyo qalaynteeda.
2. Ma banaano in salaada laga dib dhigo waqtigeeda, cudur daar la'aan.
3. Waa waajib inuu qaleeyo qofka ilaawa salaada markuu xasuusto, kan hurdaana markuu tooso.
4. Salaada in durba la qaleeyo waa waajib haba ahaato waqtiyada salaada la reebaye.

(65088)

(132) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ أَثْقَلَ صَلَاةٍ عَلَى الْمُنَافِقِينَ صَلَاةُ الْعِشَاءِ وَصَلَاةُ الْفَجْرِ، وَلَوْ يَعْلَمُونَ مَا فِيهِمَا لَأَتَوْهُمَا وَلَوْ حَبْوًا، وَلَقَدْ هَمَمْتُ أَنْ آمُرَ بِالصَّلَاةِ فَتُقَامَ، ثُمَّ آمُرَ رَجُلًا فَيُصَلِّيَ بِالنَّاسِ، ثُمَّ أَنْطَلِقَ مَعِي بِرِجَالٍ مَعَهُمْ حُزَمٌ مِنْ حَطَبٍ إِلَى قَوْمٍ لَا يَشْهَدُونَ الصَّلَاةَ، فَأُحَرِّقَ عَلَيْهِمْ بُيُوتَهُمْ بِالنَّارِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(132) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Salaadaha ugu culus munaafiqiinta waa labada salaadood ee cishaha iyo subaxa, hadayse ogaan lahaayeen waxa ku jira ee fadligooda ah waxay ku imaan lahaayeen gurguurasho, waxaan ku hamiyey in salaada la aqiimo oo aan nin jamaca tujiya aan u diro, aniguna intaan kaxaysto rag xirmooyin xaabo ah sita oo aan aadno qolada aan salaada imaanin oo aanu dab ku soo gubno guryahooda. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in munaafiqiinta iyo ka caga jiidkooda iyo karahsigooda salaadaha, gaar ahaana labada salaadood ee cishaha iyo subaxa, haday ogaan lahaayeen ajarka iyo fadliga ku jira salaadahaa oo jamac lagu tukado way imaan lahaayeen xataa sida caruurta gur-guurad ay gacmaha iyo jilbaha ha ku yimaadeene.

Nabigu wuxuu go'aan saday inuu amro in salaadda la aqiimo, oo nin dadka ka mida imaam noqdo oo dadka tujiyo, isaguna intuu kaxaysto kuwo xaabo sida oo ay aadaan raga aan salaada jamaca imaanayn oo uu guryahooda dab ku soo gubo, waayo waxay sameeyeen ee dambi ah awgeed laakiin muuna samayn, dadka guryaha jooga ee dumar, caruur aan dambi lahayn, iyo dad ka loo cudur-daarle dambina aan lahayn dartood ayuuna sidaa u samayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Khatarta ay leedahay salaadda jamaacada ee masaajidka oo laga haro.
2. Munaafiqiintu u gama jeedaan cibaadadooda is tus iyo magac ku raadin mooyaane, sidaa darteed iman maayaan salaadda waqtiga uu dadku arkayo mooyee.
3. Fadliga labada salaadood ee cishaa'iga iyo subaxa oo jamaca lala tukado, waxayna mudan yihiin in la soo xaadiro -jamaca masaajidka- gur-guurashaba ha lagu yimaadee.
4. Ilaalinta salaadda cishe iyo tan subaxa waxaa ku jira ka badbaadida munaafiqnimada, ka maqnaan shahooduna waa astaamaha munaafiqiinta.

(3366)

(133) – عَنِ ابْنِ أَبِي أَوْفَى رضي الله عنه قَالَ: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا رَفَعَ ظَهْرَهُ مِنَ الرُّكُوعِ قَالَ: «سَمِعَ اللهُ لِمَنْ حَمِدَهُ، اللَّهُمَّ رَبَّنَا لَكَ الْحَمْدُ، مِلْءَ السَّمَاوَاتِ وَمِلْءَ الْأَرْضِ وَمِلْءَ مَا شِئْتَ مِنْ شَيْءٍ بَعْدُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(133) – Ibni Abii Awfaa Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa haduu dhabarkiisa ka soo toosiyo rukuuca, wuxuu dhihi jiray: "samica Allaahu liman xamidah, Allaahuma Rabanaa lakal-xamdu, mila'asamaawaati wa mila'al ardi wamila'a maa shi'ita min shay'in bacdahu." Ilaahay wuu maqlaa qofka u mahad naqa, Allahayow Rabigayow adaa mahad leh, intay samadu qaado, intuu dhulku qaado iyo muga waxaad adigu doonto oo dhan intaa ka dib". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Waxa uu ahaa Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee marka uu ka tooso rukuucda salaadda mid dhaha: "Alle wuu maqlaa midka ku xamdiya ee u mahad naqa", oo macneheedu yahay: qofka Alle u mahad

naqa Allena wuu aqbalaa mahad naqiisa wuuna ka ajar siiyaa, haddana Alle ayuu u mahad naqayey isagoo dhahaya: "Allahayoow Rabbigayoow aday mahadi kuu sugnaatay, inta samada iyo dhulku qaadaan, iyo intaa in kabadan oo waxaad doonto ah waxay qaadi karaan oo mahad ah aday kuu sugnaatay", mahad naq buuxiya samooyinka iyo dhulalka iyo inta u dhaxaysa, iyo waxa kale ee Illaahey doono mahad naq buuxiya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa cadayn waxa sunada ah ee uu oranaayo qofka tukanaya markuu rukuuca madaxiisa kor uga soo qaadayo.
2. Waa sharci in lala yimaado ictidaalka iyo dumaaniinada marka laga soo tooso rukuuca, waayo suura gal maaha in adkaartaas la dhoho in lala yimaado ictidaal iyo dumaaniino mooyee.
3. Adkaartaasi waa sharci in la akhriyo dhamaan salaadaha oo dhan, faral iyo sunaba.

(65101)

(134) – عن حُذَيْفَةَ رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يَقُولُ بَيْنَ السَّجْدَتَيْنِ: «رَبِّ اغْفِرْ لِي، رَبِّ اغْفِرْ لِي». [صحيح] - [رواه أبو داود والنسائي وابن ماجه وأحمد]

(134) – Xudayfa Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhihi jiray labada sujuudood dhexdooda:"Rabiyow ii dambi dhaaf, Rabigayow ii dambi dhaaf ". [Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey Abuu daawuud,nasaa.i,ibn maajah,Axmad]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhihi jiray markuu fariisto labada sujuudood dhexdooda: Rabiyow ii dambi dhaaf, Rabiyow ii dambi dhaaf" wuuna ku cel-celin jiray.

Macnaha ii dambi dhaaf waa: baryada adoonku uu kaga baryayo Rabigii inuu ka masaxo oo ka dhaafo dambiyadiisa, ceebihiisana asturo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa sharci in la akhristo ducadan labada sujuudood dhexdooda, salaadaha faralka ah iyo kuwa sunahaba.
2. Waa suno in lagu celceliyo: Rabiyow ii dambi dhaaf, inta waajibka ahina waa hal mar.

(65104)

(135) – عن ابن عباس رضي الله عنهما: كان النبي صلى الله عليه وسلم يقول بين السجدتين: «اللَّهمَّ اغْفِرْ لي، وارْحَمْني، وعافِني، واهْدِني، وارزقْني». [حسن بشواهده] - [رواه أبو داود والترمذي وابن ماجه وأحمد]

(135) – Ibnu Cabbaas Allah ka raali ahaado isagiyo Aabihiibee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu oran jirey inta u dhaxaysa labada sujuudood: (Allahayow ii dambi dhaaf, iina naxariiso, oo icaafi ina hanuuni, oo i irsaaq). [Xadiis Xasan ah marka la eego u Marag kaca kale ee soo arooray] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At􀀀Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku ducaysan jiray inta u dhaxaysa labad sujuudood ducooyinkan shanta ah ee muslimku si wayn ugu baahan yahay iyado ay ku jirto khayrka aduunyada iyo kan aakhiraba, sida dambi dhaaf waydiisasho, dambi asturka iyo cafintiisa, raxmad balaaran, in laga caafimaado shubuhaatka, shahawaatka, cudurada iyo bugtaanta, iyo in Ilaahay la waydiisto ku hanuunida xaqa, iyo ku sug naashihiisa, iyo in Ilaahay ku arsaaqo iimaan, cilmi, camal saalixa, iyo maal xalaal ah oo wanaagsan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ducadaasi waa sharci in la akhriyo fadhiga labada sujuudood u dhexeeya.
2. Ducooyinkani waa qaar aad u fadli badan waxa ku jira khayrka aduun iyo kan aakhiraba.

(10930)

(136) – عَنْ حِطَّانَ بْنِ عَبْدِ اللهِ الرَّقَاشِيِّ قَالَ: صَلَّيْتُ مَعَ أَبِي مُوسَى الْأَشْعَرِيِّ صَلَاةً، فَلَمَّا كَانَ عِنْدَ الْقَعْدَةِ قَالَ رَجُلٌ مِنَ الْقَوْمِ: أُقِرَّتِ الصَّلَاةُ بِالْبِرِّ وَالزَّكَاةِ، قَالَ: فَلَمَّا قَضَى أَبُو مُوسَى الصَّلَاةَ وَسَلَّمَ انْصَرَفَ فَقَالَ: أَيُّكُمُ الْقَائِلُ كَلِمَةَ كَذَا وَكَذَا؟ قَالَ: فَأَرَمَّ الْقَوْمُ، ثُمَّ قَالَ: أَيُّكُمُ الْقَائِلُ كَلِمَةَ كَذَا وَكَذَا؟ فَأَرَمَّ الْقَوْمُ، فَقَالَ: لَعَلَّكَ يَا حِطَّانُ قُلْتَهَا؟ قَالَ: مَا قُلْتُهَا، وَلَقَدْ رَهِبْتُ أَنْ تَبْكَعَنِي بِهَا، فَقَالَ رَجُلٌ مِنَ الْقَوْمِ: أَنَا قُلْتُهَا، وَلَمْ أُرِدْ بِهَا إِلَّا الْخَيْرَ، فَقَالَ أَبُو مُوسَى: أَمَا تَعْلَمُونَ كَيْفَ تَقُولُونَ فِي صَلَاتِكُمْ؟ إِنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خَطَبَنَا فَبَيَّنَ لَنَا سُنَّتَنَا وَعَلَّمَنَا صَلَاتَنَا، فَقَالَ: «إِذَا صَلَّيْتُمْ فَأَقِيمُوا صُفُوفَكُمْ، ثُمَّ لِيَؤُمَّكُمْ أَحَدُكُمْ فَإِذَا كَبَّرَ فَكَبِّرُوا، وَإِذْ قَالَ: {غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلا الضَّالِّينَ} [الفاتحة: 7]، فَقُولُوا: آمِينَ، يُجِبْكُمُ اللهُ، فَإِذَا كَبَّرَ وَرَكَعَ فَكَبِّرُوا وَارْكَعُوا، فَإِنَّ الْإِمَامَ يَرْكَعُ قَبْلَكُمْ، وَيَرْفَعُ قَبْلَكُمْ»، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «فَتِلْكَ بِتِلْكَ، وَإِذَا قَالَ: سَمِعَ اللهُ لِمَنْ حَمِدَهُ، فَقُولُوا: اللَّهُمَّ رَبَّنَا لَكَ الْحَمْدُ، يَسْمَعِ اللهُ لَكُمْ، فَإِنَّ اللهَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى قَالَ عَلَى لِسَانِ نَبِيِّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: سَمِعَ اللهُ لِمَنْ حَمِدَهُ، وَإِذَا كَبَّرَ وَسَجَدَ فَكَبِّرُوا وَاسْجُدُوا، فَإِنَّ الْإِمَامَ يَسْجُدُ قَبْلَكُمْ وَيَرْفَعُ قَبْلَكُمْ»، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «فَتِلْكَ بِتِلْكَ، وَإِذَا كَانَ عِنْدَ الْقَعْدَةِ فَلْيَكُنْ مِنْ أَوَّلِ قَوْلِ أَحَدِكُمْ: التَّحِيَّاتُ الطَّيِّبَاتُ الصَّلَوَاتُ لِلهِ، السَّلَامُ عَلَيْكَ أَيُّهَا النَّبِيُّ وَرَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُهُ، السَّلَامُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللهِ الصَّالِحِينَ، أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(136) – Xidaan Binu Cabdullaahi Alraqaashi waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan la tukaday Abii Muusa Alashcari, markuu joogo fariisiga ayuu nin dadka ka mid ahaa yiri: salaada waxaa lagu xiriiriyey Biriga iyo Sakada-: markuu Abuu Muuse salaadii ka baxay wuu soo jeensaday, wuxuuna yiri: kiineebaa sidaa iyo sidaa yiri?, dadkii way wada aamuseen, hadana wuu ku celiyey, kiineebaa sidaa iyo sidaa yiri?, dadkii ayaa hadana wada aamusay, wuxuu yiri: waxaa laga yaabaa inaad adigu tiri Xadaanow?, wuxuu yiri: maan dhihin, waxaan ka baqay inaad eraygaa igu garaacdo, nin dadka ka mida ayaa yiri: anaa iri, khayr uun baanan ula jeeday, Abuu Muusaa ayaa yiri: miyeydaan aqoon waxa aad oranaysaan markaad tukanaysaan? Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu noo khudbeeyey wuuna noo cadeeyey sunadeena, wuuna nabaray salaadeena, oo wuxuu yiri: "Markaad tukanaysaan safafkiina toosiya, ka dibna midkiin imaam ha idiin noqdo, haduu takbiirsado takbiirsada, markuu dhoho:{Allahayow namari jidka toosan ee aan ahayn kan ay mareen kuwaad u carootay iyo kuwa xaqa ka lumay} [al faatixa:7], idinkuna aamiin dhaha, Ilaahay ayaa idin ajiibayee, haduu takbiirsado ee rukuuco idinkuna takbiirsada oo rukuuca, imaamku wuu idinka hor takbiirsan wuuna idinka hor rukuucine", wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee "tani taasay u ahaatay, markuu dhoho: samica Allaahu liman xamidah, idinkuna dhaha: Allahuma rabanaa lakal-xamdu, Ilaahay wuu idin maqliye, Ilaahay Isagaa koreeyee wuxuu ku yiri Nabigiisa nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee carabkiisa "samica Allah liman xamidah" hadii uu takbiirsado oo uu sujuudo takbiirsada oo sujuuda imaamku waa idinka hor sujuudin oo idinka soo hor toosine Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: tani taasay u ahaatay, hadii la soo gaaro fariisiga wax ugu horeeya ee qofkiin oranayo ha ahaado Ataxiyaatu Adayibaatu Aslawaatu lilaah, Asalaamu calaykum Ayuha Nabiyu wa raxmatu Allah wa barkatuhu, asalaamu calaynaa, wa calaa cibaadi Allahi saalixiin, Ashhadu alaa Ilaaha Ilaa

Allaah, wa Ashhadu ana Maxamed cabduhu wa Rasuuluh. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Asaxaabta waxaa tujiyey Abu Muusa Alashcari Allaha ka raali ahaade, markuu soo gaaray fadhiga lagu ataxiyaadsado, nin dadka la tukanaayey ayaa gadaashiisa ka yiri: Quraanku wuxuu salaada la xiriiriyey Biriga iyo Sakada, markii abu Muusa ka baxay salaadii ayuu xagga dadka u soo jeestay oo yiri: kumaa yiri hadalka: Quraanku wuxuu la xiriiriyey salaada Biriga iyo Sakada?! dadkii waa aamuseen, oo qofna ma hadalin, mar labaad ayuu ku celiyey su'aashii, markuu qofna u jawaabi waayey ayuu yiri abu Muusa: malaha adaa yiri Xadaanow! dhiiranidiisa iyo u dhawaantiisa ayuu sidaa ugu yiri iyo Qaraabanimadooda, taasoo aan dhib ku jirin haduu ku tuhmo, iyo inuu qirto kii hadalka yiri, Xadaana wuu iska leexiyey hadalka, wuxuuna yiri: waxaan ka baqay inaad igu canaanato adoo aniga ii malaynaya, markaasuu nin dadka ka mid ahaa yiri: anaa iri, waxaan khayr ahayna ulama jeedin, abu Muusaa wuxuu yiri: isagoo baraya ninkaa: miyeydaan aqoon waxaad oronaysaan markaad tukanaysaan?!, waana hadal uu ku diidanaa in sidaa la dhoho marka la tukanaayo, Abu Muusa wuxuu u sheegay in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee mar u khudbeeyey, una cadeeyey shareecadooda, salaadoodna baray, oo uu yiri:

Markaad salaada ukacdaan toosiya sufuufta salaada, salaadana hatukiyo dadka mid ka mid ahi, markuu imaamku takbiirsado (salaadda xidho) sidiisa u takbiirsada, markuu faatixada akhriyo ee uu gaadh

{غير المغضوب عليهم ولا الضالين}

[al-faatixa:7], dhaha: Aamiin, markaad samaysaan sidaa Alle wuu aqbali ducadiina, markuu takbiirsado ee uu rukuuco idinkuna takbiirsada oo rukuuca, imaamku hortiin buu rukuucaa hortiinna wuu kasoo toosaaye, waxna hakala hormarina imaamka, waayo waqtiga yaree uu idinkala horeeyo imaamku rukuucda wuxuu kabayaa ka

dambaynta aad kala dambay naysaan rukuucda, waqti yar, waqtigaa yareed ka dambay naysaan waxaa buuxinaya waqtigaa yaree uu idin kala horaynayo, wuxuuna ahaanayaa qaddarka rukuucdiinnu mid la mid ah qaddarka rukuucdiisa, markuu imaamku dhoho: samicallaahu liman xamidah (Alle wuu maqlaa kuwa ku xamdiya), dhaha: Allaahumma Rabbanaa lakal xamdu (Allahayow Rabiyow aday mahadi kuu sugnaatay), markay dadku dhahaan sidaa, Illaahey isagaa nusqaan ka hufane, wuumaqlaa ducadooda, iyo hadalkooga, Illaahey Isagaa nusqaan ka hufane wuxuu ku yidhi carrabka nabigiisa muxammad ah-naxariis iyo nabadi korkiiye-: wuu maqlaa Illaahey midka ku xamdiya, hadana markuu imaamku takbiirsado ee uu sujuudo, waxaa ku waajib ah kuwa ku xidhan ee la tukanaaya inay takbiirtaan oy sujuudaan, waayo imaamku hortoodbuu sujuudayaa, hortoodna wuu kasoo toosayaa sujuudda, qaddarkaa yareed kala dambaysaan waxaa buuxinaya qaddarkaa uu idinkala horreeyo, wuxuuna ahaanayaa qaddarka sujuudda ee ma'amuumka imaamkiisa ku xidhan mid le'eg qaddarka uu imaamku sujuudo, marka uu fadhiga ataxiyaadka soo gaadho ha ahaado hadalka ugu horreeya uu dhahayo: "Ataxiyaatu-saalaamo-Addayibaato-wanaagyo-salaado Illaahey bay u sugnaadeen" mulki iyo boqornimo, jiritaan iyo baaqinnimo, waynaan iyo deeqsi nimo, dhamaan teed Alle keligii ayaa xaq u yeeshay, sidaasoo kale salaadaha shanta ahina Illaahey keligii ayaa xaq u yeeshay, "Asalaamu calayka ayuha Nabiyo waraxmatu llaah wabara kaatuh, asalaamu calaynaa wacalaa cibaadillaahi saalixiina", Illaahey barya isagaa ceeb oo dhan iyo nusqaan iyo fasahaadba ka hufane, Nabiga Muxammad ahna waxaan u gaar yeelaynaa salaan iyo nabad gelyo, haddana waxaan salaamaynaa addoomada Ilaahay ee saalixiinta ah, ee ku taagan waxa uu Alle ku waajibiyey ee xuquuqda Ilaahay iyo kuwa addoomadiisaba, waxaan qiraynaa inaanu jirin ilaah xaq lagu caabudo oon Alle wayne ahayn, Nabi Maxamedna yahay Adoonkiisa iyo Rasuulkiisa uu khalqiga usoo diray.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa qaababka loo ataxiyaadsado mid ka mid ah.
2. Salaada ficilkeeda iyo waxa la akhrinaayo waa inuu yahay wax Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka sugnaaday mana banaana in qof iska samaysto hadal iyo ficil aan sunaha ku sugnayn.
3. Ma banaana in laga hormaro imaamka waana in laga danbeeyo, waxaa sharci ah in ma`muumku uu ku raaco imaamka ficilkiisa.
4. Waxaa la sheegay in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu ahmiyad siin jiray gaarsinta diinta iyo inuu ummaddisa baro axkaanta diinta.
5. Imaamku waa kan uu ku dayanayo ma'muumku, uma banaan inuu imaamka kala hor maro ficilada salaada ama uu la socdo iyo inuu ka dib dhoco imaamka, balse waa inuu bilaabaa raacida imaamka marka uu hubsado inuu galay ficilka uu doonayo inuu sameeyo, sunaduna waa inuu imaamka ku raaco ficilka.
6. Waa sharci in salaada sufuufteeda lasimo.

(65097)

(137) – عَنِ ابْنَ مَسْعُودٍ رضي الله عنه قَالَ: عَلَّمَنِي رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، وَكَفِّي بَيْنَ كَفَّيْهِ، التَّشَهُّدَ، كَمَا يُعَلِّمُنِي السُّورَةَ مِنَ القُرْآنِ: «**التَّحِيَّاتُ لِلَّهِ، وَالصَّلَوَاتُ وَالطَّيِّبَاتُ، السَّلاَمُ عَلَيْكَ أَيُّهَا النَّبِيُّ وَرَحْمَةُ اللَّهِ وَبَرَكَاتُهُ، السَّلاَمُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللَّهِ الصَّالِحِينَ، أَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ**».

وفي لفظ لهما: «**إِنَّ اللهَ هُوَ السَّلَامُ، فَإِذَا قَعَدَ أَحَدُكُمْ فِي الصَّلَاةِ فَلْيَقُلْ: التَّحِيَّاتُ لِلَّهِ وَالصَّلَوَاتُ وَالطَّيِّبَاتُ السَّلَامُ عَلَيْكَ أَيُّهَا النَّبِيُّ وَرَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُهُ، السَّلَامُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللهِ الصَّالِحِينَ، فَإِذَا قَالَهَا أَصَابَتْ كُلَّ عَبْدٍ لِلَّهِ صَالِحٍ فِي السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ، أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ، ثُمَّ يَتَخَيَّرُ مِنَ الْمَسْأَلَةِ مَا شَاءَ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(137) – Cabdullaahi Binu Mascuud -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyadoo calaacashadu ay saaran tahay labdiisa calaacalood ayuu i baray Ataxiyaadka, sida uu ii barayey suurada qur'aanka ah, "ataxiyaatu (salaamo), lilaahi (Ilaahay ayey u sugnaadeen),wa salawaatu (salaado), adayibaatu (wanaagyo), asalaamu calayka (nabadi korkaaga ha ahaato), ayuha nabiyu, (nabiyahaw), wa raxmatu Allaahi wa barakaatuh, (iyo naxariista Ilaahay iyo barakooyinkiisu), asalaamu calaynaa, wa calaa cibaadi Allaahi saalixiina (nabadi korkayaga ha ahaato anaga iyo adoomada Ilaahay ee saalixiinta ah), Ashhadu allaa ilaaha Ilaa Allaah, (waxaan qirayaa inaanu jirin ilaah aan Allaah wayne ahayn, wa ashhadu ana Maxamad rasuulu Allaah,(waxaan qirayaa inuu Maxamadna yahay adoonkiisa iyo rasuulkii Ilaahay soo diray)). Ruwaayad kale oo labadoodu wariyeen waxay ahayd: "Ilaahay isagaa salaam ah, hadii midkiin u fariisto salaada ha dhoho: "Ataxiyaatu lilaah, wa salawaatu wa dayibaatu asalaamu calayka ayuha nabiyo wa raxmatu Allaah wa barakaatuh, asalaamu calaynaa wa calaa cibaadi Allaahi saalixiina, marka uu dhoho intaa way gaaraysaa ducadaasi adoon kasta oo saalix ah oo ku sugan samada iyo dhulkaba, waxaan qirayaa inaanu jirin ilaah xaq lagu cibaado oo aan Ilaahay ahayn, waxa kale oo aan qirayaa inuu Maxamadna yahay adoon Ilaahay iyo rasuulkiisa, intaa ka dib ducada waxa uu doonuu ku ducaysanayaa." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu baray Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali noqdee- ataxiyaadka salaada la akhriyo, isagoo gacanta ganta u saaray, si uu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Ibnu Mascuud u soo jeediyo sida marka uu suurad qur'aanka ah barayo oo kala, arinkaasina wuxuu ina tusayaa dadaalka uu Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-ku bixinayey Ataxiyaadka Eray ahaan iyo macno ahaanba. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku yiri: " Ataxiyaatu lilaah": waana hadal iyo ficil kasta oo tusaya wayni iyo qadarin, dhamaanteedna Ilaahay casa wajala ayaa xaq u leh. " Asalawaatu": waana salaada la yaqaan, faralakeeda iyo sunaheeduba Ilaahay ayey u sugnaatay. " Adayibaatu" waa hadalada iyo ficilada iyo sifooyinka wanaagsan ee tusaya kaamilnimada dhamaanteedna Ilaahay ayey u sugnaatay. " Asalaamu calayka ayuha Nabiyu wa raxmatu Allaahi wa barakaatuh ": Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa loogu ducaynayaa in Ilaahay ka nabadgeliyo aafo iyo wax xun oo dhan uuna u siyaadiyo una badiyo khayr oo dhan. " Asalaamu calaynaa wa calaa cibaadi Allaahi saalixiina": Waa duco nabad loogu ducaynayo qofka tukanaya iyo Adoon kasta oo saalix ah oo ku sugan samada ama dhulka. "Ash hadu allaa ilaaha Ilaa Allaah": Waxaan qirayaa qiritaan ga'aan inaanu jirin macbuud xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn. " Wa ana Maxamadan cabduhu wa-Rasuuluh': Nabi Maxamed waxaan u qirayaa adoonimo iyo Risaalada khatimada ah.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dib wuxuu ku booriyey qofka tukanaaya inuu ducaduu doono ku ducaysto.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Booska Ataxiyaatku waa fadhiga ka danbeeya sujuuda u danbaysa salaad walba, iyo rakcada labaad ka dib salaadaha sadexda rakco ah iyo kuwa afarta racko ahba.

2. Ataxiyaadku waa waajib in lala yimaado, waxaana banaan in qofku ku ataxiyaadsado Ereyada ataxiyaadka ku soo arooray ee Nabiga scw ka sugnaaday kii uu doono.
3. Waa banaan tahay in salaada dhexdeeda lagu ducaysto hadaanu wax dambi ah ahayn.
4. Waxaa suna ah ducada inuu qofku naftiisa ka bilaabo.

(3096)

(138) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ: كَانَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَدْعُو وَيَقُولُ: «اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ عَذَابِ القَبْرِ، وَمِنْ عَذَابِ النَّارِ، وَمِنْ فِتْنَةِ المَحْيَا وَالمَمَاتِ، وَمِنْ فِتْنَةِ المَسِيحِ الدَّجَّالِ».

وفِي لَفْظٍ لِمُسْلِمٍ: «إِذَا فَرَغَ أَحَدُكُمْ مِنَ التَّشَهُّدِ الْآخِرِ، فَلْيَتَعَوَّذْ بِاللهِ مِنْ أَرْبَعٍ: مِنْ عَذَابِ جَهَنَّمَ، وَمِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ، وَمِنْ فِتْنَةِ الْمَحْيَا وَالْمَمَاتِ، وَمِنْ شَرِّ الْمَسِيحِ الدَّجَّالِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(138) – Abii Hurayra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Wuxuu ahaa Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee mid ku ducaysta oo dhaha: "Allahayow waxaan kaa magan galayaa cadaabta qabriga, iyo cadaabta naarta, fitnada nolosha iyo dhimashada, iyo fitnada masiixu dajaal." hadalkale oo muslim leeyahay wuxuu ahaa: "markuu midkiin dhamaysto ataxiyaadka u dambeeya, Ilaahay ha ka magan galo afar: cadaabta jahanama, cadaabta qabriga, fitnada nolosha iyo dhimashada, iyo sharka masiixu dajaal." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa mid Ilaahay ka magan gala afar, ataxiyaadka u dambeeya ka dib, iyo salaama naqsiga ka hor, wuxuuna nafaray inaan Ilaahay ka magan galno afartaa,

Tan 1aad: cadaabta qabriga.

Tan 2aad: cadaabta naarta ee maalinta qiyaamaha.

Tan 3aad: fitnada nolosha, ee ah shahawaatka aduunyada ee xaaraanta ah iyo shubuhaadka lagu lumo iyo fitnada dhimashada, waa marka sakaraadku jiro, oo islaamnimada ama sunada uu ka leexdo, fitnada qabriga sida su'aasha labada malag.

Tan 4aad: fitnada masiixu dajaal ka soo bixidoona aakhiru samaanka, Ilaahayna adoomadiisa ku imtixaamayo, wuxuuna sigaar ah ugu xusay fitmadiisa oo aad u wayn iyo dadka oo uu baadiyeynaayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Magan galkaani waa waxa ugu muhimsan ducada wax badana soo hoos galayaan, waayo waxaa soo galaya in laga magan galo sharka Aduunka iyo Aakhiraba.
2. Waa sugan yahay cadaabul qabrigu waana xaq.
3. Fitantu waa khatar waana muhiim in Ilaahay la kaalmaysto oo lana baryo si looga nabad galo.
4. Way sugan tahay soo bixida Dajaal fitnadiisuna waa wayn tahay.
5. waxaa suna ah ducadan in la akhristo ataxiyaadka u dambeeya ka dib.
6. camalka saalixa ah ka dib ducadu waa suno

(3103)

(139) – عَنْ مَعْدَانَ بْنِ أَبِي طَلْحَةَ الْيَعْمَرِيُّ قَالَ: لَقِيتُ ثَوْبَانَ مَوْلَى رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فَقُلْتُ: أَخْبِرْنِي بِعَمَلٍ أَعْمَلُهُ يُدْخِلُنِي اللهُ بِهِ الْجَنَّةَ؟ أَوْ قَالَ قُلْتُ: بِأَحَبِّ الْأَعْمَالِ إِلَى اللهِ، فَسَكَتَ. ثُمَّ سَأَلْتُهُ فَسَكَتَ. ثُمَّ سَأَلْتُهُ الثَّالِثَةَ فَقَالَ: سَأَلْتُ عَنْ ذَلِكَ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فَقَالَ: «**عَلَيْكَ بِكَثْرَةِ السُّجُودِ لِلَّهِ، فَإِنَّكَ لَا تَسْجُدُ لِلَّهِ سَجْدَةً، إِلَّا رَفَعَكَ اللهُ بِهَا دَرَجَةً، وَحَطَّ عَنْكَ بِهَا خَطِيئَةً**» قَالَ مَعْدَانُ: ثُمَّ لَقِيتُ أَبَا الدَّرْدَاءِ فَسَأَلْتُهُ فَقَالَ لِي: مِثْلَ مَا قَالَ لِي: ثَوْبَانُ. [صحيح] - [رواه مسلم]

(139) – Macdaan Binu Abii Dalxa Alyacmari -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Waxaan la kulmay Thowbaan oo ah mawlihii (adeegihii) Rasuulka (kii Nabigu xoreeyey), waxaan ku iri: ii sheeg camal aan falo oo Ilaahay janada igu geliyo? ama wuxuu yiri: waxaan ku iri: camalka Ilaahay ugu jecel yahay, wuu aamusay. hadana waan weydiiyey wuu aamusay. mar saddexaad baan weydiiyey wuxuuna yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan weydiiyey su'aashaa, wuxuuna yiri: "Ilaahay darti sujuuda u badi, sujuud kasta oo aad Ilaahay u sujuudid darajo ayuu kor kuugu qaadin dambina wuu kaaga dhaafin" wuxuu yiri Macdaan: hadana waxaan la kulmay Abu dardaa waxaana weydiyey -su'aashaas- wuxuuna igu yiri: sidii Thowbaan ii sheegay oo kale. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa la weydiiyey camal sabab u noqonaya galitaanka janada, ama camalka Ilaahay ugu jecel yahay?

Wuxuu ku yiri nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ninkii su'aasha weydiiyey: joogtee inaad badsato sujuuda salaada dhexdeeda, sujuud kasta oo aad Ilaahay u sujuudid darajo ayuu kor kuugu qaadin, dambina wuu kaaga dhaafin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofka muslimka waxaa lagu boorinayaa inuu ku dadaalo salaada faral iyo sunaba, sujuuda ku jirta awgeed.
2. Xadiiska waxaa ku cad fahamka asaxaabta iyo inay cilmi u lahaayeen inaan janada lagu helayn -naxariista Ilaahay ka dib- hadii aan la camal falan.
3. Sujuudu waa asbaabta ugu wayn ee darajada kor loogu qaado, dambiyadana lagu dhaafo.

(3732)

(140) – عن عَائِشَةَ رضيَ الله عنها قالت: إِنِّي سمعْتُ رسولَ الله صلى الله عليه وسلم يقول: «**لَا صَلَاةَ بِحَضْرَةِ الطَّعَامِ، وَلَا هُوَ يُدَافِعُهُ الْأَخْبَثَانِ**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(140) – Caa'isha Allaha ka raali ahaade waxay tiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay inuu yiri: (Salaad lama tukan karo hadii cunto la soo dhigo iyo hadii qofku labada nijaaso isku celinaaya). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in salaad la tukado hadii cunto la soo dhigay, taasoo nafta qofka tukanayaa ay rabto oo uu qalbiga ku hayo.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu kaloo uu reebey inuusan tukan karin qofka isku celinaaya labada najaaso oo ah kaadida iyo saxarada, waayo wuxuu mashquul ku yahay inuu dhib isku celiyo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la gudboon qofka tukanaya inuu iska fogeeyo wax kastoo salaadda ka mashquulinaya intaanu galin salaadda.

(3088)

(141) – عن عُثْمَانَ بْنَ أَبِي الْعَاصِ رضي الله عنه: أنه أَتَى النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالَ: يَا رَسُولَ اللهِ، إِنَّ الشَّيْطَانَ قَدْ حَالَ بَيْنِي وَبَيْنَ صَلَاتِي وَقِرَاءَتِي يَلْبِسُهَا عَلَيَّ، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**ذَاكَ شَيْطَانٌ يُقَالُ لَهُ خِنْزَبٌ، فَإِذَا أَحْسَسْتَهُ فَتَعَوَّذْ بِاللهِ مِنْهُ، وَاتْفُلْ عَلَى يَسَارِكَ ثَلَاثًا**»، قَالَ: فَفَعَلْتُ ذَلِكَ فَأَذْهَبَهُ اللهُ عَنِّي. [صحيح] - [رواه مسلم]

(141) – Cusmaan Binu Abil Caas Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayuu u yimid oo ku yiri: Rasuulka Ilaahayow, shaydaan ayaa nakala dhex galay aniga iyo salaadayda iyo akhriskayga, isaga oo i khal-khalinaaya, wuxuu ku yiri Rasuulku "kaasi waa shaydaan la dhoho: khinsab, markaad dareento ka cuudu billayso, xaga bidixna saddex jeer candhuuf u tuf", wuxuu yiri: sidaasaan sameeyey Ilaahay ayaana iga kaxeeyey. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Cusmaan Binu Abil Caas Allaha ka raali ahaade ayaa u yimid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuuna yiri: Rasuulka Ilaahyow, shaydaan ayaa kala xiray aniga iyo salaadayda, wuxuuna ii diiday inaan ku khushuuco, akhriskaygana wuu iga khal-khaliyey, shakina wuu iga galiyey. Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku yiri: kaasi waa shaydaan la dhoho: khinsab, haduu kuu yimaado eed dareentid Ilaahay ka hoos gal, oo ka acuudu bilayso, xaga bidixdaadna saddex jeer candhuuf yar u tuf, Cusmaan ayaa yiri: waxaan sameeyey sidaa Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ii sheegay, ilaahayna wuu iga kexeeyey.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa muhiim khushuuca iyo qalbiga oo la soo xaadiriyo salaada dhexdeeda, shaydaankuna wuxuu ku dadaalaa inuu was-waas iyo shaki ku furo qofka tukanaaya.
2. Waa suno in laga acuudu billaysto shaydaanka markuu salaada was-waas ku furo, iyo in candhuuf saddex jeer loo tufo xaga bidix.
3. Waa cadayn asaxaabtu inay ahaayeen kuwo u la noqda Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee mushkilad kastoo la soo darista, si uu u la xaliyo.

4. Asaxaabta qalbigoodu wuxuu ahaa mid nool, hamigooduna wuxuu aakho uun.

(65105)

(142) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «أَسْوَأُ النَّاسِ سَرَقَةً الَّذِي يَسْرِقُ صَلَاتَهُ» قَالَ: وَكَيْفَ يَسْرِقُ صَلَاتَهُ؟ قال: «لَا يُتِمُّ رُكُوعَهَا، وَلَا سُجُودَهَا». [صحيح] - [رواه ابن حبان]

(142) – Abii Hureyra Allaha ka raali noqde wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri: "Dadka waxaa u  tuugo xun midka salaadiisa xadaya" wuxuu yiri: sidee ayuu u xadin salaadiisa? wuxuu yiri: "waa mid aan dhamays tirayn rukuuceeda iyo sujuudeeda". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Ibnu Xibbaan]

## Sharraxaad:

Nabigu wuxuu caddeyey-naxariis iyo nabadi korkiiye-dadka midka ugu tuuganimo xuni inuu yahay midka salaadiisa xada, waayo ka maal aanu laheyn xadaa waxaa dhici kara inuu adduunka intifaacsado, laakiin kan salaaddiisa xadaya xaqii naftiisa oo ajar iyo xasanaat ah ayuu xadayaa, waxay dheheen: Rasuulka Allow, siduu salaaddiisa u xadaa? waxuu dhahay: uma dhammaystiro rukuucdeeda iyo sujuuddeeda, isagoo degdeg kula imanaaya rukuucda iyo sujuudadaba, sidii loo baahnaana u lama imanayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa muhiim in salaada la wanaajiyo, oo lala yimaado arkaanteeda si xasilooni iyo khushuuci ku jirto.
2. Ku tilmaamida lagu tilmaamay midka aan dhamays tirayn rukuucda iyo sujuuda inuu yahay tuug waa si looga didiyo dadka ficilkaa, looguna baraarujiyo dadka inuu xaaraan yahay.

3. Waa waajib in la dhamaystiro rukuucda iyo sujuuda salaada, iyo in laga dhigo dhex dhexaad labadaba.

(65100)

(143) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «أَمَا يَخْشَى أَحَدُكُمْ - أَوْ: لاَ يَخْشَى أَحَدُكُمْ - إِذَا رَفَعَ رَأْسَهُ قَبْلَ الإِمَامِ، أَنْ يَجْعَلَ اللَّهُ رَأْسَهُ رَأْسَ حِمَارٍ، أَوْ يَجْعَلَ اللَّهُ صُورَتَهُ صُورَةَ حِمَارٍ». [صحيح] - [متفق عليه]

(143) – Abii Hurayra-Allaha ka raali ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Miyaanu midkiin ka baqayn-ama midkiin miyaanu ka cabsanayn haduu madaxiisa kor u soo qaado imaamka ka hor in Ilaahay madaxiisa ka dhigo madax dameer, ama uu Ilaahay suuradiisa ka dhigo suurad dameer." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey goodi adag oo ku soo arooray qofka madaxiisa kor u soo qaada imaamkiisa ka hor, in Ilaahay ka dhigo madaxiisa madax dameer ama suuradiisa ka dhigo suurada dameer.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ma'amuumka la tukanaya imaamka xaalkiisu waa afar: saddex waa la iska reebay, waana: ka horayn, garab socod iyo ka daahid, ma`muumkana waxaa laga rabaa: inuu imaamka raaco.
2. Ma`muumku inuu imaamka salaada ku raaco waa waajib.
3. Goodiga ah in loo badali doono suurada qofka ka hor qaada madaxiisa imaamka ka hor suurad dameer arin suuragal ah, wuxuuna ka mid yahay masakhaada.

(3086)

(144) – عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «إِذَا شَكَّ أَحَدُكُمْ فِي صَلَاتِهِ، فَلَمْ يَدْرِ كَمْ صَلَّى ثَلَاثًا أَمْ أَرْبَعًا، فَلْيَطْرَحِ الشَّكَّ، وَلْيَبْنِ عَلَى مَا اسْتَيْقَنَ، ثُمَّ يَسْجُدُ سَجْدَتَيْنِ قَبْلَ أَنْ يُسَلِّمَ، فَإِنْ كَانَ صَلَّى خَمْسًا شَفَعْنَ لَهُ صَلَاتَهُ، وَإِنْ كَانَ صَلَّى إِتْمَامًا لِأَرْبَعٍ كَانَتَا تَرْغِيمًا لِلشَّيْطَانِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(144) – Abii Saciid Al-khudri-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Hadii midkiin ka shakiyo salaadiisa, ee uu garan waayo saddex miyuu tukaday mise afar, hatuuro shakiga, oo ha ku dhiso-hakabilaabo- inta uu hubo, hana sujuudo labo sujuudood oo sahwi ah inta aanu salaama naqsan ka hor, haduu shan tukaday salaadiisay buuxinayaan-sujuudu sahwigu- oo witirka ka bi'inaysaa, haduu afar buuxiyeyna shaydaankay dulaynaysaa." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka tukanaya haduu ka shakiyo salaadiisa oo uu garan waayo inta uu tukaday ma saddex baa mise afar? ha tuuro tirada dheeriga ah ee inuu ka shakiyey oo yaanu qaadan, saddexda ayuu hubaa, ee hatukado rakcad afaraad, ka dibna ha sujuudo labo sujuudood inta aanu salaama naqsan.

Hadii inta uu tukaday xaqiiqo ahaan afar tahay, rakcada lagu daray shan ayey ku noqon, labada sujuudoodna baddal bay ka ahaanayaan rakcada, sidaasayna tiradu ku buuxsamaysaa oo noqon mayso tiro is dheer, hadii rakcada dheeriga ah ee uu tukaday afar tahayna, wuxuu noqonayaa mid gutay wixii laga rabey oo aan siyaado iyo nuqsaan lahayn.

Labada sujuudood ee sahwiguna shaydaankay dulayn iyo jabin ku tahay, wuxuuna noqonayaa mid ku hungoobay oo ku guul daraystay ujeedadiisii, waayo salaadii ayuu shaki ka galiyey, oo inuu ka kharibo damcay, wayse dhamaystirantay salaada qofku markuu gutay amarka

Ilaahay ee ahaa sujuudii ibliis Ilaahay ku caasiyey markuu diiday inuu Ilaahay ku adeeco sujuudii Aadam.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofka tukanaya haduu ka shakiyo salaadiisa oo labada tiro uu mid rajixi waayo wuxuu tuurayaa shakiga wuxuuna ku shaqaynayaa inta uu hubo, waana tan yar, wuuna dhamaystirayaa salaadiisa, wuxuuna sujuudayaa sujuud sahwi inta aanu salaama naqsan ka dibna wuu salaama naqsan.
2. Labadaa sujuudood waxay kabayaan salaada, shaydaankana mid dulaysan oo ku hungoobay ujeedadiisii lagana fogeeyey ayey ka dhigaysaa.
3. Shakiga xadiiska kusoo arooray waa shakiga aanu qofku xagna ubadineyn, hadii uu jiro tuhun oo dhinac u bato wuu ku dhaqmi.
4. Waxaa la isku boorinayaa in lala dagaalo was-waaska oo la isaga difaaco iyadoo la gudanaayo amarka shareecada.

(11231)

(145) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**خَيْرُ يَوْمٍ طَلَعَتْ عَلَيْهِ الشَّمْسُ يَوْمُ الْجُمُعَةِ، فِيهِ خُلِقَ آدَمُ، وَفِيهِ أُدْخِلَ الْجَنَّةَ، وَفِيهِ أُخْرِجَ مِنْهَا، وَلَا تَقُومُ السَّاعَةُ إِلَّا فِي يَوْمِ الْجُمُعَةِ**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(145) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Nabiga ka wariyey nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Maalin qoraxi soo baxdo waxaa ugu khayr badan maalinta jimcaha, iyadaa Aadam la abuuray, iyadaana janada la galiyey, iyadaana laga soo saaray, qiyaamuhuna dhicimaayo maalin aan jimce ahayn". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in maalin qoraxi soo baxdo maalinta jimcuhu ugu khayr badan yahay.

Sifooyinkiisa waxaa ka mida: inuu Ilaahay abuuray Nabi Aadam- nabadi korkiisa ha ahaatee-, isla jimcahana janada la galiyey, jimcena laga saaray oo dhulka loo soo dajiyey, qiyaamuhuna ma dhacayo maalin aan jimce ahayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. xadiiskaan waxaa ku cad fadliga maalinta jimcuhu dheer yahay maalmaha kale ee usbuuca.
2. Xadiiskaan waxaa ku jira in la isku booriyo in la badsado camalka saalixa ah maalinta jimcaha, loona diyaar garoobo in la helo naxariista Ilaahay, la iskana fogeeyo ciqaabka Ilaahay.
3. Sifooyinkaan maalinta jimcaha ay leedahay ee lagu suxay xadiiskaan waxaa la yiri: maaha fadli gaara ee jimcuhu leeyahay, waayo Adam oo Jano laga soo saaray iyo dhicida qiyaamuhu laguma tirin karo fadli, waxaa kaloo la yiri: dhamaantood waa fadaa'il, Adam bixida uu ka soo baxay janada waxay sabab u noqotay jiritaanka Aadanahan kownka buuxiyey, ee Rusul, Nabiyo iyo saalixiinba ku jiraan, dhicitaanka qiyaamuhuna waa sabab lagu dedejinaayo abaal marinta saalixiinta iyo inay helaan abaal marinta fiican ee Ilaahay u diyaariyey.
4. Waxaa la sheegay maalinta jimcuhu inay leedahay sifooyin aan ahayn kuwa ruwaayadaan lagu sheegay, waxaa ka mida: in Nabi Aadan laga towbo aqbalay jimce, lana oofsaday jimce, waxaa ku jira jimcaha saacad hadii qof muumin ahi la kulmo isagoo tukanaya Ilaahay siinaayo wixii uu waydiisto.
5. Sanadka maalmihiisa waxaa ugu fadli badan maalinta carafa, waxa kaloo la yiri: maalinta ciidul-adxa, maalmaha usbuuca waxaa ugu fali badan maalinta jimcaha, habeenadana waxaa ugu fadli badan habeenka Laylatul-qadriga.

(3711)

(146) – عن ثَوْبَانَ رضي الله عنه قال: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا انْصَرَفَ مِنْ صَلَاتِهِ اسْتَغْفَرَ ثَلَاثًا، وَقَالَ: «اللَّهُمَّ أَنْتَ السَّلَامُ، وَمِنْكَ السَّلَامُ، تَبَارَكْتَ ذَا الْجَلَالِ وَالْإِكْرَامِ»، قَالَ الْوَلِيدُ: فَقُلْتُ لِلْأَوْزَاعِيِّ: كَيْفَ الْاسْتِغْفَارُ؟ قَالَ: تَقُولُ: أَسْتَغْفِرُ اللهَ، أَسْتَغْفِرُ اللهَ. [صحيح] - [رواه مسلم]

(146) – Thawbaan Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu ahaa markuu salaadda ka baxo saddex jeer buu istiqfaarsan jiray, wuxuuna yiri:( Allahayow adaa salaam ah, oo salaamtu kaa timid, waad hor ahaatay, waxaad tahay Ilaaha Jalaalka iyo Karamka u saaxibka ah). waliid wuxuu yiri waxaan ku iri awsaaci: qaabkay ahayd istiqfaartu? wuxuu yiri: Astaqfirullaah, Astaqfirullaah. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhihi jiray markuu salaadda ka baxo: Astqfirullaah, Astaqfirullaah, Astaqfirullaah.

Ka dibna Rabigii ayuu waynaynayey, wuxuuna oran jiray: Allahayow adigaa salaam ah, oo salaamtu kaa timid, waad kor ahaatay, waxaad tahay Ilaaha Jalaalka iyo Karamka u saaxibka ah, Ilaahay waa Saalim oo sifaadkiisu waa kaamilka, wuu ka nasahan yahay ceeb iyo nusqaan, isaga ayaa laga dalbaa inuu kaa nabad galiyo sharta aduun iyo tan aakhiro cid kal lagama dalbo, Ilaahay khayrkiisu waa badan yahay labada daaroodba, Ilaahay waa kan u saaxibka ah waynaan iyo ixsaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa suna ah in la istiqfaarsado salaadaha gadaashooda, lana joogteeyo.
2. Waxaa loo suneeyey istiqfaarta si loo dhamaystiro naqsiga cibaadada ku imanaya, iyo kabitaanka daacada, iyo ka gaabinteeda.

(10947)

(147) – عَنْ أَبِي الزُّبَيْرِ قَالَ: كَانَ ابْنُ الزُّبَيْرِ يَقُولُ فِي دُبُرِ كُلِّ صَلَاةٍ حِينَ يُسَلِّمُ: «لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ، لَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللهِ، لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَلَا نَعْبُدُ إِلَّا إِيَّاهُ، لَهُ النِّعْمَةُ وَلَهُ الْفَضْلُ وَلَهُ الثَّنَاءُ الْحَسَنُ، لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ وَلَوْ كَرِهَ الْكَافِرُونَ» وَقَالَ: «كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يُهَلِّلُ بِهِنَّ دُبُرَ كُلِّ صَلَاةٍ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(147) – Abii Subeyr Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Wuxuu ahaa ina Subeyr mid dhaha salaad kasta gadaasheeda marka uu salaama naqsado: (majiro ilaah aan Allaha xaqa ah ee keligi ah ahayn, mana jiro wax la wadaaga boqornimadiisa, isagaana leh mahad oo dhan, wax walbana isagaa awooda, xeelad iyo awood aan isaga xagiisa ahaynna majirto, Ilaahay mooyee ilaah kalana majiro, isaga mooyee cid kalana macaabudayno, nicmada iyo fadliga oo dhanna isagaa iskaleh, amaan wanaagsanna isgay u sugnaatay, Ilaahay maahee Ilaah kale majiro, isagaan u barax tiraynaa camalkayaga iyo umuuraha diinta oo dhan, xataa haday gaaladu dhibsadaan) wuxuuna dhahay: ( wuxuu ahaa Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee - mid dhaha dikrigaan salaad kasta dabadeeda). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa markuu ka boxo salaad kasta oo waajib ah inuu akhriyo dikraan wayn macnihiisuna waa:

(Laa ilaaha ilaa Allaah): majiro mid xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn.

(Waxdahuu laa shariika lahu) ma jiro cid la wadaagta Ilaah Nimcadiisa, Rabi nimadiisa, magacyadiisa iyo Sifooyinkiisa.

(Lahul-mulku) Ilaahay kaligi ayaa iska leh mulkiga guud ee caamka ah ee shaamilka ah ee waasica ah waa mulkiga samooyinka iyo dhulka iyo inta dhuxaysa.

(Walahul-xamdu) Ilaahay isagaa ku sifoobay kaamilnimo guud oo lagu mahadiyo maxabo kaamila iyo xaalad walba oo la wayneeyo, hadii dhib jiro iyo hadii dheefi jirtoba.

(Wa huwa calaa kulli shay'in qadiir) awoodiisu waa kaamil oo dhinac walba taamka ah wax uusan awoodin ma jiro arin ku adkaanayana ma jiro.

(Laa xawla walaa quwata illaa billaah) ma jirto cid xaalad uga wareegi karta xaalad kale ama xaalad macsi ah uga wareegi karta xaalad cibaado ah, cid awood leh ma jirto in Ilaahay u kaalmeeyo mooyee oo isaga la talo saarto.

(Laa ilaaha Ilaa Allaah,walaa nacbudu ilaa Iyaahu) waa hadal xoojinaya macnaha Ilaahnimada, oo diidaya shirkiga, mana jiro cid cibaadada xaq u leh oo aan Ilaahay ahayn.

(Lahu nicmatu walahul-fadlu) Ilaahay Isagaa abuuray nicmooyinka isagaana leh, wuxuuna siiyaa ciduu doono ee adoomadiisa ah.

(Walahu thanaa ul-xusan) amaanta fiican waxaa iska leh Ilaahay daatadiisa, afcaashiisa, nicmooyinkiisa iyo xaalad walba.

(Laa ilaaha ilaa Allaah, mukhlisiina lahu diin) Ilaahay ayaan kali yeelaynaa  cidna istusimayno cidna maqashiin mayno Ilaahay cibaadadiisa.

(Walow kariha al-kaafiruun) waxaan ku sugnaanaynaa towxiidka Ilaahay iyo cibaadadiisa haba dhibsadaan gaaladuye.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa suno in la ilaaliyo dikrigaan salaad walba oo waajiba gadaasheeda.
2. Muslimku wuxuu ku faanaa oo ciso ku leeyahay diintiisa wuuna muujiyaa cibaadada diinta, xataa haday dhibsadaan gaaladu.
3. Hadii ay ku soo aroorto xadiiska erayga: "salaada dabadeeda" hadii aanu ku sugnayn xadiiska dikri, sida asalka ahi waa in dikrigaasi salaama naqsiga ka dambeeyaa, hadayse duco tahay waxay ahaanaysaa salaama naqsiga ka hor.

(6203)

(148) – عَنْ وَرَّادٍ كَاتِبِ الْمُغِيرَةِ بْنِ شُعْبَةَ قَالَ: أَمْلَى عَلَيَّ الْمُغِيرَةُ بْنُ شُعْبَةَ فِي كِتَابٍ إِلَى مُعَاوِيَةَ: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يَقُولُ فِي دُبُرِ كُلِّ صَلَاةٍ مَكْتُوبَةٍ: «**لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ، وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ، اللَّهُمَّ لَا مَانِعَ لِمَا أَعْطَيْتَ، وَلَا مُعْطِيَ لِمَا مَنَعْتَ، وَلَا يَنْفَعُ ذَا الْجَدِّ مِنْكَ الْجَدُّ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(148) – Waraad oo ahaa qoraagii Muqiira Binu Shucba Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Muqiira Binu Shucba ayaa ii yeeriyey qoraal uu u diraayey mucaawiye: Inuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee dhihi jiray salaad kasta oo faral ah gadaasheeda: majiro mid xaq lagu caabudo oo aan Allah ahayn, waana kaligii oo malaha wax la wadaaga Ilaahnimadiisa iyo cibaadadiisaba, Isagay u sugnaatay mulki oo dhan iyo mahad oo dhan, Isagaana wax walba awooda, Allahayow majirto cid diidi karta wax aad bixinaysid, mana jirto cid bixin karta wax aad diido, mid awood lihina awoodiisu xagaaga wax uga tarto". **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu oran jiray salaad kasta oo faral ah gadaasheeda: majiro mid xaq lagu caabudo oo aan Allah ahayn, waana kaligii oo malaha wax la wadaaga Ilaahnimadiisa iyo cibaadadiisaba, Isagay u sugnaatay mulki oo dhan iyo mahad oo dhan, Isagaana wax walba awooda, Allahayow majiro cid diidi karta wax aad bixinaysid, mana jirto cid bixin karta wax aad diiddo, mid awood lihina awoodiisu xagaaga cid wax ugama tarto ".

Waxaan qirayaa oo aqoonsanahay, kalimada tawxiidka, ee: laa ilaaha Ilaa Allah, cibaadada xaqa ah waxaan u qirayaa Allah oo kaliya, waana u diidayaa waxa Ilaahay kasoo hara oo dhan, mana jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo Allah ahayn, waxaa kaloo qirsanahay mulkiga runta ah ee taamka ahi inuu Ilaahay leeyahay, dhamaan mahada kuwa ku sugan samooyinka iyo kuwa sugan dhulkuba inay Ilaahay u sugan tahay, waayo Isagaa ah Allaha wax walba awooda ah, waxa uu qadaro

bixintiisa ee deeqihiisa ah, ama uu diido wax ka hor iman karaa majiro, mid qani ihi qanimadiisa xaga Ilaahay cidna wax ugama tarayo, waxaa wax taraya waa camalka saalixa ah oo kaliya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa suno in la akhristo adkaartaa salaadaha gadaashooda, waxa ku jira darteed ee ah erayada tawxiidka iyo mahad celinta Ilaahay.
2. Waa in loo degdego gudashada sunaha Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyo in la faafiyo sunaha Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee.

(65102)

(149) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «مَنْ سَبَّحَ اللهَ فِي دُبُرِ كُلِّ صَلَاةٍ ثَلَاثًا وَثَلَاثِينَ، وَحَمِدَ اللهَ ثَلَاثًا وَثَلَاثِينَ، وَكَبَّرَ اللهَ ثَلَاثًا وَثَلَاثِينَ، فَتْلِكَ تِسْعَةٌ وَتِسْعُونَ، وَقَالَ: تَمَامَ الْمِائَةِ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ غُفِرَتْ خَطَايَاهُ وَإِنْ كَانَتْ مِثْلَ زَبَدِ الْبَحْرِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(149) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Qofka Ilaahay u tasbiixsada (dhaha: subxaana Allaah) salaad kasta gadaasheed 33 jeer, ee Ilaahay ku xamdiya (dhaha: alxamdu lilaah) 33 jeer, ee Ilaahay u takbiirsada (dhaha: Allaahu akbar) 33 jeer, intaasi waa 99, ee ku dhamaystira inuu dhaho : laa ilaaha ilaa Allaah waxdahuu laa shariika lahu, lahul-mulku walahul-xamdu wahuwa calaa kulli shay'in qadiir, waxaa laga dhaafaa dambiyadiisa haba le'ekaadeene daad xoorta badda." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka dhaha salaada faralka ah gadaasheeda:

33jeer: (subxaana Allaah) waana Ilaahay oo laga nasahayo ama laga hufayo wax kastoo nusqaan ah.

iyo 33 jeer: (Alxmdu lillaah), waana amaan Ilaahay lagu amaanayo sifooyinkiisa kaamilka ah, Isagoo la jecel yahay lana wayneynaayo.

iyo 33 jeer: (Allaahu akbar), waana Ilaahay inuu ka wayn yahay oo ka mudan yahay shay walba.

Waxaa lagu dhamaystirayaa tirada 100 hadka ah: (laa ilaaha illaa Allaah, waxdahuu laa shariika lahu, lahul-mulku, walahul-xamdu, wahuwa calaa kulli shay'in qadiir) oo macneheedu yahay: majiro macbuud xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn isagoo kaligi ah ee shariig lahayn, Isagaana nusqaan oo dhan ka hufan, oo gaar uleh boqornimada taamka ah, Isagaana xaq leh amaanta buuxda iyo in la jeclaado oo la wayneeyo, Isagaana awood badan oo wax is hortaagi karana jirin.

Qofka dhaha intaa waxaa laga tiraa dambiyadiisa, waana loo dambi dhaafaa haba u badnaato sida xoorka cad ee badda korkeeda saaran marka mawjada baddu kacdo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa suno in dikrigaan la akhriyo salaadaha faralka ah ka dib.
2. Dikrigani wuxuu sabab u noqonayaa in dambiga la dhaafo.
3. Fadliga Ilaahay iyo naxariistiisa iyo dambi dhaafkiisuba aad bay u wayn yihiin.
4. Dikrigaani wuxuu sabab u noqonayaa in dambiga la dhaafo, waxaana loo jeedaa: dambiyada yar-yar, laakiin dambiyada waaweyn laguma dhaafo waxaan towbokeen ahayn.

(10948)

(150) – عَنْ أَبِي أُمَامَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «مَنْ قَرَأَ آيَةَ الْكُرْسِيِّ فِي دُبُرِ كُلِّ صَلَاةٍ مَكْتُوبَةٍ لَمْ يَمْنَعْهُ مِنْ دُخُولِ الْجَنَّةِ إِلَّا أَنْ يَمُوتَ». [صحيح] - [رواه النسائي في الكبرى]

(150) – Abii Umaama-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka akhriya aayatul-kursiga salaad kasta oo faral ah gadaasheeda, ma jiro wax u diidaya inuu janada galideeda oo aan ahayn inuu dhinto". [Xadiis Saxiix ah] - []

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka salaadaha faralka ah gadaashooda akhriya aayatul kursiga ay janada galitaankeeda geeridu uuni ka xigto, waxayna ku jirtaa suurada Albaqara, waana aayadaan: " Macbuud xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn majiro, waana Allaha nool, ِAllaha qayuumka ah, ma qabato lulmo iyo hurdo midna wuxuu iska leeyahay oo u sugnaaday samooyinka iyo dhulka waxa ku sugan oo dhan, yuu yahay midka shafeeco qaadi kara idan la'aantiisa, wuxuu og yahay waxa ka horeeya-dadka- iyo waxa ka dambeeyaba, makoobikaraan oo wax badan kama ogaan karaan cilmiga Ilaahay ee balaaran wax yar oo uu doono maahee, wuu ka balaaran yahay kursigiisu samooyinka iyo dhulkaba, kumana adka Ilaahay ilaalinta samooyinka iyo dhulka, waana Allaha saraynta iyo waynida badan". [Al baqara:255]

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskaan waxaa ku cad fadliga wayn ee aayatul-kursigu leedahay, waayo waxa ku jira magacyada Ilaahay ee wanaagsan iyo sifooyinkiisa sareeya ah.
2. Waa sune in la akhriyo aayadan wayn-aayad kursiga- salaad walba oo faral ah gadaasheeda.
3. Camalka wanaagsani wuxuu sabab u noqdaa galitaanka janada.

(10950)

(151) – عَنِ ابْنِ عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا قَالَ: حَفِظْتُ مِنَ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَشْرَ رَكَعَاتٍ: رَكْعَتَيْنِ قَبْلَ الظُّهْرِ، وَرَكْعَتَيْنِ بَعْدَهَا، وَرَكْعَتَيْنِ بَعْدَ المَغْرِبِ فِي بَيْتِهِ، وَرَكْعَتَيْنِ بَعْدَ العِشَاءِ فِي بَيْتِهِ، وَرَكْعَتَيْنِ قَبْلَ صَلاَةِ الصُّبْحِ، وَكَانَتْ سَاعَةً لاَ يُدْخَلُ عَلَى النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِيهَا، حَدَّثَتْنِي حَفْصَةُ أَنَّهُ كَانَ إِذَا أَذَّنَ المُؤَذِّنُ وَطَلَعَ الفَجْرُ صَلَّى رَكْعَتَيْنِ، وَفِي لَفْظٍ: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يُصَلِّي بَعْدَ الْجُمُعَةِ رَكْعَتَيْنِ. [صحيح] - [متفق عليه بجميع رواياته]

(151) – Cabdullaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Waxaan Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka xafiday toban rakcadood: labo duhurka ka horaysa, labo ka dambaysa, labo maqribka ka dambaysa oo gurigiisa uu ku tukan jiray, labo ka dambeeya cishaha oo gurigiisa ku tukan jiray, labo subaxa ka horeeya, waxayna ahayd saacad aan loo soo galin Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , Xafsa ayaa ii sheegtay inuu ahaa marka uu mu'adinku adimo ee fajrigu soo boxo wuxuu tukan jiray labo rakcadood, hadalkale oo laga wariyey ayaa ahaa: wuxuu tukan jiray jumcada ka dib labo rakcadood. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waa laysku waafaqay Xadiiska Riwaayadiisa dhamaan]**

## Sharraxaad:

Cabdullaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye-: wuxuu cadeeyey in sunayaasha uu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka xafiday ay yihiin toban rakcadood oo la dhoho sunooyinka rawaatibta ah, labo rakcadood oo duhurka ka horeeya, iyo labo rakcadood oo ka dambeeya, labo rakcadood oo maqribka ka dambeeya, oo gurigiisa uu ku tukan jiray. labo rakcadood oo cishaha ka dambeeya, oo gurigiisa uu ku tukan jiray. labo rakcadood oo fajarka ka horeeya. sidaasay ku dhan yihiin tobankii rakcadood. salaada jumcadana labo rakcadood ayuu ka daba tukan jiray.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Rawaatibtaasi waa suno, waana in la joogteeyo.

2. sunaha in guriga lagu tukado waa sharci.

(3062)

(152) – عَنْ أَبِي قَتَادَةَ السَّلَمِيِّ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «**إِذَا دَخَلَ أَحَدُكُمُ الْمَسْجِدَ فَلْيَرْكَعْ رَكْعَتَيْنِ قَبْلَ أَنْ يَجْلِسَ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(152) – Abii Qataada Alsalami Allaha ka raali ahaadee wuxuu Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Hadii midkiin soo galo masaajidka ha tukado labo rakcadood, intaanu fariisan". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Wuxuu ku booriyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee qofka soo gala masaajid waqtigay doontaba ha ahaatee iyo ujeedaduu doonaba ha u soo galee, inuu tukado labo rakcadood, intaanu fariisan, waana labada rakcadood ee taxiyatul masjidka.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa suno ah in la tukado labo rakcadood oo taxiyatul masjidka ah intaan la fariisan.
2. Labada rakcadood waxaa laga rabaa waa qofka doonaya inuu masaajidka fariisto, qofkase soo gala ee ka baxa intaanu fariisan ma soo galayo amarkaas.
3. Haduu qofku soogalo masaajidka dadkuna salaada ku jiraan oo uu la galo salaada, way kaga filan tahay labadii rakcadood.

(65091)

(153) – عن أَبِي هُرَيرةَ رضي الله عنه أنَّ رسول الله صلى الله عليه وسلمَ قال: «**إذا قُلْتَ لِصَاحِبِكَ: أَنْصِتْ، يومَ الجمعةِ، والإمامُ يَخْطُبُ، فَقَدْ لَغَوْتَ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(153) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Hadaad ku tiraado saaxiibka: aammus, maalinta jumcada, iyadoo imaamku khudbaynaayo, laqwi baad la timid). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay ka mid tahay aadaabta waajibka ku ah dadka salaadda jumcada u yimid: inay dhagaystaan khadiibka dhagaystaan, si loogu tadaburo waanada iyo wacdiga, qofka hadla wax yarba ha ahaatee isagoo imaamkuna khudbaynaayo, ee ku dhaha cid kale: (aamus ama dhagayso) midkaasi wuxuu waayey fadligii salaada jumcada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa xaaraan hadalku marka khudbada jumcadu socoto, xataa qofka wax xumaana ha u reebee ama salaan haka qaado mid kale ama mid handhisay ha u duceeyee.
2. Arinkaa waxaa laga reebayaa qofka imaamka la hadlayaa ama imaamku la hadlaayo.
3. Labada khudbadood inta u dhaxaysa waa la ogol yahay hadalka haday baahi keento.
4. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee hadii la xuso imaamkuna khudbada ku jiro hoos baad ugu salliyi Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee sidaasoo kale aamiinta ducadana hoosbaa loo dhihi.

(3107)

(154) – عن عمران بن حصين رضي الله عنه قال: كَانَتْ بِي بَوَاسِيرُ، فَسَأَلْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَنِ الصَّلَاةِ، فَقَالَ: «صَلِّ قَائِمًا، فَإِنْ لَمْ تَسْتَطِعْ فَقَاعِدًا، فَإِنْ لَمْ تَسْتَطِعْ فَعَلَى جَنْبٍ».
[صحيح] - [رواه البخاري]

(154) – Cimaraan Binu Xusayn -Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan qabay babaasiir, Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan waydiiyey sidaan salaadda u tukadaa, wuxuuna yiri: (Ku tuko istaag, hadaadan awoodina fadhi ku tuko, hadaadan awoodi waydidna adoo dhinac u jiifa tuko). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in salaadda asakeeda lagu tukado istaag, xaaladaha uu qofku kariwaayo maahee, markaasoo loo ogol yahay qofku inuu fadhiga ku tukado, haduu fadhigana awoodi waayo wuxuu ku tukanayaa isagoo dhiniciisa u jiifa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Salaaddu qofka kama dhacdo inta caqligiisu joogo, kolba xaalad ayuu u guurayaa inta awoodiisu dhan tahay.
2. Diinta islaamku waa mid samaaxo iyo fudayd ah, oo adoonku wuxuu gudanayaa cibaadada inta uu awoodo.

(10951)

(155) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللهُ عَنْهُ: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «صَلَاةٌ فِي مَسْجِدِي هَذَا خَيْرٌ مِنْ أَلْفِ صَلَاةٍ فِيمَا سِوَاهُ إِلَّا الْمَسْجِدَ الْحَرَامَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(155) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu ka wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Salaada lagu tukado masajidkaygan waxay ka khayr badan tahay kun salaadood oo lagu tukaday masaajida kale ee isaga kasoo haray marka laga reebo masajidka xaramka". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey fadliga ay leedahay salaada lagu tukado masajidkiisa, iyo inay ka fadli badan tahay kun salaadood oo masaajida kale ee dhulka, ee aan ahayn masajidka xaramka Makkah, waayo masaajidka xaramka Makkah salaada lagu tukadaa way ka fadli badan tahay tan lagu tukado masjidka Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee .

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ajarka salaada lagu tukado masaajidka Xaramka iyo masaajidka Nabiga waa la laalaabaa.
2. Salaada masaajidka Xaramku waxay ka fadli badan tahay boqol kun oo salaadood oo masaajida kale lagu tukado.

(65090)

(156) – عَنْ مَحْمُودِ بْنِ لَبِيدٍ رضي الله عنه: أَنَّ عُثْمَانَ بْنَ عَفَّانَ أَرَادَ بِنَاءَ الْمَسْجِدِ فَكَرِهَ النَّاسُ ذَلِكَ، وَأَحَبُّوا أَنْ يَدَعَهُ عَلَى هَيْئَتِهِ، فَقَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «مَنْ بَنَى مَسْجِدًا لِلهِ بَنَى اللهُ لَهُ فِي الْجَنَّةِ مِثْلَهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(156) – Maxamud Binu Labiid Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey: Cusmaan Binu Cafaan ayaa damcay inuu masaajidka dhiso, dadkiina way dhib sadeen arinkaa, oo waxay jeclaysteen inuu sidiisa u daayo, wuxuuna yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahaya: "qofka Ilaahay darti masaajid u dhisa isagana Ilaahay ayaa janada uga dhisa mid la mid ah". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Cusmaan Binu Cafaan-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu damcay inuu dib u dhiso masaajidka Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, qaab ka wanaagsan qaabkii hore, dadkii ayaase dhibsaday arinkaa, waayo waxaana ku jira in la badalo qaabkii loo dhisay masjidka waqtigii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, wuxuuna ka dhisnaa masaajidku bulukeeti, saqafkiisuna wuxuu ahaa laamaha timirta, laakiin Cusmaana wuxuu damcay inuu ka dhiso dhagax iyo nuurad, wuxuu Cusmaan sheegay inuu ka maqlay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: qofka masaajid dhisa, isagoo raali ahaanshaha Ilaahay ku doonaya, is tustus iyo magac doona ka ahayn, Ilaahay wuxuu ku abaal marinayaa abaal marinta ugu fadliga badan oo nuuca camalkiisa ah, kaaso ah in Ilaahay uga gadhisayo janada mid la mida.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku booriyey in masaajida la dhiso iyo arinkaasi fadliga uu leeyahay.
2. Balaarinta masaajidka iyo cusboonaysiintiisu waxay soo galayaan fadliga dhismaha masajidka.
3. Acmaasha oo dhan in Ilaahay loo khaalis yeelo ahmiyad ayey leedahay.

(65089)

(157) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «مَا نَقَصَتْ صَدَقَةٌ مِنْ مَالٍ، وَمَا زَادَ اللهُ عَبْدًا بِعَفْوٍ إِلَّا عِزًّا، وَمَا تَوَاضَعَ أَحَدٌ لِلهِ إِلَّا رَفَعَهُ اللهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(157) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu ka wariyey Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Sadaqo maal ma yareyso, adoon wax cafiyeyna Ilaahay uma siyaadiyo cisi mooyee, qofkii Ilaahay darti u tawaaducana Ilaahay ayaa kor u qaada. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in sadaqdu aysan maalka yarayn, balse ay ka difaacado aafada, Ilaahayna wuxuu ugu badalaa ka sadaqada bixiya khayr wayn, waxayna noqotaa mid badisa ee aan yarayn.

Qofka dadka iska cafiya isagoo awooda inuu ka aarsado ama uu u qabsado qofkii, Ilaahay wuxuu ugu bedelaa awood iyo cisi.

Qofka Ilaahay darti u tawaaduca oo isu bihinbihiya, isagoon qofna ka cabsanayn ama iska jeedinayn ama aan nafac kaga doonayn, llaahay wuxuu abaal uga dhigaa inuu sarayn iyo sharaf siiyo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Khayrka iyo liibaantu waxay ku jiraan in loo hogaansamo shareecada, iyo in khayrka la falo haba la ahaato dadka qaarki in arintu sidaa ka duwan tahaye.

(5512)

(158) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «قَالَ اللهُ: أَنْفِقْ يَا ابْنَ آدَمَ أُنْفِقْ عَلَيْكَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(158) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: "Ilaahay wuxuu yiri: Ibni aadanow wax bixi aan wax ku siiyee." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay isagaa koreeyee uu yiri: Ibni aadanow bixi sadaqada waajibka ah iyo tan sunada ahba, waan idiin waasicin oo badal idinsiine idiina barakayne.-

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku booriyey sadaqada iyo in jidka Ilaahay wax lagu bixiyo
2. Ku bixinta maalka meelaha khayrka ahi waxay ka mid tahay asbaabta ugu waawayn ee Ilaahay ku barakeeyo risiqa kuna labanlaabo iyo in wixii uu bixiyey adoonku Ilaahay badalkeeda siiyo.
3. Xadiiskani wuxuu ka mid yahay axaadiista uu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Ilaahay ka wariyey, waxaana lagu magacaabaa xadiis alqudsi ama xadiis Al-Ilaahi, waana xadiis ereyadiisa iyo macnahooduba xaga Ilaahay ka yimaadeen, Qur'aankana la mid maaha oo laguma caabudo Ilaahay akhriskiisa, looma dahaaro qaato, taxadiga iyo icjaaska Qur'aanku leeyahayna malaha xadiisul-qudsigu.

(5805)

(159) – عن أبي مسعود رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «إِذَا أَنْفَقَ الرَّجُلُ عَلَى أَهْلِهِ يَحْتَسِبُهَا فَهُوَ لَهُ صَدَقَةٌ». [صحيح] - [متفق عليه]

(159) – Abii Mascuud Allaha ka raali ahaade wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: (Markuu ninku masruufo reerkiisa isagoo Ilaahay ajar kaga dalbaaya, sadaqo ayey u noqonaysaa.). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inmarkuu ninku siiyo reerkiisa biilo kaasoo ay ku waajibtay nafaqadoodu, sida xaaskiisa, labadiisa waalid, caruurtiisa iyo qayrkoodba, isaga oo isago Ilaahay ugu dhawaanaya wax bixintaa ajarna kaga raba Ilaahay wuxuu helayaa ajarka sadaqada oo kale.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ajar iyo xasanaat ayaa laga helayaa hadii la biilo reerka.
2. Mu'uminku camalkiisa wuxuu ula jeeda Ilaahay wajigiisa iyo inuu Ilaahay kaga helo ajar iyo xasanaat.
3. Waxaa habboon in qofku niyad saalixa ula yimaado camalkiisa saalixa ah, waxaana ka mid ah biilka reerka.

(6460)

(160) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ أَنْظَرَ مُعْسِرًا، أَوْ وَضَعَ لَهُ، أَظَلَّهُ اللهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ تَحْتَ ظِلِّ عَرْشِهِ يَوْمَ لَا ظِلَّ إِلَّا ظِلُّهُ». [صحيح] - [رواه الترمذي وأحمد]

(160) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri: Qofkii daynta ka suga qofka saboolka ah, ama ka dhaafa, Ilaahay wuxu hariyaa hooska carshigiisa maalinta qiyaame ee harkiisa mooyee aan har kale jirin. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At tirmidi iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka u kaadiya kan daynta qaba ama ka cafiya daynta, waxaa lagu abaal mariyaa in Ilaahay hariyo hooska carshigiisa maalinta qiyaame maalintaaso qoraxdu u soo dhawaanayso adoomada madaxooda oo kulaylkeedu aad u daran yahay. Maanlintaa qofna ma helaayo hoos qof Ilaahay hoos siiyo mooyee.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. fadliga iyo fududaynta Ilaahay siiyey adoomadiisa waxay ka mid tahay asbaabta looga nabad gelaayo kadeedka maalinta qiyaamaha.
2. Abaal marintu waxay noqotaa nooca camalka laqabtay.

(4186)

(161) – عن جابر رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «رَحِمَ اللهُ رَجُلًا سَمْحًا إِذَا بَاعَ، وَإِذَا اشْتَرَى، وَإِذَا اقْتَضَى». [صحيح] - [رواه البخاري]

(161) – Jaabir Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: (Allaha u naxariisto nin wanaag badan hadii uu wax iibinaayo, haduu wax soo gadanaayo, iyo haduu gar naqsanaayoba.) [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu naxariis ugu duceeyey qof kastoo sahlan oo deeqsiya oo sakhi ah markuu wax iibinaayo. Kuma adkeeyo sicirka qofka wax ka iibsanaya, wuxuuna kula dhaqmaa akhlaaq fiican. waa qof sahlan oo deeqsi ah oo sakhi ah oo markuu wax iibsanayo ma bakhso mana yareeyo qiimaha badeecada. Waa qof sahlan oo deeqsi ah oo sakhi ah markuu dayntiisa, waydiisanayo, kuma adkeeyo faqiirka iyo kan baahan, balse wuxuu u waydiiyaa si fudud oo naxariisi ku jirto, wuuna ka sugaa kaan haysan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ujeedooyinka shareecada Islaamka waxaa ka mid ah: ilaalinta danaha wanaagsan iyo xiriirka u dhexeeya dadka.
2. waxaa la is jeclaysiinayaa in dadka lagula dhaqmo akhlaaqda sare marka wax la kala iibsanayo iyo marka wax la soo iibsanaayo iyo wixii la midaba.

(3716)

(162) – عن خَولة الأنصاريةِ رضي الله عنها قالت: سمعت النبي صلى الله عليه وسلم يقول: «إِنَّ رِجَالًا يَتَخَوَّضُونَ فِي مَالِ اللهِ بِغَيْرِ حَقٍّ، فَلَهُمُ النَّارُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(162) – Khawla Alansaariya Allaha ka raali noqde ayaa tiri: waxaan ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Rag ayaa si xaq daro ah ugu takri fala xoolaha Ilaahay, naar ayey leeyihiin maalinta qiyaame." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in dad si xaq daro ah ugu tagri falaan xoolaha muslimiinta, ku waasoo xaq daro ku qaadanaaya, waa arimaha xoolaha guud ahaaneed sida aruurintooda, in laga kasbo meel aan banaanayn iyo in lagu bixiyo meel aan sax ahayn, taas waxaa soo galaya cunida xoolaha agoonta, xoolaha waqafka ah, iyo amaanada oo la inkiro iyo in xoolaha dad waynaha xaqdaro lagu qaato.

Ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in abaal marintoodu naar tahay maalinta qiyaame.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xoolaha dadka gacantooda ku jira waa maal Ilaahay, oo isagu u dhiibtay, si ay ugu bixiyaan dariiq sharci ah, kana fogaadaan inay si qaldan u isticmaalaan, dadkoo dhan ayaa loo jeedaa madaxda iyo qayrkood oo dadka shacabka ah.
2. Sharcigu waa adkeeyey xoolaha dad waynaha, qofkii madax ka noqda wax ka mida xoolaha dad waynaha maalinta qiyaame waa lagu xisaabin meeshuu ka keenay iyo meeshuu ku bixiyey.
3. Goodigaas waxaa soo galaya qofka si qaldan u isticmaala xoolo ama kuwiis ha noqdeen ama kuwo qayrkiye.

(5331)(163) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ صَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ» [صحيح] - [متفق عليه]

(163) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka u sooma ramadaanka iimaan ahaan iyo ajar doon ahaan waa loo dhaafaa dambigiisii hore. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka sooma bisha ramadaan isagoo Ilaahay qirsan oo rumaysan waajibnimada ramadaanka iyo ajarka iyo abaalka wayn ee Ilaahay u diyaariyey dadka sooman, Ilaahay dartina ula jeeda oo aysan ka ahayn is tustus iyo ha lagu maqlo, waa loo dhaafaa dambiyadiisii hore.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa ikhlaaska fadligiisa iyo muhimada uu u leeyahay soonka ramadaanka iyo acmaasha kale ee saalixa ah.

(4196)

(164) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ يَقُمْ لَيْلَةَ الْقَدْرِ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ» [صحيح] - [متفق عليه]

(164) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Qofkii habeenka laylatul qadarka salaatu layl u istaaga isagoo rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay fadliga habeenka laylatul qadrigu leeyahay, habeen kaasoo ku jira tobanka u dambeeya Ramadaanka, qofka habeenkaa ku dadaala salaada, ducada, akhrinta Qur'aanka, xuska Ilaahay, isagoo rumaysan habeenkaa iyo fadligiisa, oo ka rajaynaya camalkiisaa in Ilaahay ajar ka

siinaayo, ee aan ula jeedin is tustus iyo ha lugu maqlo, waxaa loo dhaafaa dambigiisii hore.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa habeenka laylatul qadriga fadligiisa, iyo dadka oo lagu dhiiri galiyo inay salaad u istaagaan.
2. Camalka suuban lama aqbalo in niyo run ah la jirto maahee.
3. Ilaahay fadligiisa iyo naxariistiisa qofka habeenka laylatul qadriga u istaaga salaad isagoo rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore.

(4202)

(165) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: سمعت النبي صلى الله عليه وسلم يقول: «مَنْ حَجَّ لِلهِ فَلَمْ يَرْفُثْ وَلَمْ يَفْسُقْ رَجَعَ كَيَوْمِ وَلَدَتْهُ أُمُّهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(165) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay isagoo leh: (qofka Ilaahay darti u xajiya ee aan dumarka la haasaawin ee aan fusuq la imaan wuxuu soo noqdaa isagoo danbi ka ah sida maalintii hooyadi dhashay. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka Ilaahay darti u Xajiya ee aan rafas la imaan, rafaskuna waa galmada iyo wax yaabaha ka horeeya sida dhunkashada, iyo salaaxida, waxa kaloo lagu macneeyaa rafaska hadalka xun, qofkaasoo aan samayn fisqi, iyo ficil macsiya iyo xumaan. Fusuqa waxaa ka mida in lagu dhoco waxyaabaha ka reeban qofka muxrimka ah, qofkaasi wuxuu xajkiisa ka soo laabtaa isagoo loo dambi dhaafay, oo ah sida ilmuhu markuu dhasho aanu danbi u lahayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fusuqu isagoo reeban mar walba, hadana waxaa lasii adkeeyey reebidiisa marka xajka la gudanaayo, iyado la waynaynaayo acmaasha xajka.
2. dadku waxay dhashaan iyago wax danbiya aan lahayn, mana qaadayo gafku qof kale danbigi.

(2758)

(166) – عن ابن عباس رضي الله عنهما قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «ما مِنْ أيَّامٍ العمَلُ الصَّالِحُ فيها أحبُّ إلى اللهِ مِن هذه الأيام» يعني أيامَ العشر، قالوا: يا رسُولَ الله، ولا الجهادُ في سبيلِ الله؟ قال: «ولا الجهادُ في سبيلِ الله، إلا رجلٌ خَرَجَ بنفسِه ومالِه فلم يَرْجِعْ من ذلك بشيءٍ». [صحيح] - [رواه البخاري وأبو داود، واللفظ له]

(166) – Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiiye wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Majiraan maalmo camalka saalixa ah Ilaahay ka jecel yahay maalmahan) waxaa loo jeedaa maal maha tobanka hore ee bisha dul-xija, waxay dheheen: Rasuulka Ilaahayow, ma xataa jihaadka diinta Ilaahay loo jihaadayo? wuxuu yiri: xataa jihaadka, inuu yahay mooyee nin u baxay jihaad oo naftiisii iyo maalkiisiiba ku bixiyey oo aan waxba ka soo noqon). [Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey bukhaari, Abuu daawuud, lafdiganna isagaa kuwariyey]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in tobanka maal mood ee bisha dil-xija ugu horeeya camalka saalixa ah ee laqabto uu ka fadli badan yahay camalka maalmaha sanadka intiisa kale.

Asxaabtu Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxay waydiiyeen jihaadka aan ahayn maalmahan tobanka ah ma isagaa fadli badan mise camalka saalixa ah ee maalmaha tobanka bisha dil-xija

laqabto? waxa ay ogaayeen inuu jihaadku camalka u fadliga badan yahay.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee  wuxuu ugu jawaabay in camalka saalixa ee maalmaha tobanka dil-xija laqabto ka fadli badan yahay jihaadka oo la jihaado waqti aan tobankan dhexdeeda ahayn, ilaa nin u baxay jihaad oo u huray naftiisa iyo maalkiisa waqti jihaad jiray, sidaana ku waayey naftiisiii iyo maalkiisiiba. Waa kaa kan ka fadliga badan camalka saalixa ah ee maalmaha tobanka ah.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga tobanka maalmood ee bisha dil-xija waa mid aad u wayn, sidaa darteed waxaa la gudboon qofka muslimka ah inuu ka faa'iidaysto maalmahaa, u hogaan sanaanta amarka Ilaahay badsado, sida xuska Ilaahay, akhrinta Qur'aanka, takbiirta(Allaahu akbar), tahliisha(laa ilaaha illa-llaah), taxmiidda(Alxamdu lilaah), salaada, sadaqada, soonka ,iyo dhamaan camalka wanaagsan.

(6255)

(167) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ اللهَ لَا يَنْظُرُ إِلَى صُوَرِكُمْ وَأَمْوَالِكُمْ، وَلَكِنْ يَنْظُرُ إِلَى قُلُوبِكُمْ وَأَعْمَالِكُمْ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(167) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri: "Ilaahay ma eegayo sawiradiina iyo xoolahiina, laakiin wuxuu eegayaa quluubtiina iyo camalkiina ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay uusan eegayn sawirada dadka iyo jirkoodu, inay quruxsan yahay ama fool xun yahay ama wayn yahay ama yar yahay ama caafimaad qabo ama jiran yahay. Ilaahay ma fiirinaayo hantidoodu, ma badan tahay mise way yar tahay? Ilaahay casa wajala uma qabanaayo

oo ku xisaabin maayo arimahaas sida ay ugu kala duwan yihiin, laakiin wuxuu eegayaa quluubtooda iyo waxa ku jira ee taqwo, yaqiin, run, iyo ikhlaas ah, ama inuu u sameeyey is tustus iyo halagaa sheego, Ilaahay wuxuu eegayaa camalkoodu inuu fiican yahay iyo inuu xun yahay, taasuuna ku ajar siin kuna abaal marin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa in qalbiga la ilaaliyo oo la islaaxiyo, oo laga sifeeyo sifo walba oo xun.
2. Qalbiga waxaa lagu islaaxiyaa ikhlaaska, camalkana waxaa lagu islaaxiyaa raacida Nabiga scw, labadaas ayaa Ilaahay eegayaa oo lagu qiimaynayaa.
3. Qofku yaanu ku kadsoomin xoolahiisa, quruxdiisa, jirkiisa iyo shay walba oo ka mida quruxda aduunka.
4. Waa laga digayaa in lagu gaabsado waxa oogada ka muuqda iyadoo aan la islaaxin wixii uurka jira".

(4555)

(168) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قال: قال رَسُولُ الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ اللهَ يَغَارُ، وَإِنَّ الْمُؤْمِنَ يَغَارُ، وَغَيْرَةُ اللهِ أَنْ يَأْتِيَ الْمُؤْمِنُ مَا حَرَّمَ عَلَيْهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(168) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ilaahay wuu caroodaa, muuminkuna wuu caroodaa, carada Ilaahay waa inuu muuminku la yimaado wax Ilaahay ka xarimay". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuu Ilaahay Qiiroodo caroodna karaahsadona, sida muuminkuba u qiiroodo una caroodo una karaahsado, sababta Ilaahay u caroodana, waa in

muuminku la yimaaddo waxa Ilaahay ka xarimay ee xumaan ah, sida sinada, liwaadka, tuugonimada, khamri cabida iyo xumaanta kale.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa laga digayaa carada Ilaahay iyo ciqaabtiisa hadii lagu dhaco wuxuu xarimay.

(3354)

(169) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «اجْتَنِبُوا السَّبْعَ الْمُوبِقَاتِ»، قَالُوا: يَا رَسُولَ اللهِ وَمَا هُنَّ؟ قَالَ: «الشِّرْكُ بِاللهِ، وَالسِّحْرُ، وَقَتْلُ النَّفْسِ الَّتِي حَرَّمَ اللهُ إِلَّا بِالْحَقِّ، وَأَكْلُ الرِّبَا، وَأَكْلُ مَالِ الْيَتِيمِ، وَالتَّوَلِّي يَوْمَ الزَّحْفِ، وَقَذْفُ الْمُحْصَنَاتِ الْمُؤْمِنَاتِ الْغَافِلَاتِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(169) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: (ka fogaada toddobada lagu halaagsamo ), waxay yiraahdeen: Rasuulkii Ilaahayow maxay yihiin? wuxuu yiri: (waa Ilaahay oo loo shariig yeelo, sixirka, dilka nafta Ilaahay xarimay in xaq lagu dilo mooyee, cunida ribada, cunida maalka agoonta, cararida maalinta jihaadka iyo in la qadfo gabdhaha muxsinaatka ah ee muuminiinta ah ee aan warba hayn). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay wuxuu Ummaddiisa faray inay ka fogaadaan todoba dambi oo ah macaasi lagu halaagsamo, markii la waydiiyey ee la yiri waa kuwee? wuxuu ku sheegay inay yihiin:

Tan koobaad: waa Ilaahay oo loo shariig yeelo, iyadoo la samaysto wax Ilaahay loo ekaysiiyo oo lalasimo nooc walba oo uu yahay, isagaa nusqaan oo dhan ka hufane, iyo cibaado cibaadooyinka ka mida oo Ilaahay qayrkii loo leexiyo, shirkiga ayuu ku bilaabay, waayo isagaa danbiyada u wayn.

Tan labaad: waa sixirka- waana guntimo wax lagu tufay iyo dawooyin iyo qiiq-, kaasoo jirka ku saamaynaaya dhimasho ama bugto ama kala gayn labada is qabta, waana shaqo shaydaan, in badan oo sixirka ka mida lama samayn karo ilaa Ilaahay loo shariig yeelo iyo in loogu dhawaado arwaaxda xun in loo sameeyo waxay jeceshahay maahee.

Tan saddexaad: waa dilka nafta Ilaahay reebay dilkeeda in lagu dilo wax sharci ah ee xaakimku fuliyo maahee.

Tan afraad: waa Ribada in loo isticmaalo cunid ama qaab kale oo nafac leh.

Tan shanaad: waa ku xad gudubka maalka Agoonta uu aabohood dhintay iyagoon qaan gaarin.

Tan lixaad: waa in laga cararo dagaalka gaalada la gula jiro.

Tan todobaad: waa in lagu tuhmo sino gabdhaha xorta ah ee dhawrsan, waxaa la mida in raga lagu tuhmo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dambiyada waa wayni kuma koobna todoba, waxaase loo gaar yeelay todobadan waynidooda iyo khatarta ay leeyihiin.
2. Way banaan tahay in nafta xaq lagu dilo sida qisaasta, ridada, sinada qofka guur soo maray, fulinta xukunka dilka waxaa fulinaya xaakimka.

(3331)

(170) – عن أبي بكرة رضي الله عنه قال: قال النبي صلى الله عليه وسلم: «أَلَا أُنَبِّئُكُمْ بِأَكْبَرِ الْكَبَائِرِ؟» ثَلَاثًا، قَالُوا: بَلَى يَا رَسُولَ اللهِ، قَالَ: «الْإِشْرَاكُ بِاللهِ، وَعُقُوقُ الْوَالِدَيْنِ» وَجَلَسَ وَكَانَ مُتَّكِئًا، فَقَالَ: «أَلَا وَقَوْلُ الزُّورِ»، قَالَ: فَمَا زَالَ يُكَرِّرُهَا حَتَّى قُلْنَا: لَيْتَهُ سَكَتَ. [صحيح] - [متفق عليه]

(170) – Abii bakrata-Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Waar hooy ma idiin sheegaa dambiyada kuwa ugu waawayn:?) saddex jeer, waxay dheheen: haa Rasuul Ilaahayow, wuxuu yiri: (waa: Ilaahay oo loo shariig yeelo iyo waalid caasiga) wuuna soo fariistay isagoo xusulku u mudan yahay,

wuxuu yiri: (waar hooy iyo markhaati beenaalaha), wuxuu yiri: kama uuna daalin inuu ku celceliyo ereygaa, ilaa aan iri: muu iska aamuso.
[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay asaxaabtiisa dambiyada ugu waawayn, saddexdan buuna sheegay:

1aad. Ilaahay oo loo shariig yeelo: waana nooc walba oo cibaadada ka mida oo loo leexiyo cidaan Ilaahay ahayn, iyo Ilaahay Ilaahnimadiisa, Rabinimadiisa, Magacyadiisa iyo sifaadkiisa oo cid kale lalasimo.

2aad. Waalid caasiga: waana dayac iyo hagardaamo kasta oo labada waalid loogaysto, hadal iyo ficilba kuu doono ha ahaadee, iyo samafalkooda oo lala imaan waayo.

3aad. Been abuurka oo markhaati beenaaluhuna soo galayo: waana hadal kasta oo been abuura loogana jeedo in lagu duudsiiyo qof, kaasoo lagu banaysanayo maalkiisa, laguna xad gudbo cirdigiisa iyo wixii la mida.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ku celceliyey ka digida hadalka been abuurka ah, isagoo ku baraarujinaya dadka xumaantiisa iyo saamayntiisa xun ee bulshada uu u leeyahay, ilaa ay dheheen asaxaabtu: muu iska aamuso, iyagoo u naxariisanaya Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , oo nacaya wixii isaga dhibaya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dambiga ugu wayn waa in Ilaahay loo shariig yeelo, waayo Ilaahay wuxuu ka dhigay kan ugu horeeya uguna wayn dambiyada, waxaana cadaynaya sidaa, hadalka Ilaahay ee {Ilaahay uma dambi dhaafo in loo shirki yeelo, wixii ka hooseeyase qofkuu doono ayuu u dhaafaa}.
2. Waynida Xuquuqda labada waalid, waayo xaqooda Ilaahay ayaa ku xiriiriyey xaqiisa.

3. Dambiyadu waxay u qaybsamaan waawayn iyo yaryar, dambiyada waawayni waa: dambi kasta oo ay ku soo aroortay ciqaab aduunka ah, sida Xuduuda iyo Lacnada, ama goodi aakhiro, sida goodiga inuu naar galidoono, dambiyada waawayn way kala sareeyaan oo qaar ayaa xarimaada kaga sii adag qaarka kale, dambiyada yaryari waa wixii kuwa waawayn ka soo hara.

(2941)

(171) – عن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «الْكَبَائِرُ: الْإِشْرَاكُ بِاللهِ، وَعُقُوقُ الْوَالِدَيْنِ، وَقَتْلُ النَّفْسِ، وَالْيَمِينُ الْغَمُوسُ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(171) – Cabdullaahi Camar Binu Caas Allaha ka raali ahaadee wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: (Dambiyad waawayni waa: Ilaahayoo loo shariik yeelo, waalid caasiga, naf la dilo iyo dhaar badanaha). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey dambiyada waawayn, waana kuwa loo balan qaaday cida samaysa ciqaab adag oo aduunyada iyo aakhiraba ah.

Tan koowaad: Ilaahay oo loo shariig yeelo: waana cibaadada noocay doontaba ha ahaate oo loo leexiyo cid aan Ilaahay ahayn, iyo Isaga oo lala simo wax aan Isaga ahayn wax yaabaha uu keligii xaq u leeyahay sida Ilaahnimadiisa, Rabinimadiisa, magacyadiisa iyo tilmaamihiisa wanaagsan.

Tan labaad: waa waalid caasiga: waana wax kasta oo labada waalid dhib ku ah, oo ah hadal ama ficil, iyo u samafal kooda oo laga tago.

Tan saddexaad waa naf la dilo: taasoo ah xaq daro, sida dilka dulmiga iyo cadaawada ah.

Tan afraad, waa dhaar badanaha: waa mida lagu dhaaranayo beenta loo bareerayo, waxaana sidaa loogu magacaabay, waayo dhaar badanaha waxay quusinaysaa dambi ama naar.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dhaarta qamuusku malahan kafaara gud, khatarta ay leedahay iyo dambi waynideeda darteed, waxayse leedahay towbadkeen.
2. Afartaan dambi ee sheegidooda lagu koobay xadiiskaan waa waynida dambigooda, ee maha inay dambiyada waawayn intaa ku eg yihiin.
3. Dambiyadu waxay u qaybsamaan waawayn iyo yar yar, dambiyada waa wayni waa: dambi kasta oo ay ku soo aroortay ciqaab aduunka ah, sida danbiyada xuduuda leh ama lacnada, ama goodi kale, sida goodiga inuu naar gali doono, dambiyada waa waynina waa sida jaranjaro, qaarba qaar kaga sii adag yihiin xaaraanimada, dambiyada yar-yari waa wixii kuwaa waa-wayn ka soo hara.

(3044)

(172) – عَنْ عَبْدِ اللهِ بنِ مَسْعُودٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «أَوَّلُ مَا يُقْضَى بَيْنَ النَّاسِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِي الدِّمَاءِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(172) – Cabdullaahi Binu Mascuud- Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: "Waxa ugu horeeya ee dadka loo kala xukumaayo maalinta qiyaamaha waa dhiiga". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay waxa ugu horeeya ee loo kala xukumayo dadka is dulmayey maalinta qiyaamaha waa: dhiiga, sida dilka iyo dhaawacyada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dhiiga arinkiisu waa wayn yahay, bilaabidu waxay noqon shayga ugu muhimsan.
2. Dambiyadu waxay u kala daran yihiin kolba fasahaadka ka dhalanaya sida uu yahay, nafta aan waxba gaysan oo la dilaana waa dambiyada ugu waawayn, wax ka wayna ma jiraan gaalnimada iyo in Ilaahay loo shariig yeelo mooyee.

(2962)

(173) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ قَتَلَ مُعَاهَدًا لَمْ يَرَحْ رَائِحَةَ الْجَنَّةِ، وَإِنَّ رِيحَهَا تُوجَدُ مِنْ مَسِيرَةِ أَرْبَعِينَ عَامًا». [صحيح] - [رواه البخاري]

(173) – Cabdullahi Binu Camar Allaha ka raali ahaade Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu dhahay: "Qofka dila gaal mucaahida ma urin doono carafta janada, carafteedana waxaa laga uriyaa meel loo socdo afartan sano". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey goodiga adag ee ku soo arooray adag qofka dila mucaahad waana gaalka ku soogala dhulka muslimiinta heshiis iyo amaan, qofkaasi ma urindoono carafta janada, carafteedana waxaa laga uriyaa meel loo socdo afartan sano.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa xaaraan in la dilo mucaahidka, dimiga iyo musta-amanka, dilkooduna waa dambiyada waaweyn.
2. Mucaahadku: waa gaalka balan lala galo isagoo dhulkiisa jooga, inaanu la dagaalamayn muslimiinta, muslimiintuna amaan siinayaan, dimigu: waa midka deganaada dhulka Muslimiinta

ee jisyada laga qaado, musta-mankuna: waa gaalka ku soo gala dhulka islaamka heshiis iyo amaan, waqti kooban.

3. Waxaa laga digayaa in la khiyaamo balamada lagu jiro dadka aan musliniita ahayn.

(64637)

(174) – عن جُبَير بن مُطْعِم رضي الله عنه أنه سمع النبي صلى الله عليه وسلم يقول: «لَا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ قَاطِعُ رَحِمٍ». [صحيح] - [متفق عليه]

(174) – Jubeyr Binu Mudcim Allaha ka raali ahaade wuxuu ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Magalayo janada qofka gooya qaraabada." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka qaraabadiisa ka gooya waxay waajib ahaan ugu leeyihiin ee xuquuq ah, ama dhib iyo xumaan kula kaca, wuxuu mutaysanayaa inuusan janada gelin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qaraaba gonytu waa dambi dambiyada waa wayn ka mid ah.
2. Qaraabo xiriirintu waa kolba sida curfiga ah ee loo yaqaan, wayna kala duwan tahay sida ay u kala duwan yihiin dhulka, waqtiga iyo dadku.
3. Qaraabo xiriirintu waa in la is booqdo, sadaqado la siiyo, in loo ixsaan falo , kan buka la booqdo, wanaaga la faro, xumaanta laga reebo, iyo wixii la mid ah.
4. Mar kastoo qaraabo gooytu tahay dadka sokeeyaha is ku ah dambigu waa ka sii adag yahay.

(5367)

(175) – عن أنس بن مالك رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ أَحَبَّ أَنْ يُبْسَطَ لَهُ فِي رِزْقِهِ، وَيُنْسَأَ لَهُ فِي أَثَرِهِ، فَلْيَصِلْ رَحِمَهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(175) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Qofka jecel in loo waasiciyo irsaaqadiisa oo loo dheereeyo cumrigiisa, ha xiriiriyo qaraabadiisa." **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku booriyey in qaraabada lagu xiriiriyo booqasho, in la karaameeyo jir ahaan, xoolo ahaan iyo wixii la mida, waxayna sabab u tahay irsaaqada oo la waasiciyo iyo cimriga oo la dheereeyo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Raximku waa qaraabada ka soo jeeda xaga aabe iyo xaga hooyo, mar kasta oo uu noqdo qaraabo dhaw isagaa sii awlaysan in la xariiriyo.
2. Abaal marintu waa nooca camalka, qofkii qaraabadiisa ku xiriiriya wanaag iyo ixsaan, Ilaahay wuxuu u xiriiriyaa cimrigiisa iyo irsaaqadiisa.
3. Xiriirinta qaraabadu waxay sabab u tahay in irsaaqada loo waasiciyo waxay kaloo sabab u tahay in cimriga loo dheereeyo inkastoo ajasha iyo risqiguba qoran yihiin, laakiin waxay noqon kartaa in loo barakeeyo risqiga iyo cimriga, oo uu qabto wax ka badan kana nafac badan dadka kale waxay qabtaan, waxaa kale oo lagu sheegay risqiga iyo cimriga si dhab ah in loogu siyaadiyo, Ilaahay ayaa og.

(5372)

(176) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «لَيْسَ الْوَاصِلُ بِالْمُكَافِئِ، وَلَكِنِ الْوَاصِلُ الَّذِي إِذَا قُطِعَتْ رَحِمُهُ وَصَلَهَا». [صحيح] - [رواه البخاري]

(176) – Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay scw inuu yiri: (Maaha qofka qaraabada xiriiriya midka marka la xiriiriyo uun qaraabada xiriiriya, laakiin kan qaraabada xiriiriyaa waa midka marka qaraabadiisu goyso xiriiriya). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay: In qofka buuxiyey xiriirinta qaraabada oo wanaajiyaa aanu ahayn qofka ixsaanka ku guda ixsaan kaliya. Balse kan dhab ahaan u xiriiriya ee si buuxda qaraabada u xiriiriya waa kan hadii qaraabadu goyso xiriiriya, hadii ay xumeeyaana u ixsaan fala.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xiriirinta qaraabada ee sharci ahaan loo ictibaariyaa waa inaad xiriiriso qofka ku gooya, oo aad cafido kan ku dulma, oo aad siiso kan kuu diida, ee ma aha xiriirku mid ku salaysan wax is dhaafsi iyo is abaal marin.
2. Xiriirinta qaraabadu waa inaad gaarsiiso intii aad awoodo oo khayra, sida maalka, ducada, farida wanaaga, xumo ka reebida iyo wixii kale ee la mida, iyo ka difaacida wixii shar ah.

(3854)

(177) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «أَتَدْرُونَ مَا الْغِيبَةُ؟»، قَالُوا: اللهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ، قَالَ: «ذِكْرُكَ أَخَاكَ بِمَا يَكْرَهُ»، قِيلَ: أَفَرَأَيْتَ إِنْ كَانَ فِي أَخِي مَا أَقُولُ؟ قَالَ: «إِنْ كَانَ فِيهِ مَا تَقُولُ فَقَدِ اغْتَبْتَهُ، وَإِنْ لَمْ يَكُنْ فِيهِ فَقَدْ بَهَتَّهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(177) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee. yiri: "Ma taqaanaan xantu waxey tahay? ", waxay dheheen asaxaabtii: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa naga og, wuxuu yiri: " waa adigo walaalkaa wuxuu dhibsanaayo ku sheega, ", waxaa lagu yiri: ka waran haduu leeyahay walaalkay waxa aan ku sheegay? wuxuu ku yiri: " "haduu leeyahay waxaad, ku sheegtay waad xamatay haduusan lahayn waxaad ku sheegtayna waad hafaryeysay. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee. wuxuu cadeeyey xaqiiqada xanta la xarrimay oo ah: in lagu sheego qofka muslimka ee maqan wax uu dhibsaonayo, waxaasi ha ahaadaan sifooyinkiisa Ilaahay ku abuurkay ama kuwo dhaqankiisa ah sida: cawar, khaa'in, beenaale, iyo wixii lamida, ee ereyo cay ah, xataa haduu leeyahay sifadaa lagu shegay.

hadaanu lahayn waxaa lagu sheegayo taasi wayba ka sii dambi wayn tahay xanta, oo waaba been abuur, dadka lugu been abuuranayo wax aanay ahayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee si fiican ayuu wax u baray, waayo masalada wuxuu u soo jeediyaa sida suaal oo kale.
2. Asaxaabtu aadaab fiican ayey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee kula dhaqmeen markay yiraahdeen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og.
3. Qofkii la waydiiyo wax uusan aqoon wuxuu oronayaa: Ilaahay ayaa og.

4. Shareecadu way dar yeeshay bulshada iyada oo ilaalisay xuquuqda iyo walaaltinimada u dhexaysa.
5. Xantu waa xaaraan marka laga reebo xaalado qaarkood oo maslaxo ku jirto, waxaana ka mida: joojinta dulmiga, isaga oo dhibbanuhu sheego ka dulmiyay, una sheego cida awooda u leh inay xaqiisa uga qaado, wuxuu dhahaya: hebel baa i dulmiyey, ama waxaas iyo waxaas buu igu sameeyey, waxa kaloo ka mida: talo siinta qof guur kaala tashaday iyo shuraako ama la darsid iyo wixii la mida.

(5326)

(178) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: لَعَنَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ الرَّاشِي وَالْمُرْتَشِيَ فِي الْحُكْمِ. [صحيح] - [رواه الترمذي وأحمد]

(178) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu lacnaday laaluush bixiyaha iyo laaluush qaataha waana siman yihiin xaga xukunka. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At tirmidi iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku habaaray in Ilaahay naxariistiisa ka dheereeyo kan laaluushka bixiya, kan qaata, iyo kan u kala qaada.

Ariinkaa waxaa la mid ah waxa lasiiyo gar-soorayaasha si'ay cadaalada uga leexdaan xukunka ay faraha ku hayaan, taasoo kan dhiibaya laaluushku uu ku helayo muraadkiisa si aan xaq ahayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa xaaraan ah, bixinta laaluushka, qaadashadiisa, kan dilaalkiisa, u gar-gaarkiisa, waayo wuxuu soo galayaa isku kaalmaynta baadilka.

2. Laaluushku waa dambiyada waa wayn, waayo Rasuulka Ilaahay scw wuu lacnaday qofka qaata iyo kan bixiyaba.
3. Laaluushku marka la joogo gar soorka iyo xukunka waa dulmiga iyo dambiga ugu wayn, waxa ku jira dulmi iyo in lagu xukumo wax uusan Ilaahay soo dajin.

(64689)

(179) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صلى الله عليه وسلم قَالَ: «إِيَّاكُمْ وَالظَّنَّ؛ فَإِنَّ الظَّنَّ أَكْذَبُ الْحَدِيثِ، وَلَا تَحَسَّسُوا، وَلَا تَجَسَّسُوا، وَلَا تَحَاسَدُوا، وَلَا تَدَابَرُوا، وَلَا تَبَاغَضُوا، وَكُونُوا عِبَادَ اللهِ إِخْوَانًا». [صحيح] - [متفق عليه]

(179) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Nabiga ka wariyey nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Waxaan idiinka digayaa malaha, waayo maluhu waa warka ugu beenta badan, dadka ha baar baarina, ha basaasina, oo ha is xasdina, hana kala jeensanina, hana isku caroonina, adoomada Ilaahay oo walaalaa ahaada". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebey kana digay wax yaabaha u keena muslimiinta kala fogaanta iyo cadaawada. Waxaana ka mid ah:

(malaha), waana tuhun ku dhaca qalbiga daliilna aan lahayn, wuxuuna cadeeyey, inuu yahay war kan ugu beenta badan.

(ceebo raadintu): waa qofka oo ku raadiya isha ama dhagta ceebaha dadka.

Iyo (basaasida): waa baarida umuuraha dadka u qarsoon, inta badana waxaa laga sheegaa waa sharka.

Iyo (xasadka): waa qofka oo uurka ka naca dadka kale inay nicmo helaan.

Iyo (isu daba jeedin): waa dadka oo is naca oo midba mid ka jeensado, oo uusan salaamin oo siyaaran walaalkiisa muslimka ah.

Iyo (isku carood): waa in la is karho oo la kala dido, sida in dad kale la dhibo iyo in si xun loo qaabilo.

Ka dib wuxuu yiri hadal guud ee xaalka wadajirka muslimiintu ku hagaagayo, wuxuu yiri: (ahaada adoomo Ilaahay oo walaalo ah). walaaltinimadu waxay isku xidhaa xiriirka dadka ka dhexeeya, waxayna kordhisaa is jacaylka iyo isku duubnaanta dadka.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. dhib malaha hadii male xun laga maleeyo qofka calaamadihiisu ka muuqdaan, muuminkuna waa inuu ahaado qof caqlilow ah oo wax fahmi kara oo aan ku sirmin dadka xun iyo faasiqiinta.
2. Ujeedadu waa in laga digo malaha iyo tuhunka nafta ku jira oo lugu sii adkaysto, laakiin waxa nafta kusoo dhacaya ee aan ku sii harayn kaasi dhib malaha.
3. Waa la xarimay asbaabta keenta in bulshada Muslimku kala tagto isna goyso, sida is basaasida, xasadka, iyo wixii la mida.
4. Waxaa la isu dardaarmay in muslimka lagula dhaqmo dhaqan walaaltinimo iyo naseexo iyo is jacayl leh.

(5332)

(180) – عن حذيفة رضي الله عنه قال: سمعت النبي صلى الله عليه وسلم يقول: «لَا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ قَتَّاتٌ». [صحيح] - [متفق عليه]

(180) – Xudeyfa Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Janada magalo fitnoole." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka dadka xanta ee hadalka u kala qaada dadka si uu isugu diro uu mutaysanayo ciqaab ah inuusan janada gelin .

## Faa'iidooyinka xadiiska.:

1. Isku dirku wuxuu ka mid yahay dambiyada waa wayn.
2. Isku dirka waa la reebay, waayo wuxuu dhex dhigayaa dadka qof ahaan iyo busho ahaanba dhib iyo fasaad.

(5368)

(181) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «**كُلُّ أُمَّتِي مُعَافًى إِلَّا المُجَاهِرِينَ، وَإِنَّ مِنَ المُجَاهَرَةِ أَنْ يَعْمَلَ الرَّجُلُ بِاللَّيْلِ عَمَلًا، ثُمَّ يُصْبِحَ وَقَدْ سَتَرَهُ اللَّهُ عَلَيْهِ، فَيَقُولَ: يَا فُلَانُ، عَمِلْتُ البَارِحَةَ كَذَا وَكَذَا، وَقَدْ بَاتَ يَسْتُرُهُ رَبُّهُ، وَيُصْبِحُ يَكْشِفُ سِتْرَ اللَّهِ عَنْهُ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(181) – Abii Hureyra -Allaha karaali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- yaan ka maqlay isagoo dhahaya: "Ummaddayda dhamanteed waa laga cafin dambiyada kuwa xumaanta muujista maahee, qofku inuu danbi muujisto waxaa ka mida in ninku habeenkii danbi sameeyo oo waagu u baryo isagoo Ilaahay asturay markaasuu oron waar hebelow shalay waxaan suubiyey caykaas iyo caankaas xalayna wuxuu baryey isagoo Rabigi asturay, wuxuuna waa bariistay isagoo asturkii Ilaahay iska faydaya. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey qofka muslimka ah, ee dambaaba waxaa loo rajaynayaa cafinta Ilaahay iyo dambi dhaafkiisa, marka laga reebo midka cadaysta macsida oo ku faanaya si xishood la`aana, kaasi ma mudna in la cafiyo, isagoo habeenkii macsida suubiyey ayaa waagu u baryaa isagoo Ilaahay asturay, isagaase cid kale uga sheekeeya inuu macsi sameeyey shalay, ilaahay ayaa habeenkii asturay, subuxiina isagaa iska qaaday asturkii Ilaahay!!

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiska waxaa ku cad xumaanta ay leedahay macsida oo la muujisto markuu Ilaahay asturay ka dib.
2. Macsida oo la cadaysto waxaa ku sugan faaxishada oo ku faafta Muminiinta dhexdooda.
3. Qofka Ilaahay aduunka ku asturay aakhirana wuu ku asturayaa, taasina waa naxariista Ilaahay ee balaaran ee uu adoomadiisa siiyey.
4. Qofka lagu ibtileeyo macsi waa inuu naftiisa asturo, Ilaahayna u towbo keeno.
5. Dambi wayn bay leeyihiin kuwa muujista macsida ee u qasda inay macsida cadaystaan, waxay is dhaafinayaan dambi dhaafka Ilaahay.

(3756)

(182) – عَنِ ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما: أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خَطَبَ النَّاسَ يَوْمَ فَتْحِ مَكَّةَ، فَقَالَ: «يَا أَيُّهَا النَّاسُ، إِنَّ اللهَ قَدْ أَذْهَبَ عَنْكُمْ عُبِّيَّةَ الْجَاهِلِيَّةِ وَتَعَاظُمَهَا بِآبَائِهَا، فَالنَّاسُ رَجُلَانِ: بَرٌّ تَقِيٌّ كَرِيمٌ عَلَى اللهِ، وَفَاجِرٌ شَقِيٌّ هَيِّنٌ عَلَى اللهِ، وَالنَّاسُ بَنُو آدَمَ، وَخَلَقَ اللهُ آدَمَ مِنْ تُرَابٍ، قَالَ اللهُ: {يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِنْ ذَكَرٍ وَأُنْثَى وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللهِ أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ} [الحجرات: 13]». [صحيح] - [رواه الترمذي وابن حبان]

(182) – Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye waxaa laga wariyeye: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee dadka ayuu u khudbeeyey maalintii Makah la furay, wuxuuna yiri: "dadoow, Ilaahay ayaa idinka bixiyey kibirkii jaahiliyada, iyo ku faanideedii Aabayaashood, dadku waa laba qof uun: mid baari ah oo taqi ah, Ilaahayna kariim ku ah, iyo mid faajir ah oo hooge ah, oo aan Ilaahay qiimo la lahayn, dadku waa ilma Nabi Aadam calayhi Salaam, Aadamna ciidaa Ilaahay ka abuuray, Ilaahay wuxuu yiri:{dadow, waxaan idinka abuuray lab iyo dhadig, waxaana idinka yeelay shucuub iyo qabiilo, si aad isku aqoonsataan, Ilaahay xagiisana waxaa ugu qiimo badan kan idiinku taqwada badan, Ilaahay waa kii cilmi badan oo khibrad badan} [Al xujuraat:13]). **[Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey tirmidi iyo ibn xibbaan]**

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u khudbeeyey dadka maalinta makah la furay, wuxuuna yiri: dadow, Ilaahay ayaa idinka kor qaaday oo idinka bixiyey kibirkii jaahiliyada iyo islawaynideedii iyo iskugu faanidii aabayaasha, dadku waa labo nuuc uun:

Waa mid Muumin baari ah taqina ah oo Ilaahay casa wajala adeecay caabudayna, kaasi Ilaahay kariim ayuu ku yahay, yuuba ahaane mid sharaf iyo nasab dadka ku dhex lehe.

iyo mid gaal faajir ah oo hooge ah, kaasina Ilaahay xagiisa wuxuu ka yahay mid aan qiimo lahayn oo duli ah oo aan waxba ahayn, haba haado mid nasab ama waji iyo saldano lehe.

Dadka dhamaantood waa ubadkii Aadam, Aadamna Ilaahay wuxuu ka abuuray ciid, kuma haboona mid asalkii laga abuuray ciid inuu kibro oo uu is cajabiyo, waxaana u daliil ah qawlka Ilaaay casa wajala yiri: {dadoow anagaa idinka abuurnay lab iyo dhadig, waxaanan idinka yeelnay shucuub iyo qabiilo, si aad isku garataan, xaga Ilaahay waxaa

idiinku karaamo badan kan idiinku taqwo badan, Ilaahay waa cilmi badane khibrad badan.} [al-xujuraat:13].

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la reebay in la isugu faano nasabka iyo qabiilka.

(65074)

(183) – عن عائشة رضي الله عنها عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «إِنَّ أَبْغَضَ الرِّجَالِ إِلَى اللهِ الْأَلَدُّ الْخَصِمُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(183) – Caa'isha Allaha ka raali Ahaadee waxay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka warisey inuu yiri: "Ilaahay raga uu ugu neceb yahay waa garmaqaataha dooda badan." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay Isagaa sareeya oo nusqaan ka hufane uu u caroodo midka muranka iyo dooda badan, ee gar maqaataha ah, ee xaqa inuu muran ku difaaco doonaya, ama xaqa ugu dooda si ka baxsan aadaabta iyo xadkii loo baneeyey oo cilmi daro ku dooda.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Muranka xun ee la nacay masoo galayo oo kuma jiro dhibanaha xaqiisa u doodaya si sharciga waafaqsan.
2. Muranka iyo dooddu waxay ka mid yihiin aafada carabka ee sababata kala taga iyo kala jeensiga muslimiinta dhexdooda.
3. Muranka iyo doodu waa wax wanaagsan hadii xaq lagu doodayo qaab wanaagsana loo doodayo, waana wax xun hadii xaq la isku hor taagayo baadilna lagu difaacayo, ama ay tahay mid xaq iyo cadayn aan lahayn

(5474)

(184) – عن أبي بَكرة رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «إِذَا الْتَقَى الْمُسْلِمَانِ بِسَيْفَيْهِمَا فَالْقَاتِلُ وَالْمَقْتُولُ فِي النَّارِ»، فَقُلْتُ: يَا رَسُولَ اللهِ هَذَا الْقَاتِلُ، فَمَا بَالُ الْمَقْتُولِ؟ قَالَ: «إِنَّهُ كَانَ حَرِيصًا عَلَى قَتْلِ صَاحِبِهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(184) – Abii bakrata Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahaya: " Labo qof oo Muslima hadii ay seefohooda isu qaataan, kii wax dila iyo kan la dilaba naartay galayaan ", waxaan ku iri: Rasuulka Ilaahayow, kani waaba kii wax dilaye, ka la dilay maxay tahay arintiisu? wuxuu yiri: " wuxuu ku dadaalayey inuu dilo kan kale ". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay hadii labo qof oo muslimiin ahi seefo isku qaataan oo midba midka kale inuu dilo doonayo, kii wax dila naartuu galayaa sababtoo ah isagaa si toosa u dilay kii kale. Asaxaabtu waxay fahmi waayeen kan la dilay: sideebuu naarta u galayaa? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay in isaguna uu naarta galayo, sababtoo ah wuxuu ku dadaalayey inuu kan kale dilo, inuu kan kale dilona waxaa diiday uun in lagala hormaray dilka.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofkii qalbigiisa ka go`aansada inuu macsi sameeyo oo asbaabteedii ku dhaqaaqa wuxuu mutaysanayaa ciqaab.
2. Waxaa si adag looga diyagaa in muslimiintu is diriraan, arinkaas waxaa ku soo arooray goodi naar lagu galayo.
3. Dagaalka dhex mara muslimiinta ee xaq lagu dagaalamayo masoo galayo goodigaa, sida dagaalka Buqaada iyo Mufsidiinta.

4. Qofka dambiga Kabiirada ah gala laguma gaalaysiinayo kaliya inuu dambigaa galay, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku magacaabay labada diriray muslimiin.

5. Hadii labo Muslim ahi ay isu qaataana shay la isku dili karo, midkoodna kii kale dilo, kan wax dilay iyo kan la dilayba naartay galayaan, seefta lagu xusay xadiiska waa tusaale uun.

(4304)

(185) – عن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ حَمَلَ عَلَيْنَا السِّلَاحَ فَلَيْسَ مِنَّا». [صحيح] - [متفق عليه]

(185) – Abii Muusa Alashcari Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey, inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: "Qofka hub nooqaata nagama mid aha". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digay in muslimiinta hub loo qaato, si loo bajiyo ama loo boobo, qofka xaq daro sidaa u sameeya wuxuu ku kacay dambi wayn iyo danbi ka mida kabaa`irta waawayn, wuxuuna mudan yahay goodigaas adag.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa aad looga digay inuu qofka Muslim ka ahi walaalihiisa Muslimiinta ah la dagaalamo.

2. Munkarka iyo fasahaadka ugu wayn dhulka korkiisa waxaa ka mida in Muslimiinta hub looqaato, iyo in dhulka dil lagu fasahaadiyo.

3. Goodiga adag ee la soo sheegay makhuseeyo dagaalka xaqa ah, sida la dagaalanka kuwa sharciga jabiya, iyo mufsidiinta, iyo qayrkood.

4. Waa xaaraan in Muslimiinta lagu cabsi geliyo hub iyo waxa la midka ah- kaftanba ha ahaatee-.

(2997)

(186) – عن عائشة رضي الله عنها قالت: قال النبي صلى الله عليه وسلم: «لَا تَسُبُّوا الْأَمْوَاتَ، فَإِنَّهُمْ قَدْ أَفْضَوْا إِلَى مَا قَدَّمُوا». [صحيح] - [رواه البخاري]

(186) – Caa'isha Allaha ka raali ahaadee waxay tiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ha caayina dadka dhintay, way la kulmeen waxay hor marsadeene." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay xaaraan tahay in dadka dhintay la caayo iyo in sharaftooda wax laga sheego, taasina waa akhlaaq xumo, waayo waxay heleen waxay hor marsadeen ee acmaal fiican ama xun ahaa, caydaasina iyaga ma gaarayso ee waxay dhibaysaa kuwa nool.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskani wuxuu daliil u yahay inay xaaraan tahay cayda dadka dhintay.
2. In la iska daayo cayda dadka dhintay waxaa ku jira ilaalinta danta dadka nool, iyo ka ilaalinta bulshada cadaawadda iyo is nacaybka.
3. Xikmadda loo reebeyo cayda dadka dhintay waa inay la kulmeen wixii ay hor marsadeen, caydooduna waxba matarayso, waxayna dhib ku tahay qaraabadooda nool.
4. Ma haboona dadku inay ku hadlaan wax aan maslaxadi ku jirin.

(5364)

(187) – عن أبي أيوب الأنصاري رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «لَا يَحِلُّ لِرَجُلٍ أَنْ يَهْجُرَ أَخَاهُ فَوْقَ ثَلَاثِ لَيَالٍ، يَلْتَقِيَانِ، فَيُعْرِضُ هَذَا وَيُعْرِضُ هَذَا، وَخَيْرُهُمَا الَّذِي يَبْدَأُ بِالسَّلَامِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(187) – Abii ayuub Alansaarii Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: "Nina uma banaana inuu gooyo walaalkii saddex habeen wax ka badan, iyagoo kulmaya oo midba midka kale ka jeensanayo, labadoodana waxaa khayr badan kii bilaaba salaanta." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in qofka Muslimka ah gooyo walaalkiisa Muslimka ah wax ka badan saddex habeen, iyagoo wada kulmaya oo aan isasa salaamayn oo wada hadlayn.

Waxaana fadli badan labada isu caraysan kii isku daya inuu gooynta joojiyo oo salaanta bilaaba, gooynta la sheegay waxaa loo jeedaa wax qofka dantiisa ah, laakiin gooynta ku saabsan xaq Ilaahay leeyahay, sida in la gooyo kuwa caasiyada ah, kuwa bidcada ah iyo saaxiibada xun, taasi waqti kuma xirna ee waxay ku xiran tahay danta loo gooyey, oo hadii ay joogsato iyana way joogsan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxa loo baneeyey saddex maalmood iyo wixii ka yar, iyado la tix galinayo dabeecadaha dadka, waxaana laga cafiyey gooynta saddex beri ah si uu u dhamaado khilaafku.
2. Fadliga salaantu leedahay, iyo inay tirtirayso wixii nafta ku jira, waxayna astaan u tahay is jeclaanta.

3. Islaamku wuxuu ku dadaalay walaaltinimada iyo isku duubnaanta Muslimiinta u dhaxaysa.

(5365)

(188) – عن سهل بن سعد رضي الله عنه عن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ يَضْمَنْ لِي مَا بَيْنَ لَحْيَيْهِ وَمَا بَيْنَ رِجْلَيْهِ أَضْمَنْ لَهُ الْجَنَّةَ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(188) – Sahal Binu Sacad Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Rasuulka scw inuu yiri: (qofkii ii balan qaada inta u dhaxaysa labadiisa qal iyo waxa u dhexeeya labadiisa lugood waxaan u balan qaadayaa janada). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay labo arimood oo hadii qofka muslimku ilaaliyo uu janada ku galayo.

Tan koowaad: waa carabka oo laga ilaaliyo inuu ku hadlo wax Ilaahay ka caraysiinaya.

Tan labaad: waa Farjiga oo laga Ilaaliyo inuu ku dhoco macsi

Waayo waxaa badan in labadaa xubnood lagu sameeyo macaasi.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Carabka iyo farjiga in Ilaaliyo waxay sabab u tahay galida janada.
2. Waxaa si gaara loo sheegay carabka iyo farjiga, waayo labadoodu waa mimbaca ugu wayn ee dadka dhibku uga imaanayo aduun iyo aakhiroba.

(3475)

(189) – عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الخُدْرِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ -وَكَانَ غَزَا مَعَ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ثِنْتَيْ عَشْرَةَ غَزْوَةً- قَالَ: سَمِعْتُ أَرْبَعًا مِنَ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، فَأَعْجَبْنَنِي، قَالَ: «لاَ تُسَافِرِ المَرْأَةُ مَسِيرَةَ يَوْمَيْنِ إِلَّا وَمَعَهَا زَوْجُهَا أَوْ ذُو مَحْرَمٍ، وَلاَ صَوْمَ فِي يَوْمَيْنِ: الفِطْرِ وَالأَضْحَى، وَلاَ صَلاَةَ بَعْدَ الصُّبْحِ حَتَّى تَطْلُعَ الشَّمْسُ، وَلاَ بَعْدَ العَصْرِ حَتَّى تَغْرُبَ، وَلاَ تُشَدُّ الرِّحَالُ إِلَّا إِلَى ثَلاَثَةِ مَسَاجِدَ: مَسْجِدِ الحَرَامِ، وَمَسْجِدِ الأَقْصَى، وَمَسْجِدِي هَذَا». [صحيح] - [متفق عليه]

(189) – Abii Saciid Alkhudri -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu la duulay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee laba iyo toban duulaan -wuxuu yiri: Nabigaan nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaan ka maqlay afar aan jeclaaday, wuxuu yiri: "Haweenaydu uma safari karto meel loo socdo habeen iyo maalin hadii aanu la socon ninkeedu ama nin maxramkeeda, mana soomayso labada maalmood ee ciidul fidriga iyo ciidul adxa, salaada subaxa ka dibna salaad lama ogola ilaa qoraxdu soo baxdo, salaada casarna ka dibna lama ogola salaad ilaa ay qoraxdu dhacdo, sadex masaajid waxan ahayna looma safri karo: masjidka xaramka, masjidka Alaqsaa, masjidkayga kan ah." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wxuu reebay afar arimood:

Mida 1aad: haweenayda oo loo ogola inay safarto meel labo maalin loo socdo iyadoo aanay la socon ninkeeda ama nin maxaarimteeda ka mida ee ka mida qaraabadeda aanay waligood is guursan karin, sida Wiilkeeda, Aabbeheed, Wiilka walaalkeed dhalay, Wiilka walaasheed dhashay, adeerkeed, abtigeed, iyo inta la midka ah.

mida 2aad: waxaa la reebay soonka maalinta ciidul fidriga iyo ciidul adxa, waa isku mid haduu Muslimku u soomo nidar ama suno ama kafaara gud.

mida 3aad: la ma tukan karo salaado suno ah salaada casar ka dib ilaa ay qoraxdu dhacdo, marka fajarku soo boxo ka dibna la ma tukan karo ilaa ay soo baxdo qoraxdu.

Mida 4aad: looma safri karo meel dhulka ka mida oo la aaminsan yahay inay fadli gaara dheer tahay meelaha kale oo ajarkeeda la laalaabayo, oo aan ahayn sadexda masaajid, oo meel aan iyaga ahayn salaad looguma safri karo: masjidka Xaramka, masjidka Nabiga, masjidka Alaqsaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Haweenayda uma banaana inay safarto maxram la'aan.
2. Safarka haweenaydu maxram uma noqon karto haweenay kale, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "ninkeeda ama mid maxram u ah."
3. Socod kasta oo safar loo yaqaan haweenayda waa ka xaaraan hadaanu la socon ninkeedu ama maxram kale oo rag ah, xadiiskanina wuxuu ahaanayaa kolba duruufta qofka su'aasha leh iyo dalka uu ku nool yahay.
4. Maxramka gabadhu waa ninkeeda iyo nin walba oo qaraabada aanay waligood is guursan karin ah, sida Aabbaha, Wiilkeeda, Adeerka, Abtiga, ama dhinaca nuugmada, sida Aabbaha nuugmada, Adeerka nuugmada, ama xididnimo, sida ninkeeda aabihi, marwalbana maxramku waa inuu ahaado muslim, qaan gaar ah , caqligiisu dhan yahay, Aamin lagu kalsoon yahay, ujeedada maxramku waa inuu ilaalin karo gabadha oo masuuli ka noqon karo.
5. Shareecada Islaamku way maamustay haweenka, oo ilaalisay oo xushmaysay.
6. Salaada sunaha ah ee aan sabab lahay ma ansaxayso salaada fajarka iyo casarka ka dib, waxaa laga soo reebay oo la

tukanayaa salaadaha qadaha ah ee faralka ah ee qofka dhaafay, iyo sunaha sababta leh, sida taxiyatul masjidka iyo wixii la mida.

7. Waa la xarimay salaada marka qoraxdu toos u soo baxayso ka dib, balse waa inay kor u soo kacdo ilaa wax le`eg waran oo kale, oo u dhaw toban daqiiqo ilaa rubuc saac.
8. Waqtida salaada casarku waa ilaa qorax dhaca.
9. xaddiiska waxaa ku sugan inay banaan tahay in saddexdaa masaajid loo safri karo.
10. xaddiiska waxaa ku sugan fadliga ay leeyihiin sadexdaa masaajid, oo ay inta kale dheer yihiin.
11. Ma banaana in loo safro siyaaro qubuur, haba ahaado qabriga Nabigee-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, qofkiise madiina jooga ama u yimaada ujeedo mashruuc kale way u banaan tahay booqashada qabriga Nabiga.

(10603)

(190) – عن أسامة بن زيد رضي الله عنهما عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَا تَرَكْتُ بَعْدِي فِتْنَةً أَضَرَّ عَلَى الرِّجَالِ مِنَ النِّسَاءِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(190) – Usaama Binu Seyd Allaha ka raali ahaado isagiyo Aabihiibee, wuxuu ka wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Ugama tegin gadaashayda fitno raga uga daran dumarka). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inuusan gadaashiisa uga tegin raga itaxaan iyo ibtilo uga daran dumarka, haday ehelkiisa tahay waxaa dhici kara inuu ku raaco wax ay sharciga ku khilaaftay, haday ajnabi ka tahayna inay is dhex galaan oo uu la khaali noqdo ayaa fasaad uga imaan karaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska.:

1. Qofka muslimka ah waxaa looga baahan yahay inuu ka digtoonaado fitnada haweenka, iyo inuu iska oodo meel kasta oo fitno dumar uga iman karto.
2. Waxaa la gudboon muuminka inuu Ilaahay cuskado oo isaga jeclaado si uu uga nabad galo fitnooyinka aduunka.

(5830)

(191) – عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «إِنَّ الدُّنْيَا حُلْوَةٌ خَضِرَةٌ، وَإِنَّ اللهَ مُسْتَخْلِفُكُمْ فِيهَا، فَيَنْظُرُ كَيْفَ تَعْمَلُونَ، فَاتَّقُوا الدُّنْيَا وَاتَّقُوا النِّسَاءَ، فَإِنَّ أَوَّلَ فِتْنَةِ بَنِي إِسْرَائِيلَ كَانَتْ فِي النِّسَاءِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(191) – Abii Saciid al Khudri-Allaha ka raali ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Aduunyadu waa macaan cagaaran, Ilaahayna idinkuu idiin dhiibay, wuxuuna fiirin waxa aad ku samaysaan, aduunyada iska jira dumarkana iska jira, fitnadii reer beni israa'iil lagu fitneeyey ee ugu horaysay dumarkay ahayd". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay aduunyadu dhadhan macaan tahay, aragana cagaar u tahay, dadkuna way ku kadsoomayaan, oo isku sii daynayaan macaankeeda, hamigiisa ugu wayna iyaduu ka dhigayaa. Ilaahayna -isagaa nusqaan ka hufane- wuxuu inaga yeelay in qaarkeenba qaarka kale uga danbeeyo aduunyada, si uu Ilaahay u eego waxa aynu samaynayno, inaan isaga adeecayno iyo inaan ku caasiyeyno. Ka dib wuxuu yiri: ka digtoonaada inaad ku sirtoontaan raaxada aduunyada iyo quruxdeeda, oo ay idin gaarsiiso inaad ka tagtaan wuxuu Ilaahay idin faray, oo aad ku dhacdaan wuxuu idinka reebay. Fitnada aduunyada ugu wayn ee ay waajibka tahay in laga digtoonaadaa waa fitnada dumarka, iyadayna ahayd fitnadii ugu horaysey ee reer bani Israa'iil ay ku dhacaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa in la joogteeo Taqwada, oo aan lagu mashquulin muuqaalada aduunyada iyo quruxdeeda.
2. Waxaa laga digayaa in lagu fitnoobo dumarka, sida eegistooda iyo in raga ajaanibta ka ahi ku dhex jiraan, iyo wixii la mida.
3. Fitnada dumarku waa fitnooyinka ugu waaweyn aduunyada.
4. Waa in la waansamo oo lagu cibroqaato ummadihii hore, waayo wixii reer banii israa'iil ku dhacay qayrkoodna wuu ku dhici karaa.
5. fitnada Dumarku markay xaaska tahay waxay ku kallifi kartaa ninka masruuf aanu awoodin, waxayna ka mashquulisaa barashada cilmiga, waxayna ku kalifaysaa inuu isku dhabar jabiyo raadinta aduunyada, haday ajnabi ka tahayna fitnadeedu waa inay damac galiso oo xaqa ka leexiso, markay soo baxaan oo ay raga dhex galaan, gaar ahaan hadii aysan asturnayn ee cawradoodu muuqdato, taasina waxay keenaysaa in lagu dhaco sinada darajooyinkeeda, muminka waxaa ku haboon inuu Ilaahay magan galo oo jeclaado si uu uga nabad galo finada Dumarka.

(3053)

(192) – عن أبي موسى رضي الله عنه أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «لا نِكَاحَ إِلّا بِوَلِيٍّ».

[صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وابن ماجه وأحمد]

(192) – Abbii Muusa Allaha ka raali ahaae wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu dhahay: "Ma jiro guur wali la'aantii". [Xadiis Saxiix ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At􀀀Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inay gabadha guurkeedu ansaxayn wali nikaaxiya la`aanti.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waligu wuxuu shardi u yahay nikaaxu inuu ansaxo, haduu wali la`aan la nikaaxo ama gabadhu iyadu isu guuriso nikaasi ma ansaxaayo.
2. Waligu waa ninka ugu dhow gabadha, uma guurinaayo wali ka fog iyadoo mid uga dhawaa joogo.
3. Waliga waxaa u shardi ah: inuu yahay qof masuula oo nin ah, waa inuu yaqaan maslaxada nikaaxa, waa inay isaga iyo gabadhu isku diin yihiin, qofka aan sifooyinkaas laga helin wali uma noqonkaro nikaax.

(58066)

(193) – عن عقبة بن عامر رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «أَحَقُّ الشُّرُوطِ أَنْ تُوفُوا بِهِ مَا اسْتَحْلَلْتُمْ بِهِ الْفُرُوجَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(193) – Cuqba Binu Caamir Allaha ka raali ahaadee waxa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: (Shuruuda ugu xaqnimo badan inaad oofisaan waa tii aad ku xalaashateen farjiga). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in shuruuda ugu mudan in la fuliyo ay tahay shardiga lagu xalaashaday ku raaxaysiga dumarka, waana shuruud mubaax ah oo ay dalban karto xaasku marka la nikaaxayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib fulinta shardiga labada is qabaa midkood kan kale ku xiro, shardi xaaraan xalaalaynaaya ama shardi xalaala xaaraantimaynaaya mooyee.

2. Fulinta shuruuda nikaaxa wuu ka mudan yahay wixii qayrki ah, waayo waxaa looga bedeshay oo lagu xalaashaday farjiga.
3. Ilaamku guurka makaano wayn ayuu dhigay, waayo wuxuu adkeeyey oofinta shuruudiisa.

(6021)

(194) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «الدُّنْيَا مَتَاعٌ، وَخَيْرُ مَتَاعِ الدُّنْيَا الْمَرْأَةُ الصَّالِحَةُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(194) – Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiibe wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Aduunyadu waa raaxo, raaxada aduuna waxaa u khayr badan gabar saalixad ah. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in aduunyada iyo waxa dhex yaalaba ay yihiin wax waqti kooban lagu raaxaysto, ka dibna tagaya, raaxada aduun waxaa ugu fiican xaas saalixad ah, taasoo markuu ninkeedu eego farxad gelisa, markuu wax farana adeecda, markuu ka maqnaadana nafteeda iyo maalkiisaba ilaalisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa banaan ku  raaxaysiga wax yaabaha wanaagsan ee Ilaahay u xalaaleeyey adoomadiisa iyadoon la israafayn ama riyo beenaad laga dhigin.
2. Waxaa la isku booriyey xulashada xaas wanaagsan, waayo waxay ninkeeda ku caawinaysaa inuu rabigi caabudo.
3. Raaxada aduunka waxaa ugu khayr badan wixii cibaadada Ilaahay la xiriira ama wixii cibaadada ku kaalmeeya.

(5794)

(195) – عَن عَبْدِ الرَّحْمَنِ بْنِ أَبِي لَيْلَى أَنَّهُمْ كَانُوا عِنْدَ حُذَيْفَةَ، فَاسْتَسْقَى فَسَقَاهُ مَجُوسِيٌّ، فَلَمَّا وَضَعَ القَدَحَ فِي يَدِهِ رَمَاهُ بِهِ، وَقَالَ: لَوْلاَ أَنِّي نَهَيْتُهُ غَيْرَ مَرَّةٍ وَلاَ مَرَّتَيْنِ -كَأَنَّهُ يَقُولُ: لَمْ أَفْعَلْ هَذَا-، وَلَكِنِّي سَمِعْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «لاَ تَلْبَسُوا الحَرِيرَ وَلاَ الدِّيبَاجَ، وَلاَ تَشْرَبُوا فِي آنِيَةِ الذَّهَبِ وَالفِضَّةِ، وَلاَ تَأْكُلُوا فِي صِحَافِهَا، فَإِنَّهَا لَهُمْ فِي الدُّنْيَا وَلَنَا فِي الآخِرَةِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(195) – Cabduraxmaan Binu Abii Laylaa waxaa laga wariyey inay la joogeen Xudayfa oo codsaday in la waraabiyo markaasaa waxaa waraabiyey nin majuusi ah, markuu galaaskii qabtay ayuu ku tuuray isagii, wuxuu yiri: hadii aan la ii diidi lahan mar iyo labo maahee, waaba isaga oo aad moodid inuu leeyahay: sidaa ma sameeyeen, laakiin Nabigaan ka maqlay isagoo dhahaya: "Ha xiranina xariirta iyo diibaajka, hana ku cabina weelasha dahabka iyo fidada ka samaysan, hana ku cunina wax xeerooyinka labadaa ka samaysan, waayo gaaladaa aduunka wax ku cuna inaguna aakhiraan leenahay." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u diiday raga inay xirtaan dharka xariirta ah dhaaman noocyadiisa kala duwan. Raga iyo dumarkabana wuxuu ka reebay inay ku cunaan ama ku cabaan weelasha ka samaysan dahabka iyo fidada. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu u sheegay inay mu'uminiitu gaar u yeelan doomaan maalinta qiyaamaha, waayo aduunka ayey uga tageen iyagoo Ilaahay ku adeecaya. Gaaladuse alaabtaa ma helayaan aakhiro, waayo noloshoodii aduunka ayey ku soo hor marsadeen wanaagoodii wayna soo isticmaaleen alaabtaas, Ilaahayna way ku caasiyeen.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Raga waa ka xaaraan inay ku labistaan xariirta iyo diibaajka, goodi adag ayaa ugu soo arooray qofkii labista.

2. Haweenka waa u banaan tahay inay ku labistaan xariirta iyo diibaajka.
3. Waa xaaraan in wax lagu cuno oo wax lagu cabo weelasha dahabka iyo fidada weelasha labadaas laga sameeyey rag iyo dumarba waa ka xaaraan.
4. Xudayfa aad ayuu u adkeeyey diidmada isticmaalka weelashaa kor ku xusan, waayo ninkaan mar wax ka badan ayuu ka reebay isticmaalka weelasha dahabka iyo fidada, laakiin ma uusan ka joogsan.

(2985)

(196) – عن ابن عمر رضي الله عنهما: أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ نَهَى عَنِ الْقَزَعِ.
[صحيح] - [متفق عليه]

(196) – Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiibee-: Wuxuu ka wariyey Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu diiday qasciga. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Wuxuu diiday Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in timaha madaxa qaybna laxiiro qaybna la daayo.

diidmadanu waa guud ahaan raga yaryar iyo kuwa wawaynba, dumarkase uma banaana inay timaha madaxooda xiiraan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Shareecada Islaamku way ilaalisay muuqaalka dadka.

(8914)

(197) – عن ابن عمر رضي الله عنهما عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «أحْفُوا الشَّوَارِبَ وأَعْفُوا اللِّحَى». [صحيح] - [متفق عليه]

(197) – Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiiye wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyeyn inuu yiri: "Gaabiya shaarubka garkana daaya". **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu faray in la gaabiyo shaarubka, oo aan la dayn balse lagu xeel dheeraado gaabinta.

Taa baddalkeed wuxuu amray Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in la daayo garka oo la dhaafo isagoo badan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa xaaraan xiiritaanka garku.

(3279)

(198) – عَن أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «لَا يَنْظُرُ الرَّجُلُ إِلَى عَوْرَةِ الرَّجُلِ، وَلَا الْمَرْأَةُ إِلَى عَوْرَةِ الْمَرْأَةِ، وَلَا يُفْضِي الرَّجُلُ إِلَى الرَّجُلِ فِي ثَوْبٍ وَاحِدٍ، وَلَا تُفْضِي الْمَرْأَةُ إِلَى الْمَرْأَةِ فِي الثَّوْبِ الْوَاحِدِ». **[صحيح] - [رواه مسلم]**

(198) – Abii Saciid Alkhudri -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Rasuulka Ilaahay ka wariyey inuu yiri: "Yaanu eegin ninku cawrada nin kale, haweenayduna yaanay eegin cawrada naag kale, ninna yaanu la huwan nin kale hal maro, haweenayna yaanay haweenay kale la huwan hal maro." **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in ninku eego cawrada nin kale, iyo inay haweenaydu eegto cawrada haweenay kale.

cawraduna: waa wax kastoo laga xishoodo hadii ay muuqato, cawrada ninkuna waa inta u dhaxaysa xuduntiisa iyo lawgiisa, Haweenayduna dhamaanteed cawro ayey ka tahay raga ajaanibta ah,

dumarka iyo raga maxaarimteeda ahna waxay u muujinaysaa inta ay muujiso marka ay guriga ka shaqaynayso.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay inuu ninku ninkale hal maro ama wax kalaba kula keliyoobo iyagoo qaawan, wuxuu kaloo reebay in haweenay ay haweenay kale hal maro ama wax kale kula keli noqoto iyagoo wada qaawan, waayo arinkaasi wuxuu keenayaa in qofba qofka kale cawradiisa taabto, taabashadeeduna waa xaaraan sida eegmadeeda loo xaaraan tinimeeyey, oo waliba way kasii daran tahay, waxayna keenaysaa fasahaad kasii wayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la reebay in la eego cawrooyinka marka laga reebo ninka iyo xaaskiisa.
2. Islaamku wuxuu ku dadaalay in bulshadu daahir ahaato oo la xiro dariiq walba oo faaxisho keenaya.
3. Way banaan tahay eegmada cawradu markay baahi keento sida daawaynta iyo wixii la mida, waana inaan shahwad loo taaban.
4. Qofka muslimka ah waxaa la faray inuu cawradiisa asturo oo indhihiisana ka laabto cawrada dadka kale.
5. waxaa reebida lagu gaar yeelay rag la jooga rag kale iyo dumarka la jooga dumar kale, waayo taasi waxay keenaysaa inay is eegaan oo cawrada faydaan.

(8904)

(199) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما قال: لَمْ يَكُنِ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَاحِشًا وَلَا مُتَفَحِّشًا، وَكَانَ يَقُولُ: «إِنَّ مِنْ خِيَارِكُمْ أَحْسَنَكُمْ أَخْلَاقًا». [صحيح] - [متفق عليه]

(199) – Cabdullaahi Binu Camar Allah ka raali ahaado isaga iyo aabihiye wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ma ahayn mid af xun oo ma xishoode ah, wuxuuna dhihi jiray: " waxaa idiinku ikhyaarsan kuwa idiinku akhlaaq fiican." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Kama mid ahayn Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee akhlaaqdiisa hadalka xun iyo ficilka xuni, mana ahayn mid u qasda xumaanta ama ula kac u sameeya xumaan, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa mid akhlaaq wayn leh.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu oran jiray kan Ilaahay xagiisa idiinku fadliga badan waa kan idiinku akhlaaq wanaagsan, sida wanaag bixinta waji furnaanta, dhib la'aanta, u dul qaadashada dadka, iyo dad la dhaqanka wanaagsan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Muuminka waxaa ku haboon inuu ka fogaado fuxshiga, hadlka xun iyo ficilka xun.
2. Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee akhlaaqdiisa kaamil nimadeeda kama soo bixi jirin camal saalixa iyo ereyo fiican maahee.
3. Akhlaaq wanaagu waa goob banaan oo lagu tartamo, qofka u dheereeya wuxuu ka mid noqonayaa Muuminiinta ikhyaartooda ee iimaankoodu kaamilka yahay .

(5803)

(200) – عن عائشة رضي الله عنها قالت: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «إِنَّ الْمُؤْمِنَ لَيُدْرِكُ بِحُسْنِ خُلُقِهِ دَرَجَةَ الصَّائِمِ الْقَائِمِ». [صحيح بشواهده] - [رواه أبو داود وأحمد]

(200) – Caa'isha Allaha ka raali ahaadee waxay tiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Qofka muuminku wuxuu ku gaaraa akhlaaq wanaagiisa darajada qofka sooman ee salaad u taagan). **[Xadiis Saxiix ah, marka la eego u Marag kaca kale ee soo arooray] - [Waxaa Wariyay Abuu Daa'uud iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in akhlaaq wanaagu ay qofka gaarsiiso darajada qofka si joogto ah maalintii u sooma habeenkiina salaad u taagan, akhlaaq wanaaga waxaa lagu soo ururiyey: gacan furnaanta, hadal wanaaga, waji furnaanta, joojinta dhibka iyo dadka oo uu u dulqaato.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Diinta islaamku si wayn ayey u ilaalisay in la carbiyo akhlaaqda iyo kaamil nimadeeda.
2. Fadliga akhlaaq wanaaga adoonku wuxuu ku gaaraa daraja qofka sooman ee aan afurayn iyo kan salaad u taagan ee aan daalayn.
3. Soonka maalinta iyo salaatul-laylku waa labo camal oo waawayn naftana ku adag, darajadooduna gaarayso mida uu helo qofka akhlaaqda wanaagsan, waayo wuxuu ku dadaalay in naftiisu dhaqan wanaagsan yeelato.

(5799)

(201) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «أَكْمَلُ الْمُؤْمِنِينَ إِيمَانًا أَحْسَنُهُمْ خُلُقًا، وَخَيْرُكُمْ خَيْرُكُمْ لِنِسَائِهِمْ». [حسن] - [رواه أبو داود والترمذي وأحمد]

(201) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Muuminiinta waxaa ugu iimaan sareeya kan ugu akhlaaqda wanaagsan, waxaana idiinku khayr badan kuwa dumarkooda u khayroon.) [Xadiis Xasan ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At Tirmidi, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka dadka ugu iimaan badan uu yahay kan akhlaaqdiisu fiican tahay, taasoo ah waji furnaanta, wanaag samaynta, hadal wanaaga, iyo dhibka oo uu iska daayo.

Muuminiinta waxaa ugu khayr badan kuwa dumarkooda u khayr roon, sida xaaskiisa, gabdhihiisa, walaalihiis iyo dumarka qaraabadiisa ah, waayo kuwaasaa u xaq leh akhlaaq wanaagiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa fadliga akhlaaqda wanaagsan iyo inay ka mid tahay iimaanka.
2. Camalku iimaan kuu ka mid yahay, iimaankuna wuu kordhaa wuuna yaraada.
3. Islaamku wuu maamuusay Dumarka wuxuuna ku booriyey in loo ixsaan falo.

(5792)

(202) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: سُئِلَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَنْ أَكْثَرِ مَا يُدْخِلُ النَّاسَ الْجَنَّةَ، فَقَالَ: «تَقْوَى اللهِ وَحُسْنُ الْخُلُقِ»، وَسُئِلَ عَنْ أَكْثَرِ مَا يُدْخِلُ النَّاسَ النَّارَ فَقَالَ: «الْفَمُ وَالْفَرْجُ». [حسن صحيح] - [رواه الترمذي وابن ماجه وأحمد]

(202) – Abii Hurayra Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa la waydiiyey waxa ugu badan ee janada lagu galo, wuxuuna yiri: "waa cabsida Ilaahay iyo Akhlaaq wanaaga ", waxa kaloo la waydiiyey waxa ugu badan ee naarta lagu galo, wuxuuna yiri: "waa afka iyo farjiga." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At tirmidi, Ibnu Maajah iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey asbaabta ugu wayn ee janada lagu galo inay yihiin labo sababood oo ah:

Ilaahay cabsidiisa iyo akhlaaq wanaagsan.

Ilaahay cabsidiisu: waa inaad samaysataa wax cadaabka Ilaahay kaa xigsada, taasoo ah inaad amarkiisa raacdo kana fogaato wixii uu kaareebay.

Akhlaaq wanaaguna: waa waji furnaanta, wanaag samaynta iyo dhibka oo la joojiyo.

Asbaabta ugu weyn ee naarta lagu galana waa labo sababood, ku waasoo ah: Carabka iyo farjiga.

Carabka macsidiisa waxaa ka mid ah: beenta, xanta, isku dirka iyo wixii la mid ah.

Farjiga macsidiisa waxaa ka mid ah: sinada, khaniisida, iyo wixii la mid ah.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Galitaanka janadu waxay leedahay sababo Ilaahay ku xiran, waxaana ka mida Ilaahay cabsidiisa, iyo sababo dadka ku xiran, waxaana ka mid ah: akhlaaq wanaaga.

2. Khatarta carabku u leeyahay qofka, iyo inuu ka mid yahay asbaabta naarta lagu galo.

3. Khatarta shahawaadka iyo fuxshigu u leeyihiin dadka, iyo inay ka mid yihiin asbaabta ugu badan ee naarta lagu galo.

(5476)

(203) – عن أنس بن مالك رضي الله عنه قال: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَحْسَنَ النَّاسِ خُلُقًا. [صحيح] - [متفق عليه]

(203) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali noqdee waxa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa kan dadka ugu akhlaaq fiican. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa dadka ugu akhlaaq badnaa, isagaana ugu horeeyey dadka dhamaan xaga Akhlaaqda wanaagsan oo dhan, sida hadal wanaaga, gacan furnaanta, bashaash nimada, dhib la'aanta, u dul qaadashada dadka dhibkooda.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Kaamilnimada akhlaaqda Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa ku cad xadiiskaan.
2. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa tusaale dhamaystiran xaga dhaqan iyo akhlaaq wanaaga.
3. Waxaa lagu boorinayaa dadka inay kaga daydaan Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee akhlaaq wanaaga.

(6180)

(204) – قال سعد بن هشام بن عامر -عندما دخل على عائشة رضي الله عنها-: يَا أُمَّ الْمُؤْمِنِينَ، أَنْبِئِينِي عَنْ خُلُقِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، قَالَتْ: أَلَسْتَ تَقْرَأُ الْقُرْآنَ؟ قُلْتُ: بَلَى، قَالَتْ: فَإِنَّ خُلُقَ نَبِيِّ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ الْقُرْآنَ. [صحيح] - [رواه مسلم في جملة حديثٍ طويل]

(204) – Wuxuu yiri sacad Binu Hishaam Binu Caamir-markuu u galay Caa'isha-Allaha ka raali ahaaadee-: Hooyadii mu'uminiintaay, ii sheeg akhlaaqdii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, waxay tiri: Qur'aanka miyaadan akhrin? waxaan iri: haa, waxay tiri: akhlaaqda Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa Qur'aanka. [Xadiis Saxiix ah] - [muslim baa wariyey isagoo xadiis aad udheer ah]

## Sharraxaad:

Waxaa la waydiiyey Caa'isha-Allaha ka raali ahaade akhlaaqdii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxay ku jawaabtay hadal aad u guda wayn, waxayna ku jeedisay qofkii su'aasha waydiiyey Qur'aanka oo ah kitaabka sifooyinkiisa oo dhan kaamil yihiin, waxayna dhahday: wuxuu ahaa Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee mid ka akhlaaq dhigta Qur'aanka, oo ku dhaqma isaga, Qur'aanku wuxuu faro wuu fulin jiray, wuxuu ka reebana wuu ka fogaanayey, khuluqiisu wuxuu ahaa mid Qur'aanka ku camal fala, kuna ekaada xuduuddiisa, ka edeb qaata quraanka, oo ku cibro qaata maahmaahyihiisa iyo qisooyinkiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa lagu boorinayaa dadku inay kaga daydaan Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee akhlaaqdiisii uu ka dhigtay akhlaaqda Qur'aanka.
2. Waa la amaanay akhlaadii Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxayna ka mid ahayd ilayskii waxyiga.
3. Qur'aanku waa salka u noqoshada dhamaan akhlaaqda wanaagsan.

4. Akhlaaqdu islaamka waxay koobaysaa diinta oo dhan hadii ay tahay amarka oo la fuiyo iyo hadii ay tahay wixii la iska reebay oo laga fogaado.

(8265)

(205) – عن شداد بن أوس رضي الله عنه قال: ثِنْتَانِ حَفِظْتُهُمَا عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «إِنَّ اللهَ كَتَبَ الْإِحْسَانَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ، فَإِذَا قَتَلْتُمْ فَأَحْسِنُوا الْقِتْلَةَ، وَإِذَا ذَبَحْتُمْ فَأَحْسِنُوا الذَّبْحَ، وَلْيُحِدَّ أَحَدُكُمْ شَفْرَتَهُ، فَلْيُرِحْ ذَبِيحَتَهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(205) – Shadaad Binu Aws Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee labo ayaan ka xifdiyey isagoo dhahaya: "Ilaahay wuxuu faray in shay walba loo ixsaan falo, hadii aad wax dilaysaan dilka wanaajiya, hadii aad gawracaysaan gawraca wanaajiya, mididana afeeya, oo neefka u raaxeeya. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay nagu waajibiyey inaan shay walba u ixsaan falo,

Ixsaankuna: waa in Ilaahay si joogto inoo ilaalinaayo, oo uu eegaayo caabududiisa, bixinta khayrka, dadka oo dhibka laga daayo, ixsaankaas waxaa soo galaya dilka iyo gawraca.

Ixsaanka qisaastu waa: in loo dooro dariiqa ugu sahlan oo ugu fudud oo ugu dhaqso badan oo nafta looga goyn karo kan la dilaayo.

ixsaan falka gawracu waa marka la gawracyo: oo waa in loogu naxariisto neefka in la afeeyo midida, oo aan hortiisa lagu afayn isagoo eegaya, oo xoolo kale oo u jeeda aan la gawricin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa Ilaahay naxariistiisa casa wajala iyo u dhimrinta khalqiga.
2. Ixsaanka dilka iyo gawracu waa inuu ahaado siday shareecadu jidaysay.

3. Waa kaamilnimada shareecada oo koobaysa khayr oo dhan, waxaana ka mida in loo naxariisto xayawaanka oo loo dhimriyo.
4. Waxaa la reebay in sar-waji lagu sameeeyo dadka marka la dilo ka dib.
5. Waa la xarimay wax walba oo ay ku jirto ciqaabta xayawaanku.

(4319)

(206) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ الْمُقْسِطِينَ عِنْدَ اللهِ عَلَى مَنَابِرَ مِنْ نُورٍ، عَنْ يَمِينِ الرَّحْمَنِ عَزَّ وَجَلَّ، وَكِلْتَا يَدَيْهِ يَمِينٌ، الَّذِينَ يَعْدِلُونَ فِي حُكْمِهِمْ وَأَهْلِيهِمْ وَمَا وَلُوا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(206) – Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiibe wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "dadka cadaalada ku dhaqma Ilaahay agtiisa ayey ku fadhiyaan minbar nuur ah, kaasoo ah midigta Ilaahay casa wajala, iyadoo labadiisa gacmoodba ay midig yihiin, dadkaasu waa kuwa cadaalada ku suubiya xugunkooda, reerkooda iyo cidii ay masuulka ka yihiinba. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay kuwa dadka ay maamulaan iyo eheladoodaba cadaalad iyo xaqa ku xukuma, waxay ku fariisanayaan kuraas dhaa-dheer oo nuur ka samaysan, oo iyaga lagu maamuusayo maalinta qiyaamaha. manaabirtaas waxay taalaa Allaha raxmaanka ah midigtiisa, Isagoo labadiisa gacmoodba-Isagaa nusqaan ka hufane- ay midig yihiin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadli ayey leedahay cadaalada iyo isku boorinteeda.

2. Cadaaladu waa wax guud oo koobaysa dhamaan masuuliyada iyo dadka oo la kala xukumo iyo in cadaalad loo sameeyo xaasaska caruurta iyo qayrkoodba.
3. Cadaynta maqaamka ay leeyihiin dadka caadiliinta ah maalinta qiyaamaha.
4. Maalinta qiyaamaha dadka Ahlu iimaanka ah mansiladoodu waa kala tagsan tahay qof walbana sida camalkiisu ahaa ayuu noqon.
5. qaabka wax jeclaysiintu wuxu ka mid yahay qaababka diinta dadka loogu yeero taasoo qofka loo yeeraayo jeclaysiinaysa cibaadada.

(4935)

(207) – عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «لَا ضَرَرَ وَلَا ضِرَارَ، مَنْ ضَارَّ ضَرَّهُ اللَّهُ، وَمَنْ شَاقَّ شَقَّ اللَّهُ عَلَيْهِ». [صحيح بشواهده] - [رواه الدارقطني]

(207) – Abii Saciid Alkhudri Allaha ka raali ahaade wuxuu Rasuulka Ilaahay ka wariyey inuu yiri: "dhib majiro is dhibidna majirto, qofka dadka dhiba Ilahay ayaa dhiba, qofka dadka ku adkeeyana Ilaahay ayaa ku adkeeyo ". [Xadiis Saxiix ah, marka la eego u Marag kaca kale ee soo arooray] - [Waxaa wariyay Ad□aaraqudni]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay waajib tahay in qofku ka joojiyo naftiisa iyo dadka kaleba dhibka nooca uu yahayba iyo qaab uu yahayba qofna uma banaana inuu dhibo naftiisa ama cid kale midna.

Qofna uma banaana inuu dhib ka hor geeyo dhib kale waayo dhib laguma joojiyo dhib kale, inay qisaas aan lagu xadgudbayn tahay mooyee.

Ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in loogu goodiyey qofka dadka dhiba in la dhibidoono, oo qofka dadka ku adkeeya lagu adkayndoono.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la reebay in qofku xadka ka baxo oo wixii loo gaystay wax ka badan uu gaysto.
2. Ilaahay ma amrin adoomadiisa wax dhibaaya.
3. Waa la xarimay dhibka iyo in la isku dhibaateeyo hadal, ficil ama ka tagidba.
4. Abaal marintu waa nooca camal ku yahay, qofkii dhib gaysta Ilaahay ayaa dhiba, qofkii ku adkeeyana Ilaahay ayaa ku adkeeya.
5. Arkaanta shareecada waxaa ka mida: " dhib waa la joojiyaa ", shareecadu ma ogola dhib, wayna diidaysaa is dhibaataynta.

(4711)

(208) – عَنْ أَبِي مُوسَى رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «إِنَّمَا مَثَلُ الْجَلِيسِ الصَّالِحِ وَالْجَلِيسِ السَّوْءِ كَحَامِلِ الْمِسْكِ وَنَافِخِ الْكِيرِ، فَحَامِلُ الْمِسْكِ: إِمَّا أَنْ يُحْذِيَكَ، وَإِمَّا أَنْ تَبْتَاعَ مِنْهُ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ مِنْهُ رِيحًا طَيِّبَةً، وَنَافِخُ الْكِيرِ: إِمَّا أَنْ يُحْرِقَ ثِيَابَكَ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ رِيحًا خَبِيثَةً». [صحيح] - [متفق عليه]

(208) – Abii Muusa Alashcari -Allaha ka raalli ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: " Waxay la mid yihiin kan la fadhiya nin saalix ah iyo kan la fadhiya nin xun sida kan sita catarka Miskiga iyo kan dabka afuufaya, kan catarka Miskiga sita: waa inuu kuu mariyo ama aad ka iibsatid, ama aad ka heshid caraf udgoon, kan dabka afuufayana: waa inuu dharka kaa gubo ama ay kaa soo gaarto ur qarmuun". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu tusaale u keenay labo nooc oo dadka ka mid ah:

nooca 1aad: waa qofka la fadhiya saaxiibka wanaagsan oo tusaaya Ilaahay iyo wuxuu raaliga ka yahay, oo ugu kaalmaynaaya cibaadada Ilaahay. kaasi wuxuu la mid yahay kan iibinaaya Miskiga waa inuu ku siiyo ama aad ka iibsatid, ama aad caraf udgoon ka heshid.

nooca 2aad: waa kan la fadhiya saaxiibka xun, ee jidka Ilaahay ka hor istaaga dadka, oo ugu kaalmaynaaya in macsi la sameeyo, oo aad ka arkaysid ficil xun, hadii kaasoo kale la la saaxiibo oo lala fariisto dhib ayaa kaa soo gaaraya. Kaasi wuxuu la mid yahay bir tumaha afuufa dabkiisa, waa inay kaa gubaan dharkaaga dhinbilaha ka soo duulaya ama ay kaasoo gaarto ur qarmuuni.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. way banaan tahay in tusaale la soo qaato si loogu soo dhaweeyo macnaha cida hadalka dhagaysanaysa.
2. Waxaa la isku boorinayaa oo la is jeclaysiinayaa in la la fariisto dadka ahlu daacada iyo wanaaga ah, oo laga fogaado dadka ahlu fasaadka ah iyo kuwa akhlaaqda xun.

(3127)

(209) – عن أبي هريرة رضي الله عنه: أَنَّ رَجُلًا قَالَ لِلنَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: أَوْصِنِي، قَالَ: «لَا تَغْضَبْ» فَرَدَّدَ مِرَارًا قَالَ: «لَا تَغْضَبْ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(209) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey-: Nin inuu ku yiri Rasuulka: ii dardaaran, Nabiguna ku yiri; " ha caroon " wuu ku celceliyey dhowr jeer wuxuu ku yiri: " ha caroon ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Asaxaabta Nabiga mid ka mida ayaa waydiistay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu tuso wax anfacaya, wuxuu faray inaanu caroon, oo macnaheedu yahay inuu ka fogaado sababta u keenaysa carada, iyo inuu naftiisa hanto markuu caroodo, oo aanu ku sii socon caradiisa oo aanay gaarsiin inuu wax dilo ama garaaco, ama caayo, iyo wixii la mida.

Ninku waa ku celceliyey codsigiisa uu dardaaranka ku rabay dhowr jeer, Nabiguna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee kama siyaadin ereygii ahaa " "ha caroon ".

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa laga digay carada iyo sababteeda, waayo waa halka shartu ku kulanto, in carada laga xoroobana waa halka khayrku ku kulmo.
2. Ilaahay darti in loo caroodo sida carada marka lagu xud gudbo Ilaahay maxaarimtiisa waa caro wanaagsan.
3. Hadalka oo lagu celceliyo markay baahi jirto ilaa uu fahmo kan dhagaysanayaa oo uu garto ahmiyadiisa.
4. Fadli ayey leedahay in la waydiisto dardaaran qofka caalimka ah.

(4709)

(210) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «لَيْسَ الشَّدِيدُ بِالصُّرَعَةِ، إِنَّمَا الشَّدِيدُ الَّذِي يَمْلِكُ نَفْسَهُ عِنْدَ الْغَضَبِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(210) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu Rasuulka Ilahay ka wariyey inuu yiri: "Ma aha kan xooga lihi kan dadka legda, ee kan xooga lihi waa kan naftiisa hanta markuu caroodo. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in xooga dhabta ahi uusan ahayn kan jirka, ama qofka dadka xooga leh lagda, , balse kan xooga badani waa midka naftiisa ka adkaada ee qasba markuu aad u caroodo, waayo taasi waxay tusaysaa inuu awood u leeyahay inuu naftiisa hanan karo oo uu ka guulaysan karo shaydaanka.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga dulqaadka iyo nafta oo la qabto marka la caroodo, wuxuuna ka mid yahay camalka saalixa ah ee Diinta Islaamku ku .booriday.
2. Nafta oo lagu jihaado marka la caroodo wuu ka daran yahay in cadow lagu jihaado.
3. Islaamku wuxuu u badalay aragtida xooga jaahiliga ahaa akhlaaq fiican, qofka dadka ugu xooga badani waa qofka naftiisa hanan kara.
4. Waa in laga fogaado carada, waayo dhib ayaa ugu jira qofka iyo Bulshadaba.

(5351)

(211) – عن عبد الله بن عمر رضي الله عنهما قال: سَمِعَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ رَجُلًا يَعِظُ أَخَاهُ فِي الْحَيَاءِ، فَقَالَ: «الْحَيَاءُ مِنَ الْإِيمَانِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(211) – Cabdullaahi Binu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiiye wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu maqlay nin ka waaninaaya walaalkii xishoodka, wuxuuna ku yiri: " "xishoodku iimaankuu ka mid yahay ". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu maqlay nin walaalkii ku waaninaaya inuu ka tago xishoodka badan! wuxuuna u cadeeyey Nabigu inuu xishoodku iimaanka ka mid yahay, waxaan khayr ahayna ma keenayo.

Xishoodkuna waa akhlaaqda ku bixinaysa qofka inuu wanaaga sameeyo oo xumaanta ka tago.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Wixii khayrka kuu diida laguma magacaabo xishood, balse waxaa lagu magacaabaa khajil, caajisnimo, daciifnimo iyo fulaynimo.
2. Xishoodka Ilaahay casa wajala laga xishoodaa waa amarkiisa oo laqaato, iyo wuxuu reebay oo laga tago.
3. Xishoodka dadka laga xishoodaana waa in la ixtiraamo, ee darajadooda la geeyo, iyo in laga fogaado wixii caado ahaan xumaynaya.

(5478)

(212) – عن المِقدام بن معدي كرب رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «إِذَا أَحَبَّ الرَّجُلُ أَخَاهُ فَلْيُخْبِرْهُ أَنَّهُ يُحِبُّهُ». [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي والنسائي في السنن الكبرى وأحمد]

(212) – Miqdaam Binu Macdi Karib Allaha ka raali ahaade wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: (Hadii qofku Ilaahey darti u jeclaado walaalkiisa muslimka ah ha u sheego inuu jecel yahay). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Abuu Daa'uud, Tirmidi, Nisaa'i Sunan kubraa, iyo Ahmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey mid ka mida sababaha xoojinaya xiriirka muuminiinta iyo is jacaylkooda, taasoo ah hadii qof jeclaado walaalki ha u sheego inuu jecel yahay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga ay leedahay maxabada Ilaahay darti u khaaliska ah, ee aysan ku jirin maslaxad aduun.
2. Waa suno in loo sheego kan Ilaahay darti loo jecel yahay, jacaylka loo qabo, si uu u sii korodho jaceylka iyo isku duubnaantu.
3. Muuminiinta in dhexdooda lagu faafiyo is jeclaanta waxay xoojisaa walaalnimada iimaaniga ah waxayna bulshada ka ilaalisaa inay kala furato oo kala tagto.

(3017)

(213) – عن جابر بن عبد الله رضي الله عنهما عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «**كُلُّ مَعْرُوفٍ صَدَقَةٌ**». **[صحيح] - [رواه البخاري من حديث جابر، ورواه مسلم من حديث حذيفة]**

(213) – Jaabir Binu Cabdullaahi Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiibee wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Wax kastoo wanaag ahi waa sadaqo." **[Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey bukhaari,waana xadiiska jaabir,muslimna waxuu kuwariyey xadiiska xudayfa]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay wanaag kasta iyo wax tar kasta oo loo qabto dadka sida hadalka iyo adeega waa sadaqo, ajar iyo xasanaad baa ku jira.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Sadaqadu kuma koobna waxay dadku maalkooda ka bixiyaan, balse waxaa soo galaya khayrka dadku sameeyo ama ay dhahaan oo ay dadka gaarsiiyaan.
2. Waxaa ku jira in dadka la jeclaysiiyo wanaaga bixintiisa, iyo wixii nafac ugu jiro dadka kale.
3. Lama yaraysto shay wanaaga, haba yaraadee.

(5346)

(214) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «كُلُّ سُلاَمَى مِنَ النَّاسِ عَلَيْهِ صَدَقَةٌ، كُلَّ يَوْمٍ تَطْلُعُ فِيهِ الشَّمْسُ يَعْدِلُ بَيْنَ الِاثْنَيْنِ صَدَقَةٌ، وَيُعِينُ الرَّجُلَ عَلَى دَابَّتِهِ فَيَحْمِلُ عَلَيْهَا أَوْ يَرْفَعُ عَلَيْهَا مَتَاعَهُ صَدَقَةٌ، وَالكَلِمَةُ الطَّيِّبَةُ صَدَقَةٌ، وَكُلُّ خُطْوَةٍ يَخْطُوهَا إِلَى الصَّلاَةِ صَدَقَةٌ، وَيُمِيطُ الأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ صَدَقَةٌ». **[صحيح] - [متفق عليه]**

(214) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Xubin kasta oo xubnaha jirka ka mida waxaa ku waajiba sadaqo, maalin kasta oo qoraxdu soo baxdo, labo qof oo uu dhex-dhexaadiyo waa u sadaqo, haduu ka caawiyo nin gaadiidkiisa isagoo gacan ku siinaya inuu fuulo ama alaabtiisa u soo dhiiba waa u sadaqo, hadalka fiicana waa u sadaqo, talaabo walba oo uu masaajidka u qaadaana waa u sadaqo, dariiqa oo dhibka uu ka fogeeyana waa u sadaqo." **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in muslim kasta oo qaan gaar ah laga rabo maalin kasta xubin walba oo xubnaha jirkiisa ka mida sadaqo uu Ilaahay darti ula baxo isagoo uga mahad celinaaya Ilaahay caafimaadka, iyo inuu uga dhigay lafhiisa xubno uu soo laabi karo oo uu fidin karo. Sadaqadaas waxaa lagu bixin karaa camal kasta oo wanaagsan ee kuma xirna in xoolo la bixiyo oo kaliya waxaana ka mid ah: Dhex-dhexaadintaada iyo heshiisiintaada labo is heysata waa sadaqo, Midka aan awoodin inuu fuulo ama raro gaadiidkiisa oo aad caawisana waa sadaqo, hadalka wanaagsan sida: dikriga, ducada, salaanta, iyo qayrkeed waa sadaqo, Talaabo kasta oo aad u qaado salaada waa sadaqo, Dariiqa oo aad ka qaado wixii lagu dhibtoonayo waa sadaqo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qaabka ay iskugu rakiban yihiin lafaha iyo xubnaha aadanuhu waa nicmooyinka Ilaahay ee ugu waaweyn, waxaana loo baahan yahay in xubin walba sigaar ah looga sadaqo bixiyo, si ay u noqoto mahadnaqa nicmadaas.
2. Waxaa la is jeclaysiinayaa in la cusboonaysiiyo mahadnaqa maalin kasta, si ay nicmadaasi joogto u noqoto.

3. Waxaa la is jeclaysiinayaa in la joogteeyo sunaha iyo sadaqada maalin kasta.
4. Fadli wayn ayuu ku jira in dadka la heshiisiiyo .
5. Waxaa la isku boorinayaa in ninku walaalkiis caawiyo, waayo caawintiisu waa sadaqo.
6. Waxaa la isku boorinayaa in la tago jamaacaadka oo loo socdo salaada, oo masaajida lagu camiro arinkaas.
7. Waa waajib in la ixtiraamo dariiqa muslimiintu marayaan lagana fogeeyo wixii muslimiimta dhibayaa.

(4568)

(215) – عَنْ أَبِي بَرْزَةَ الأَسْلَمِيِّ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**لَا تَزُولُ قَدَمَا عَبْدٍ يَوْمَ القِيَامَةِ حَتَّى يُسْأَلَ عَنْ عُمُرِهِ فِيمَا أَفْنَاهُ، وَعَنْ عِلْمِهِ فِيمَ فَعَلَ، وَعَنْ مَالِهِ مِنْ أَيْنَ اكْتَسَبَهُ وَفِيمَ أَنْفَقَهُ، وَعَنْ جِسْمِهِ فِيمَ أَبْلَاهُ**». [صحيح] - [رواه الترمذي]

(215) – Abii Barsata Alaslami-Allaha karaalli ahaadee- wuxuu dhahay: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhahay: "Maalinta qiyaame qofku ma dhaqaaqayo ilaa la weydiiyo cimrigiisii wuxuu ku dhameeyey, cilmigii Ilaahay baray wuxuu ku sameeyey, maalkiisii halkuu ka keenay iyo halkuu ku bixiyey iyo jirkiisii wuxuu ku dhameeyey". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At�tirmidi]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofna uusan dhaafayn meesha la isku xisaabinaayo maalinta Qiyaame oo uusan aadayn Jano ama Naar ilaa la weydiiyo arimo:

Mida 1aad: noloshiisii wuxuu ku dhameeyey?

Mida 2aad: cilmigii uu bartay dar Ilaahay ma ka ahaa? mase ku camal falay? oo ma gaarsiiyey cilmiga cidii xaqa u lahayd?

Mida 3aad: maalkiisii halka ayuu ka keeney, ma xalaal mise xaaraan buu ku soo galay?, muxuuse ku bixiyey, ma wax Ilaahay raalli geliya mise wax ka caraysiiya.

Mida 4aad: jirkiisii, xooggiisii, caafimaadkiisii, dhallin yaranimadiisii wuxuu ku dhameeyey oo u adeegsaday?

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa lagu boorinayaa dadku inay uga faa'iidaystaan nolosha wax Ilaahay raalli gelinaaya.
2. Nicmooyinka Ilaahay uu siiyey adoomadiisa way badan yihiin, wuuna weydiin doonaa nicmooyikaa maalinta qiyaamaha, sidaa darteed waxaa lagudboon qofku inuu nicmooyinkaa uga faa'iidaysto wax Ilaahay raalli gelinaaya.

(4950)

(216) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ: قَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «السَّاعِي عَلَى الأَرْمَلَةِ وَالمِسْكِينِ، كَالْمُجَاهِدِ فِي سَبِيلِ اللَّهِ، أَوِ القَائِمِ اللَّيْلَ الصَّائِمِ النَّهَارَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(216) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "qofka u adeega garoobka iyo maskiinka, wuxuu la mid yahay mujaahidka jidka Ilaahay u dagaalamaya, ama qof habeenkiina cibaado u taagan maalintiina sooman". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofka ka shaqeeya danaha dumarka ragoodu ka dhintay cid u miciintana haysan, iyo masaakiinta baahidu hayso, waxna siiya isagoo Ilaahay uun ajar kaga raba, qofkaasi xaga ajarka wuxuu la mid yahay mujaahidka Ilaahay dartii u dagaalamaya, ama qofka salaad tahajuda u taagan ee aan daalayn, oo sooman oo aan afurayn

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa, iskaashi iyo in la is kafaalo qaado iyo in la caawiyo dadka baahan ee daciifka ah.
2. Cibaadada waxaa soo galaya camal kastoo wanaagsan, waxaana ka mida cibaadada in loo adeego garoobka iyo miskiinka.
3. Ibn Hubayra: wuxuu yiri: waxaa loo jeedaa Ilaahay kor ahaaye qofkaas wuxuu isugu darayaa ajarka qofka sooman iyo kan cibaadada u taagan iyo mujaahidka hal mar ayuu wada siin, waayo garoobka ayuu u gacan qabtay sida ninkeedii ...., sidaas oo kale wuxuu u garab istaagay miskiinka waxba qabsan kari waayey, wuxuu heli karay iyo xoogiisiiba wuu sadaqaystay wax tarkiisu wuxuu u dhigmaa soomka, qiyaamka iyo jihaadka.

(3135)

(217) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا أَوْ لِيَصْمُتْ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُكْرِمْ جَارَهُ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(217) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu ka wariyey Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Qofka Ilaahay iyo maalinta qiyaamaha rumaysan khayr ha ku hadlo ama ha iska aamuso, qofka rumaysan Ilaahay iyo maalinta qiyaamaha jaarkiisa ha maamuuso, qofka Ilaahay iyo maalinta qiyaame rumaysan ha maamuuso martidiisa." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in adoonka muuminka ee rumaysan Ilaahay iyo maalinta qiyaamaha ee loo celinaayo qiyaamaha ee abaal marinta camalkiisu ay jirto, in imaankiisu ku dhiiri geliyo inuu sifooyinkaa wanaagsan sameeyo:

Tan koobaad: hadalka wanaagsan: ee ah tasbiixda, tahliilka, wanaag farida, xumo reebida, islaaxinta dadka dhexdooda, intaa haduuna samayn karin ha iska aamuso dadkana dhibkiisa ha ka daayo, carabkiisana ha xafido.

Tan labaad: maamuuska dariska: oo ah in loo ixsaan falo oo aan la dhibin.

Tan saddexaad: maamuuska martida ku soo siyaarata: oo ah hadal wanaagsan, sooryeyn wanaagsan, iyo wixii la mid ah.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Rumaynta Ilaahay iyo maalinta qiyaamahu waxay sal dhig u yihiin khayr oo dhan, waxayna farayaan qofka inuu khayr sameeyo.
2. Waxaa laga digayaa aafada carabka .
3. Diinta Islaamku waa diin isku duubnaan iyo karam ah.
4. Sifooyinkaa waxay ka mid yihiin qaybha Iimaanka iyo aadaabta fiican.
5. Hadalka badani waxaa dhici karta inuu qofka u soo jiido shay karaahiyo ah ama xaaraan ah, nabad galyadu waxay ku jirtaa inuusan ku hadlin waxaan khayr ahayn.

(5437)

(218) – عن أبي ذر رضي الله عنه قال: قال لي النبي صلى الله عليه وسلم: «لَا تَحْقِرَنَّ مِنَ الْمَعْرُوفِ شَيْئًا، وَلَوْ أَنْ تَلْقَى أَخَاكَ بِوَجْهٍ طَلْقٍ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(218) – Abii Dar Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu dhahay: Nabiga scw ayaa igu yiri: " Shay ka mida wanaag ha yarysan, haba ahaato inaad kula kulanto walaalkaa waji furan." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku booriyey in wanaaga la suubiyo oo aan la yaraysan wanaaga haba yaraadee, waxaana ka mida waji fornaanta iyo dhoolo cadaynta marka la kulmo, waxaa haboon in qofka muslinku ku dadaalo taas, waayo waxaa ku jira soo dhawayn qofka muslimka ah iyo in la farax geliyo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga ku jira isjacaylka muuminiinta, iyo isku dhoola cadaynta iyo weji fornaanta markay kulmaan.
2. Shareecadaani waa kaamil, wax walbana waa koobaysaa, waxaa ku jira wax kasta oo muslimiinta wanaagooda iyo midnimadoodu ku jirto.
3. Waxaa la isku boorinayaa wanaaga falitaankiisa haba yaraadee.
4. Waxaa suno ah in muslimiinta la farax geliyo, waayo waxaa ku jira inay is jeclaadaan.

(5348)

(219) – عن جرير بن عبد الله رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ لَا يَرْحَمِ النَّاسَ لَا يَرْحَمْهُ اللهُ عَزَّ وَجَلَّ». [صحيح] - [متفق عليه]

(219) – Jariir Binu Cabdullaahi Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka aan dadka u naxariisan isagana Ilaahay uma naxariisto." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka aan u naxariisan dadka in Ilaahay casa wajala isna aanu u

naxariisanayn, qofka u naxariista khalqiga waa asbaabta ugu wayn ee lagu gaaro naxariista Ilaahay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Naxariista waa u baahan yihiin khalqiga oo dhan, waxaase dadka si gaara loogu xusay ahmiyad la siiyey awgeed.
2. Ilaahay waa raxiim, adoomadiisa naxariistana wuu u naxariistaa, abaal marintu waa nooca camalka.
3. Naxariista loo naxariisanayo dadka waxaa ka mida in khayrka la gaarsiiyo iyo in dhibka laga daayo oo lagula dhaqmo wanaag.

(5439)

(220) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «الرَّاحِمُونَ يَرْحَمُهمُ الرَّحمنُ، ارحَمُوا أهلَ الأرضِ يَرْحَمْكُم مَن في السّماء». [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وأحمد]

(220) – Cabdullaahi Binu Camar waxaa laga wariyey-Allaha karaali ahaado isaga iyo aabihiiba-inuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: "kuwa naxariista Raxmaankaa iyagana u naxariisan, u naxariista waxa dhulka ku nool waxaa idiin naxariisan Raxmaanka samada ku sugane. [Xadiis Saxiix ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, AtTirmidi, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Wuxuu cadeeyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee kuwa u naxariista naflayda kale iyagana waxaa u naxariisan Raxmaanka naxariistiisa balaaran ee wax walba gaadhay, abaal marin waafaqsan camalkiisa.

Ka dibna wuxuu amray Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in loo naxariisto dhamaan noolayaasha ku nool dhulka, dad, xayawaan, shimbiro, iyo nuucyada kale ee Ilaahay abuuray, kuwaasna abaalkoodu waa in Ilaahay uga soo naxariisto xaga samada.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Diinta islaamku waa diin naxariis, waana diin dhamaanteed ku taagan daacada Ilaahay iyo wanaajinta kuwuu Ilaahay abuuray.
2. Ilaahay isagaa wayne wuxuu ku tilmaaman yahay mid naxariis badan, waana Allaha naxariista guud iyo midda gaarka ahba naxariista, adoomadiisana naxariista gaarsiiya.
3. Abaal marintu waa kolba siduu yahay camalka la qabto-wanaag iyo xumaanba, kuwa naxariista badan Allaha raxmaanka ah baa u naxariista.

(8289)

(221) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «الْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ الْمُسْلِمُونَ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ، وَالْمُهَاجِرُ مَنْ هَجَرَ مَا نَهَى اللَّهُ عَنْهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(221) – Cabdullaahi Binu Camar -Allaha ka raali ahaado- isaga iyo aabhiye wuxuu ka wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Muslimku waa qofka ay muslimiintu ka nabad galeen carabkiisa iyo gacantiisaba, muhaajirkuna waa qofka ka dheeraada wixii Ilaahay ka reebay." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Muslimka islaamnimadiisu kaamilka tahay uu yahay midka Muslimiintu ka nabad galaan carabkiisa ee aan caayin, oo nacaladin, oo xamanin, oo dadka la dhex qaadin wax dhib ah oo uu ka gaysto carabkiisa. Muslimiintuna ka nabad galaan gacantiisa oo aan ku xad gudbin, oo aan ku qaadan xoolahooda xaq daro, iyo wixii la mida. Muhaajirkuna waa qofka ka dheeraada waxa uu Ilaahay ka xarimay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. kaamilnimada Islaamka la ma gaaro in dadka dhibka laga daayo maada ahaan iyo macnawi ahaanba maahee.
2. Carabka iyo gacanta waxaa si gaara loogu xusay, gafkooda iyo dhibaatadooda oo badan, waayo sharta ugu badan iyagay ka timaadaa.
3. waxaa la isku boorinayaa in laga tago macaasida oo lagu sugnaado wixii Ilaahay faray.
4. Muslimiinta waxaa ugu fadli badan qofkii guta xaqa Ilaahay leeyahay iyo xuquuqda Muslimiinta.
5. Xadgudubku wuxuu noqo karaa hadal ama ficil.
6. Hijrada kaamilka ahi waa in laga tago wixii Ilaahay xarimay.

(10101)

(222) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «حَقُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ خَمْسٌ: رَدُّ السَّلَامِ، وَعِيَادَةُ الْمَرِيضِ، وَاتِّبَاعُ الْجَنَائِزِ، وَإِجَابَةُ الدَّعْوَةِ، وَتَشْمِيتُ الْعَاطِسِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(222) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqalay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: (muslimku xaga uu ku leeyahay muslimka kale waa shan: salaanta oo la radiyo, bukaanka oo la booqdo, janaasada oo la raaco, u yeerida oo la ajiibo iyo markuu hindhiso oo loo duceeyo). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey wax ka mida xuquuqda muslimku ku leeyahay walaalkiisa muslimka ah. Kan koowaad: waa inaad cidii ku salaanta aad salaanta ka radido.

Xaqa labaad: waa booqashada qofka jiran iyo siyaaradiisa.

xaqa saddexaad: waa janaasada raacideeda laga bilaabo gurigiisa ilaa meesha lagula tukanaayo ilaa qabriga ilaa laga aaso.

Xaqa afraad: waa u yeerida oo la ajiibo haduu ugu yeero casuumad guur iyo qayrkoodba.

xaqa shanaad: waa in loo duceeyo markuu hindhiso oo uu yiraaho Alxamdu lilaah, oo lagu dhoho: yarxamuka Allaah, ka dib kan hindhisay wuxuu oronayaa: yahdiikumu Allaah wa yuslix baalakum.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Islaamka waynidiisa waxay ka muuqataa adkaynta xuquuqda u dhaxaysa muslimiinta iyo xoojinta walaaltinimada iyo is jacaylka u dhexeeya.

(3706)

(223) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**لَا تَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ حَتَّى تُؤْمِنُوا، وَلَا تُؤْمِنُوا حَتَّى تَحَابُّوا، أَوَلَا أَدُلُّكُمْ عَلَى شَيْءٍ إِذَا فَعَلْتُمُوهُ تَحَابَبْتُمْ؟ أَفْشُوا السَّلَامَ بَيْنَكُمْ**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(223) – Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Janada galimaysaan ilaa aad rumaysaan, rumayna maysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa wax hadaad samaysaan aad is jeclaanaysaan? salaanta dhexdiina ku faafiya." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inaysan janada galeyn cidaan mu'uminiinta ahayni, iimaankuna ma dhamaystirmo mana hagaagayo xaalka muslimiintu ilaa ay is jeclaadaan. Ka dibna wuxuu ku booriyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wax yaabaha ugu fiican ee is jacaylka keena, waana salaanta oo muslimiinu lagu faafiyo, taasoo Ilaahay uu ka dhigay salaanta adoomadiisa ay ku salaamaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Janada laguma galo wax aan Iimaan ahayn.
2. Iimaanka kaamilnimadiisa waxaa ka mida in qofka muslimkaahi la jeclaado walaalki waxa uu naftiisa la jecel yahay.
3. Waa suno in salaanta la faafiyo oo Muslimiinta la salaamo, waayo faafinta salaanta dadka waxay u keenaysaa is jacayl iyo amaan.
4. Salaanta laguma salaami karo qof aan Muslim ahayn, waayo Nabigu scw wuxuu yiri: " dhexdiina".
5. salaanta oo la joogteeyo waxay meesha ka saartaa is naca dadka, kalategga, iyo caloolxumada dadka dhexdiisa taalla.
6. Ahmiyad ayey leedahay  is jeclaanta Muslimiintu waxayna ka mid tahay iimaanka kaamilnimadiisa.
7. Xaddiis kale waxaa ku soo arooray, qaabka salaanta buuxda: "Asalaamu calaykum wa raxmatu Allaahi wa barakaatuh", waxaana ku filan: ''Asalaamu calaykum''.

(3361)

(224) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا: أَنَّ رَجُلًا سَأَلَ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: أَيُّ الإِسْلاَمِ خَيْرٌ؟ قَالَ: «**تُطْعِمُ الطَّعَامَ، وَتَقْرَأُ السَّلاَمَ عَلَى مَنْ عَرَفْتَ وَمَنْ لَمْ تَعْرِفْ**». [صحيح] - [متفق عليه]

(224) – Cabdullaahi Binu Camar -Allaha ka raalli ahaado isaga iyo Aabihiye- waxaa laga wariyey: Inuu nin weydiiyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: Islaamka maxaa ugu khayr badan? wuxuuna ugu jawaabay: "dadka oo aad cunto siiso iyo inaad salaanto qofka aad taqaan  iyo kan aadan aqoonba." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabiga  nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa la weydiiyey, sifooyinka islaamka kuwee ugu fadli badan? wuxuu sheegay labo sifo:

Mida 1aad: in la badiyo quudinta fuqarada, waxaana soo galaya sadaqa, hadiyada, soorida, casumida, waxayna sii fadli badan tahay quudintu waqtiyada ay jiraan abaaraha iyo sicir bararku.

mida 2aad: waa inaad salaanto qof walba oo Muslim ah kii aad taqaan iyo kii aadan aqoonba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Asaxaabu waxay aad ugu dadaalayeen barashada dhaqanka wanaagsan ee anfacaya aduun iyo aakhiraba.
2. Salaanta iyo cunto siintu waa acmaasha ugu fadliga badan Islaamka, waana fadli badnaanteeda iyo baahida dadku ay u qabaan waqti walaba.
3. Labadaa sifo waxaa ku kulmay ixsaankii oo hadal iyo ficilba ah, waana ixsaanka ugu kaamilsan.
4. Sifooyinkaani waxay ku saabsan yihiin tacaamulka muslimiinta dhexdooda, waxaase jira sifooyin kale oo ku saabsan adoonka oo la tacaamulaya Rabigi.
5. Salaanta oo aad qofka ku bilawdo waxay gaar u tahay muslimiinta dhexdooda, gaalse salaan laguma bilaabo.

(5808)

(225) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «أَلَا أَدُلُّكُمْ عَلَى مَا يَمْحُو اللهُ بِهِ الْخَطَايَا، وَيَرْفَعُ بِهِ الدَّرَجَاتِ؟» قَالُوا بَلَى يَا رَسُولَ اللهِ قَالَ: «إِسْبَاغُ الْوُضُوءِ عَلَى الْمَكَارِهِ، وَكَثْرَةُ الْخُطَا إِلَى الْمَسَاجِدِ، وَانْتِظَارُ الصَّلَاةِ بَعْدَ الصَّلَاةِ، فَذَلِكُمُ الرِّبَاطُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(225) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ma idin tusaa waxa Ilaahay dambiyada ku dhaafo oo darajaada qofka kor loogu qaado?" waxay dheheen haa, Rasuulkii Ilaahayow, wuxuu yiri:"waa waysada oo lagu xeel dheeraado waqtiyada waysada la dhibsado, talaabada oo loo badiyo xaga masaajida iyo salaada ka dib oo la sugo salaada xigta, taasi waa iyado jihaad loo darban yahay. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu waydiiyey asxaabtiisa inay rabaan inuu tuso camal sabab u noqda in dambiga la dhaafo oo laga masaxo diiwaanka malaa`igtu ku qorto, oo laga masaxo buugta malaa'igtu ku qorto oo lagu helo darajo sare?

Waxay dheheen asxaabtu: haa waan doonaynaa kaas, wuxuu yiri:

Kan 1aad: waa in sifiican loo wayso qaato waqtiyada la dhibsanyo biyaha, sida qabowga, biyo yaaranta, jirka oo xanuunsan iyo biyaha oo kulul.

Kan 2aad: waa in talaabada loo badiyo xaga masaajidka, talaabaduna waa masaafada u dhaxaysa labada lugood oo loo qaado masaajida ka fog guriga iyo in inbadan lagu soo celceliyo talaabadaas.

Kan 3aad: waa waqtiga salaada oo la sugo, iyo qalbiga oo ku xiran waqtiga salaada loona diyaargaroobo salaada iyo masjidka oo la fariisto oo lagu sugo jamaacada, oo haduu salaada tukado uu fadhiyo meeshii uu ku tukaday ilaa salaada xigta la gaaro.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dib wuxuu cadeeyey in camalkaasi yahay jihaad loo darban yahay, waayo nafta ayuu ka xirayaa dariiqa shaydaanka hawadana wuu qasbaysaa oo ka joojinaysaa inay aqbasho waswaaska, markaas ayey xisbiga Ilaahay ka adkaanayaan ciidanka shaydaanka, kaasaana ah jihaadka wayn, taasina waxay la mid tahay qof dhufays ugu jira cadowga.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa muhiim in la ilaaliyo salaada jamaacada ah oo lagu tukado masaajidka, oo ihtimaam la siiyo salaadaha oo aan laga mashquulin.
2. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee si fiican ayuu ugu soo bandhigay asxaabtiisa wuuna jeclaysiiyey isagoo ku bilaabay qaab su`aal ah, waana qaab ka mida qaababka wax loo baro dadka.
3. Faa'iidada ay leedahay masalada oo loo dhigo qaab su'aal iyo jawaab ah: waa inuu hadalku noqdo mid saamayn ku leh nafta waayo inta la qariyey ayaa la cadeeyey.
4. Wuxuu yiri imaam Nawawi-Allaha u naxariistee: kaasi waa ribaad: waa ribaad la jecel yahay, Ribaadka asal ahaantiisuna waa in shay la xabiso waa sidii isago naftiisa u xabisay cibaadadaas, waxaa kaloo la yiri waa ribaadka ugu fadliga badan waxaa kaloo la yiri: jihaadka runtaahi waa jihaadka nafta, waxaa kaloo la yiri waxaa dhici karta in laga wado ribaadka qofka u fudud oo u suuragalka ah, yacni: waa ribaad ka mida noocyada ribaadka.
5. Way soo noq-noqotay weedha "Ribaad" waxaana lagu qeexaa "AL" waana tan wax lagu qeexo: si loo wayneeyo xaalka acmaashaas.

(3574)

(226) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «الْمُؤْمِنُ الْقَوِيُّ، خَيْرٌ وَأَحَبُّ إِلَى اللهِ مِنَ الْمُؤْمِنِ الضَّعِيفِ، وَفِي كُلٍّ خَيْرٌ، احْرِصْ عَلَى مَا يَنْفَعُكَ، وَاسْتَعِنْ بِاللهِ وَلَا تَعْجَزْ، وَإِنْ أَصَابَكَ شَيْءٌ، فَلَا تَقُلْ لَوْ أَنِّي فَعَلْتُ كَانَ كَذَا وَكَذَا، وَلَكِنْ قُلْ قَدَرُ اللهِ وَمَا شَاءَ فَعَلَ، فَإِنَّ (لَوْ) تَفْتَحُ عَمَلَ الشَّيْطَانِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(226) – Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: ((Mu'uminka xoogga wayn, ayaa ka khayr badan lagana jecel yahay xagga Ilaahay mu'uminka daciifka ah, mid walbana khayr buu leeyahay, ku dadaal waxa ku anfacaya, Ilaahayna kaasho, hana caajisin, haddii wax kugu dhacana ha dhihin haddaan sidaa iyo sidaa yeeli lahaa, waxaadse tiraahdaa: Ilaahay wuxuu doonuu qadaaa wuxuu doonana wuu falaa, Ereyga ( LOW ) camalka shaydaanka ayuu furaa)). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in qofka Mu'uminku sidiisaba khayr badan yahay, hase ahaatee mu'uminka xoogga wayn xagga iimaanka, go'aan qaadashada, maalka iyo waxa la midka ah ee wanaagga ah ayaa ka khayr badan Ilaahayna ka jecel yahay Mu'uminka daciifka ka ah. Intaa ka dib wuxuu u dardaarmay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Mu'uminka inuu qaato sababaha wax yaabaha anfacaya aduun iyo aakhiraba, isagoo Ilaahay tala saaranaya. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka reebay dadka caajiska, wahsiga iyo inuu ka cuslaysto ficilka isaga anfacaya ifka iyo aakhiroba. Markuu mu'uminku ku dadaalo camalka, sababihiisana qaato, isagoo Ilaahay kaashanaya, kheyrna ka dalbaya, qofkaa waxaa lagudboon inuu arrinkiisa Ilaahay u ban dhigo, wuxuu Ilaahay u doorana kheyr yahay, Haddii intaa ka dib musiibo ku dhacado yaanu dhihin: ((Haddaan sidaa iyo sidaa yeeli lahaa)), "waayo Ereyga ( Low - haddan-) camalka shaydaanka ayey furtaa" waana qadarkii oo la diidayo iyo ka qoomamayn wax tegay, laakiin waa inuu dhoho isagoo Ilaahay isku dhiibaya, kuna raalli ah qaddarkiisa" Ilaahay ayaa qaddaray wuxuu doonana ayuu falaa", waxa dhacay waa wax Ilaahay horay u xukumay rabitaankiisana ku dhacay, Ilaahay isagaa wuxuu doono sameeya, qaddarkiisana cidi isma hor taagi karto, loogamana dambeyn karo xugun kiisa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dadku way ku kala duwan yihiin iimaanka.
2. Waa sunne in xoog loo yeesho camalka aan qabanayno, waayo xoogga waxaa ku yimaadda faa'iido aan ku iman karin daciifnimada.
3. Waxaa lagudboon aadoonku inuu ku dadaalo wixii faa'iido u leh, kana fogaado wixii aan tar u lahayn.
4. Waxaa mu'uminka waajib ku ah inuu Ilaahay gar-gaar waydiisto dhamaan umuurihiisa oo dhan, oo uusan naftiisa isku hallayn.
5. Waxa Alle xukumo iyo qaddarkiisuba waa run oo waa wax cad oo sugan, kamana hor imanaayo in qofku sababaha iyo dadaalka sameeyo, kheyrkana u dadaalo.
6. Waxaa la reebey Ereyga "haddaan saa yeeli lahaa" oo si caro ku jirto loo dhaho marka musiibo qofka ku dhacdo, waana xaraan in la diido qadaaga iyo qaddarka Ilaahay.

(5493)

(227) – عن ابن عمر رضي الله عنهما قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَا زَالَ يُوصِينِي جِبْرِيلُ بِالْجَارِ، حَتَّى ظَنَنْتُ أَنَّهُ سَيُوَرِّثُهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(227) – Waxaa laga wariyey Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiiba inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "kama uu tagin malakul Jibriil inuu jaarka ii dardaarmayo, ilaa aan u maleeyey inay is dhaxlayaan ". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in malakul Jibriil uusan ka tagin inuu ku celceliyo oo uu amrayo jaarka

ilaalintiisa, kaasoo ah guriga u dhaw, xataa haduu yahay muslim, gaal, qaraabo, ama shisheeye waa in la ilaaliyo xaqiisa oo aan la dhibin, waa in loo ixsaan falo oo lagu sabro dhibkiisa, ilaa uu u maleeyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu arkay sida uu u wayn yahay xaqa jaarku oo uu ugu celcelinaayo Jibriil ayuu u maleeyey in waxyi ku soo dagi doono in la siiyo xoolaha uu ka tagi doono markuu dhinto.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Jaarka xaqiisu aad ayuu u wayn yahay waana waajib in la ilaaliyo.
2. Adkaynta xaqa jaarka oo laga dardaarmay waxay keenaysaa inay daruuri tahay in jaarka la xurmeeyo, lana jeclaado, lana wanaajiyo, lagana daayo dhibka, lana soo booqdo markuu buko, oo loo hambalyeeyo markuu faraxsan yahay, loona tacsiyeeyo markii musiibo ku dhacdo.
3. Mar kastoo albaabka darisku kugu dhawaado xaqiisu waa wayn yahay.
4. Shareecada kaamilnimadeeda waxay la timid waxay ku jirto bulshada wanaageedu sida in dariska loo ixsaan falo oo dhibka laga daayo.

(4965)

(228) – عن أبي الدرداء رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ رَدَّ عَنْ عِرْضِ أَخِيهِ رَدَّ اللهُ عَنْ وَجْهِهِ النَّارَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ». [صحيح] - [رواه الترمذي وأحمد]

(228) – Abii Dardaa Allaha ka raali ahaade wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: "Qofka difaaca cirdiga iyo sharafta walaalki Ilaahay baa isna wajigiisa naarta ka difaaci maalinta qiyaamaha." **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At-tirmidi iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka difaaca sharafta walaalkiisa muslimka ah markuu maqan yahay, isagoo u diidaya in lacaayo oo la xumeeyo, qofkaa wajigiisa Ilaahay waa ka Ilaaliyaa cadaabka maalinta aakhiro.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la reebay in wax laga sheego cirdiga muslimiinta.
2. Abaal marintu waa nooca camalku yahay, qofka cirdiga walaalkiisa muslimka ah difaaca isagana Ilaahay baa naarta ka celiya.
3. Islaamku waa diin walaaltinimo faraysana muslimiintu inay xaqa isugu hiiliyaan.

(5514)

(229) – عن عائشة رضي الله عنها زوج النبي صلى الله عليه وسلم عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «إِنَّ الرِّفْقَ لَا يَكُونُ فِي شَيْءٍ إِلَّا زَانَهُ، وَلَا يُنْزَعُ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا شَانَهُ». **[صحيح] - [رواه مسلم]**

(229) – Caa'isha oo ahayd xaaskii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxay ka warisay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Jileecu shayga uu galo wuu wanaajiyaa, shaygii laga siibana wuu xumaadaa. **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in jileeca iyo dabac sanaata xaga hadalka iyo ficilkuba ay u siyaadiso

qurux arimaha, kamaal, iyo wanaag waxayna u dhawdahay in qofka sidaa suubiya uu dantiis gaaro.

Dabacsaan la`aantu arimaha way ceebaysaa oo xumaysaa waxayna u diidaa qofka sameeya inuusan dantiisa gaarin ama uu ku gaaro dhib.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa ku dhaqanka akhlaaqda dabacsan.
2. Dabacsaantu qofka way qurxisaa, waxayna sabab u tahay khayr kasta oo arimaha diinta ama Aduunyada ah.

(5796)

(230) – عن أنس بن مالك رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «يَسِّرُوا وَلَا تُعَسِّرُوا، وَبَشِّرُوا وَلَا تُنَفِّرُوا». [صحيح] - [متفق عليه]

(230) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaadee wuxuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: (Wax fududeeya oo ha adkaynina, oo bishaareeya oo dadka ha cayrinina ). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu amray in loo fudeydiyo oo loo sahlo dadka aana lagu adkayn dhamaan arimaha diinta iyo tan aduunba, taasoo ah xuduuda Ilaahay baneeyey ee shareecadiisu ogoshahay.

Wuxuu ku dhiiri galinayaa dadku inay khayrka iyo wanaaga isugu bishaareeyaan oo aanay dadka ka eryin khayrka.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofka muuminka ah waxaa waajib ku ah inuu dadka Ilaahay jeclaysiiyo, khayrkana jeclaysiiyo.

2. Daaciga dadka Ilaahay ugu yeeraya waxaa ku haboon inuu qaab xikmadaysan ugu yeero dadka markuu diinta islaamka ugu yeerayo.
3. Bishaaraynta waxa ka dhasha farxad, ogolaasho iyo in lagu kalsoonaado daaciga, markuu dadka wax u sheegayo.
4. Adkayntuna waxay keentaa kala yaac iyo kala jeensi iyo in laga shakiyo hadalka daaciga.
5. Naxariista balaran ee Ilaahay siiyey adoomadiisa waxaa ka mida inuu uga raali noqday diin fiican iyo shareeco fudud.
6. Fudaydinta la is faray waa mida shareecada Islaamku la timid.

(5866)

(231) – عن أنس رضي الله عنه قال: كُنَّا عِنْدَ عُمَرَ فَقَالَ: «نُهِينَا عَنِ التَّكَلُّفِ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(231) – Anas Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Waxaan la joognay Cumar, wuxuuna yiri: (waa naloo diiday kalifaada ). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Cumar Allaha ka raali ahaade wuxuu sheegay in Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee u diiday dadka in la caadaysto wax dhib maahee aan dheef laheyn, hadal iyo ficil kuu doonaba ha ahaadee.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa ka mid ah isku cuslaynta la reebey: su'aalaha badan, isku kalifida waxaan cilmi loo laheyn, ama adkaynta wax Ilaahay fudaydiyey.
2. Waxaa qofka muslimka ah la gudboon inuu naftiisa baro saamaxaada, wax fudaydinta iyo isku ad-adkeyn la'aanta

hadalka iyo camalkaba, cuntadiisa, cabitaankiisa, iyo dhamaan arimihiisa kale.

3. Diinta islaamku waa diin fudud.

(8945)

(232) – عن ابن عمر رضي الله عنهما أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «إِذَا أَكَلَ أَحَدُكُمْ فَلْيَأْكُلْ بِيَمِينِهِ، وَإِذَا شَرِبَ فَلْيَشْرَبْ بِيَمِينِهِ، فَإِنَّ الشَّيْطَانَ يَأْكُلُ بِشِمَالِهِ، وَيَشْرَبُ بِشِمَالِهِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(232) – Ibnu Cumar Allaha kawada raali ahaado isaga iyo Aabihiibe wuxuu sheegay in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: " hadii qof idinka mida uu wax cunayo ha ku cuno midigtiisa, haduu wax cabaayana ha ku cabo midigtiisa, waayo shaydaanku wuxuu ku cunaa bidixdiisa wuxuuna ku cabaa bidixdiisa". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu faray inuu qofka muslimka ahi wax ku cuno kuna cabo gacantiisa midig, wuuna reebay in wax lagu cuno laguna cabo gacanta bidix, waayo shaydaankaa kuna cuna kuna caba bidixda.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la reebay in shaydaanka looga ekaado ku cunida iyo ku cabida bidixda.

(58122)

(233) – عن عُمر بن أبي سلمة رضي الله عنه قال: كُنْتُ غُلَامًا فِي حَجْرِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، وَكَانَتْ يَدِي تَطِيشُ فِي الصَّحْفَةِ، فَقَالَ لِي رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «يَا غُلَامُ، سَمِّ اللهَ، وَكُلْ بِيَمِينِكَ، وَكُلْ مِمَّا يَلِيكَ» فَمَا زَالَتْ تِلْكَ طِعْمَتِي بَعْدُ. [صحيح] - [متفق عليه]

(233) – Cumar Binu Abii Salama-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu dhahay: Anoo ah wiil yar oo ku nool guriga Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayey gacantaydu  xeerada ku dhex wareegtay markaasaa Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee igu yiri: yarow Bismi Allah dheh oo midigta ku cun, oo ka cun dhinaca ku soo xiga, intii ka danbaysay sidaas ayaan u cuni jiray cuntada. [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Cumar Binu Abii Salama-Allaha ka raali ahaade wuxuu sheegay inuu ahaa wiilkii yar oo ay dhashay xaaskii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ee Umu Salama Allaha ka raali ahaadee- waxaana gacanta ku hayay oo tarbiyeynaayey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo Nabiga wax la cunaya ayuu weelkii cuntada dhinacyada cunto ka qaatay, markaasuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu baray saddexdan aadaabta cuntada ku saabsan.:

Tan 1aad: waa erayga "Bismillaah" bilawga cuntada.

Tan 2aad: midigta oo lagu cuno.

Tan 3aad: waa inuu cuntaa ka cuno dhinaca u dhaw isaga.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Aadaabta cunida iyo cabida waxaa ka mida Bisika oo lagu bilaabo.
2. Waa muhiim in caruurta la baro aadaabta, gaar ahaana kuwa qofku masuulka ka yahay.
3. Waa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee naxariistiisa waasica ah iyo dulqaadkiisa  markuu caruurta wax barayo oo uu tarbiyeynaayo.

4. Waxaa ka mid ah aadaabta cuntada inuu ka cuno dhinaca isaga soo xiga hadayna ahayn cuntadu noocyo kala duwan, markaa waxaa u banaan tahaty inuu ka qaato shay walba halkuu yaallo.
5. Asaxaabtu waxay qaadan jireen aadaabta uu baray Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee arinkaana waxaa laga fahmayaa hadalka Cumar Binu Abii Salama: intii ka danbaysay sidaas ayaan cuntada u cuni jiray.

(58120)

(234) – عن أنس بن مالك رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِنَّ اللهَ لَيَرْضَى عَنِ الْعَبْدِ أَنْ يَأْكُلَ الْأَكْلَةَ فَيَحْمَدَهُ عَلَيْهَا، أَوْ يَشْرَبَ الشَّرْبَةَ فَيَحْمَدَهُ عَلَيْهَا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(234) – Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Ilaahay wuu kaga raali noqdaa qofka markuu wax cuno oo Ilaahay ku mahadiyo iyo markuu wax cabo oo uu Ilaahay ku mahadiyo). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in marka adoonku Ilaahay fadligiisa iyo nicmadiisa uu ku mahadiyo ay ka mid tahay arimaha lagu gaaro Ilaahay raali ahaantiisa, markuu cuntada cuno wuxuu oran: Alxamdu lilaah, haduu cabana wuxuu oran: Alxamdu lilaah.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Deeqsinimada Ilaahay casa wajala, wuxuu fadligiisa ku siiyey irsaaqad hadii lagu xamdiyona wuu ku raalinoqdaa.
2. Raali ahaanta Ilaahay waxaa lagu gaaraa asbaabta ugu fudud, sida mahadnaqa marka wax la cuno ama wax la cabo.

3. Aadaabta cuntada iyo cabitaanka waxaa ka mida: Ilaahay oo loo mahadiyo cunida iyo cabida ka dib.

(5798)

(235) – عَنْ سَلَمَةَ بْنِ الْأَكْوَعِ رضي الله عنه: أَنَّ رَجُلًا أَكَلَ عِنْدَ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِشِمَالِهِ، فَقَالَ: «**كُلْ بِيَمِينِكَ**»، قَالَ: لَا أَسْتَطِيعُ، قَالَ: «**لَا اسْتَطَعْتَ**»، مَا مَنَعَهُ إِلَّا الْكِبْرُ، قَالَ: فَمَا رَفَعَهَا إِلَى فِيهِ. [صحيح] - [رواه مسلم]

(235) – Salama Binu Alakwac-Allaha ka raali ahaadee-: Nin ayaa bidixda ku cunay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee agtiisa, wuxuu Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku yiri: "midigtaada ku cun", wuxuuse yiri: ma awoodo, wuxuu Rasuulku scw yiri: " ha awoodin ", kibir baa u diiday, wuxuu yiri: mar danbe gacantiisii afkiisa uma qaadin, . [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa arkaynin bidixda wax ku cunaaya, wuxuuna amray inuu midigtiisa ku cuno, Wuxuu ku jawaabay inuusan awoodin isagoo ay kibir iyo been ka tahay! Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku habaaray inuu kari waayo midigta inuu wax ku cuno. Ilaahayna wuu aqbalay habaarkii Nabigiisa oo waxaa qalashay midigtiisii, mana awoodin inuu afkiisa gaarsiiyo intaa ka dib cunto iyo cabitaanba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa waajib ah in midigta wax lagu cuco, waana xaaraan in bidixda wax lagu cuno.
2. Qofka iska waynaysiiya ku dhaqanka axkaanta shareecada islaamka wuxuu mudan yahay in la ciqaabo.
3. Ilaahay wuxuu ku karaameeyey Nabigiisa nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu habaarkiisa aqbalay.

4. Farida wanaaga iyo reebida xumaha waa waajib shareecadu fartay, xaalad kastoo lagu jiro, xataa waqtiga cuntada.

(3372)

(236) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: كان رسولُ الله صلى الله عليه وسلم إذا عَطَس وضَعَ يَدَه -أو ثوبَهُ- على فيهِ، وخَفَضَ -أو غضَّ- بها صوتَهُ. [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي وأحمد]

(236) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee haduu hindhisayo gacantiisa ama maradiisa ayuu saari jiray afkiisa oo ku yarayn jiray codkiisa. [Xadiis Saxiix ah] - [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At Tirmidi, Iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa haduu hindhisayo:

marka 1aad: gacantiisa ama maradiisa ayuu afka saari jiray, si aanu uga soo bixin afkiisa ama sankiisa wax dadka la fadhiya dhiba.

Marka 2aad: codkiisa ayuu hoos u dhigi jiray oo kor uma qaadi. jirin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Xadiiskaan waxaa ku cad dhaqankii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu u hindhisi jiray iyo in looga daydo arinkaas.
2. Waa suno in afka iyo sanka lasaaro maro ama masar iyo wixii la mid ah markuu qofku hindhisayo, si aanay uga soo bixin wax dhiba qofka la fadhiya.
3. In codka hoos loo dhigo marka la hindhisaayo waa la rabaa, waana kaamilnimada aadaabta iyo akhlaaqda wanaagsan.

(3317)

(237) – عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنهما قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ أَنْ تُؤْتَى رُخَصُهُ، كَمَا يُحِبُّ أَنْ تُؤْتَى عَزَائِمُهُ**». [صحيح] - [رواه ابن حبان]

(237) – Ibnu Cabbaas Allaha ka raali noqdo isagiyo Aabihiise wuxuu yiri: Rasuulkii Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Ilaahay wuxuu jecel yahay in lala yimaado ruqsooyinkiisa sida uu u jecel yahay in lala yimaado waajibaadkiisa. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Ibnu Xibbaan]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: ha ahaate wuxuu sheegay: in Ilaahay jecel yahay in la qaato ruqsooyinkiisa sharciga ah, sida khafiifinta axkaanta iyo cibaadada iyo in qofkii qaan gaar ah ee cudur daar leh loo sahlo cibaadada sida gaabinta salaada iyo jamcinteeda waqtiga safarka. sida Ilaahay u jecel yahay in lala yimaado waajibaadka uu waajibiyey, waayo amarka Ilaahay ee ruqsada ah iyo waajibaadku waa hal mid.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ilaahay wuu u naxariistay adoomadiisa, wuxuuna jecel yahay in la qaato wixii ruqsooyin ah ee uu jideeyey.
2. waa kaamilnimada shareecadaan iyo in laga dulqaaday Muslimka wixii dhib ku ah.

(65017)

(238) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «**مَنْ يُرِدِ اللَّهُ بِهِ خَيْرًا يُصِبْ مِنْهُ**». [صحيح] - [رواه البخاري]

(238) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: "Qofkii Ilaahay khayr la doono wuu asiibaa." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay haduu la doono khayr qof adoomadiisa muuminiinta ah, wuxuu itaxaan kaga rido xaga naftooda, maalkooda, ehelkooda, muumniintu waxay ka helayaan arinkaa inay Ilaahay magan galaan oo baryaan iyo in loo danbi dhaafo darajadoodana kor loo qaado.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Qofka Muuminka ah waxaa lagu itaxaamaa balaayo kala duwan.
2. itaxaanka Muuminku marayo wuxuu calaamad u noqon karaa in Ilaahay jecel yahay adoonkiisa, oo darajadiisa kor u qaado, oo maqaamkiisa kor u qaado, dambigiisana dhaafo.
3. Waxaa la isku boorinayaa marka masiibo dhacdo in la sabro oo aan la argagixin.

(4204)

(239) – عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ وَعَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنهما عَنِ النَّبِيِّ صلى الله عليه وسلم قَالَ: «مَا يُصِيبُ الْمُسْلِمَ مِنْ نَصَبٍ وَلَا وَصَبٍ وَلَا هَمٍّ وَلَا حُزْنٍ وَلَا أَذًى وَلَا غَمٍّ حَتَّى الشَّوْكَةِ يُشَاكُهَا إِلَّا كَفَّرَ اللهُ بِهَا مِنْ خَطَايَاهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(239) – Abii Saciid Al-khudriyi iyo Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- waxay Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee ka wariyeen- inuu yiri: " Wixii ku dhaca muslimka ee ah rafaad ,daal, hami, murug, uur ku taalo iyo dhibaato, xataa qodaxda mudaysa, Ilaahay danbigiisuu ugu dhaafaa". [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Wuxuu Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee cadeeyey waxa soo gaaraya muslimka ee jiro, murugo, walba haar iyo dhibaatooyin kale ah sida: cabsida, gaajada, xataa qodaxda mudaysa ee

xanuujisa, waxaasoo dhan kafaara gud ayey u noqonayaan, Ilaahayna dambiyadiisuu kaga dhaafayaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa cadayn fadliga Ilaahay siiyey adoomadiisa muuminiinta ah iyo siduu ugu naxariistay uguna danbi dhaafay dhibka ugu yar ee soo gaaray.
2. Waxaa ku haboon muuminku inuu Ilaahay kaga ajar dalbo wixii dhib ah ee ku dhaca kuna sabro wixii yar ama wayn ee ku dhaca si ay ugu noqoto mid darajadiisa kor u qaada danbigana looga dhaafo.

(3701)

(240) – عَنْ صُهَيْبٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «عَجَبًا لِأَمْرِ الْمُؤْمِنِ، إِنَّ أَمْرَهُ كُلَّهُ خَيْرٌ، وَلَيْسَ ذَاكَ لِأَحَدٍ إِلَّا لِلْمُؤْمِنِ، إِنْ أَصَابَتْهُ سَرَّاءُ شَكَرَ، فَكَانَ خَيْرًا لَهُ، وَإِنْ أَصَابَتْهُ ضَرَّاءُ صَبَرَ، فَكَانَ خَيْرًا لَهُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(240) – Suheyb-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay- naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "Muuminka xaalkiisu yaab ayuu leeyahay, arimihiisa oo dhan waa khayr, sidaasina Muuminka maahee cid kale uma sugnaan, haduu khayr helo wuu ka mahad celinayaa, khayr ayeyna u ahaanaysaa, hadii dhibaato ku dhacdana wuu sabrayaa, khayr ayeyna u noqonaysaa. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu la yaabay Muuminka arinkiisa iyo axwaashiisa, isagoo-Rasuulku- jeclaysanaya arinkaa, waayo xaalkiisoo dhan baa kheyr wada ah, Muuminka maahee cid kale uma sugna arinkaasi, Hadii wax farxad leh uu helo wuu ka mahad celinayaa markaasuu mahad celintaas ka helayaa ajar. Hadii dhib ku dhacona wuu ku sabraa oo Ilaahay ayuu ajar ka helayaa,

wuxuuna sabirkaa ka helayaa ajar, sidaa awgeed mar walba wuxuu helayaa ajar.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadli ayey leedahay in laga mahad celiyo nicmada oo lagu sabro dhibka, qofka sidaa sameeya aduun iyo aakhiroba wuxuu helayaa khayr, qofka aan ka mahad celin nicmada oo aan ku sabrin musiibada waxaa dhaafay ajar weyn, wuuna danbaabay.
2. Iimaanku fadli ayuu leeyahay, ajarkana mar walba waxaa iska leh dadka iimaanka leh.
3. Nicmada oo laga mahad celiyo, iyo dhibka oo lagu sabro waa sifaadka muuminiinta.
4. In la rumeeyo Qadaha iyo qadarka Ilaahay waxay ka dhigaysaa Muuminka inuu axwaashiisa oo dhan ku raali noqdo, waxaa ka duwan qofka aan muuminka ahayn kaasoo ku jiraya caro joogto ah marka dhib ku dhocoba, hadii Ilaahay nicmo siiyana wuxuu kaga mashquulaa cibaadada Ilaahay, waliba wuxuu u isticmaala macsida Ilaahay.

(3298)

(241) – عن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «إِذَا مَرِضَ الْعَبْدُ أَوْ سَافَرَ كُتِبَ لَهُ مِثْلُ مَا كَانَ يَعْمَلُ مُقِيمًا صَحِيحًا». [صحيح] - [رواه البخاري]

(241) – Abii Muusa Alashcari Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri: (Hadii adoonku jirado ama uu safro waxaa loo qoraa xasanaadkii uu qaban jiray markuu daganaa ee uu  caafimaadka qabay). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay fadliga Ilaahay iyo raxmadiisa, hadii qofka muslimka ahi caadaysto inuu sameeyo camal wanaagsan marka uu caafimaadka qabo ee gurigiisa joogo ka dibna uu ku yimaado wax cudurdaar ah sida jiro oo uu awoodi waayo inuu camalkii suubiyo ama uu kaga mashquulo safar ama wax kale, waxaa loo qoroyaa ajar kaamil ah sidii isagoo sameeyey camalka markuu gurigiisa joogay oo uu caafimaadka qabay oo kale.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa Ilaahay fadligiisa waasica ah ee uu siiyey adoomadiisa.
2. Waxaa la isku boorinayaa in lagu dadaalo cibaadada oo laga faa'iidaysto waqtiga caafimaadka iyo firaaqada la ahaysto.

(3553)

(242) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «بَادِرُوا بِالْأَعْمَالِ فِتَنًا كَقِطَعِ اللَّيْلِ الْمُظْلِمِ، يُصْبِحُ الرَّجُلُ مُؤْمِنًا وَيُمْسِي كَافِرًا، أَوْ يُمْسِي مُؤْمِنًا وَيُصْبِحُ كَافِرًا، يَبِيعُ دِينَهُ بِعَرَضٍ مِنَ الدُّنْيَا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(242) – Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ka wariyey inuu yiri: "U deg-dega camalka saalixa ah inta aanay idinku imaan fitnooyinka la moodo qayb habeen ah oo mugdi ah, oo ninku waabariisanaayo isagoo Muumin ah oo galabaysanaayo isagoo gaal ah ama uu galabaysanaayo isagoo muumin ah oo uu waabariisanaayo isagoo gaal ah, oo uu diintiisa ku iibsanaayo xoogaa aduunyo ah. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku boorinayaa qofka muuminka ah inuu u deg-dego oo uu badsado camalka saalixa ah, inta aan la waayin ama aan lagu mashquulin, fitnooyin iyo shubuhaat imaandoona oo u diidaya oo ka hor istaagaya camalka saalixa ah, fitnooyinkaasi waxay la mid yihiin qayb habeen mugdi ah, oo ay isku darsamayaan xaqa iyo baadilku, oo dadka ay ku adkaanayso inay kala saaraan, oo sida ay u daran tahay ay dadku isku dhex yaacayaan ilaa qofku uu waabariisto isagoo muumin ah oo galabaysto isagoo gaal ah, oo uu galabaysto isagoo muumina oo uu waabariisto isagoo gaala, oo diintiisa uga tago xoolo aduunyo oo dhamaanaya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa waajib in diinta la qabsado, oo loo degdego camalka saalixa ah inta aanay imaan wax dadka u diida camalka saalixa ah.
2. Waxaa la ishaaray in fitnooyinka lagu baadiyoobo isdaba joogaan aakhiru samaanka, oo markii fitno tagtaba waxaa daba socota fitno kale.
3. Hadii diinta qofku daciifto oo uu dhaafsado diintiisa wax yaroo maal aduunyo ama wax kale ah, taasi waxay sabab u noqonaysaa inuu ka leexado oo isaga tago diinta oo uu iska dabagalo fitnooyinka.

4. Xadiiskaani wuxuu daliil u yahay inuu camalka saalixa ahi sabab u yahay in fitnada laga bad-baado.
5. Fitnadu waa labo qaybood: fitno shubho ah, dawadeeduna waa Cilmi, iyo fitno shahwo ah, dawadeeduna waa iimaan iyo sabir.
6. Xadiiskan waxaa lagu ishaaray in qofka cibaadadiisu yaraato fitnadu ku soo degdegayso, qofka cibaadadiisu badan tahayna waxaa haboon inuusan ku kadsoomin khayrka uu haysto balse waa inuu khayrka badsadaa.

(3138)

(243) – عن معاوية رضي الله عنه قال: سمعت النبي صلى الله عليه وسلم يقول: «مَنْ يُرِدِ اللَّهُ بِهِ خَيْرًا يُفَقِّهْهُ فِي الدِّينِ، وَإِنَّمَا أَنَا قَاسِمٌ، وَاللَّهُ يُعْطِي، وَلَنْ تَزَالَ هَذِهِ الْأُمَّةُ قَائِمَةً عَلَى أَمْرِ اللَّهِ، لَا يَضُرُّهُمْ مَنْ خَالَفَهُمْ، حَتَّى يَأْتِيَ أَمْرُ اللَّهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(243) – Mucaawiye Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: (Qofka Ilaahay la doono khayr diinta ayuu fahamsiiyaa, anigu qaybiye ayaan ahay, Ilaahay ayaa wax bixiya, ummaddaani ka suulimayso inay xaqa ku taagan tahay mana dhibayso cidii khilaafta ilaa amarka Ilaahay yimaado.) [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofka Ilaahay khayr la doono inuu ku irsaaqo fahamka diinta, Nabiguna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yahay mid u qaybiya dadka waxa Ilaahay bixiyo ee risiq iyo cilmi iyo wixii kaleba, irsaaq bixiyaha dhabta ahina waa Ilaahay, wixii Ilaahay ka soo harayna waa asbaab aan waxba tarayn in Ilaahay u idmo maahee, ummaddaanina ka tagimayso inay amarka Ilaahay ku taagan tahay, mana dhibayso cidii khilaataa ilaa qiyaamuhu dhoco.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga wayn ee cimliga shareecada iyo barashadiisu leeyihiin iyo isku boorintiisa.
2. Waa lama huraan in xaqa lagu taagnaado oo ummaddan laga dhex helo xaqa, oo hadii qolo ka tagto qolo kale ay ku taagnaato.
3. Diinta in la fahmo waa khayr Ilaahay la doonay adoonkiisa.
4. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu wax ku siiyaa amarka iyo doonista Ilaahay, ee isagu waxbana mahaysto.

(5518)

(244) – عَنْ جَابِرِ بْنِ عَبْدِ اللَّهِ رضي الله عنهما أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: «لَا تَعَلَّمُوا الْعِلْمَ لِتُبَاهُوا بِهِ الْعُلَمَاءَ، وَلَا لِتُمَارُوا بِهِ السُّفَهَاءَ، وَلَا تَخَيَّرُوا بِهِ الْمَجَالِسَ، فَمَنْ فَعَلَ ذَلِكَ، فَالنَّارُ النَّارُ». [صحيح] - [رواه ابن ماجه]

(244) – Jaabir Binu Cabdullaahi Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiiye waxaa laga wariyey inuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: (Ha u baranina cilmiga si aad ugu faantaan culimada ama ugu la murantaan dadka xun ama in la idinku ixtiraamo, qofka intaa suubiya naartuu mudan naartuu mudan) **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Ibnu Maajah]**

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ka digay in cilmiga loo barto in lagu faano ama in culimada lagula tartamo, ama si uu u muujiyo inuu culumo yahay, iyo in lagula murmo wax ma garadka, iyo in loo barto in la xurmeeyo ama mudnaanta la siiyo. Qofka sidaa sameeya, wuxuu mudanayaa naarta, waayo cilmiga Ilaahay darti loo barto ayuu u bartay istustus iyo ikhlaas la'aan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Naarta ayaa loogu goodiyey qofka cilmiga u barta faan ama inuu culimada kula murmo ama in lagu xurmeeyo iyo wixii la mida.
2. Ahmiyada ay leedahay in ikhlaas loola yimaado niyada qofkii doonaya inuu cilmi barto ama uu baro.
3. Niyadu iyadaa aasaas u ah camalka, iyadana qofka lagu abaal marin.

(65047)

(245) – عن عثمان رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «خَيْرُكُمْ مَنْ تَعَلَّمَ الْقُرْآنَ وَعَلَّمَهُ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(245) – Cusmaan Allaha ka raali ahaadee wuxuu Nabiga scw ka wariyey inuu yiri: (Waxaa idiinku khayr badan kan Qur'aanka bartay ee bara quraanka). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka muslimiinta ugu fadliga badan uguna darajada sareeya Ilaahay agtiisa uu yahay qofka Qur'aanka bartay, akhrintiisa, xafiday, tartiilkiisa iyo tafsiirkiisa, oo qayrki baray wuxuu ka yaqaan culuunta quraanka kuna camal fala quraanka.

## Faa'iidooyinka xadiiska.:

1. waa cadayn sharafta Qur'aanka iyo inuu yahay hadal kan ugu khayr badan, waayo waa hadalkii Ilaahay.
2. Kuwa wax bartay waxaa ugu khayr badan kuwa qayrkood sii bara, kan naftiisa ku gaabsada maaha.

3. Barashda Qur'aanka iyo baridiisu waxaa ka mida akhrintiisa, macnihiisa, iyo axkaantiisa.

(5913)

(246) – عَنْ أَبِي عَبْدِ الرَّحْمَنِ السُّلَمِي رحمه الله قَالَ: حَدَّثَنَا مَنْ كَانَ يُقْرِئُنَا مِنْ أَصْحَابِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُمْ كَانُوا يَقْتَرِئُونَ مِنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَشْرَ آيَاتٍ، فَلَا يَأْخُذُونَ فِي الْعَشْرِ الْأُخْرَى حَتَّى يَعْلَمُوا مَا فِي هَذِهِ مِنَ الْعِلْمِ وَالْعَمَلِ، قَالُوا: فَعَلِمْنَا الْعِلْمَ وَالْعَمَلَ.

[حسن] - [رواه أحمد]

(246) – Abii Cabdiraxmaan Asulami Allaha u naxariiste waxaa laga wariyey inuu yiri: Wuxuu noo sheegay mid noo akhrin jiray oo asxaabta Nabiga scw, ka mid ahaa, asxaabtu waxay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka akhrisan jireen toban aayadood, mana ay qaadan jirin tabanka kale ilaa ay bartaan waxa ku jira ee cilmi iyo camalba ah, waxay yiraahdeen: waan baranay cilmigii iyo camalkiiba.

[Xadiis Xasan ah] - [Waxa wariyay Axmed]

## Sharraxaad:

Asxaabtu Allaha ka raali ahaadee waxay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka qaadan jireen toban aayadood oo Quraanka ah, wax kale ma ay qaadan jirin ilaa ay bartaan waxa ku jira tobankaa ee cilmi ah kuna camal falaan, markaasay cilmigii iyo camalkiiba isla heleen.`

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga ay leeyihiin asxaabtu Allaha ka raali noqdee iyo dadaalka ay ku bixiyeen barashada Qur'aanka.
2. Qur'aanka barashadiisu waa in loo barto cilmi ahaan laguna camal falo waxa ku yaal, ee ma aha akhrintiisa iyo xifdigiisa oo keliya.
3. Cilmig barashadiisa ayaa ka horaysa wax sheegida iyo camal falka.

(65058)

(247) – عن عبد الله بن مسعود رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «مَنْ قَرَأَ حَرْفًا مِنْ كِتَابِ اللهِ فَلَهُ بِهِ حَسَنَةٌ، وَالْحَسَنَةُ بِعَشْرِ أَمْثَالِهَا، لَا أَقُولُ {الم} حَرْفٌ، وَلَكِنْ {أَلِفٌ} حَرْفٌ، وَ{لَامٌ} حَرْفٌ، وَ{مِيمٌ} حَرْفٌ». [حسن] - [رواه الترمذي]

(247) – Cabdullaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Qofka akhriya xaraf ka mid ah kitaabka Ilaahay wuxuu ka halayaa hal xasano, halka xasano waxay u dhigantaa toban laabkeed, ma oranaayo {ألم} waa xaraf, laakiin Alifku waa xaraf, oo laamku waa xaraf, oo miimku waa xaraf). **[Xadiis Xasan ah] - [Waxaa wariyay At□tirmidi]**

## Sharraxaad:

Rasuulku scw wuxuu sheegay qof kastoo muslim ah oo akhriya xaraf kitaabka Ilaahay ka mid ah, inuu ka helaayo hal xasano, kaasoo ajarka loo laalaabayo toban laabkeed.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku cadeeyey hadalkiisaa isagoo dhahay: (ma dhahayo alif laam miim) waa xaraf, laakiin alifku waa xaraf, laamku waa xaraf, miimkuna waa xaraf): waxay ahaanaysaa saddex xaraf oo soddon xasano laga helayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa laysku boorinayaa in la badiyo akhrinta Qur'aanka.
2. Qofka akhrinaya quraanka wuxuu ka helayaa xaraf kastoo ee ku jira kalimad walba ee uu akhriyo hal xasano taasoo loo laalaabayo toban laabkeed.
3. Waa Ilaahay raxmadiisa waasac nimadeeda iyo deeqdiisa, waayo wuxuu u laban laabay adoomadiisa ajarka, waana fadligiisa, iyo deeqsinimadiisa.

4. Qur'aanku wuu ka fadli badan yahay wixii qayrkiisa ee hadal ah, akhrintiisaana Ilaahay ayaa lagu caabudaa, waayo waa hadalkii Ilaahay  sareeye.

(6275)

(248) – عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «يقالُ لصاحبِ القرآن: اقرَأ وارتَقِ، ورتِّل كما كُنْتَ ترتِّل في الدُنيا، فإن منزِلَكَ عندَ آخرِ آية تقرؤها». [حسن] - [رواه أبو داود والترمذي والنسائي في الكبرى وأحمد]

(248) – Cabdullaahi Binu Camar Binu caas Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Qofka Ahlu Qur'aanka ah waxaa lagu oran: akhri oo kor u soco, oo ku luuqee sidaad ugu luuqayn jirtay aduunka, gurigaagu waa halka aayada ugu dambaysa aad ku akhrido). [Xadiis Xasan ah] - [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,nasaa.i oo kawayn kuwariyey iyo Axmad]

## Sharraxaad:

Nabigu  nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in lagu oran doono qofka Qur'aanka akhriya, kuna camal fala, ee laasima akhrintiisa iyo xifdintiisa markuu janada galayo: Qur'aanka akhri oo kor ugu soco darajooyinka janada, kuna luuqee sidaad ugu luuqayn jirtay akhrintiisa aduunka, u akhri si dagan oo xasilooni leh, gurigaagu waa halka ay kaaga dhamaato aayada ugu dambaysa akhriskeedu.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Abaal marintu waxay waafaqsan tahay camalka la qabto tiro ahaan iyo tayo ahaanba.
2. Waxaa la isku booriyey Qur'aanka akhrintiisa, itqaanintiisa, xifdintiisa, tadaburkiisa, iyo ku camal falkiisa.

3. Janadu waa heerar iyo darajooyin badan, dadka Ahlu Qur'aanka ahi darajooyinka ugu sareeya ayey dagayaan.

(65054)

(249) – عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ إِذَا رَجَعَ إِلَى أَهْلِهِ أَنْ يَجِدَ فِيهِ ثَلَاثَ خَلِفَاتٍ عِظَامٍ سِمَانٍ؟» قُلْنَا: نَعَمْ. قَالَ: «فَثَلَاثُ آيَاتٍ يَقْرَأُ بِهِنَّ أَحَدُكُمْ فِي صَلَاتِهِ خَيْرٌ لَهُ مِنْ ثَلَاثِ خَلِفَاتٍ عِظَامٍ سِمَانٍ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(249) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Ma jecel yahay in qof idinka mida haduu u soo laabto reerkiisa uu ka halo saddex halaad oo waawayn oo buur buuran?) waxaan niri: haa. wuxuu yiri: (Saddex aayadood oo midkiin ku akhriyo salaada ayaa uga kheyr badan saddex halaad oo waawayn oo buur buuran). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in salaada oo lagu akhriyo saddex aayadood ajarkeedu ka kheyr badan yahay in qofku gurigiisa ka helo saddex halaad oo riman oo waawayn oo buur buuran.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la cadeeyey fadliga ay leedahay in salaada lagu akhriyo Qur'aanka.
2. Camalka saalixa ahi ka kheyr badan oo ka caaqibo fiican xoolo lagu helo aduunkaan dhamaanaya.
3. Fadligaasi kuma koobna oo keliya akhrinta saddex aayadood, mar walboo qofka tukanayaa salaadiisa ku kordhiyo akhrinta aayadaha khayrka iyo ajarka uu ka helaayo way ka kheyr badan tahay tiradooda geel le`eg.

(65053)

(250) – عن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «**تَعَاهَدُوا هَذَا الْقُرْآنَ، فَوَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ لَهُوَ أَشَدُّ تَفَلُّتًا مِنَ الْإِبِلِ فِي عُقُلِهَا**». **[صحيح] - [متفق عليه]**

(250) – Abii Muusa Alashcari Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey, inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee yiri: (Joogteeya akhrinta Qur'aanka, Allaha nafta Maxamed gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye wuxuu ka siibasho badan yahay Qur'aanku geel dabaran,). **[Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]**

## Sharraxaad:

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu amray in la joogteeyo akhrinta Qur'aanka iyo in si xiriira loo akhriyo, si aan qofka laabta ku xifdisani u ilaawin, wuxuuna Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku adkeeyey inuu ku dhaartay in Qur'aanku laabta kaga baxsan og yahay si kadaran geel la dabray oo xarig dhudhunka looga xiray, hadii qofku ilaaliyo wuu soo qaban hadiise uu iska daayo wuu tagin oo lumin.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Haduu qofka Qur'aanka xifdisani uu joogteeyo akhrintiisa marba marka ka danbeeya qalbiga ayuu ku xafidisanaan, hadii kale wuu illaawin.
2. Faa'iidooyinka joogtaynta akhrinta Qur'aanka waxaa ka mida: Ajar, xasanaat, iyo darajada oo kor loo qaado maalinta qiyaame.

(5907)

(251) – عن أبي هريرة رضي الله عنه: أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «**لَا تَجْعَلُوا بُيُوتَكُمْ مَقَابِرَ، إِنَّ الشَّيْطَانَ يَنْفِرُ مِنَ الْبَيْتِ الَّذِي تُقْرَأُ فِيهِ سُورَةُ الْبَقَرَةِ**». **[صحيح] - [رواه مسلم]**

(251) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka wariyey inuu yiri: (Ha ka dhigina guryihiina qabuur oo kale, shaydaanku wuu ka cararaa guriga suuratul-baqara lagu akhriyee). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in guryaha laga qadiyo salaada oo ay noqdaan sida qabuurta aan lagu tukan.

Ka dibna Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in shaydaanku ka cararo guriga lagu akhriyo suurada Baqara.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa sune in la badiyo cibaadada iyo salaada sunaha ah ee guryaha lagu tukado.
2. Ma banaana in lagu tukado qubuurta, waayo waa waxyaabaha keena shirkiga iyo in dadku ku xad gudbaan qubuurta, salaada janaasada wax ka baxsan lama ogola.
3. Reebida in qubuurta lagu tukado wuxuu ka sugnaaday asxaabtii, sidaa daraadeed Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in guryaha laga dhigo sida qubuurta aan lagu tukan.

(6208)

(252) – عَنْ أُبَيِّ بْنِ كَعْبٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «يَا أَبَا الْمُنْذِرِ، أَتَدْرِي أَيُّ آيَةٍ مِنْ كِتَابِ اللهِ مَعَكَ أَعْظَمُ؟» قَالَ: قُلْتُ: اللهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ. قَالَ: «يَا أَبَا الْمُنْذِرِ، أَتَدْرِي أَيُّ آيَةٍ مِنْ كِتَابِ اللهِ مَعَكَ أَعْظَمُ؟» قَالَ: قُلْتُ: {اللهُ لا إِلَهَ إِلا هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ} [البقرة: 255]. قَالَ: فَضَرَبَ فِي صَدْرِي، وَقَالَ: «وَاللهِ لِيَهْنِكَ الْعِلْمُ، أَبَا الْمُنْذِرِ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(252) – Ubaya Binu Kacab Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Abaa Mundiroow, ma og tahay aayda ugu wayn kitaabka Ilaahay ee aad hayso?) wuxuu yiri: waxaan iri: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og. wuxuu yiri: (Abaa Mundiroow, ma og tahay aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay ee aad hayso?) wuxuu yiri: waxaan iri:

{الله لاإله إلا هو الحيّ القيّوم} [البقرة.255]

wuxuu yiri: laabtuu igu dhuftay, wuxuuna yiri: Abaa mundirow Ilaahay cilmi ayuu kuu hibeeyey). [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu waydiiyey Ubaya Binu Kacab aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay, jawaabtii wuu ka laalaabtay ka dibna wuxuu yiri: waa aayatul-kursiga:

{الله لا إله إلا هو الحيّ القيّوم}

Nabiguna wuu ku ayiday, wuxuuna Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku dhuftay laabtiisa isago u ishaaraya inay ka buuxdo cilmi iyo xikmad, wuxuuna ugu duceeyey inuu ku liibaano cilmigaan Ilaahayna u fududeeyo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waa sifo wayn oo fiican oo loo qiray Ubaya Binu Kacab Allaha ka raali noqdee.
2. Ayatul kursigu waa aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay sareeye, waxaa haboon in la xifdiyo oo lagu tadaburo macnaheeda, laguna camal falo.

(65059)

(253) – عن أبي مسعود رضي الله عنه قال: قال النبي صلى الله عليه وسلم: «مَنْ قَرَأَ بِالْآيَتَيْنِ مِنْ آخِرِ سُورَةِ الْبَقَرَةِ فِي لَيْلَةٍ كَفَتَاهُ». [صحيح] - [متفق عليه]

(253) – Abii Mascuud-Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Qofka akhriya labada aayadood ee suuradda Al-baqara u dambeeya habeenka way ku filan yihiin). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka akhriya labada aayadood ee u dambeeya suuradda Al-baqara habeenkii Ilaahay wuuka kaafiyaa sharka iyo dhibaatada, waxaa kaloo la yiri: way ka kaafidaa salaatul-laylka, waxaa kaloo la yiri: waxay ka kaafidaa adkaarta kale, waxaa kaloo la yiri: waa waxa ugu yar ee ay kaga gudmayso akhrinta Qur'aanka ee salaatul-laylka, siyaabo kalana waa lagu fasiray, waxaa dhici kara inuu sax yahay dhamaan waxaa lagu fasiray oo dhan oo ay erayga soo wada galaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa cad fadliga wayn ee ku jira dhamaadka suuratul baqara, waanana hadalkii ilaahay yiri:

   {آمن الرسول}

   ilaa dhammaadka suuradda.

2. Dhamaadka suuradda Al-baqara wuxuu ka difaacaa qofka dhibka, sharka, shaydaanka, haduu akhriyo habeenkii.
3. Habeenku wuxuu ka bilawdaa dhicida qoraxda, wuxuuna ku dhamaadaa soo bixitaanka fajarka.

(6274)

(254) – عن عائشة رضي الله عنها قالت: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَذْكُرُ اللهَ عَلَى كُلِّ أَحْيَانِهِ. [صحيح] - [رواه مسلم]

(254) – Caa'isha Allaha ka raali ahaade waxay tiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa mid Ilaahay xusa xaalad walba oo uu ku jiro. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Caa'isha waxay sheegtay Allaha ka raali ahaad inuu Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ahaa mid aad ugu dadaala xuska Ilaahay, oo xusa Ilaahay goor kasta, meel kasta, xaalad walba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Looma shardiyo xuska Ilaahay inuu qofku ka dahaaro qabo Xadaska yar iyo Xadaska wayn midna.
2. Nabigu scw wuxuu joogtayn jiray xuska Ilaahay.
3. Waxaa lagu boorinayaa dadka inay badsadaan xuska Ilaahay xaalad kasta, taasoo looga dayanaayo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , marka laga reebo xaaladaha aan la ogolayn xuska Ilaahay, sida waqtiga xaajo gudashada.

(8402)

(255) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «لَيْسَ شَيْءٌ أَكْرَمَ عَلَى اللهِ تَعَالَى مِنَ الدُّعَاءِ». [حسن] - [رواه الترمذي وابن ماجه وأحمد]

(255) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Majiro shay Ilaahay kaga qiimo badan ducada." **[Xadiis Xasan ah] - [Waxaa wariyay At tirmidi, Ibnu Maajah iyo Axmed]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inaanu jirin shay cibaadada ka mid ah ee Ilaahay agtiisa ka fadli badan ducada, waayo waxaa ku jira ducada in la citiraafo Ilaahay inuu qani yahay Isagaa nusqaan ka hufane, waxa kaloo ku jira ducada in la citiraafo in adoonku tabar yar yahay oo uu Ilaahay u baahan yahay.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Fadliga ducada iyo in qofka Ilaahay barya uu wayneeyey, ee uu qiray inuu qani yahay isagaa xumaan ka hufane waayo faqiir lama baryo, wuxuu qiray inuu samiic yahay waayo dhagool lama baryo, kariimna yahay waayo bakhiil lama baryo oo uu raxiim yahay waayo qabiid lama baryo, qaadirna yahay waayo daciif lama baryo oo uu dhaw yahay waayo mid fog kuma maqlayo iyo sifaadka kale ee Ilaahay waynaantiisa iyo quruxdiisa ku saabsan isagaa xumaan ka nasahane.

(5509)

(256) – عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرِو بْنِ الْعَاصِ رضي الله عنهما قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**إِنَّ الْإِيمَانَ لَيَخْلَقُ فِي جَوْفِ أَحَدِكُمْ كَمَا يَخْلَقُ الثَّوْبُ الْخَلِقُ، فَاسْأَلُوا اللَّهَ أَنْ يُجَدِّدَ الْإِيمَانَ فِي قُلُوبِكُمْ**». [صحيح] - [رواه الحاكم والطبراني]

(256) – Cabdullahi Binu Camar Binu Caas Allaha ka raali noqdo asaga iyo aabihiye wuxuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Iimaanku wuu ku duugoobaa uurkiina sida ay u duugowdo marada cusubi, Ilaahay waydiista inuu iimaanka ku cusboonaysiiyo qalbigiina. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay Alxaakim iyo Ad□dabaraani]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in iimaanku ku duugoobo qalbiga Muslimka, wuxuu u duugoobaa sida marada cusubi ugu duugawdo isticmaalka dheer. Taas waxaa u sababa cibaadada laga gaabiyo ama in macaasi lagu dhaco iyo naftu waxay jeceshahay in la muquurto. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee.

wuxuu sheegay inaan Ilaahay ka barino inuu iimaankeena inoo cusboonaysiiyo, inago gudanayna waajibaadka lana imaanayna dikri badan iyo istiqfaarta.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa la isku booriyey in Ilaahay la weydiisto sugnaanta iyo iimaanka qalbigana lagu cusboonaysiiyo.
2. Iimaanku waa mid carabka looga dhawaaqo, xubnahana laga camal falo qalbigana laga rumeeyo, wuxuu ku siyaadaa cibaadada wuxuuna ku nusqaamaa macsida.

(65020)

(257) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «أَقْرَبُ مَا يَكُونُ الْعَبْدُ مِنْ رَبِّهِ وَهُوَ سَاجِدٌ، فَأَكْثِرُوا الدُّعَاءَ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(257) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Adoonku wuxuu ugu dhaw yahay Rabigi markuu sujuudsan yahay ee ducada badiya." [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in adoonku markuu ugu dhaw yahay Rabigi ay tahay markuu sujuudsan yahay, taasina waa qofka tukanayaa wuxuu dhigayaa dhulka meesha ugu saraysa uguna sharaf badan jirkiisa isago Ilaahay casa wajala u khuduucaya, isuna dulaynaya oo u tawaaducaya isagoo sujuudsan.

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu amray in ducada la badiyo sujuuda dhexdeeda, waayo waxaa kulmaya in Ilaahay la isu duleeyo hadal ahaan iyo ficil ahaanba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Cibaadadu waxay u kordhisaa adoonka u dhawaanshaha Ilaahay, Isagaa nusqaan ka hufan oo sareeyee.
2. Waxaa suno ah in sujuuda lagu badiyo ducada, waayo waxay ka mid tahay meelaha ducada lagu aqbalo.

(5382)

(258) – عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ أَكْثَرُ دُعَاءِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «اللَّهُمَّ رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً، وَفِي الآخِرَةِ حَسَنَةً، وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(258) – Anas Allaha ka raalli noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Ducada Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa ugu badnaa "Allahayow, Rabiyow, Adduunka nagu sii kheyr, Aakhirana nagu sii kheyr, nagana ilaali cadaabta naarta-ee Aakhiro." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ahaa

mid badiya ducada ducooyinka kulmisa, waxaana ka mida: "Allahayow, Rabiyow Adduunka nagu sii khayr, Aakhirana nagu sii khayr, cadaabta naartana naga dheeree", Ducadaasi waxay koobaysaa xasanada adduunka ee ah risiq wanaagsan oo waasic ah, xaas wanaagsan, ubad indhuhu ku qabawsadaan, raaxo iyo cilmi wax tar leh, camal saalix ah, iyo waxa la mida ee wax yaabaha wanaagsan ee la jecel yahay ah ee mubaaxa ah, xasanada aakhirana waa ka badbaadka ciqaabta aakhiro ee qabriga, marka la taagan yahay maxsharka,, naar, helitaanka Raalli ahaanta Ilaahay, ku guulaysiga nicmada joogtada ah, iyo Rabiga Raxiimka ah oo lagu dhawaado.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa sunne ah in lagu ducaysto ducada kulmisa ducooyinka , iyadoo looga dayanaayo Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee .
2. Waxaa ugu kaamilsan in qofku ducadiisa ku kulmiyo khayrka Adduunyada iyo khayrka Aakhiraba.

(5502)

(259) – عَنْ أَبِي الدَّرْدَاءِ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «أَلاَ أُنَبِّئُكُمْ بِخَيْرِ أَعْمَالِكُمْ، وَأَزْكَاهَا عِنْدَ مَلِيكِكُمْ، وَأَرْفَعِهَا فِي دَرَجَاتِكُمْ وَخَيْرٌ لَكُمْ مِنْ إِنْفَاقِ الذَّهَبِ وَالوَرِقِ، وَخَيْرٌ لَكُمْ مِنْ أَنْ تَلْقَوْا عَدُوَّكُمْ فَتَضْرِبُوا أَعْنَاقَهُمْ وَيَضْرِبُوا أَعْنَاقَكُمْ؟» قَالُوا: بَلَى. قَالَ: «ذِكْرُ اللَّهِ تَعَالَى». [صحيح] - [رواه الترمذي وابن ماجه وأحمد]

(259) – Abii Dar-daa-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ma iidiin sheegaa acmaashiina kuwa ugu fadliga badan, uguna daahirnimada badan xaga Allaha Boqorkiina ah, uguna sare qaadid badan darajooyinkiina oo idiinka khayr badan inaad dahab iyo lacag bixisaan, oo idiinka khayrka badan inaad la kulantaan cadowgiina aadna qoorta ka garaacdaan iyaguna ay qoorta idinka garaacaan?", waxay dheheen: haa Rasuulkii Ilaahayow noo sheeg, wuxuu yiri: "waa dikriga Ilaahay ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxaa wariyay At tirmidi, Ibnu Maajah iyo Axmed]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu waydiiyey asxaabtiisa: M: 3575

Ma doonaysaan inaan idiin sheego oo idin baro acmaashiina kuwa ugu khayrka badan, uguna sharfta badan, uguna barako badan, oo ugu daahirnimada badan, uguna nadiifsan xaga

Allaha Maaliga ah ee casa wajale ah. M: 3575

darajaadkiina janadana idiin kor yeelid badan?

Ee idiinka khayr badan inaad sadaqaysaan dahabka iyo Fidada?

Ee idiinka khayr badan inaad gaalada jihaad la gashaan oo aad qoorta ka garaacdaan, iyaguna qoorta idinka garaacaan?

Waxay dheheen asaxaabtu: haa, waan doonaynaa, Rasuulkii Ilaahayow.

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: waa dikriga Ilaahay, oo aad xustaan waqti kasta iyo qaab walba iyo xaalad kasta oo aad kuj irtaan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Joogtaynta xuska Ilaahay kor iyo hoosba loo xuso waa acmaasha Ilaahay loogu dhawaado, uguna anfaca badan xaga Ilaahay.
2. Dhamaan acmaasha waxaa loo jideeyey waa xusitaanka Ilaahay, Ilaahay sareeye wuxuu yiri: "salaada u oog xuskayga dartii". Nabiguna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: waxaa loo jideeyey dawaafka Kacbada lagu dawaafo, iyo socodka safa iyo marwa, iyo tuurida dhagaxyada jamaraadka mina in la oogo dikriga Ilaahay. waxaa wariyey Abuu Daa'uud iyo Tirmidi.
3. Alcis Binu Cabdisalaam wuxuu ku yiri Qaacidooyinkiisa: xadiiskani wuxuu ka mid yahay wax yaabaha ku tusaaya in ajarka aan lagu helib sida camalka loogu daalo, taasoo ah dhamaan cibaadaadka, waxaaba dhici kara in Ilaahay camal yar ku abaal mariyo ajar ka badan kan uu ku bixiyo acmaal badan, hadaba ajarku wuxuu u kala bataa waa siday acmaashu u kala sharaf badan yihiin.
4. Almanaawi wuxuu ku sheegay kitaabka "Faydul qadiir": xadiiskaan waxaa lagu xambaarayaa in dikrigu yahay waxa u fadli badan dadka lagala hadlayo xadiiskaan, hadiise loo jeedin lahaa hadalka geesi soomajeeste ah oo Islaamka dagaal wax ugu tara waxaa lagu oran lahaa waa jihaad, ama mid hantile ah oo dadka saboolka ahi xoolihiisa ku intifaacayaan waxaa lagu oran lahaa waa sadaqada, ama mid awooda inuu soo xajiyo waxaa lagu oran lahaa waa xajka, ama mid labadiisa waalid nool yihiina waxaa lagu oran lahaa iyaga u baari noqo, sidaasaa lagu helaa iswaafajinta axaadiista.
5. Dikriga ugu kaamilsan waa midka carabku ku hadlo qalbiguna macnihiisa ku tadaburo, waxaa ku xiga dikriga qalbiga kaliya

laga xuso sida fakarida, waxaa kusii xiga dikriga carabka oo keliya laga xuso, dhamaana ajarbay leeyihiin in shaa Allah Tacaalaa.

6. Muslimka joogteeya adkaarta ku saabsan axwaasha qofka sida adkaarta subaxa, galabta, galida masjidka, galida guriga, galida iyo ka soo bixida suuliga .... iyo qayrkoodba waxay ka dhigayaan qofka inuu ka mid noqda kuwa Ilaahay in badan xusa.

(3575)

(260) – عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ إِذَا أَوَى إِلَى فِرَاشِهِ كُلَّ لَيْلَةٍ جَمَعَ كَفَّيْهِ، ثُمَّ نَفَثَ فِيهِمَا فَقَرَأَ فِيهِمَا: {قُلْ هُوَ اللهُ أَحَدٌ}، وَ{قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ}، وَ{قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ}، ثُمَّ يَمْسَحُ بِهِمَا مَا اسْتَطَاعَ مِنْ جَسَدِهِ، يَبْدَأُ بِهِمَا عَلَى رَأْسِهِ وَوَجْهِهِ وَمَا أَقْبَلَ مِنْ جَسَدِهِ، يَفْعَلُ ذَلِكَ ثَلَاثَ مَرَّاتٍ. [صحيح] - [رواه البخاري]

(260) – Caa'isha Allaha  ka raali noqde waxaa laga wariyey: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu tago gogoshiisa habeen walba wuu isku qaban jirey labadiisa sacab, wuxuu ku akhrin jiray kuna tufi jiray:

{ قل هو الله أحد} iyo ,{قل أعوذ بربّ الفلق } iyo ,{قل أعوذ بربّ النّاس}

ka dibna ku masixi jiray inta uu ka gaaro jirkiisa, isagoo ka bilaabaya madaxa iyo wajigiisa iyo inta soo qaabisha jirkiisa, saddex jeer buu samayn jiray. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabiga dhaqankiisa waxaa mid ahaa markuu tago gogoshiisa si uu u seexdo wuxuu isku qaban jiray labadiisa sacab isago kor u qaadaya sida qofka ducaysanaya si khafiifa ayuu ugu tufi jiray afkiisa candhuufo yar, wuxuuna ku akhriyi jiray saddexda suuradood ee:

{قل هو الله أحد } iyo { قل أعوذ بربّ الفلق iyo { قل أعوذ برب النّاس}.

ka dibna wuxuu ku masixi jiray labadiisa sacab inta uu gaaro ee jirkiisa ah, isagoo ku bilaabaya madaxa iyo wajigiisa iyo soo jeedkiisa, wuuna ku celcelin jiray ficilkaa saddex jeer.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa suno akhrinta suuradaha saddexda ah ee: Alikhlaas iyo labada qul acuudu intaan la seexan iyo in lagu tufo gacmaha, jirkana inta laga gaaro lagu masoxo.

(65060)

(261) – عَنْ شَدَّادِ بْنِ أَوْسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «سَيِّدُ الاِسْتِغْفَارِ أَنْ تَقُولَ: اللَّهُمَّ أَنْتَ رَبِّي لاَ إِلَهَ إِلَّا أَنْتَ، خَلَقْتَنِي وَأَنَا عَبْدُكَ، وَأَنَا عَلَى عَهْدِكَ وَوَعْدِكَ مَا اسْتَطَعْتُ، أَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ مَا صَنَعْتُ، أَبُوءُ لَكَ بِنِعْمَتِكَ عَلَيَّ، وَأَبُوءُ لَكَ بِذَنْبِي فَاغْفِرْ لِي، فَإِنَّهُ لاَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ إِلَّا أَنْتَ» قَالَ: «وَمَنْ قَالَهَا مِنَ النَّهَارِ مُوقِنًا بِهَا، فَمَاتَ مِنْ يَوْمِهِ قَبْلَ أَنْ يُمْسِيَ، فَهُوَ مِنْ أَهْلِ الجَنَّةِ، وَمَنْ قَالَهَا مِنَ اللَّيْلِ وَهُوَ مُوقِنٌ بِهَا، فَمَاتَ قَبْلَ أَنْ يُصْبِحَ، فَهُوَ مِنْ أَهْلِ الجَنَّةِ». [صحيح] - [رواه البخاري]

(261) – Shaddaad Binu Aws-Allaha ka ralli ahaadee- Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuuu ka wariyey inuu yiri: " Sayidka istiqfaartu waa inaad tiraahdo: Allahayow adigaa Rabigay ah Ilaah aan adiga ahayn ma jiro, adigaa i abuuray ana adoonkaagii ayaan ahay waxaan ku taagnahay balantaada iyo balan qaadkaaga intaan awoodo, waxaan kaa magan galayaa wixii aan sameeyey shartooda, waan qirsanahay nicmooyinka aad i siisay, waan kaaga towbadkeenay danbigayga ee ii dhaaf, adiga maahee cid kale danbiyada ma dhaaftee" wuxuu yiri: " qofkii yiraahda maalintii isagoo yaqiinsan, oo dhinta maalintaas galabtii ka hor waa Ehlu Jano, qofkii yiraahda habeenkii isagoo yaqiinsan, oo dhinta habeenkaas inta aan waagu baryin, waa Ehlu Jano". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Albukhaari]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in istiqfaartu ay leedahay Ereyo, kuwa ugu fadliga badana ay yihiin inuu Addoonku dhoho: "Allahayow, adaa Rabigay ah, ilaah aan adiga ahayni majiro, waad i abuurtay ana addoonkaagaan ahay, waxaanan ku jiraa ballankaagii iyo ballan qaadkaagii inta aan awoodo, waxaan kaa magan galayaa sharka aan sameeyo dhibkiisa, waxaan kuu ogsoonahay oo qiraya nicmooyinka aad i siisay, waxaan qirsanahay dambigayga, Allahayow ii dambi dhaaf, mid aan Adiga ahayn oo dambiga dhaafi karaa majiree" Marka hore addoonku wuxuu u qirayaa towxiidka, iyo in Ilaahay abuuray oo uu caabudayo isagoon cidna la wadaajin, oo addoonku ku kusugan yahay wixii uu Ilaahay kula ballamay ee iimaan iyo u hoggaansan Ilaahay ah kolba inta Awooddiisu tahay, waayo addoonku sikasta oo uu u cibaadaysto haddana lama iman karo dhamaan wixii Ilaahay faray ee cibaado ah, iyo inuu guto mahadnaqii looga baahnaa ee nicmooyinka Ilaahay, addoonku llaahay buu cuskadaa, diintiisana qabsadaa, Isaguuna addoonku ka hoos galaa sharka ay naftiisu samayso Ilaahay ayuu u qirayaa nicmada uu siiyey, wuxuu naftiisa ula noqonayaa inuu qirto oo citiraafo gafkiisa iyo

dambigiisa. Codsigaa uu Ilaahay u jeediyey ka dib, Addoonku wuxuu Ilaahay ka baryayaa inuu u dambi dhaafo, oo uu u asturo dambiyadiisii oo kaga nadiifiyo dembiyada cafiskiisa, fadligiisa iyo naxariistiisa, waayo cid aan Ilaahay wayne kor ahaaye ahayn oo dambiyada addoomada dhaafi karta majirto. Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu sheegay inay ka mid tahay wardiga subaxa iyo habeenka, qofka akhriya bilawga maalinta isagoo yaqiinsan macneheedana dhadhan sanaya rumaysana, inta u dhaxaysa qorax soo baxa ilaa sawaalka -oo ah markay bartamaha samada u yara dhaafto wax yar qorraxdu xagga qorrax dhaca-, waana waqtiga maalinimada ah ee sidaa ku dhinta janaduu galayaa. Qofka habeenka akhriyana, waana qorax dhaca ilaa soo bixitaanka fajarka, oo sidaa ku dhinta intaanu waabariisan janaduu galayaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Siiqadaha loo istiqfaarsado way kala duwan yihiin, qaarba qaarka kale ka fadli badan.
2. Waxaa la gudboon Addoonka inuu ku dadaalo baryada uu Ilaahay baryo inuu ducadaa ku baryo, waayo waa boqorka istiqfaarta.

(5503)

(262) – عَن عبدِ اللهِ بن خُبَيب رضي الله عنه أنه قال: خَرَجْنَا فِي لَيْلَةٍ مَطِيرَةٍ وَظُلْمَةٍ شَدِيدَةٍ، نَطْلُبُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؛ يُصَلِّي لَنَا، قَالَ: فَأَدْرَكْتُهُ، فَقَالَ: «قُلْ»، فَلَمْ أَقُلْ شَيْئًا، ثُمَّ قَالَ: «قُلْ»، فَلَمْ أَقُلْ شَيْئًا، قَالَ: «قُلْ»، فَقُلْتُ: مَا أَقُولُ؟ قَالَ: «{قُلْ هُوَ اللهُ أَحَدٌ} وَالْمُعَوِّذَتَيْنِ حِينَ تُمْسِي وَتُصْبِحُ ثَلَاثَ مَرَّاتٍ، تَكْفِيكَ مِنْ كُلِّ شَيْءٍ». [صحيح] - [رواه أبو داود والترمذي والنسائي]

(262) – Cabdullaahi Binu Khubayb-Allaha ka raali ahaadee-waxaa laga wariyey inuu yiri: Waxaan soo baxnay habeen roob da'ayo, oo gudcur ah, anagoo Rasuulka Ilaahay raadinayna si uu noo tujiyo, wuxuu yiri: waan helnay, wuxuuna yiri: "dheh", waxba maana dhihin, wuxuu yiri: "dheh", waxba maana dhihin, wuxuu yiri: "dheh", waxaan iri: maxaan dhahaa? wuxuu yiri: dheh:

{قل هو الله أحد}

Ilaahay waa Allaah keligii ah-, iyo labada suuradood ee Micwadateynka:

{سورة الفلق iyo سورة الناس}.

galabtii iyo subixii sadeex jeer, way kaaga filan tahay wax walba".

[Xadiis Saxiix ah] - [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi, iyo nasaa.i]

## Sharraxaad:

Wuxuu sheegay saxaabiga wayn ee Cabdullaahi Binu Khubayb-Allaha ka raali ahaadee-: inay bexeen habeen roob badan oo gudcur ah, iyagoo raadinaya Rasuulka-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, si uu u tujiyo, wayna heleen, Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku yiri: waxaad dhahdaa "dheh" oo uu uga jeeday akhri, waxbana ma akhrin, Nabiguna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ku celiyey hadalkiisa, wuxuuna dhahay Cabdullaahi: maxaan akhriyaa Rasuul Ilaahayow? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: akhri suuradaha: {Al-ikhlaas}, {Al-falaq}, {Anaas}, waqtiga galabta iyo waqtiga subaxa, saddex jeer-midiiba-, waxay kaa ilaalin wax walba, xumaan oo dhana way kaa ilaaline.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa suno ah akhrinta suurada Al-ikhlaas iyo labada suuradood ee micwadateynka (Al-falaq, Anaas), subaxii iyo galabtii, waxayna xirsi xir ka tahay shar oo dhan.
2. Fadli ayey leeyihiin suuradaha: Al-ikhlaas, Al-falaq, iyo Anaas.

(6082)

(263) – عن سَمُرَة بن جندبٍ رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «أَحَبُّ الْكَلَامِ إِلَى اللهِ أَرْبَعٌ: سُبْحَانَ اللهِ، وَالْحَمْدُ لِلهِ، وَلَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَاللهُ أَكْبَرُ، لَا يَضُرُّكَ بِأَيِّهِنَّ بَدَأْتَ».
[صحيح] - [رواه مسلم]

(263) – Samura Binu Jundub Allaha ka raali ahaadee wuxu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa yiri: "Ilaahay hadalka wuxuu u jecel yahay afar: subxaana Allaah, Alxamdu lilaah, laa ilaaha ilaa Allaah, Allaahu akbar, dhib maleh tii aad ka bilowdaa. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey Ilaahay inuu hadalka Afar ugu jecel yahay:

Subxaana Allaah: waxayna tahay Ilaahay wuu ka nasahan yahay wax kastoo nusqaan ah.

Alxamdu lillaahi: Ilaahay wuxuu ku sifoobay kaamilnimo taam ah oo ay la socoto waynayntiisa iyo jeclaantiisa.

Laa ilaaha ilaa Allaah: majiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan ahayn Allah.

Allaahu Akbar: Ilaahay ayaa ka wayn oo ka cisi badan, oo ka sharaf badan cid kasta.

fadliga ereyadan iyo ajarkooduba kuma xirna inay iskugu xigaan, marka lagu dhawaaqayo.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Shareecada Islaamku way fududahay dhibna kuma jiro ereyadaan kii aad ka bilowdo.

(5475)

(264) – عن أبي أيوب رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ قَالَ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ، عَشْرَ مِرَارٍ كَانَ كَمَنْ أَعْتَقَ أَرْبَعَةَ أَنْفُسٍ مِنْ وَلَدِ إِسْمَاعِيلَ». [صحيح] - [متفق عليه]

(264) – Abii Ayuub Allaha ka raali ahaadee wuxuu ka wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Qofka dhaha: laa ilaaha Ilaa Allaah waxdahu laa shariika lahu lahul mulku wa lahul xamdu wa huwa calaa kuli shayin qadiir, toban jeer wuxuu la mid ahaanayaa qof xoreeyey afar qof oo duriyadii Nabi Ismaaciil ah.) [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka dhaha: (laa ilaaha Ilaa Allaah, waxdahuu laa shariika lahu, lahul mulku, wa lahul xamdu, wa huwa calaa kuli shayin qadiir) macneheeduna yahay: mid xaq lagu caabudo ma jiro oo aan Ilaahay ahayn, waa kaligii shariigna malah, Ilaahayna isagaa xumaan ka hufane mulkigiisu waa kaamil, wuxuu xag u leeyahay amaan oo dhan iyadoo la jecel yahay oo la waynaynaayo cidaan isaga ahayn la waynayn, Ilaahay waa qaadir wax cajsi galinayaa jirin. Qofka ku celceliya digrigaa wayn maalin kasta toban jeer, wuxuu helayaa ajarka uu helo qof xoreeyey afar adoon oo duriyadii Nabi Ismaaciil ah, isaga iyo aabihiiba nabadi korkooda ha ahaatee, wuxuuna ugu gaar yeelay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee duriyada Nabi Ismaaciil way ka sharaf badan yihiin dadka kale.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. dikrigaan fadligiisa waxaa soo galaya in Ilaahay loo kali yeelo Ilaahnimada, Mulkiga, xamdiga iyo qudro taam ah.
2. Ajarka dikrigaan wuu helayaa qofkii si xiriira u yiraahda ama si goos goos ah u yiraahda.

(5517)

(265) – عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «كَلِمَتَانِ خَفِيفَتَانِ عَلَى اللِّسَانِ، ثَقِيلَتَانِ فِي الْمِيزَانِ، حَبِيبَتَانِ إِلَى الرَّحْمَنِ: سُبْحَانَ اللهِ الْعَظِيمِ، سُبْحَانَ اللهِ وَبِحَمْدِهِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(265) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Labo eray oo ku fudud carabka, kuna culus miisaanka, Raxmaankuna jecel yahay: waa: subxaana Allahi Alcadiim, subxaana Allahi wa bixamdihi." [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay laba eray oo dadku u oran karaan si fudud iyo xaalad kasta oo ay joogaan, oo ajarkoodu ku wayn yahay miisaanka, Rabigeena raxmaankuna jecel yahay.

Subxaana Allaahi Alcadiim, subxaan Allaahi wa bixamdihi, ereyadaani Ilaahay waxay ku sifaynayaan waynaan iyo kaamilnimo, iyo in Ilaahay laga nasaho nuqsaanta isagaa sareeyee.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dikriga ugu wayn waa in lagu kulmiyo Ilaahay nasahnaantiisa iyo amaantiisa.
2. Waxaa cad Ilahay raxmadiisa waasica ah ee uu siiyey adoomadiisa, camal yar ayuu ku abaal marinayaa ajar wayn.

(5507)

(266) – عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: «مَنْ قَالَ: سُبْحَانَ اللهِ وَبِحَمْدِهِ، فِي يَوْمٍ مِائَةَ مَرَّةٍ، حُطَّتْ خَطَايَاهُ وَإِنْ كَانَتْ مِثْلَ زَبَدِ الْبَحْرِ». [صحيح] - [متفق عليه]

(266) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: (Qofka dhaha: subxaana Allaahi wa bixamdihii, boqol jeer maalintii dambigiisa waa loo dhaafaa haba haato daad xoorta badda oo kalee). [Xadiis Saxiix ah] - [Xadiis la isku waafaqay]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofka dhaha maalintii boqol jeer: (subxaana Allaahi wa bixamdihii) waa laga tirtiraa oo loo dhaafaa dambigiisa, haba badnaado sida xoorta cad ee badda dul saaran marka baddu kacsan tahaye.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Ajarkaa waxaa helaya qofka u dhaha maalintii si xiriir ah ama si aan xiriir ahaynba.
2. Tasbiixdu: waa Ilaahay oo laga hufo nusqaanta, xamdiguna: waa Ilaahay oo lagu sifeeyo kaamilnimo isagoo la jecel yahay oo la waynaynaayo.
3. Ujeedada xadiisku waa in dambiga yar la dhaafayo, danbiga waynse waxaa lagama maarmaan ah in laga towbad keeno.

(5516)

(267) – عن أبي مالكٍ الأشعريِّ رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «الطُّهُورُ شَطْرُ الْإِيمَانِ، وَالْحَمْدُ لِلهِ تَمْلَأُ الْمِيزَانَ، وَسُبْحَانَ اللهِ وَالْحَمْدُ لِلهِ تَمْلَآنِ -أَوْ تَمْلَأُ- مَا بَيْنَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ، وَالصَّلَاةُ نُورٌ، وَالصَّدَقَةُ بُرْهَانٌ، وَالصَّبْرُ ضِيَاءٌ، وَالْقُرْآنُ حُجَّةٌ لَكَ أَوْ عَلَيْكَ، كُلُّ النَّاسِ يَغْدُو، فَبَايِعٌ نَفْسَهُ فَمُعْتِقُهَا أَوْ مُوبِقُهَا». [صحيح] - [رواه مسلم]

(267) – Abii Maalik Alashcari Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Daahirnimadu waa iimaanka barki, alxamdu lillahina miisaanka ayey buuxisaa, ama subxaana Allaah iyo alxamdulilah waxay buuxiyaan inta u dhaxaysa samooyinka iyo dhulka, salaaduna waa nuur, sadaqaduna qofka xujo ayey u tahay, sabirkuna waa iftiin, Quraankuna xujo ayuu kuu noqdaa ama xujo ayuu kugu noqdaa dadka oo dhan way kalahaan, qof walbana wuxuu samaynaayo ayuu naftiisa ku iibsaday markaasaa dadku waxay noqonayaan mid naftiisa xoreeya ama halaaga. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in dahaarada muuqataa ay tahay weysada iyo qubayska waxayna shardi u tahay salaada. Erayga alxamdu lilaahi waxay buuxisaa miisaanka waana amaanta Ilaahay isagaa nusqaan ka hufane, iyo in lagu sifeeyo sifaadka kaamilka ah, maalinta qiyaame waa la miisaamin waxayna buuxin miisaanka camalka. Erayga subxaana Allaah iyo Alxamdu lillaah waa Ilaahay oo laga hufo wax kastoo naaqus ah, iyo in ilaahay lagu sifeeyo kaamilnimo oo dhan, taasoo u qalanta ilaahay waynankiisa, Isagoo la jecel yahay lana weyneynayo, taasi waxay buuxisaa inta u dhaxaysa samooyinka iyo dhulka. Salaadu nuur ayey u tahay adoonka qalbigiisa, wejigiisa, qabrigiisa, iyo markuu maxsharka imaanayo. Sadaqadu waxay muminka u tahay xujo waxayna daliil u tahay in iimaankiisu

run yahay kana duwan yahay munaafiqa aan rumaysnayn ajarka loo balan qaaday. Sabirku waa iftiin, waana naftoo laga xabiso argagaxa iyo carada, waana nuur uu la socdo kulayal iyo gubasho sida iftiika qoraxdoo kale, waayo sabirku waa dhib u baahan la dagaalanka nafta iyo in loo diido waxay rabto, qofka sabrayaa wuxuu ahaanayaa mid sabirka iftiinsada oo ku hanuuna oo si sax ah u toosnaada, sabirku waa in lagu sabro daadcada ilahay, macsida oo laga sabro, musiibda oo lagu sabro iyo noocyada dhibaatooyinka Adduunka oo loo adkaysto. qur'aanku akhriskiisa iyo ku camal falkiisa ayuu xujo kuugu noqon, hadii aad akhrin waydo ama ku camal fali waydona xujo ayuu kugu noqon. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka dib wuxuu sheegay in dadka oo dhan soconayaan oo faafayaan oo hurdadooda ka toosayaan oo guryahooda uga soo baxayaan shaqooyin kooda kala duwan. dadka waxaa ka mid ah qof ku toosan daacada Ilaahay oo naftiisa naarta ka xoreynaya, waxaa kaloo ka mida mid xaqa ka leexaday oo macaasida ku dhacaya oo naftiisa naar ku halaagaya.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Dahaaradu waa labo dahaaro: dahaarada muuqata waa weysada iyo qubeyska, dahaarada qarsoona waa towxiidka, iimaanka iyo camalka saalixa ah.
2. Muhimad ayey leedahay ilaalinta salaadu, Adoonka salaadu waxay u tahay nuur aduunka iyo maalinta qiyaameba.
3. Sadaqaduna waxay daliil u tahay in iimaanku run yahay.
4. Muhimad ayey leedahay ku camal falka qur'aanka iyo rumayntiisu si uu kuugu noqdo xujo, oo aanu kugu noqon xujo.
5. Nafta hadaanad ku mashquulin daacada Ilaahay macsi ayey kugu mashquulin.

6. Qof waliba waa hubaal inuu shaqeynaayo, qofku daacada Ilaahay ayuu naftiisa ku xorayn, ama macsi ayuu naftiisa ku halaagin.
7. Sabirku wuxuu u baahan yahay adkaysin iyo ajar raadin wuxuuna leeyahay mashaqo.

(65004)

(268) – عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «لَأَنْ أَقُولَ: سُبْحَانَ اللهِ، وَالْحَمْدُ لِلهِ، وَلَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَاللهُ أَكْبَرُ، أَحَبُّ إِلَيَّ مِمَّا طَلَعَتْ عَلَيْهِ الشَّمْسُ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(268) – Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: (Inaan iraahdo: subxaana Allaahi, wal-xamdu lillaahi, walaa ilaaha ilaa-llaahu, wallaahu akbar, ayaan ka jeclahay inta qoraxdu u soo baxdo oo dhan. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in dikriga Ilaahay ee ereyadaan waawayn ah ay ka khayr badan yihiin aduunyada iyo waxa dhex yaalla, oo ah:

(Subxaana Allaah) Ilaahay Isagaa nusqaan oo dhan ka hufan.

(Alxamdu lillaahi) Ilaahay Isagaa ku amaanan sifaadkiisa kaamilka ah oo maxabadiisa iyo weynaantiisu la jirto.

(Laa ilaaha Ilaa Allaah) ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn.

(Allaahu akbar) Ilaahay ayaa wax walba ka wayn.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa laysku boorinayaa dikriga Ilaahay, isagaana laga jecel yahay waxay qoraxdu u soo baxdo.

2. Waxaa laysku boorinayaa in la badsado dikriga Ilaahay, ajarka iyo fadliga ku jira awgeed.
3. Raaxada aduunyadu waa wax yar macaankeeduna wuu tagayaa.

(6211)

(269) – عن جابر رضي الله عنه قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: «أَفْضَلُ الذِّكْرِ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَأَفْضَلُ الدُّعَاءِ: الْحَمْدُ لِلهِ». [حسن] - [رواه الترمذي والنسائي في الكبرى وابن ماجه]

(269) – Jaabir Ilaahay ha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: (Dikri waxaa u fadli badan: laa Ilaaha Ilaa Allah, ducuna waxaa u fadli badan: Alxamdu lilaah). [Xadiis Xasan ah] - [Waxaa wariyay At􀀀tirmidi, An􀀀nisaa'i oo Sunan kubraa ah iyo Ibnu Maajah]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in dikriga ugu fadli badni yahay: laa ilaaha ilaa Allaah, oo macnaheedu yahay: ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan Allah ahayn, ducana waxaa ugu fadli badan Alxamdu lillaah, waana qirid kan nicmada bixiyaa inuu Ilaahay yahay, isagaa xaq u leh in lagu sifeeyo wanaag oo dhan.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waxaa la isku boorinayaa in lagu badiyo dikriga Ilaahay erayga towxiidka, ducadana erayga Alxamdu lillaah.

(3567)

(270) – عن خَوْلَةَ بِنْتَ حَكِيمٍ السُّلَمِيَّةَ قَالتْ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «مَنْ نَزَلَ مَنْزِلًا ثُمَّ قَالَ: أَعُوذُ بِكَلِمَاتِ اللهِ التَّامَّاتِ مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ، لَمْ يَضُرَّهُ شَيْءٌ حَتَّى يَرْتَحِلَ مِنْ مَنْزِلِهِ ذَلِكَ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(270) – khawlat bintu Xakiim Alsulaymiyah Allaha ka raali ahaade waxay tiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaan ka maqlay isagoo dhahaya: (Qofka meel dega ee dhaha: acuudu bikalimaati Allaahi taamaati min shari ma khalaqa, lam yaduruhu shayin xataa yartaxil min mansilihi daalik). **[Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]**

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku hagayaa ummaddiisa inay magan galaan kan wax tarka leh ee ka difaacaya wax walba ee dadku ka baqayaan markay meel dhulka ka mida degaan, ama safar yahay ama dalxiis iyo wixii la mida, waa inuu magan galaa oo difaac ka dhigtaa kalimaadka Ilaahay ee kaamilka ah fadligooda iyo barakadooda iyo nafacooda iyado aan lahayn ceeb iyo naqsi, uuna ka magan galaya wixii Ilaahay abuuray ee shar leh, oo makraa uu ka nabad galo wax walba oo dhib leh inta uu degan yahay meshaa.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Magan galku waa cibaado, waana in la magan galo Ilaahay, magacyadiisa iyo sifaadkiisa.
2. Waa banaan tahay in la magan galo hadlaka Ilaahay, waayo waa sifo ka mida sifaadkiisa, waxaa ka duwan in la magan galo makhluuq Ilaahay abuuray oo iyadu shirki ah.
3. Fadliga ay leedahay ducadaasi iyo barakadeeda.
4. Adkaarta oo xirsi xir laga dhigto waxay sabab u tahay in adoonka laga ilaaliyo sharta.
5. Waa baadil in la magan galo cid aan Ilaahay ahayn sida jinka, saaxiriinta, dajjaaliinta iyo wixii la mida.

6. Waxaa sharci ah in la akhristo ducadaan marka meel magaalo ah la dego ama safar la yahay.

(5932)

(271) – عَنْ أَبِي حُمَيْدٍ أَوْ عَنْ أَبِي أُسَيْدٍ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «إِذَا دَخَلَ أَحَدُكُمُ الْمَسْجِدَ فَلْيَقُلِ: اللَّهُمَّ افْتَحْ لِي أَبْوَابَ رَحْمَتِكَ، وَإِذَا خَرَجَ فَلْيَقُلِ: اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ مِنْ فَضْلِكَ». [صحيح] - [رواه مسلم]

(271) – Abii Xamiid ama Abii Usayd wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Hadii midkiin soo galo masaajidka ha dhoho: Allahayow ii fur albaabada naxariistaada, haduu baxayana ha dhoho: Allahayow waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga ". [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku booriyey ummaddiisa ducada la oranaayo marka masaajidka la soo galayo: (Allahayow ii fur albaabada naxariistaada), oo Ilaahay la waydiisto inuu u diyaariyo asabaabta lagu helo naxariistiisa, markuu qofku damco inuu ka boxo masaajidkana uu dhoho: (Allahayow waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga), oo Ilaahay uu waydiisto fadligiisa uuna u siyaadiyo ixsaankiisa ay ka mid tahay irsaaqada xalaasha ah.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. Waa suno in lagu ducaysto ducadan marka masaajidka la galayo iyo marka laga baxayaba.
2. Waxaa loogu gaar yeelay raxmada waqtiga galitaanka masaajidka, fadligana waqtiga laga bixiyo: waa in qofka sii galaya masaajidka uu ka shaqaynaayo wax u dhawaynaya Ilaahay iyo janadiisa markaasay munaasab u noqotay in la xuso raxmada, haduu ka boxo masjidkana wuu shaqo tagayaa

isago raadinaaya Ilaahay fadligiisa risqigu ka mid yahay, markaas ayey munaasab noqotay in fadliga la xuso.

3. Adkaartaan waxaa la oranayaa marka la rabo in masjidka la galo, iyo marka la rabo in laga soo boxo masjidka.

(65092)

(272) – عَنْ جَابِرِ بْنِ عَبْدِ اللهِ رضي الله عنهما أَنَّهُ سَمِعَ النَّبِيَّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: «**إِذَا دَخَلَ الرَّجُلُ بَيْتَهُ، فَذَكَرَ اللهَ عِنْدَ دُخُولِهِ وَعِنْدَ طَعَامِهِ، قَالَ الشَّيْطَانُ: لَا مَبِيتَ لَكُمْ، وَلَا عَشَاءَ، وَإِذَا دَخَلَ، فَلَمْ يَذْكُرِ اللهَ عِنْدَ دُخُولِهِ، قَالَ الشَّيْطَانُ: أَدْرَكْتُمُ الْمَبِيتَ، وَإِذَا لَمْ يَذْكُرِ اللهَ عِنْدَ طَعَامِهِ، قَالَ: أَدْرَكْتُمُ الْمَبِيتَ وَالْعَشَاءَ**». [صحيح] - [رواه مسلم]

(272) – Jaabir Binu Cabdullaahi-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: " Haduu ninku soo galo gurigiisa, ee uu Ilaahay xuso markuu soo galayo ama uu baxayo ama uu cuntadiisa cunaayo, shaydaanka ayaa dhaha: halkan hoy iyo cashaba kuma lihin, marka uu soo galo ee uu xusi waayo Ilaahay, shaydaankaa ayaa oronaya: hoy iyo casho ayaad soo gaadheen. [Xadiis Saxiix ah] - [Waxa wariyay Muslim]

## Sharraxaad:

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu amray in Ilaahay la xuso marka guriga la galayo iyo cuntada ka hor, marka qofku Ilaahay xuso isagoo dhahaya (bismillaah) maarkuu gurigiisa galayo iyo marka cuntadiisa uu bilaabayo, shaydaanka ayaa ku dhaha taageerayaal kiisa: hoyaatin iyo casho kuma lihidin gurigaan ninkii iska lahaa idinka magan galay dikriga Ilaahay. Hadiise ninku soo galo gurigiisa oo uusan xusin Ilaahay markuu guriga galayo iyo markuu cuntada cunaayo shaydaanka ayaa u sheegaya taageerayaalkiisa inay guriga ku leeyihiin hoyaatin iyo cashaba.

## Faa'iidooyinka xadiiska:

1. waxaa suna ah dikriga Ilaahay marka guriga la galayo iyo marka cuntada la cunaayo, waayo shaydaanka ayaa ku hoyda guryaha dadka dagana cuntadooda cuna hadii aan magaca Ilaahay lagu xusin.
2. Shaydaanku kor kuu kala socdaa oo wuu ilaashadaa camalka aadanaha iyo wuxuu qabanaayo oo dhan, markuu qaafil ka noqdo xuska Ilaahay ayuu shaydaanku muraadkiisa ka qabsadaa.
3. Xuska Ilaahay shaydaankuu eryaa.
4. shaydaan walba wuxuu leeyahay taageerayaal iyo sokeeye ku bishaaraysta hadalkiisa, amaradiisana qaata.

(3037)

**Table of Contents**

**Horudhac** ............................................................................................................. 1

acmaashu waa niyada uun, qof kastana wuxuu niyeystay uun buu leeyahay ......... **Error! Bookmark not defined.**

Qofka la yimaada wax aan diinteena ka mid ahayn waa lagu celinayaa**Error! Bookmark not defined.**

Islaamku waa inaad qirto in Ilaahay maahee inuusan jirin Ilaah kaloo xaq lagu caabudo, Maxamedna Rasuulka Ilaahay yahay, oo aad salaada oogtid, sakadana bixisid, ramadaankana soontid, oo aad xajkana gudatid hadaad awoodo**Error! Bookmark not defined.**

Islaamka waxaa lagu dhisay shan tiir ............................... **Error! Bookmark not defined.**

xaqa Ilaahay Adoomada ku leeyahay waa inay caabudaan oo ayna cidna ugu shariig yeelin, xaqa Adoomadu Ilaahay ku leeyihiina waa inuuna cadaabin qofkii aan u shariig yeelin ............................................................................................................. 10

majiro qof qiraya inuu jirin ilaah kale, Allaha xaqa lagu caabudo mooyee, Muaamadna Rasuulka Ilaahay yahay, isagoo qalbigiisa karun sheegaya, hadduu jirase Ilaahaybaa ka xarimaya naarta inuu galo ............................................................................. 11

(Qofka dhaha: laa ilaaha illa-llaah, ee ku gaalooba wax kastoo Ilaahay sokadii la caabudo Ilaahay wuu xarimay maalkiisa iyo dhiigiisaba, Ilaahay ayaana xisaabin doona) .... **Error! Bookmark not defined.**

qofka dhinta isagoon Ilaahay u shariig yeelayn janaduu galin, qofkase dhinta isagoo Ilaahay u shariig yeelaya naartuu galin ......................................................... 15

qofka dhinta isagoo wax aan Ilaahay ahayn baryaaya naartuu galayaa**Error! Bookmark not defined.**

waxaad u tagidoontaa Qolo Ahlu kitaab ah, hadaad u tagto ugu yeer inay qiraan in Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudaa jirin, Maxamedna uu yahay Rasuulkii Ilaahay ............................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

, qofka dadka ugu mudan shafaacadayda maalinta qiyaame, waa qofka qalbigiisa ama naftiisa si ikhlaas ah uga yiraahda laa ilaaha ilaa Allaah.) ........................................... 19

(Iimaanku waa dhowr iyo todobaatan ama dhowr iyo lixdan qaybood, waxaana ugu fadli badan hadalka: (laa ilaaha Illa-llaah), waxaana ugu yar jidka oo wixii dhib ah laga qaado ......................................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Nabigaan waydiiyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: xaga Ilaahay dambigee ugu wayn?, wuxuu yiri: "waa adigoo Ilaahay u sameeya mid la mida isagoo ku abuuray ............ **Error! Bookmark not defined.**

Ummaddayda oo dhan janaday galaysaa qofka iska diida maahee**Error! Bookmark not defined.**

((Ha ku xad gudbina amaantayda siday ugu xad gudubtay Nasaaradu Ibnu Maryam, anigu waxaan ahay adoon Ilaahay ee i dhaha adoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa)) ... **Error! Bookmark not defined.**

( Axad idinka midihi ma rumayn ilaa uu iga jeclaado waaridki, caruurtiisa iyo dadka oo dhan ............ **Error! Bookmark not defined.**

Ha i weydiinina waxaan ka aamuso, waxaa halaagay kuwii idinka horeeyey su'aalahoodii iyo ambiyadoodii oo ay khilaafayeene............ **Error! Bookmark not defined.**

(Iga gudbiya aniga kulay aayad ku tahay, reer Banii Israa'iilna ka sheekaya dhib kuma jiree, qofka si kas ah iigu been abuurta ha u diyaar noqodo booskuu naarta ka fariisan lahaa) ............ **Error! Bookmark not defined.**

War hooy ma laga yaaba in xadiiskaygu gaaro nin fadhigiisa ku dangiiga oo yiraahda : waxaa anaga iyo adinka inoo dhexeeya kitaabka Ilaahay . **Error! Bookmark not defined.**

Allaha lacnado Yuhuud iyo Nasaaro, qubuuraha nabiyadooda ayey masaajid ka dhigteen ............ **Error! Bookmark not defined.**

Ilaahow ha ka dhigin qabrigayga Sanam............ **Error! Bookmark not defined.**

(Ha ka dhigina guryihiina qubuur, hana ka dhigina qabrigayga ciid, iguna saliya, salintiinu way isoo gaaraysaa meel kastood joogtaan) ............ **Error! Bookmark not defined.**

kuwaasi waa duul markuu ka dhinto qof wanaagsani qabrigiisa ka dul dhista masaajid ............ **Error! Bookmark not defined.**

ma kuu diraa wuxuu Rasuulka Ilaahay scw ii diray? inaadan dhaafin sanam oo aad burburiso iyo qabri la dhisay oo aad dhulka la sinto ........ **Error! Bookmark not defined.**

Baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki,-saddex jeer", qofkasta oo naga mid ah qalbigiisa wax baasaysiga ah baa ka dhacaaya laakiin Ilaahay wuxuu kaga dhaafaa tawakulka ............ **Error! Bookmark not defined.**

(Naga mid maaha qofka shimbiraha ka faaliya ama shimbiraha looga faaliyo, ama faalalow ah ama loo faaliyo, ama saaxir ah, ama loo sixro**Error! Bookmark not defined.**

Majirto is qaadsiini, majiro baaseysi, waxaanan jeclahay in wanaag la fisho", wuxuu yiri- Anas- waxaa lagu yiri -Nabiga scw-: waa maxay wanaag la fisho?, wuxuu yiri: "waa hadalka wanaagsan........................................................ **Error! Bookmark not defined.**

ma og tihiin wuxuu Rabigiin yiri, waxay dheheen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yiri: adoomadayda waxaa waagu u baryey iyago midna i rumeeyey midna kufriyey .... **Error! Bookmark not defined.**

qofka xirta xirsi Ilaahay ayuu u shariig yeelay.................. **Error! Bookmark not defined.**

Ku tufida, qardhaasta, iyo madiidadu waa shirki............. **Error! Bookmark not defined.**

(Qofka u taga faaliye oo wax waydiiya salaad lagama aqbalo afartan habeen) ........... 46

(Qofkii ku dhaarta waxaan Ilaahay ahayn wuu gaaloobay ama shirki buu la yimid)**Error! Bookmark not defined.**

Hadhihina: hadii Ilaahay ogolaado hebelna ogolaado, laakiin waxaad dhahdaan: hadii Ilaahay ogolaado ka dibna hebel ogolaado ..................... **Error! Bookmark not defined.**

Waxa ugu badan ee aan idiinka cabsi qabo waa shirkiga yar", waxay dheheen asaxaabtu: waa maxay shirkiga yari Rasuulka Ilaahayow? wuxuu dhahay: "waa istustuska .... **Error! Bookmark not defined.**

(Haku fadhiisanina qabuuraha, hana u tukanina xageeda)**Error! Bookmark not defined.**

Malaa'igtu ma raacdo safar wata Ey iyo gambaleel........ **Error! Bookmark not defined.**

Sheydaankaa u imaan midkiin wuxuuna ku dhihin yaa abuuray kaas yaa abuuray kaas? Ilaa uu yiraahdo yaa abuuray Rabigaa, haduu halkaa soo gaaro ilaahay ha ka magan galo oo ha ka joogsado.......................................................... **Error! Bookmark not defined.**

qofka la colooba waligayga, waxaan ogaysiiyey dagaal, adoonkaygu iiguma soo dhawaado waxaan ka jeclahay waxaan ku waajibyey....... **Error! Bookmark not defined.**

waxaan idin farayaa Ilaahay cabsidi, iyo inaad maqashaan oo adeecdaan midka idiin madaxda ah hadii xataa uu yahay adoon xabashi ah, waxaad arki doontaan gadaashayda muran iyo is khilaaf daran, waxaan idiin dar-daarmayaa sunadayda iyo sunada khulafaa'u raashidiinta hanoonsan ee iga dambaysa-...... **Error! Bookmark not defined.**

Qofka ka hor yimaada madaxdiisa, bulshada muslimiintana ka dhex baxa ee sidaa ku dhinta, wuxuu ku dhintay dhimasho jaahili..................... **Error! Bookmark not defined.**

Qofkii Ilaahay madax uga dhigo shacab, oo maalinta geeridiisu joogto, dhinta isago soo khiyaamay shacabkiisii, Ilaahay wuxuu ka xarimaa janada**Error! Bookmark not defined.**

waxaa imaan doona kuwo madaxa oo samayndoona waxaad ku raacsan tihiin iyo waxaad ku diidan tihiinba, qofkii ku raaca wixii saxa wuu is beri yeelay, qofkii ku diida wixii khalad ahna wuu badbaadey, laakiin khaladku waa qofkii xumaha ku raaca ...... 62

Waxaa imaan doona naf jeclaysi iyo arimo aad diidi doontaan" waxay dheheen: Rasuulka Ilaahayow, maxaad nafariysaa? wuxuu yiri: "iska bixiya xaqa la idinku leeyahay, xaqiinana Ilaahay waydiista ............................................ **Error! Bookmark not defined.**

dhamaantiin waxaad tihiin Ilaaliye, waana la waydiin wixii la raaciyey,**Error! Bookmark not defined.**

Allahayow qofkii madax u noqda ummaddayda oo wax ku adkeeya isna ku adkee, midka madax u noqda ummaddayda oo u naxariistana u naxariiso**Error! Bookmark not defined.**

Diintu waa naseexo.......................................................... **Error! Bookmark not defined.**

qofkii idinka mid ah ee arka xumaan gacantiisa ha ku dooriyo, haduusan awoodin carabkiisa ha ku dooriyo, haduusan awoodin qalbigiisa hakanoco, kaasina waa meesha iimaanka ugu liidata........................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Tusaalaha Qofka xuduuda Ilaahay ku taagan ee ilaalinaya sharciga iyo midka ku dhacaya ee aan ka waabanayn,waa sida dad doon u qori ritay, oo qaar heleen xaga sare qaar xaga hoose ....................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Qofka dadka hanuun ugu yeera wuxuu helayaa ajarka ay helayaan dadka hanuunka ku raacay mid la mida, iyagoon ajarkooda laga nusqaamin .. **Error! Bookmark not defined.**

qofka khayrka dadka tusa wuxuu leeyahay ajar la mida kan khayrka sameeyey ajarkiisa ......................................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay baan ku dhaartaye in Ilaahay kugu soo hanuuniyo hal nin, ayaa kaaga kheyr badan inaad yeelato geel cas-cas .................................... **Error! Bookmark not defined.**

Qofkii qolo isu ekaysiiya iyaguu ka mid yahay ................. **Error! Bookmark not defined.**

((qofku waa kolba diinta(dhaqanka) saaxiibkii uu kusugan yahay uun,ee ha eego midkiin qofka uu lasaaxiibayo)) .................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Arinkaani (islaamka) wuxuu gaaridoonaa habeenka iyo maalintu halkay gaaraan, Ilaahay dayn maayo guri magaalo iyo guri baadiye midna ee wuu galin diintiisa ............... **Error! Bookmark not defined.**

Allaha nafta Maxamed gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee qofka i maqla ee ummaddaan ka mid ah yahuudi ama nasraani-kuu doonaba ha ahaadee-, ee dhinta isagoon rumayn xaqa la ila soo diray wuxuu ahaanayaa kuwa naarta gala ........................................... 81

dadoow, waxaan idiinka digayaa inaad diinta ku xad gudubtaan, dadkii idinka horeeyeyba waxay ku halaagsameen diinta oo ay ku xad gudbeen**Error! Bookmark not defined.**

(Way halaagsameen kuwa diinta ....................................**Error! Bookmark not defined.**

Yuhuuda waa loo carooday, Nasaaraduna waa baadiyoobeen .................................. 85

Ilaahay wuxuu qoray maqaadiirta khalqiga inta aanu abuurin samooyinka iyo dhulka Kontan kun oo sano ka hor .............................................**Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu noo sheegay isagoo Runlow la rumaysto ah: Abuurida midkiin waxaa lagu jamciyaa uurka hooyadi afartan maalmood iyo afartan habeen ...................................................................................... 87

(Qofkastoo idinka mida Janadu waxay uga dhowdahay suunka kabtiisa, naartuna waa la mid).......................................................................................................................... 88

(Naarta waxaa lagu wareejiyey shahawaat, Janadana waxaa lagu wareejiyey wax naftu kahanayso).....................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Markuu Ilaahay Abuuray janada iyo naarta wuxuu u direy janada malakul jibriil nabadi korkiisa ha ahaatee.........................................................**Error! Bookmark not defined.**

Dabkiinu waa hal qayb oo ka mida todobaatan qaybood oo naarta jahanama ah ..... 93

Ilaahay baa dhulka qabanaaya, samooyinkana midigtiisuu ku laa-laabayaa, ka dibna wuxuu dhahayaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku .................................... 94

Ilaahay xagiisa waxaa dadka ugu cadaab kulul maalinta qiyaame kuwa Ilaahay khalqigiisa wax u ekaysiiya..............................................**Error! Bookmark not defined.**

Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye, waxay u dhawdahay inuu idiin la soo dago ina Maryama isago xaakim caadil ah, oo uu jejebiyo macatabka, oo dilo khansiirka, oo uu soo rogo jisyada, oo maalku buux dhaafo, heer cid qaadata oo baahan la waayo ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

dheh: laa Ilaaha Ilaa Allaah, aan kuu marag furo maalinta Qiyaamee**Error! Bookmark not defined.**

xawdkaygu wuxuu le`eg yahay intii bil socodkeeda, biyihiisu way ka cad yihiin caanaha, caraftiisuna way ka udug badan tahay miskiga.................**Error! Bookmark not defined.**

Waxaa la keenidoonaa dhimashadii oo u eg wan galaalan**Error! Bookmark not defined.**

Hadii aad Ilaahay u talo saaran lahaydeen tawakulka dhabta ah, wuxuu idiin arsaaqi lahaa siduu shimbiraha u arsaaqo, waxay kalahdaa iyadoo gaajaysan, waxayna soo hoyataa iyadoo dharagsan...............................................**Error! Bookmark not defined.**

Qofka gaadiidka saaran ayaa salaamaya kan lugaynaya, kan lugaynayana wuxuu salaamayaa kan fadhiya, dadka tirada yarina kuwa tirada badan bay salaamayaan ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Ka cabsada dulmiga, waayo dulmigu wuxuu qofka galinayaa mugdiyada maalinta qiyaame, ka cabsada bukhliga, waayo bukhligu wuxuu halaagay kuwii idinka horeeyey, ............................................................................................................................ 104

(Ilaahay waa u kaadiyaa daalimka markuu qabtase ma siidaayo **Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay wuu qoray xasanaadka iyo dambiyada, ka dibna wuu cadeeyey, qofka ku hamiya inuu sameeyo xasano ee aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa xasano kaamil ah, hadiise uu ku hamiyo xasano oo uu sameeyo Ilaahay wuxuu u qoraa toban xasano ilaa todobol oo laalaab, ilaa laalaabyo badan, qofkii ku hamiya danbi oo aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa xasano kaamil ah, haduu ku hamiyo dambi oo uu sameeyo waxaa loo qoraa hal danbi ................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

, wuxuu yiri: qofkii islaama ee wanaag fala loo qaban maayo wuxuu jaahiligii sameeyey, qofkase Islaama oo shirki la yimaada danbigii hore iyo kii dambeba waa lagu ciqaabin ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

waxaad sheegaysid oo aad dadka ugu yeeraysid waa wax fiican, ee noo sheeg dambiyadii aanu galay wax naga guda ............................ **Error! Bookmark not defined.**

islaamtay ........................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay kama dulmiyo muuminka xasano aduunka wuu ku siiyaa aakhirona ......... **Error! Bookmark not defined.**

Adoon baa dambaabay dambi, wuxuu yiri: Allahayow ii dambi dhaaf...................... 112

Majiro qof dambaabaya dambi, oo intuu kaco dahaara qaadanaya salaadna tukanaaya, ka dibna istiqfaarsanaya, haduu jirose Ilaahay wuu u dambi dhaafayaa isaga........... 114

Ilaahay wuxuu fidiyaa gacantiisa habeenka si uu u tawbo keeno midka maalinta dambaabay, maalintana wuu fidiyaa gacantiisa si uu u towbo keeno midka habeenka dambaabay, ilaa qoraxu ka soo baxdo meesha ay u dhacdo **Error! Bookmark not defined.**

(Rabigeen-tabaaraka watacaalaa-habeen walba wuxuu u soo dagaa samada dhow, marka habeenku yahay saddex qaybood qaybta u dambaysa **Error! Bookmark not defined.**

Xalaashu way cadahay, xaaraantuna way cadahay........... **Error! Bookmark not defined.**

yaroow, waxaan ku barayaa erayo, llaahay xifdi wuu ku xifdine, llaahey xifdi hortaadaad ka heliye, markaad wax waydiisanayso Ilaahay waydiiso, hadii aad cid kaalmaysan Ilaahay kaalmayso............................................................ **Error! Bookmark not defined.**

iiga sheeg diinta Islaamka hadal aana waydiin cid aan adiga ahayn, wuxuu yiri: "dheh: Ilaahay ayaan rumeeyey ka dibna toosnow...................... **Error! Bookmark not defined.**

Mu'uminiinta ee isjacaylkooda, isku naxariisashadoodu iyo isu dhimrintoodu, waxay la mid tahay sida jirka oo kale, oo hadii xubin xanuunsato jirka kale oo dhan uu la qabayaa soo jeedka iyo xanuunka.................................................. **Error! Bookmark not defined.**

(Qofka waysaqaata ee hagaajiya waysada, dambiyadiisu jirkiisa oo dhan bay ka baxayaan ilaa ay ciddiyaha hoostoodana ka baxaan) ....... **Error! Bookmark not defined.**

Markaad xaaraysaan ha u jeensanina qiblada, hana u daba jeedinina qiblada, laakiin bari iyo galbeed u jeesta.................................................. **Error! Bookmark not defined.**

Yaanu midkiin ku qaban midigtiisa guskiisa isagoo kaadinaaya, oo yaanu midigtiisa isaga tirin najaasada, oo yaanu ku neefsan weelka uu ku cabayo**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay ma aqbalo salaada midkiin markii waysadu ka jabto ilaa uu weyso qaato . **Error! Bookmark not defined.**

Nin ayaa weyso qaatay oo ka tagay meel cidi le`eg oo ciribtiisa ah, Nabiguna naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuu arkay, wuxuuna ku yiri: "noqo oo weysadaada hagaaji", wuu laabtay-ninkii- wuuna wanaajiyey weysadii ka dib wuu tukaday**Error! Bookmark not defined.**

Nabigu scw wuu u wayso qaadan jiray salaad walba ....... **Error! Bookmark not defined.**

Nabigu scw markuu wayso qaadanayo wuxuu dhaqi jiray mar mar kaliya ................ 129

Nabigu scw wuxuu waysadiisa dhaqay xubnaha labo labo mar**Error! Bookmark not defined.**

qofka u weyso qaata sidaa aan u wayso qaatay ee tukada labo rakcadood oo aan naftiisa la sheekaysan salaada dhexdeeda, Ilaahay wuxuu ka dhaafaa dambiyadiisii hore . **Error! Bookmark not defined.**

Markuu wayso qaadanayo midkiin biyaha sankiisa haku qaado oo hadana ha soo firdhiyo, qofka dhagax ku istinjoodana witir ha ka dhigo . **Error! Bookmark not defined.**

labadaba waa lacadaabayaa, wax wayna lagu cadaabimaayo, mid kaadida iskama duwi jirin, kan kalena dadka ayuu warka u kala qaadi jiray....... **Error! Bookmark not defined.**

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- waxa uu ahaa marka uu galayo suuligo inuu dhaho: "Allahayow waxaan kaa magan galayaa shaydaanka kiisa lab iyo kiisa dhadigba ........................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

(Cadaygu afka wuu nadiifiyaa Ilaahayna wuu raali galiyaa)**Error! Bookmark not defined.**

Waxaa muslim kasta xaq ku ah, inuu qubaysto todobadii maalmoodba maalin, oo dhaqo madaxiisa iyo jirkiisoo dhan............................................ **Error! Bookmark not defined.**

(Fidrada fiicani waa shan: gudniinka, xiiritaanka bisqanta, gaabinta shaarubaha, jaritaanka cidiyaha, rifitaanka timaha kilkilada ............... **Error! Bookmark not defined.**

waxaan ahaa nin Madi badan Nabigana scw waan ka xishoon jiray, waayo gabadhiisaan qabay, waxaan faray Miqdaad Binu Aswad, wuuna su`aalay wuxuuna yiri: xubintiisa taranka ha dhaqo hana wayso qaato............................... **Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- markuu janaabo ka qabaysanayo wuxuu dhiqi jiray gacmihiisa, wuxuuna u wayso qaadan jiray sida salaada uu ugu wayso qaato, ka dibna wuu qubaysan jiray .......... **Error! Bookmark not defined.**

waxaa kugu filnaa inaad gacmahaaga sidan dhahdid ", wuxuuna hal mar ku dhiftay gacmihiisa dhulka, gacantiisa bidix ayuu ku masaxay tiisa midig, iyo labadiisa calaacalood oo dusha ah iyo wajigiisa ............................. **Error! Bookmark not defined.**

iska daa, anoo wayso qaba -ayaan galiyaye..................... **Error! Bookmark not defined.**

taasi waa xidid dartiiye salaada jooji qadarkii ayaamaha xaydku kugu dhici jiray, ka dibna ka qubayso oo salaada tuko........................................................................................ 145

Hadii qofkiin calooshiisa shay ka dareemo, oo uu ka shakiyo in wax ka yimaadeen iyo in kale, yaanu ka bixin masjidka ilaa uu maqlo cod ama uu ur dareemo**Error! Bookmark not defined.**

Markuu dhoho mu'addinku: Allaahu akbar Allaahu akbar, ee midkiin dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar ........................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Hadii aad maqashaan mu'adinka dhaha wuxuu dhahayo, anigana igu saliya ......... **Error! Bookmark not defined.**

{Qofka dhaha markuu maqlo mu'adinka: Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee oo uu kali yahay oo cid wax la wadaagta aysan jirin, Maxamedna uu yahay adoonkiisii iyo Rasuulkiisii, waxaan raali ka ahayn inaan Ilaahay Rabi ka dhigto oo Maxamed aan ka dhigto Rasuul oo aan Islaamkana ka dhigto diin, danbigiisa waa la dhaafaa} ........................................................................................ 151

aadaanka salaadda ma maqashaa? wuxuu yiri: haa, wuxuu Rasuulku ku yiri: (ajiib ) ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Ka warama haddii wabi marayo albaabka midkiin, oo ku qubaysanayo maalin walba shan jeer, uskag maku harayaa qofkaa? ..................................................................... 153

camalkee Ilaahay ugu jecel yahay? wuxuu yiri: ''waa salaadoo waqtigeeda la tukado'' wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: '' labada waalid oo baari loo noqodo'' wuxuu yiri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: ''jidka Ilaahay oo lagu jihaado''**Error! Bookmark not defined.**

Majiro qof muslim ah oo salaad faral ahi u soo gashay, oo wanaajiya waysadeeda, khushuuceeda, rukuuceeda, haduuse jiro waxaa loogu dhaafaa wixii dambi ahaa ee salaadaas ka horeeyey, hadaanu dambi wayn la imaan, arinkaasi waa sanadka oo dhan ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

(Salaadaha shanta ah, iyo jimce ilaa jimcada kale, iyo ramadaan ilaa ramadaanka kale, waa lagu danbi dhaafaa inta u dhaxaysa hadii laga fogaado kabaa`irta)................. **Error! Bookmark not defined.**

Fara caruurtiina salaadda markay gaaraan toddoba sano, kuna garaaca haday ka tagaan salaadda iyagoo toban jir ah, una kala duwa meesha ay seexanayaan**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay sareeye wuxuu yiri: salaada waxaan u kala qaybiyey aniga iyo adoonkayga laba nus, adoonkayguna wuxuu i waydiistuu .......................... **Error! Bookmark not defined.**

Balanta u dhaxaysa inaga iyo iyaga waa salaada, qofka ka tagaana wuu gaaloobay ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Ninka iyo shirkiga iyo gaalnimada waxaa u dhexeeya salaada oo uu ka tago ......... **Error! Bookmark not defined.**

Bilaalow, salaada aqiim oo noogu raaxee ......................... **Error! Bookmark not defined.**

Allahayow kala fogee aniga iyo dambiyadayda sidaad u kala fogaysay bari iyo galbeed ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu kor u qaadi jiray gacmihiisa ilaa meel ku aadan garbihiisa markuu salaada xiranaayo**Error! Bookmark not defined.**

((Salaadi kama ansixin qofka aan Akhrin suuradda faatixada)) waa qofka aan imaam ku xirnayn, qofka imaamka ku xirtay oo waqti uu faatixada ku akhriyo ka gaari waayey ma khuseeyo xaddiisku ........................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee salaadaydaa u ekaansho badan salaadii Rasuulka scw salaaddiisuna sidaas ayey ahayd ilaa uu aduunka ka tagay.... 167

Waxaa la i faray inaan ka sujuudo todoba lafood............**Error! Bookmark not defined.**

waxaad u arki doontaan Rabigiin sidaad dayaxan u arkaysaan, idinkoon isku ciriirinayn aragtida Ilaahay...............................................................**Error! Bookmark not defined.**

Qofka tukada labada salaadood ee qabaw janaduu galayaaa**Error! Bookmark not defined.**

Qofka tukada salaada subaxa Ilaahay magantiisuu ku jiraa....................................... 172

qofka ka taga salaadda casar camalkiisu wuu buray).......**Error! Bookmark not defined.**

Qofka salaad ilaawa ha tukado markuu xasuusto, kafaaro gud kale malaha oo intaa ahayn ...................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Salaadaha ugu culus munaafiqiinta waa labada salaadood ee cishaha iyo subaxa, hadayse ogaan lahaayeen waxa ku jira ee fadligooda ah waxay ku imaan lahaayeen gurguurasho...................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka Ilaahay scw wuxuu ahaa haduu dhabarkiisa ka soo toosiyo rukuuca, wuxuu dhihi jiray: "samica Allaahu liman xamidah......................**Error! Bookmark not defined.**

Nabigu scw wuxuu dhihi jiray labada sujuudood dhexdooda:"Rabiyow ii dambi dhaaf, Rabigayow ii dambi dhaaf................................................**Error! Bookmark not defined.**

Nabigu scw wuxuu oran jirey inta u dhaxaysa labada sujuudood: (Allahayow ii dambi dhaaf, iina naxariiso, oo icaafi ina hanuuni, oo i irsaaq)...**Error! Bookmark not defined.**

Markaad tukanaysaan safafkiina toosiya, ka dibna midkiin imaam ha idiin noqdo, haduu takbiirsado takbiirsada.....................................................**Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- iyadoo calaacashadu ay saaran tahay labdiisa calaacalood ayuu i baray Ataxiyaadka, sida uu ii barayey suurada qur'aanka ah ................................................................................................................... 184

Allahayow waxaan kaa magan galayaa cadaabta qabriga, iyo cadaabta naarta, fitnada nolosha iyo dhimashada, iyo fitnada masiixu dajaal .......**Error! Bookmark not defined.**

"Ilaahay darti sujuuda u badi, sujuud kasta oo aad Ilaahay u sujuudid darajo ayuu kor kuugu qaadin dambina wuu kaaga dhaafin......................**Error! Bookmark not defined.**

(Salaad lama tukan karo hadii cunto la soo dhigo iyo hadii qofku labada nijaaso isku celinaaya).........................................................................**Error! Bookmark not defined.**

kaasi waa shaydaan la dhoho: khinsab, markaad dareento ka cuudu billayso, xaga bidixna saddex jeer candhuuf u tuf .................................**Error! Bookmark not defined.**

Dadka wax aa u tuugo xun midka salaadiisa xadaya" wuxuu yiri: sidee ayuu u xadin salaadiisa? wuxuu yiri: "waa mid aan dhamays tirayn rukuuceeda iyo sujuudeeda ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Miyaanu midkiin ka baqayn-ama midkiin miyaanu ka cabsanayn haduu madaxiisa kor u soo qaado imaamka ka hor in Ilaahay madaxiisa ka dhigo madax dameer, ama uu Ilaahay suuradiisa ka dhigo suurad dameer ................................ **Error! Bookmark not defined.**

Hadii midkiin ka shakiyo salaadiisa, ee uu garan waayo saddex miyuu tukaday mise afar, hatuuro shakiga, oo ha ku dhiso-hakabilaabo- inta uu hubo, hana sujuudo labo sujuudood oo sahwi ah inta aanu salaama naqsan ka hor ........................................ 193

Maalin qoraxi soo baxdo waxaa ugu khayr badan maalinta jimcaha**Error! Bookmark not defined.**

Allahayow adaa salaam ah, oo salaamtu kaa timid, waad hor ahaatay, waxaad tahay Ilaaha Jalaalka iyo Karamka ............................................ **Error! Bookmark not defined.**

wuxuu ahaa Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee -mid dhaha dikrigaan salaad kasta dabadeeda)................................. **Error! Bookmark not defined.**

Inuu Nabigu scw dhihi jiray salaad kasta oo faral ah ........ **Error! Bookmark not defined.**

Qofka Ilaahay u tasbiixsada (dhaha: subxaana Allaah) salaad kasta gadaasheed 33 jeer, ee Ilaahay ku xamdiya (dhaha: alxamdu lilaah) 33 jeer, ee Ilaahay u takbiirsada (dhaha: Allaahu akbar) 33 jeer, intaasi waa 99, ee ku dhamaystira inuu dhaho : laa ilaaha ilaa Allaah waxdahuu laa shariika lahu, lahul-mulku walahul-xamdu wahuwa calaa kulli shay'in qadiir, waxaa laga dhaafaa dambiyadiisa haba le'ekaadeene daad xoorta badda ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Qofka akhriya aayatul-kursiga salaad kasta oo faral ah gadaasheeda, ma jiro wax u diidaya inuu janada galideeda oo aan ahayn inuu dhinto **Error! Bookmark not defined.**

Waxaan Nabiga ka xafiday-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- toban rakcadood ........................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Hadii midkiin soo galo masaajidka ha tukado labo rakcadood, intaanu fariisan ..... **Error! Bookmark not defined.**

(Hadaad ku tiraado saaxiibka: aammus, maalinta jumcada, iyadoo imaamku khudbaynaayo, laqwi baad la timid) ........................................................................ 204

(Ku tuko istaag, hadaadan awoodina fadhi ku tuko, hadaadan awoodi waydidna adoo dhinac u jiifa tuko) ........................................................................................ 206

Salaada lagu tukado masajidkaygan waxay ka khayr badan tahay kun salaadood oo lagu tukaday masaajida kale ee isaga kasoo haray marka laga reebo masajidka xaramka ........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

qofka Ilaahay darti masaajid u dhisa isagana Ilaahay ayaa janada uga dhisa mid la mid ah ........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Sadaqo maal ma yareyso, adoon wax cafiyeyna Ilaahay uma siyaadiyo cisi mooyee, qofkii Ilaahay darti u tawaaducana Ilaahay ayaa kor u qaada .................................. 209

Ilaahay wuxuu yiri: Ibni aadanow wax bixi aan wax ku siiyee**Error! Bookmark not defined.**

(Markuu ninku masruufo reerkiisa isagoo Ilaahay ajar kaga dalbaaya, sadaqo ayey u noqonaysaa.) ........................................................................................ 211

Qofkii daynta ka suga qofka saboolka ah, ama ka dhaafa, Ilaahay wuxu hariyaa hooska carshigiisa maalinta qiyaame ee harkiisa mooyee aan har kale jirin**Error! Bookmark not defined.**

(Allaha u naxariisto nin wanaag badan hadii uu wax iibinaayo, haduu wax soo gadanaayo, iyo haduu gar naqsanaayoba.).......................**Error! Bookmark not defined.**

Rag ayaa si xaq daro ah ugu takri fala xoolaha Ilaahay, naar ayey leeyihiin maalinta qiyaame ...........................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Qofka u sooma ramadaanka iimaan ahaan iyo ajar doon ahaan waa loo dhaafaa dambigiisii hore ...............................................................**Error! Bookmark not defined.**

Qofkii habeenka laylatul qadarka salaatu layl u istaaga isagoo rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore ...............................**Error! Bookmark not defined.**

(qofka Ilaahay darti u xajiya ee aan dumarka la haasaawin ee aan fusuq la imaan wuxuu soo noqdaa isagoo danbi ka ah sida maalintii hooyadi dhashay ............................... 216

(Majiraan maalmo camalka saalixa ah Ilaahay ka jecel yahay maalmahan) waxaa loo jeedaa maal maha tobanka hore ee bisha dul-xija ..........**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay ma eegayo sawiradiina iyo xoolahiina, laakiin wuxuu eegayaa quluubtiina iyo camalkiina ........................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay wuu caroodaa, muuminkuna wuu caroodaa, carada Ilaahay waa inuu muuminku la yimaado wax Ilaahay ka xarimay..................................**Error! Bookmark not defined.**

(ka fogaada toddobada lagu halaagsamo ........................**Error! Bookmark not defined.**

(Waar hooy ma idiin sheegaa dambiyada kuwa ugu waawayn:?**Error! Bookmark not defined.**

(Dambiyad waawayni waa: Ilaahayoo loo shariik yeelo, waalid caasiga, naf la dilo iyo dhaar badanaha)............................................................**Error! Bookmark not defined.**

Waxa ugu horeeya ee dadka loo kala xukumaayo maalinta qiyaamaha waa dhiiga**Error! Bookmark not defined.**

Qofka dila gaal mucaahida ma urin doono carafta janada, carafteedana waxaa laga uriyaa meel loo socdo afartan sano.................................**Error! Bookmark not defined.**

Magalayo janada qofka gooya qaraabada ........................**Error! Bookmark not defined.**

Qofka jecel in loo waasiciyo irsaaqadiisa oo loo dheereeyo cumrigiisa, ha xiriiriyo qaraabadiisa....................................................................**Error! Bookmark not defined.**

(Maaha qofka qaraabada xiriiriya midka marka la xiriiriyo uun qaraabada xiriiriya, laakiin kan qaraabada xiriiriyaa waa midka marka qaraabadiisu goyso xiriiriya).................. 228

Ma taqaanaan xantu waxey tahay? ", waxay dheheen asaxaabtii: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa naga og, wuxuu yiri: " waa adigo walaalkaa wuxuu dhibsanaayo ku sheega, ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka Ilaahay scw wuxuu lacnaday laaluush bixiyaha iyo laaluush qaataha waana siman yihiin xaga xukunka ...............................................**Error! Bookmark not defined.**

Waxaan idiinka digayaa malaha, waayo maluhu waa warka**Error! Bookmark not defined.**

Janada magalo fitnoole....................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ummaddayda dhamanteed waa laga cafin dambiyada kuwa xumaanta muujista maahee ............................................................................................................................ 233

dadoow, Ilaahay ayaa idinka bixiyey kibirkii jaahiliyada, iyo ku faanideedii Aabayaashood ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay raga uu ugu neceb yahay waa garmaqaataha dooda badan**Error! Bookmark not defined.**

Labo qof oo muslima hadii ay seefohooda isu qaataan, kii wax dila iyo kan la dilaba naartay galayaan.......................................................................................... 237

Qofka hub nooqaata nagama mid aha ............................**Error! Bookmark not defined.**

Ha caayina dadka dhintay, way la kulmeen waxay hor marsadeene**Error! Bookmark not defined.**

Nina uma banaana inuu gooyo walaalkii saddex habeen wax ka badan, iyagoo kulmaya oo midba midka kale ka jeensanayo, labadoodana waxaa khayr badan kii bilaaba salaanta......................................................................................................... 240

(qofkii ii balan qaada inta u dhaxaysa labadiisa qal iyo waxa u dhexeeya labadiisa lugood waxaan u balan qaadayaa janada).................................**Error! Bookmark not defined.**

Haweenaydu uma safari karto meel loo socdo habeen iyo maalin hadii aanu la socon ninkeedu ama nin maxramkeeda................................................................................ 242

(Ugama tegin gadaashayda fitno raga uga daran dumarka)**Error! Bookmark not defined.**

Aduunyadu waa macaan cagaaran, Ilaahayna idinkuu idiin dhiibay, wuxuuna fiirin waxa aad ku samaysaan, aduunyada iska jira dumarkana iska jira**Error! Bookmark not defined.**

Ma jiro guur wali la'aantii ................................................**Error! Bookmark not defined.**

(Shuruuda ugu xaqnimo badan inaad oofisaan waa tii aad ku xalaashateen farjiga) ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

(Aduunyadu waa raaxo, raaxada aduuna waxaa u khayr badan gabar saalixad ah . **Error! Bookmark not defined.**

Ha xiranina xariirta iyo diibaajka, hana ku cabina weelasha dahabka iyo fidada ka samaysan, hana ku cunina wax xeerooyinka labadaa ka samaysan, waayo gaaladaa aduunka wax ku cuna inaguna aakhiraan leenahay .................................................. 249

Wuxuu ka wariyey Rasuulka scw inuu diiday qasciga .......**Error! Bookmark not defined.**

Gaabiya shaarubka garkana daaya .................................**Error! Bookmark not defined.**

Yaanu eegin ninku cawrada nin kale, haweenayduna yaanay eegin cawrada naag kale ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

waxaa idiinku ikhyaarsan kuwa idiinku akhlaaq fiican......**Error! Bookmark not defined.**

(Qofka muuminku wuxuu ku gaaraa akhlaaq wanaagiisa darajada qofka sooman ee salaad u taagan)........................................................................................... 254

(Muuminiinta waxaa ugu iimaan sareeya kan ugu akhlaaqda wanaagsan, waxaana idiinku khayr badan kuwa dumarkooda u khayroon.) ............................................. 255

Rasuulka Ilaahay scw waxaa la waydiiyey waxa ugu badan ee janada lagu galo, wuxuuna yiri: "waa cabsida Ilaahay iyo Akhlaaq wanaaga....................................................... 256

Rasuulka Ilaahay scw wuxuu ahaa kan dadka ugu akhlaaq fiican**Error! Bookmark not defined.**

akhlaaqda Nabigu scw wuxuu ahaa Qur'aanka ......................................................... 258

Ilaahay wuxuu faray in shay walba loo ixsaan falo ...........**Error! Bookmark not defined.**

dadka cadaalada ku dhaqma Ilaahay agtiisa ayey ku fadhiyaan minbar nuur ah, kaasoo ah midigta Ilaahay casa wajala, iyadoo labadiisa gacmoodba ay midig**Error! Bookmark not defined.**

dhib majiro is dhibidna majirto, qofka dadka dhiba Ilahay ayaa dhiba, qofka dadka ku adkeeyana Ilaahay ayaa ku adkeeyo ................................**Error! Bookmark not defined.**

Waxay la mid yihiin kan la fadhiya nin saalix ah iyo kan la fadhiya nin xun sida kan sita catarka Miskiga iyo kan dabka afuufaya ..........................**Error! Bookmark not defined.**

ha caroon .........................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ma aha kan xooga lihi kan dadka legda, ee kan xooga lihi waa kan naftiisa hanta markuu caroodo.............................................................................**Error! Bookmark not defined.**

xishoodku iimaankuu ka mid yahay.................................**Error! Bookmark not defined.**

(Hadii qofku Ilaahey darti u jeclaado walaalkiisa muslimka ah ha u sheego inuu jecel yahay) ...............................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Wax kastoo wanaag ahi waa sadaqo ...............................**Error! Bookmark not defined.**

Xubin kasta oo xubnaha jirka ka mida waxaa ku waajiba sadaqo**Error! Bookmark not defined.**

Maalinta qiyaame qofku ma dhaqaaqayo ilaa la weydiiyo cimrigiisii wuxuu ku dhameeyey, cilmigii Ilaahay baray wuxuu ku sameeyey, maalkiisii halkuu ka keenay iyo halkuu ku bixiyey iyo jirkiisii wuxuu ku dhameeyey .........**Error! Bookmark not defined.**

qofka u adeega garoobka iyo maskiinka, wuxuu la mid yahay mujaahidka jidka Ilaahay u dagaalamaya, ama qof habeenkiina cibaado u taagan maalintiina sooman........**Error! Bookmark not defined.**

Qofka Ilaahay iyo maalinta qiyaamaha rumaysan khayr ha ku hadlo ama ha iska aamuso ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Shay ka mida wanaag ha yarysan, haba ahaato inaad kula kulanto walaalkaa waji furan ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Qofka aan dadka u naxariisan isagana Ilaahay uma naxariisto**Error! Bookmark not defined.**

kuwa naxariista Raxmaankaa iyagana u naxariisan, u naxariista waxa dhulka ku nool waxaa idiin naxariisan Raxmaanka samada ku sugane.....**Error! Bookmark not defined.**

Muslimku waa qofka ay muslimiintu ka nabad galeen carabkiisa iyo gacantiisaba, muhaajirkuna waa qofka ka dheeraada wixii Ilaahay ka reebay**Error! Bookmark not defined.**

(muslimku xaga uu ku leeyahay muslimka kale waa shan: salaanta oo la radiyo, bukaanka oo la booqdo, janaasada oo la raaco, u yeerida oo la ajiibo iyo markuu hindhiso oo loo duceeyo) .......................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Janada galimaysaan ilaa aad rumaysaan, rumayna maysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa wax hadaad samaysaan aad is jeclaanaysaan? salaanta dhexdiina ku faafiya .......................................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Inuu nin weydiiyey Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: Islaamka maxaa ugu khayr badan? wuxuuna ugu jawaabay: "dadka oo aad cunto siiso iyo inaad salaanto qofka aad taqaan  iyo kan aadan aqoonba....................... **Error! Bookmark not defined.**

Ma idin tusaa waxa Ilaahay dambiyada ku dhaafo oo darajaada qofka kor loogu qaado? .......................................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

((Mu'uminka xoogga wayn, ayaa ka khayr badan lagana jecel yahay xagga Ilaahay mu'uminka daciifka ah, mid walbana khayr buu leeyahay, **Error! Bookmark not defined.**

kama uu tagin malakul Jibriil  inuu jaarka ii dardaarmayo, ilaa aan u maleeyey inay is dhaxlayaan....................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Qofka difaaca cirdiga iyo sharafta walaalki Ilaahay baa isna wajigiisa naarta ka difaaci maalinta qiyaamaha ........................................................ **Error! Bookmark not defined.**

(Jileecu shayga uu galo wuu wanaajiyaa, shaygii laga siibana wuu xumaadaa ....... **Error! Bookmark not defined.**

(Wax fududeeya oo ha adkaynina, oo bishaareeya oo dadka ha cayrinina ).............. 287

Waxaan la joognay Cumar, wuxuuna yiri: (waa naloo diiday kalifaada )**Error! Bookmark not defined.**

hadii qof idinka mida uu wax cunayo ha ku cuno midigtiisa, haduu wax cabaayana ha ku cabo midigtiisa, waayo shaydaanku wuxuu ku cunaa bidixdiisa wuxuuna ku cabaa bidixdiisa .......................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Bismi Allah dheh oo midigta ku cun, oo ka cun dhinaca ku soo xiga**Error! Bookmark not defined.**

(Ilaahay wuu kaga raali noqdaa qofka  markuu wax cuno oo Ilaahay ku mahadiyo iyo markuu wax cabo oo uu Ilaahay ku mahadiyo) ................ **Error! Bookmark not defined.**

Nin ayaa bidixda ku cunay Rasuulka agtiisa-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, wuxuu Rasuulku scw ku yiri: "midigtaada ku cun", wuxuuse yiri: ma awoodo, wuxuu Rasuulku scw yiri:  " ha awoodin .................................... **Error! Bookmark not defined.**

Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- haduu hindhisayo gacantiisa ama maradiisa ayuu saari jiray afkiisa oo ku yarayn jiray codkiisa**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay wuxuu jecel yahay in lala yimaado ruqsooyinkiisa sida uu u jecel yahay in lala yimaado waajibaadkiisa.................................................**Error! Bookmark not defined.**

Qofkii Ilaahay khayr la doono wuu asiibaa ......................**Error! Bookmark not defined.**

Wixii ku dhaca muslimka ee ah rafaad ,daal, hami, murug, uur ku taalo iyo dhibaato, xataa qodaxda mudaysa, Ilaahay danbigiisuu ugu dhaafaa**Error! Bookmark not defined.**

muuminka xaalkiisu yaab ayuu leeyahay, arimihiisa oo dhan waa khayr, sidaasina muuminka maahee cid kale uma sugnaan ......................**Error! Bookmark not defined.**

(Hadii adoonku jirado ama uu safro waxaa loo qoraa xasanaadkii uu qaban jiray markuu daganaa ee uu caafimaadka qabay)................................**Error! Bookmark not defined.**

U deg-dega camalka saalixa ah inta aanay idinku imaan fitnooyinka la moodo qayb habeen ah oo mugdi ah ..................................................**Error! Bookmark not defined.**

(Qofka Ilaahay la doono khayr diinta ayuu fahamsiiyaa ...**Error! Bookmark not defined.**

(Ha u baranina cilmiga si aad ugu faantaan culimada ama ugu la murantaan dadka xun ........................................................................................................................ 301

(Waxaa idiinku khayr badan kan Qur'aanka bartay ee bara quraanka)**Error! Bookmark not defined.**

toban aayadood, mana ay qaadan jirin tabanka kale ilaa ay bartaan waxa ku jira ee cilmi iyo camalba ah ...............................................................**Error! Bookmark not defined.**

(Qofka akhriya xaraf ka mid ah kitaabka Ilaahay wuxuu ka halayaa hal xasano, halka xasano waxay u dhigantaa toban laabkeed .....................**Error! Bookmark not defined.**

(Qofka Ahlu Qur'aanka ah waxaa lagu oran: akhri oo kor u soco, oo ku luuqee sidaad ugu luuqayn jirtay aduunka, gurigaagu waa halka aayada ugu dambaysa aad ku akhrido) ..........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

(Ma jecel yahay in qof idinka mida haduu u soo laabto reerkiisa uu ka halo saddex halaad oo waawayn oo buur buuran? ...................................................................... 306

(Joogteeya akhrinta Qur'aanka, Allaha nafta Maxamed gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye wuxuu ka siibasho badan yahay Qur'aanku geel dabaran,)**Error! Bookmark not defined.**

(Ha ka dhigina guryihiina qabuur oo kale, shaydaanku wuu ka cararaa guriga suuratul-baqara lagu akhriyee) ...................................................**Error! Bookmark not defined.**

Abaa Mundiroow, ma og tahay aayada ugu wayn kitaabka Ilaahay ee aad hayso?) wuxuu yiri: waxaan iri:{ الله لاإله إلا هو الحيّ القيّوم} [البقرة:255]. wuxuu yiri: laabtuu igu dhuftay, wuxuuna yiri: Abaa mundirow Ilaahay cilmi ayuu kuu hibeeyey)**Error! Bookmark not defined.**

(Qofka akhriya labada aayadood ee suuradda Al-baqara u dambeeya habeenka way ku filan yihiin) ........................................................................................................ 310

Nabigu scw wuxuu ahaa mid Ilaahay xusa xaalad walba oo uu ku jiro...................... 311

Majiro shay Ilaahay kaga qiimo badan ducada................**Error! Bookmark not defined.**

Iimaanku wuu ku duugoobaa uurkiina sida ay u duugowdo marada cusubi, Ilaahay waydiista inuu iimaanka ku cusboonaysiiyo qalbigiina.....**Error! Bookmark not defined.**

Adoonku wuxuu ugu dhaw yahay Rabigi markuu sujuudsan yahay ee ducada badiya .........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ducada Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- waxaa ugu badnaa "Allahayow, Rabiyow, Adduunka nagu sii kheyr, Aakhirana nagu sii kheyr, nagana ilaali cadaabta naarta-ee Aakhiro ...........................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ma iidiin sheegaa acmaashiina kuwa ugu fadliga badan, uguna daahirnimada badan xaga Allaha Boqorkiina ah, uguna sare qaadid badan darajooyinkiina**Error! Bookmark not defined.**

Nabigu scw markuu tago gogoshiisa habeen walba wuu isku qaban jirey labadiisa sacab, wuxuu ku akhrin jiray kuna tufi jiray: { قل هو الله أحد}, iyo {قل أعوذ بربّ الفلق}, iyo { قل أعوذ بربّ النّاس} .......................................................................................................... 318

Sayidka istiqfaartu...........................................................**Error! Bookmark not defined.**

{قل هو الله أحد} Ilaahay waa Allaah keligii ah-, iyo labada suuradood ee micwadateynka "سورة الفلق iyo سورة الناس" galabtii iyo subixii sadeex jeer, way kaaga filan tahay wax walba .........................................................................................**Error! Bookmark not defined.**

Ilaahay hadalka wuxuu u jecel yahay afar: subxaana Allaah, Alxamdu lilaah, laa ilaaha ilaa Allaah, Allaahu akbar, dhib maleh tii aad ka bilowdaa**Error! Bookmark not defined.**

(Qofka dhaha: laa ilaaha Ilaa Allaah waxdahu laa shariika lahu lahul mulku wa lahul xamdu wa huwa calaa kuli shayin qadiir, toban jeer ........**Error! Bookmark not defined.**

Labo eray oo ku fudud carabka, kuna culus miisaanka, Raxmaankuna jecel yahay **Error! Bookmark not defined.**

(Qofka dhaha: subxaana Allaahi wa bixamdihii, boqol jeer maalintii dambigiisa waa loo dhaafaa haba haato daad xoorta badda oo kalee) ........... **Error! Bookmark not defined.**

Daahirnimadu waa iimaanka barki, alxamdu lillahina miisaanka ayey buuxisaa, ama subxaana Allaah iyo alxamdulilah waxay buuxiyaan inta u dhaxaysa samooyinka iyo dhulka ........................................................................................................... 327

(Inaan iraahdo: subxaana Allaahi, wal-xamdu lillaahi, walaa ilaaha ilaa-llaahu, wallaahu akbar, ayaan ka jeclahay inta qoraxdu u soo baxdo oo dhan**Error! Bookmark not defined.**

(Dikri waxaa u fadli badan: laa Ilaaha Ilaa Allah, ducuna waxaa u fadli badan: Alxamdu lilaah) ................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

(Qofka meel dega ee dhaha: acuudu bikalimaati Allaahi taamaati min shari ma khalaqa, lam yaduruhu shayin xataa yartaxil min mansilihi daalik) **Error! Bookmark not defined.**

Hadii midkiin soo galo masaajidka ha dhoho: Allahayow iifur albaabada naxariistaada, haduu baxayana ha dhoho: Allahayow waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga......... **Error! Bookmark not defined.**

Haduu ninku soo galo gurigiisa, ee uu Ilaahay xuso markuu soo galayo ama uu baxayo ama uu cuntadiisa cunaayo, shaydaanka ayaa dhaha: halkan hoy iyo cashaba kuma lihin ............................................................................................ **Error! Bookmark not defined.**